Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 13aad** **Muqdisho, 01 August 2026** **Lr.3**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# BILAHA

# March-July

# 2026

Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية
# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 13aad** **Muqdisho, 01 August 2026** **Lr.3**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# BILAHA

# March-July

# 2026

# TUSMO


| | | |
|---|---|---|
| **HESHIISKA AAGGA GANACSIGA XORTA AH EE QAARADDA AFRIKA (AFCFTA)**<br>SHARCI LR. 52 | 28/10/2025 | **1** |
| **AXDIGA URUR GOBOLEEDKA HORUMARINTA - IGAD**<br>SHARCI LR. 53 | 14/02/2026 | **71** |
| **MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA HAY'ADDA QAXOOTIGA & BARAKACAYAASHA QARANKA**<br>XEER MADAXWEYNE LR. 699 | 01/03/2026 | **96** |
| **MAGACAABIS KU-XIGEENKA AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA J.F.S.**<br>XEER MADAXWEYNE LR. 710 | 05/03/2026 | **97** |
| **MAGACAABIS NOOTAAYO**<br>XEER MADAXWEYNE LR. 723 | 26/03/2026 | **98** |
| **MAGACAABIS NOOTAAYO**<br>XEER MADAXWEYNE LR. 727 | 31/03/2026 | **99** |
| **MAGACAABIS NOOTAAYO**<br>XEER MADAXWEYNE LR. 728 | 31/03/2026 | **100** |
| **MAGACAABIS NOOTAAYO**<br>XEER MADAXWEYNE LR. 733 | 04/04/2026 | **101** |
| **XILKA-QAADIS AGAASIMIHII GUUD HORE IYO MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA**<br>XEER MADAXWEYNE LR. 735 | 20/04/2026 | **102** |
| **MAGACAABIS NOOTAAYO**<br>XEER MADAXWEYNE LR. 740 | 20/05/2026 | **103** |
| **MAGACAABIS TALIYAHA TALISKA TAAKULAYNTA EE C.X.D.S.**<br>XEER MADAXWEYNE LR. 741 | 20/05/2026 | **104** |

# TUSMO


**MAGACAABIS NOOTAAYO**
XEER MADAXWEYNE LR. 742 23/05/2026 **105**

**MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE MADAXWEYNAHA J.F.S.**
XEER MADAXWEYNE LR. 755 06/06/2026 **106**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**
XEER MADAXWEYNE LR. 761 20/06/2026 **107**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**
XEER MADAXWEYNE LR. 763 24/06/2026 **108**

**MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA GANACSIGA IYO GANACSATADA**
XEER MADAXWEYNE LR. 769 24/06/2026 **109**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**
XEER MADAXWEYNE LR. 783 18/07/2026 **110**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**
XEER MADAXWEYNE LR. 784 18/07/2026 **111**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**
XEER MADAXWEYNE LR. 787 21/07/2026 **112**

**MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA GANACSIGA IYO MAALGASHIGA**
XEER MADAXWEYNE LR. 788 22/07/2026 **113**

**XILKA-QAADIS TALIYIHII HORE IYO MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA ASLUUBTA SOOMAALIYEED**
XEER MADAXWEYNE LR. 794 29/03/2026 **114**

**XEER-NIDAAMIYAHA DIIWAANGELINTA GAADIIDKA BADDA**
XEER RA'IISUL WASAARE LR. 196 01/02/2026 **115**

# TUSMO


| | | |
|---|---|---|
| **XEER-NIDAAMIYAHA SANDUUQA QARAN EE MAAREYNTA KHATARAHA MUSIIBOOYINKA** | | |
| XEER RA'IISUL WASAARE LR. 197 | 08/02/2026 | **142** |
| **XEER-NIDAAMIYAHA DHISMAHA HAY'ADDA DARYEELKA AGOONTA, SHUHADADA, NAAFADA & HOWLGABKA CIIDANKA XDS** | | |
| XEER RA'IISUL WASAARE LR. 198 | 07/03/2026 | **156** |
| **XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA SHAQADA ARRIMAHA DIBADDA** | | |
| XEER RA'IISUL WASAARE LR. 200 | 05/04/2026 | **172** |
| **XEER-NIDAAMIYAHA CAFISKA GUUD** | | |
| XEER RA'IISUL WASAARE LR. 201 | 09/05/2026 | **246** |
| **XARUNTA ADEEGYADA MIDEYSAN EE HALMEEL** | | |
| XEER RA'IISUL WASAARE LR. 202 | 09/05/2026 | **256** |
| **HAGAHA NIDAAMKA HANTI-DHOWRKA GUDAHA** | | |
| XEER RA'IISUL WASAARE LR. 203 | 09/05/2026 | **263** |
| **XEER-NIDAAMIYAHA ADEEGYADA AMNIGA GAARKA AH** | | |
| XEER RA'IISUL WASAARE LR. 204 | 09/05/2026 | **278** |
| **GO'AAN GOLE EE ANSIXINTA SIYAASADDA BOOSTADA SOOMAALIYEED 2025-2030** | | |
| XEER RA'IISUL WASAARE LR. 550 | 25/01/2026 | **299** |
| **GO'AAN GOLE EE ANSIXINTA SIYAASADDA QARAN EE HORUMARINTA ISBOORTISKA SOOMAALIYA** | | |
| XEER RA'IISUL WASAARE LR. 605 | 18/05/2026 | **327** |

**SHARCI LR. 52** **TAARIIKH: 28-DA OKTOOBAR 2025**

**HESHIISKA AAGA GANACSIGA XORTA AH EE QAARADDA AFRIKA (AFCFTA)**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/664/B11/25**, ku taariikheysan **25/10/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta Heshiiska aaga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika (AFCFTA) |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo Heshiiskan. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Heshiiskan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Heshiiska Aaga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika (AFCFTA).

**Qodobka 2aad**

Waxa uu heshiiskan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 041-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Madaxweynaha J. F.S.**

001484

MINISTRY OF COMMERCE & INDUSTRY
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

# SOOMAALIYA IYO AAGGA GANACSIGA XORTA AH EE QAARADDA AFRIKA

## Heshiiska Dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

Waxaa diyaarisay Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha XJFS 2023

## Hesshiiska Dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

## Hordhac

Annaga oo ah Dawladaha Xubnaha ka ah ururka midowga Afrika,

Annagoo ka duuleyna fulinta go’aankii ka soo baxay Kal-fadhigii 18$^{aad}$ ee shir madaxeedka midowga Afrika ee Magaalada Adis-Ababa ee Dalka Ethiopia 29$^{kii}$-30$^{kii}$ Janaayo 2012$^{ka}$ si loo sameeyo ra’yi uruurin, Qorshe-hawleed iyo qaab-dhismeed u jeedadiisu tahay sidii loo dedejin lahaa dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo Xoojinta Ganacsiga gudaha ah ee Qaaradda Dhexdeeda.

Annagoo tix-raaceyna go’aanaddii ka soo baxay shir-madaxeedkii Madaxda Midowga Afrika ee Magaalada Johannesburge ee Dalka Koonfur Afrika 14$^{kii}$-15$^{kii}$ juun 2015 kaasoo tirsigiisu ahaa 569 iyadoo la tixraacayo go’aankii kasoo baxay heshiiska Abuuja ee lagu gaaray Magaalada Abuuja ee Dalka Nigeria ee ahaa Shirkii 25$^{aad}$ ee Madaxda Midowga Afrika kaasoo tilmaamayey mabaadi’a ay kamid yihiin dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ujeedkiisune ay tahay is-dhexgalka Afrika.

Annagoo go’aan sananay in aan sare u qaadno Xariirka dhaqaale ee Afrika kuna dhisan Xuquuqaha iyo waajibaadka ee heshiiska dastuuriga ah ee Midowga Afrika ee 2000, heshiiska dhaqan-galay ee Abuuja iyo heshiiskii Marrakesh ee lagu dhisay ururka Ganacsiga Aduunka ee 1994$^{kii}$.

Annagoo tixgelinayna hiigsiga fog ee ajandaha 2063$^{ka}$ ee ah suuqa Qaaradda Afrika oo xor ah isu socodka ganacsatada Afrika is-dhaafsiga badeecada, Adeegyada ujeedkuna uu yahay in muhiimadda lasiiyo is-dhexgal dhaqaale ee Afrika iyo in la dhiirigeliyo horumarka beeraha, sugnaanta cunnada, wershadeynta iyo habka is-dhaafsiga dhaqaalaha.

Annagoo ogsoon baahida loo-qabo in la’abuuro lana ballaariyo suuqa xorta ah ee ku saleysan is-dhaafsiga badeecadaha, adeegyada iyadoo loo marayo taageeridda Dawladaha ee dhismaha kaabayaasha Dhaqaalaha yareynta iyo baabi’inta shaqo la’aanta.

Sidoo kale annagoo ogsoon baahiha loo qabo dhismo hay’ado sharci ee dhaqan geliya heshiisyada ku saleysan ganacsiga iyo ilaalinta xaquuqda hanti maskaxeedka si loo xafido dhinaca saddexaad.

Anagoo og, muhiimadda ay leeyahay nabadgelyada caalamiga ah, dimuqraadiyadda, Xuquuqda Aadanaha, sinnaanta Jinsiga iyo kudhaqanka Sharciga ujeedaduna ay tahay hormarinta ganacsiga Aduunka iyo iskaashiga dhaqaalaha

Waxaan aamin sannahay, xuquuqaha ay u leeyihiin Dawladaha xubnaha ka ah Ururka Midowga Afrika in ay ka mid dhigaan sharciga gudaha si heshiiskan uu u yeesho saameyn sharci dhinacyada caafimaadka, Badbaadada, deegaanka, anshaxa guud iyo ilaalinta kala duwaanashaha Dhaqanka

Si lamid ah waxaan qireynaa in ay jiri karaan xuquuqo iyo waajibaad heshiisyo kale ee aan dhinac kanahay

Caddeyn ururka isutagga dhaqaale Goboleedka ee Midowga Afrika uu yahay aas-aaska udub dhaxaadka dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

Waxaan ku heshiinnay Qodobada soo-socda:

## Qaybta I

### Qodobka 1$^{aad}$

### Qeexitaano

Ujeeddada Erayada ku jira heshiiskan waxaa loo fasirayaa sida soo-socota:

a) "**Heshiiska Abuuja**": waa heshiiska lagu dhisay ururka dhaqaalaha Afrika sanadki 1991$^{kii}$.
b) **"Heshiis":** waa heshiiskan lagu dhisayo Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Afrika, habraacyada iyo lifaaqa ku lammaanan ee as-aas u ah jiritaanka heshiiskan.
**c)** **"Lifaaq":** waxaa loola jeedaa dukumintiga lagu lifaaqayo heshiiska kaasoo qayb ka ah heshiiskan.
**d)** "**Tixraac":** waxaa loola jeedaa dokumintiga lagu xiro lifaaqa heshiiska kaasoo qayb ka ah heshiiskan.
e) "**Shir-Madaxeed**": waa Shir-madaxeedka Madaxda Midowga Afrika
f) "**Midowga Afrika"** waa Ururka Afrika ee ay ku Midooween Dawladaha Afrikaanka.
g) "**AfCFTA":** waxaa loola jeedaa Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika.
h) "**Guddi":** waxaa loola jeedaa Guddiga Midowga Afrika.
i) "**Sharciga Dhismaha**": waa shaciga dhismaha Midowga Afrika ee 2000.

j) “**Mideynta Furdooyinka Afrika”:** waxaa loola jeedaa mideynta canshuurta la saaro badeecadaha taasoo lagu dhisay heshiiska Guddiga Dhaqaalaha ee Afrika 1991[kii].

k) **“Golaha Wasiirrada”:** Waxaa loola jeedaa Wasiirrada Ganacsiga ee Dawladaha xubnaha ka ah Midowga Afrika.

l) “**Guddiga Xalinta Khilaafaadka”:** waa guddiga Xalinta khilaafka ka dhasha Heshiiskan iyo hab-raacyada inta aan ka aheyn inta ku cad heshiiskan.

m) “**Golaha Fulinta”:** waa Wasiirrada Midowga Afrika.

n) **“GATS”:** waxaa loola jeedaa Heshiiska Hay’adda Ganacsasiga Aduunka (WTO) ee ku saabsan Adeegyada sanadki 1994[kii].

o) “**GATT”:** waxaa loola jeedaa Heshiiska ganacsasiga iyo Tariifada go’an ee badeecadaha 1994[kii] ee Hay’adda Ganacsasiga Aduunka (WTO).

p) “**Heshiis**”: haddii aan si kale loogu sheegin heshiis waxaa loola jeedaa heshiiskan iyo dhammaan habraaca iyo lifaaqa saameynta ku leh heshiiskan.

q) “**Xubnaha Dawladaha**”: waxaa loola jeedaa Dawladaha Xubnaha ka ah Midowga Afrika.

r) “**Caqabada aan Tariifa aheyn”:** waxaa loola jeedaa in laga hortago caqabadaha lidka ku ah gananasiga iyadoo la saarayo canshuur aan ahayn tan waajibka ah.

s) “**Barotokool”:** waxaa loola jeedaa lifaaqa ku lammaanan heshiiskan oo leh awood sharciyeed.

t) **“RECs”:** waxaa loola jeedaa Urur Goboleedka Dhaqaale ee uu aqoonsaday Midowga Afrika:

“**UMA”** Midowga Carabta Maqrib.

“**COMESA**”: Suuqa ay ku Mideysanyihiin Dawladaha Bariga iyo Koofurta Afrika

“**CEN-SAD”:** waa Urur-goboleedka Dhaqaale ee Dawladaha dhaca Saaxil iyo Saxaraha Afrika.

**“EAC”:** waa Urur-goboleedka Dhaqaalaha Dawladaha dhaca Bariga Afrika.

**“ECCAS”:** waa Urur-goboleedka Dhaqaalaha Dawladaha dhaca Bartamaha Afrika.

**“ECOWAS**”: waa Urur-goboleedka Dhaqaalaha Dawladaha dhaca Galbeedka Afrika.

**“IGAD”:** waa Urur-goboleedka horumarinta Dhaqaalahaha Dawladaha dhaca Bariga Afrika.

**"SADC":** waa Urur-goboleedka horumarinta Dhaqaalaha Dawladaha dhaca Koonfurta Afrika.

u) "**Xoghayn"** waxaa loola jeedaa Xoghaynta lagu xusay Qodobka 13aad ee heshiiskan.

v) "**Dawladaha Xubnaha**": waxaa loola jeedaa Dawlahada saxiixay heshiiskan oo uu waajib sharci ku noqonayo fulintiisa.

w) "**Dhinaca Saddexaad":** haddii aan si kale u qeexin heshiiskan, dhinaca Saddexaad waxaa loola jeedaa Dawlad aan saxiixin heshiiskan.

x) "**WTO":** waxaa loola jeedaa Ururka Ganacsiga Adduunka ee lagu dhisay heshiiski Marrakesh1994[kii].

## Qaybta II

## Asaaska dhismaha, ujeeddooyinka, Mabaadi'da iyo Baaxada ee

## Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrikaf

### Qodobka 2[aad]

**Asaaska dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika**

Asaaska dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waxaa loo tixraacayaa sida ku cad Qodobada soo socda:

### Qodobka 3[aad]

### Ujeeddo Guud

U jeedooyinka guud ee Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waxaa ay kala yihiin:

a) In la dhiso suuq mid ah ee badeecooyinka, adeegyada una fududeeya is-dhexgal dhaqaale ee Qaaradda Afrika lana tixraacayo mabda'a Afrikaannimada si loo gaaro nabadgelyo iyo barwaaqo hiigsiga fog ee 2063[ka].

b) In la dhiso suuq Xor ah ee badeecooyinka iyo adeegyada iyadoo laga wada xaajoonayo.

c) Gacan-siinta Dawladaha saxiixay heshiiskan iyadoo lagu gacansiinayo dhaq-dhaqaaqyada Ganacsiga, Maal-gelinta, hal-abuurka isu socodka dadka.

d) In marxadda xigta la dhiso Hay'ad mideeysa dhaqamada dadka Afrikaanka ah.

e) Abuuridda iyo sare u qaadidda jawi degenaasho bulso iyo horumar dhaqaale, Sinnaan iyo is-beddel dhab ah ee Dawladaha Xubnaha ka ah heshiiskan.

f) Dhiiri-gelinta Tartanka Dawladaha Saxaiixay heshiiskan ee Qaaradda dhexdeeda iyo suuqyada caalamka.

g) Sare-u-qaadidda horumarinta warshada, beeraha iyo ilaalinta dalagga.
h) Xalinta caqabadaha soo wajaha dowlahada xubnaha ka ah heshiiskan iyo daadejinta hannaanka is-dhexgalka ee heer Gobal iyo heer Qaarad.

## Qodobka 4$^{aad}$
## U jeeddo Gaar ah

Si loo gaaro isla markaasna loo fuliyo u jeeddooyinya ku xusan Qodobka 3$^{aad}$ ee heshiiskan Dawladaha xubnaha ka ah waa in:

a) ay baabi'so Tariifooyinka iyo Caqabadaha aan Tariifada aheyn ee lidka ku ah ganacsiga badeecadaha.
b) ay Dawladda siiso Xorriyad Ganacsiga la xariira Adeegga.
c) ay Dawladda gacan-ka-geysato Maal-gelinta, ilaalinta Xuquuqda lahaanshaha gaarka ah iyo siyaasadda tartanka.
d) ay Dawladda gacan-ka-geysato dhammaan wax kasta ee laxariira ganacsiga.
e) la sameeyo Iskaashi xagga furdooyinka isla markaana ay fuliso dawladda tallaabooyinka Fududeynta Ganacsiga.
f) la dhiso hab lagu xalliyo Murannada iyadoo la dhawrayo Xuquuqaha iyo waajibaadka dhinacyada u dhexeeya khilaafka.
g) in la dhiso hab lagu dhaqan-gelin karo heshiiskan.

## Qodobka 5$^{aad}$
## Mabaadi'da Heshiiska

Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waxa hagaya Mabaadi'da soosocda:

a) Heshiiskan waxaa maamulaya madaxda Midowga Afrika;
b) Suuqyada xorta ah ee Urur-goboleedyada dhaqaale ee Afrika ayaa tusaale fiican u ah dhismaha heshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika
c) Kala-duwidda Xarumaha;
d) Dabacsanaan iyo Xalinta kala duwanaashiyaha;
e) Daah-furnaan iyo isu gudbinta xogaha;
f) Ilaalinta hab-dhaqanka wanaagsan;
g) Mudnaan isku wada mid ah;
h) Isku si ula dhaqmidda badeecadaha gudaha iyo Dibadda;
i) Is-qadarin;
j) Ilaalinta Xorriyadda;
k) Go'aan qaadasho wada ogol ah; iyo

l) Dhawrista ilaalinta ugu fiican ee Urur-goboleedka dhaqaalaha Afrika, Dawladaha saxiixay heshiiskan iyo heshiisyada caalamiga ah ee saameyn sharci ku leh Midowga Afrika.

## Qodobka 6aad

## Baaxada Sharciga

Heshiiskan wuxuu ku saabsan yahay Ganacsiga badeecadaha, Adeegyada, maal-gashiga, Xuquuqda hanti maskaxeedka iyo siyaasada jaangoynta tartanka ganacsiga.

## Qodobka 7aad

## Wejiga II

## Wada-xaajood

1. Ayadoo laga amba qaadayo u jeeddooyinka guud ee heshiiskan madaxda Dawladaha Xubnaha ka ah midowga Afrika waxaa ay Wejiga II ay ka-gelayaan wada-xaajood arrima soo socda:

a) Xuquuqda Hanti maskaxeedka;
b) Maal-gashiga; iyo
c) Siyaasadda tartanka.

2. Wada-xaajoodyada ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan waxaa la sameynayaa Marka lagu ansixiyo heshiiskan shir-madaxeedka Midowga Afrika.

## Qodobka 8aad

## Xaaladaha la xariirta Lifaaqyada Heshiiska

1. Lifaaqa la xiriira ganacsiga badeecadaha, Adeegyada, maal-gashiga, xuquuqda hanti maskaxeedka, siyaasadda tartanka, xeerarka iyo habraacyada xalinta khilaafaadka waxaa ay u baahanyihiin ansixin si ay qeyb uga noqdaan heshiiska.
2. Lifaaqa dib ka yimaadda ee la xiriira ganacsiga, maal-gashiga, xuquuqda hanti maskaxeedka, siyaasadda tartanka, xeerarka iyo habraacyada waxaa ay qayb ka noqonayaan heshiiskan.
3. Dokuminti kasta ee lagama-maarmaan ah lana xiriira u jeeddooyinka inta uu xadeeynayo heshiiskan lana saxiixay waxaa uu qayb ka noqonayaa heshiiskan.

## Qaybta III

## Qaab-dhismeedka Maamulka

## Qodoba 9[aad]

## Hab-dhiska Hay’adda fulinta ee Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

Waa hay’ad fulineed shaqadeedu tahay Maamulka iyo kor-joogteynta ee Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika Qaab-dhismeekeedu yahay sida soo socota:

a) Golaha Guud;
b) Golaha Wasiirrada;
c) Guddiga khubarada sare ee Ganacsiga; iyo
d) Xoghayn.

## Qodobka 10[aad]

## Golaha Guud

1. Golaha Guud waa Hay’adda ugu sareysa ee leh go’aan qaadashada oo hoostagta Midowga Afrika shaqadeedu tahay dejinta istaraatiijiyadda, dejinta qorshe-howleedka si loo helo is-dhax-gal dhaqaale iyo kor-joogteynta.
2. Golaha waxaa ay leedahay awoodda fasiraadda heshiiskan ayadoo talo ka siinaysa Golaha Wasiirrada. Go’aanka ansixinta fasiraadda waa in uu noqdaa wada ogol.

## Qodobka 11[aad]

## Hawlaha Golaha Wasiirrada

1. Golaha Wasiirrada ee lagu dhisay sharcigan wuxuu ka kooban yahay Wasiirrada Ganacsiga ama wasiiro kale ama hay’ad, ama Mas’uulkii ay u igmadaan Dawladaha Xubnaha ka ah heshiiskan.
2. Golaha Wasiirrada waxaa ay warbixinnada siinayaan Golaha la tashiga (Assembly) ayagoo u sii marinaya Golaha fulinta.
3. Golaha Wasiirrada waxaa kale oo awood u leeyihiin:
   a) Go’aan qaadasho aan ka baxsaneyn xuduuda sharcigan;
   b) Hubinta fulinta iyo dhaqan-gelinta heshiiskan;
   c) In ay qaadaan tallaabooyinka muhiimka ah ee lagu xaqiijinayo u jeeddooyinka heshiiskan iyo aaladaha kale ee xiriirka la leh;
   d) Inay Wada-shaqeyn la yeeshaan hay’adaha kale ee shaqo wadaagga la ah sida hay’adaha Midowga Afrika;
   e) Dhiiri-gelinta iyo is-waafajinta siyaasadaha, istaratiijiyadaha ee lagu dhaqan-gelinayo heshiiskan;
   f) Dhismaha Hay’ado, Guddiyo iyo Khubaro wakiil ka ah Golaha Wasiirrada;

g) Diyaarinta xeerarka iyo habraacyada wakiillada Golaha Wasiirrada si loo gaaro u jeedada iyo u gudbinta Golaha guud si loo ansixiyo;
h) Kormeerka iyo kor-joogteynta hawlaha Gudiyada, Hay'adaha hawl-wadeennada Kooxaha ee lagu dhisay heshiiskan;
i) Tix-gelinta warbinnada iyo hawlaha Xoghaynta iyo qaadista tallaabada ku habboon;
j) Soo-saaridda Dekereetoyin iyo Xeer-nidaamiyayaal si waafaqsan heshiiskan
k) Dhisidda iyo u-soojeedinta Golaha Sare saraakiisha iyo Xeer-hoosaadka maaliyadda si loo ansixiyo;
l) Aqbalaadda hawlaha shaqo ee Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo Hay'adaheeda;
m) Ogolaashaha howlaha Shaqo Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo Hay'adaheeda;
n) Tix-gelinta miisaaniyadda Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo Hay'adda dejisay kadib soo-jeedinta Golaha la tashiga ayadoo lasoo marayo Golaha Fulinta;
o) Tallo-siinta Golaha la tashiga ee ku aaddan fasiraadda heshiiskan iyo
p) Qabashada hawl kasta ee ku cad heshiiskan ama ay codsato Golaha la tashiga; iyo

4. Kulamada caadiga ah Golaha Wasiirrada waa 2 (labo) jeer sanadkiiba, waxaa kale ee jiri kara kulan aan caadi ahayn haaddii loo baahdo.
5. Go'aanada Golaha waa in ay ku sal go'naadaan Awoodooda sharci ee Golaha waana waajib in ay fuliyaan xubnaha saxiixay heshiikan.
6. Dawladaha Xubnaha ka ah waxay qaadi karaan tallaabooyinka lama huraanka u ah fulinta go'aannada Golaha Wasiirrada.

**Qodobka 12$^{aad}$**

**Guddiga khubarada Sare ee Ganacsiga**

1. Guddiga khubarada sare ee Ganacsiga wuxuu ka kooban yahay saraakiisha maamul ee ugu sareeya ama Mas'uulkii ay u igmadaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
2. Shaqada khubarada sare waxay tahay:
   a) Fulinta go'aannada Golaha Wasiirrada si waafaqsan heshiiskan.
   b) Waxay mas'uul ka yihiin horumarinta barnaamijyada iyo dejinta Qorshe-hawleedka si loo dhaqan-geliyo heshiiskan;

c) Kor-joogteynta hawlaha horumarineed ee Aagga Ganacsiga xorta ah ee Qaaradda Afrika si waafaqsan heshiiskan;
d) Dhisidda Guddi hoosaadyo haddii ay tahay lama-maarmaan;
e) Kor-joogteynta fulinta si waafaqsan heshiiskan ama waxaa la dhisayaa Guddi farsamo ee baara xaalad kasta ee gaar ah;
f) Hagidda xoghaynta; iyo
g) Qabashada hawl kasta ee uu siinayo heshiiskan ama ay ka codasadaan Golaha Wasiirrada.

3. Iyadoo laga tallo-qaadanayo Golaha Wasiirrada Guddiga sare ee Golaha Ganacsatada waxaa ay kulmayaan ugu yaraan 2 (labo) jeer sanadkiiba waana in ay ku shaqeeyaan xeerarka iyo habraacyada uu jideeyay Golaha Wasiirrada.
4. Go'aanada ka-soo-baxa kulamada Guddiga waa inay u gudbiyaan Golaha Wasiirrada.
5. Guddiga Dhaqaalaha ee Gobalka waxaa ay leeyihiin tallo-soojeedin.

## Qodobka 13aad
## Xoghayn

1. Golaha Sare waa inay dhisaan Xoghayn leh qaab-dhismeed, xarun iyo Miisaaniyad ay ku shaqeyso.
2. Xoghaynta waa kumeel-gaar inta si buuxda looga dhameestirayo.
3. Xoghaynta waxaa ay yeelanayaan shaqsiyad-qaanuuni ah waana u madax bannaan tahay shaqadeeda si waafaqsan heshiiskan.
4. Xoghaynta waxaa ay katirsan tahay Midowga Afrika.
5. Dhaqaalaha iyo miisaaniyadda sanadlaha ah ee Xoghaynta waxaa dejinaya Midowga Afrika.
6. Kaalinta iyo mas'uuliyadda Xoghaynta waxaa diyaarinaya Golaha Wasiirrada.

## Qodobka 14aad
## Habka Go'aan Qaadashada

1. Habka go'aan qaadashada ee Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waa in lagu gaaraa hanaan wada ogol ah.
2. si waafaqsan Faqradda (1) ee Qodobkan, Guddiga Sare ee khubarada Ganacsiga wuxuu gudbinayaa wax kasta oo aan laga gaarin heshiis wada ogol ah Golaha Wasiirrada, sidoo kale haddii aanay Golahu ku ansixin wada ogol waa in Golaha Wasiirrada u gudbiyaa Golaha Sare.
3. Go'aan qaadashada hannaanka farsamo waxaa lagu gaarayaa aqlabiyadda fudud ee Dawladaha Xubnaha ka ah heshiiskan ee leh xaqa codeybta.
4. Go'aannada guud ahaan ha'ahaadeen xallin khilaaf ama go'aan kale waxaa lagu gaarayaa aqlabiyadda fudud ee Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ee leh xaqa codeybta.
5. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxay leedahay xaqa codeynta lagamana hor-istaagi karo xaqa codeynta si aan waafaqsaneyn heshiiskan.

## Qodobka 15aad
## Ka-tanaasul Waajib

1. Xaalad gaar ah darteed, codsiga soo jeedinta ee tanaasul waajibaad ee Dawlad xubin ka ah heshiiskan waa in go'aanka Golaha uu ku saleesnaadaa ¾ (Afar-meelood Saddax) marka la waayo wada ogol.

2. Ansixinta codsiga khuseeya tanaasulka waajibka la saaray Dawlad xubin ka ah heshiiskan waa inuu ahaadaa wada ogol. Golaha Wasiirrada waa inay codsiga ku meel mariyaa waqti go’an mana dhaafi karo 90 (sagaashan) maalmood haddii aan la helin go’aan wada ogol ah waxaa go’aanka lagu saleynayaa 3/4 (Afar meelood saddax) ee Dawladahha Xubnaha ka ah heshiiskan.
3. Xaalado gaar ah darteed Go’aanka ogolaashaha ee tanaasulka waajibaadka ee Golaha Wasiirrada waa la kordhin karaa ilaa hal sano waana in Golaha Wasiirrada ay dib-u-eegis kusameeyaan sanad kasta si ay u hubiyaan sii socoshada go’aankan iyo waxa kadhashay. Golaha Wasiirrada waxay dib-u-eegista ku dari karaan waqti.

## Qaybta IV

## Hufnaanta

### Qodobka 16$^{aad}$

### Faafin

1. Dawlad kasta ee Xubin ka ah heshiiskan waa inay ku faafisaa meelaha ay ku faafiso shuruucdeeda kuna faafisaa mid kamid ah luqadaha midowga Afrika iyo siyaabaha kale ee waafaqsan xeerka caalamiga ah iyo Qodobada heshiiskan.
2. Qodobada heshiiskan kama hor-imaa karaan sharciga dhaqan-galka ah iyo danaha Qaran ee Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.

### Qodobka 17$^{aad}$

### Ogeysiin

1. Ansixinta Sharciyada, Xeer-hoosaadarka iyo habraacyada xeerka caalamiga ah ee la xiriira ganacsiga si waafaqsan heshiiskan ayadoo lagu qorayo mid kamid ah luqadaha Midowga Afrika loona diraayo Dawladaha kale ee xubnaha ka ah heshiiskan iyadoo lamarinayo Xoghaynta.
2. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxay xaq u leedahay in ay ka cabato saameynta xun ee xeerarka iyo habraacyada xeerka caalamiga ah ee la xiriira ganacsiga kana hor-imaanaya heshiiskan ama danaheeda gaarka ah.
3. Codsiga Dawlad xubin ka ah heshiiskan ee ku wajahan Dawlad kale ee xubin ah waa in lasoo mariyaa Xoghaynta waana in ay Xoghaynta si aan daah ku jirin u dirtaa Dawladda uu ku wajahan yahay kana jawaabaa dhibaatooyinka iyo mas’uuliyad darrada ee horay loo soo gaarsiiyey.

4. Ogeysiiska iyo warbixin kasta ee lagu caddeeyay Qodobkan waa in la waafajiyaa heshiiska.

## Qaybta V

## Kala-doorashada Qaaradeed

### Qodobka 18aad
### Kala doorashada Qaaradeed

1. Iyadoo la fulinayo heshiiskan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay geli karaan heshiisyo u dhexeeya Dawladaha dhexdooda oo ah is-dhaafsi dano labada dhinac ay wadaagaan.
2. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa in lagu qadariyaan heshiiska ay lagasho Dawladaha kale ee xubnaha ka ah heshiiskan iyo kuwa aan ka ahayn ee ah Dhinaca saddaxaad ah si waafaqsan heshiiskan.
3. Heshiiskan ma burin karo heshiisyada ka horreeyay ee xubnaha ay la galeen Dawlado kale.

### Qodobka 19aad
### Iska hor-imaadka heshiisyada

1. Haddii ay dhacdo iska hor-imaad heshiiskan iyo heshiisyo Goboleed kasta waxaa la dabaqayaa heshiiskan haddii aan si ka duwan loogu sheegin heshiiskan.
2. Iyadoo ay jirto farqadda (1) ee Qodobkan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ee xubin ka ah urur-goboleedyo Ganacsi waa in ay qiimeeyaan yaa dan u ah ama u wanaagsan is-dhexgalka bulsho.

## Qaybta VI

## Xalinta Khilaafaadka

### Qodobka 20aad
### Xalinta Khilaafaadka

1. Hannaanka Xalinta khilaafaadka ee lagu sheegay heshiiskan wuxuu khuseeya khilaafaadka ka dhexdhasha Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
2. Hannaanka Xalinta khilaafaadka waa in loo maraa si waafaqsan heshiiskan.

## Qaybta VII
## Gabagabada Qodobada

### Qodobka 21aad
### Qodobada aan lasoco karin heshiiskan

Fasiraadda Qodobada heshiiskan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan mabaadi'da guud ee heshiiskan, xeerarka kale ee xeriirka laleh heshiiska iyo wax-ka-beddelka heshiikan.

### Qodobka 22aad
### Ogolaashaha, Saxiixa, Ansixinta iyo kubiiridda heshiiska

1. Heshiiskan waxaa lagu meel-miranayaa shir-weyne guud.
2. Heshiiskan waa u furanyahay in ay saxiixaan, ansixiyaan ayna kusoo biiraan Dawladaha xunaha ka ah midowga Afrika si waafaqsan Dastuurka Midowga Afrika.

### Qodobka 23aad
### Dhaqan-galka heshiiska

1. Heshiiska iyo borotokoolka Ganacsiga badeecadaha, Adeegyada iyo xeerka xalinka khilaafaadka wuxuu hirgelayaa 30 (soddon) maalmood kadib marka ay ansixiyaan 22 (labaatan iyo labo) Dawladood oo kamid ah Dawladda xubnaha ka ah heshiiskan.
2. Heshiiska la xariira maal-gashiga ganacsiga, xuquuqda hanti maskaxeedka, Siyaasadda Tartanka wuxuu hirgelayaa 30 (soddon) maalmood kadib marka ay ansixiyaan 22 (labaatan iyo labo) Dawladood oo kamid ah Dawladda xubnaha ka ah heshiiska. Dawlad kasta ee saxiixday heshiiskan waxaa waajib qaanuuni ku ah inay ilaaliso laga billaabo maalinta ay keento ogolaashaha heshiiskan.
3. Dawlad kasta ee ku biireysa heshiiskan, borotokoolka Ganacsiga badeecadaha, Adeegyada iyo Hanaanka xalinka khilaafaadka wuxuu dhaqan-gelinayaa kadib taariikhda la dhameestiro ku biiritaanka.
4. Dawlad kasta ee ku biireysa heshiiskan, borotokoolka Maal-gashiga, lahaanshaha xuquuqda Hanti-maskaxeedka iyo siyaasadda tartanka wuxuu dhaqan-gelinyaa kadib taariikhada la dhameestiro ku biiritaanka.
5. Xafiiska la dhigay Dokumintiga codsiga ka-qeyb-galka heshiiskan waa in uu bixiyaa ogeysiis ku wajahan dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan iyo lifaaqiisa.

## Qodobka 24aad
## Xafiiska Araajida

1. Xafiiska la dhigayo araajida ka-qeyb-galka heshiiskan waa inuu yeeshaa Gudoomiye.
2. Heshiiskan waxaa lagu keydinayaa xafiiska araajida waana inuu nuqul kasiiyaa dhammaan Dawladaha saxiixay heshiishkan.
3. Dawladda xubinta ah waa in ay xafiiska keydinta Dokumintiyada dhigtaa codsiga Ansixinya ama kamid noqoshada heshiiskan
4. Xafiiska ladhigay codsiga kamid noqoshada heshiiskan waa in uu wargeliyaa dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan

## Qodobka 25aad
## Kagaabsi Qodobkaobo gaar ahaaneed

Wax ka-gaabsi ah lagama samey karo heshiiskan.

## Qodobka 26aad
## Diiwaan-gelin iyo wargelin

1. Heshiiskan wuxuu dhaqan-gelayaa marka laga diiwaan-geliyo xafiiska Diiwaangelinta ee Xog-haayaha Qaramada Midoobay si waafaqsan Qodobka 102aad ee axdiga Qaramada Midoobay.
2. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan si kali-kali ama wadajir ah waa inay ogeeysiiyaan heshiiskan Ururka Ganacsiga Aduunka.

## Qodobka 27aad
## Kalaabashada Heshiiskan

1. Heshiiskan waxaa laga bixi karaa kadib **5** sano marka uu dhaqalgal kunoqday Dawladda codsatay ka bixitaanka waana in loodiraa codsigan dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
2. Kalaabashada heshiiskan wuxuu dhaqan-gal noqonayaa **2** sano kadib marka ay soobaxdo warqadda caddeynta ee xafiiska keydka ama taariikhda gaarka ah ee laguxusay warqadda xafiiska Kerydka
3. Kalaabashada heshiiskan masaamey doonto xuquuqaha iyo waajibaadka Dawladda ee ka horeeyay kabixitaanka heshiiskan

## Qodobka 28$^{aad}$

## Dib-u eegista Heshiiskan

1. Heshiiskan waa in lagu sameeyaa Dib-u-eegis 5 (shan**)** sano ee kasta iyadoo laga billaabayo marka uu dhaqalgalo heshiiskan, Dawladaha xubnaha ka ah waa in ay hubiyaan guulaha laga gaaray heshiiskan sida hormarka is-dhexgalka Ganacsiga iyo siada uu u dhaqan-galay.
2. Iyadoo laraacayo hannaanka dib-u-eegista waxay sameeykaraan soo-jeedin ku saabsan wax-kabedelka heshiiskan si waafaqsan qodobka 29$^{aad}$ ee heshiiskan marka ay qiimeeyaan hannaanka fulineed ee heshiiskan, iyo guulaha laga gaaray fulinta.

## Qodobka 29$^{aad}$

## Wax-kabedelka Heshiiskan

1. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxay leedahay xaqa soo-jeedinta waxkabedel waana in lageeyaa xafiiska Keydinta.
2. Soo-jeedinta waxkabedelka waa in 30 (sodon) maalin gudaheed lagu ogeysiiyaa Dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan iyo Xog-haynta
3. Dawladaha doonaya in ay ka falceliyaan soo-jeedinta waa in 60 maalin gudaheed ku keenaan falcelinta iyagoo xafiiska keydinta Dukumintiyada iyo xafiiska Xoghaynta
4. Falcelinnada iyo soo-jeedinta ladhigay xafiiska Xog-hayntawaa in loo diraa Gudiyada iyo Giddi hoosaadyada xubnaha ka’ ah hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika.
5. Falcelinnada Guddiyada iyo Guddi hoosaadyada shaqada ku leh waa in geeyaan xafiiska Xog-haynta. Xafiiska Xog-hayntawaa in uu falcelintaas u gudbiyaa Golaha Wasiirrada.
6. Wax kabedelka Qodobada waa in lagu ansixiyaa shir-weyne.
7. Wax-kabedelka Heshiiskan wuxuu ku guntamayaa marka laraaco hab-raaca Qodobka  23aad ee heshiiskan

## Qodobka 30$^{aad}$

## Qoraalada Rasmiga ah ee heshiiskan

Heshiiskan waa in laga sameeyaa 4 (afar) Nuqul oo asal iyo isku mid ah kuna qoran afafka Carabiga, Ingiriiska, Faransiiska iyo Boortaqiiska

## Barotokool gaar u ah ka Ganacsiag Badeecada

## Hordhac

Annaga oo ah Dawladaha Xubnaha ka ah ururka midowga Afrika.

Annagoo ka duuleyna fulinta go'aanki ka soobaxay shir madaxeedkii midowga Afrika ee Magaalada Adis-Ababa ee Dalka Ethiopia 29-30 Janaayo 2012 si loo sameeyo ra'yi uruurin, Qorshe-howleed iyo qaab-dhismeed u jeedadiisu tahay sidii loo dedeji lahaa dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo Xoojinta Ganacsiga gudaha ah ee Qaaradda Dhexdeeda.

Annagoo tix-raaceyna go'aanaddii ka soobaxay shir-madaxeedkii Madaxda Midowga Afrika ee Magaalada Johannesburge ee Dalka Koofur Afrika 14-15 juun 2015 kaas oo tirsigiisu ahaa 569 iyadoo latix raacayo miraha heshiiska Abuuja ee lagugaaray Magaalada Abuuja ee Dalka Nigeria ee ahaa Shirki 25 aad ee Madaxda Midowga Afrika kaas oo tilmaamaaye mabaa di'a ay kamid yihiin dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ujeedkiisune ay tahay is-dhexgalka Afrika.

Annagoo go'aansanay in aan yareeyno Qiimaha si loo abuurto Ganacsi iyo annagoo abuurnay jawi ku habboon hormarinta ganacsiga gaarka ah iyo is-dhaxgalka ganacsiga.

Annagoo go'aansanay in aan sare u qaadno heerka tartan warshadeed ee Qaaradda Afrika si loo abuuro suuq dhaqaale ee kudhisan iskaashi Afrika.

Annagoo kukalsoon in aan sameeyno sharci gaar u ah kaganacsiga Badeecadaha ujeedkiisu tahay horumarinta iyo isku xirka dhaqaalaha, maalgashiga, horumarinta arrimaha Bulshada iyo baabi'inta caqabadaha kuhor gudboon ee Ganacsatada Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.

Annagoo ballan kuqaadnay in aan xoojinno is-dhaxgalkaGanacsi ee Qaaradda Afrika iyadoo la'adeegsanayo is-waafajinta shuruucda Afrika, isku xirka ganacsiga xurta ah, fududeynta safarrada Ganacsi ee Qaaradda, maalgelinta kaabayaasha Dhaqaalaha, cilmiga, teknoolajiyada iyo fulinta halbeeg Ganacsi horumarsan.

Anaagoo Aqoonsan heerarka horumarin ee kala duwanaashaha Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan iyo haqabtirka baahida, mucaamilaadka gaar ahaaneed iyo gacan siinta farsamo ee Dawladaha xubnaha ka ah heshiiska ee qaba baahida.

Waxaan ku heshiinnay Qodobada Soo-socda:

## Qaybta I
## Eray-bixnno, Ujeedooyin iyo xadka

### Qodobka 1[aad]
### Qeexitaanno

Ujeeddada erayadan waxaa Erayada macnahooda waxaa loo fasirayaa sida hoos ku qoran:

a) "**Heshiiska hafinta Badeecadaha"**: waxaa loola jeedaa fulinta heshiiska Ururka Ganacsiga Adduunka Aduunka si waafaqsan Qodobka 6 aad ee heshiiska Guud  ee kusaabsan sar-goynta canshuuraha ganacsiga ee 1994
b) "**Guddi":** waxaa loola jeedaa Guddiga Ganacsiga Badeecadaha ee lagu dhisay Qodobka 31 aad ee hesiiskan gaarka ah
c) " **waajibaadka Furdooyinka":** waxaa loola jeedaa canshuuraha lasaaro nuucyada kala duwan ee badeecadaha ladhoofiyo ama lasoo dejiyo
d) "**Hannaanka Mideynta":** waxaa loola jeedaa hannaanka mideynta shuruucda lagu mideynayo caddeymaha badeecadaha ee ku dhisan heshiiaka caalamiga ah iyo tiriskooda numbareed.
e) **"Caqabadah aan ahayn canshuur":** waxaa loola jeedaa caqabadaha ku horgudboon ganacsiga ee aan ahayn canshuurta waajibtay
f) "**Asalka Wax-soosaar ":** waxaa loola jeedaa Badeecada ku guuleestay Asalka wax soosaarka ee xeerarka Asalka badeecadaha ee lifaaqa 2aad ee heshiiskan.
g) **"Kala doorashada Ganacsiga":** waxaa loola jeedaa Abaabulka ganacsi ee labo geeskoodka ah ee Dawlad kamid ah heshiiskan ay siiyo Dawladda kale iyadoon wax dhaafsaneyn.
h) "**Heshiiska Bedqabka":** waxaa loola jeedaa heshiiska bedqabka ee Ururka Ganacsiga Aduunka
i) "**Jaan tusyada wada-xaajoodyada Tariifooyinka":** waxaa loola jeedaa liiska wada xaajoodyada ee laxariirta canshuraha badeecadaha ee Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waana in ay ku dhacdaa daah-furnaan

si waafaqsan Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

j) **“TBT”:** waxaa loola jeedaa caqabadaha farsamo ee Ganacsiga iyo

k) **“TBT Agreement”:** waxaa loola jeedaa Heshiiska Ururka Ganacsiga Aduunka ee caqabadaha farsamo ee Ganacsiga

## Qodobk 2aad

## Ujeeddooyinka

1. Ujeeddada guud ee heshiiskan Gaarka ah waa in la’abuuro Suuq Ganacsi ee xor ah si waafaqsan Qodobka 3 aad ee heshiishka
2. Ujeeddada gaar ahaaneed ee heshiiskan gaarka ah waa in laxaqiijiyo is-dhaxgalka Ganacsi ee Qaaradda Afrika ayadoo loomarayo:
   a) Baabi’inta Qiimaha go’an ee canshuuraha
   b) Baabi’inta caqabadaha aaan canshurta aheyn isla markaana lidka ku ah Ganacsiga
   c) Sare u qaadida Hanaanka Furdooyinka iyo fududeenta howlaha Ganacsi
   d) Sare u qaadidda wada shaqeynta in laga gudbo caqabadah lidka ku ah Ganacsiga iyo halbeegyada Ganacsiga
   e) Horumarinta iyo dhiirigelinta Ganacsiga Gobalka iyo kan Qaaradda Afrika
   f) Sare u qaadidda horumarinta dhaqaalaha Bulshada, kala duwanaanshaha iyo wershadeynta Afrika oo dhan.

## Qodobka 3aad

## Xadka heshiiskan gaarka ah

1. Qodobada heshiiskan gaarka ah waa in lagu dabaqaa Ganacsiga Badeecadaha ee u dhexeeya Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan
2. Jaantusyada lifaaqa 1 aad go’aamada canshuuraha, lifaaqa 2aad ee xeerarka la xariira tayada badeecadaha, lifaaqa 3aad Gooabaha canshuuraha iyo maamulka, lifaaqa 4aad Fududeynta Ganacsiga, lifaaqa 5aad xalka dhibaatada Gabnacsiga, lifaaqa 6aad farsamada dhibaatada Ganacs, lifaaqa 7aad hal-beegyada nadaafadda, lifaaqa 8aad kalssoni abuurka, iyo lifaaqa 9aad ee magdhawyada Ganacsiga dhammaan lifaaqyada waxa in ay qeyb muhiim ah kayihiin heshiiskan gaarka ah

## Qaybta II

## Sinnaanta

### Qodobka 4aad

### Mudnaan isku wada mid ah

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa in ay ka heshiiyaan Dawladaha leh mudnaanta si waafaqsan Qodobka 18 aad ee heshiiskan
2. Heshiiskan wuxuu ogol yahay in Dawladkasta ee xubin ka ah heshiiskan gaarka ah qeyb kanoqo karto heshiis Dawlad xubin ah ama aan xubin ka aheyn
3. Heshiiskan wuxuu ogolyahay in labo Dawlad ama kabadan ay sameykaraan iskaashi laxiriira sida ay u meel mari lahaayeen u jeedooyinka heshiiskan
4. Iyadoo ay sidiideeda u taaganyihiin Farqadaha 2 iyo 3 ee Qodobkan, Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan qasab kuma aha in ay iskaashi sameeyaan. Dawladda xubinta ah waa in ay wada xaajood kagashaa qaabka mudnaansiinta ee laxariira heerka dhaqaale ee Dowlaha xubnaha ka ah heshiiskan

### Qodobka 5aad

### Mudnaan isku mid ah

Dawladda xubinta ah waa in ay heshiis ka gashaa wax soosaarka ay u dhoofisa Dibadda wax aan kayareyn qiimaha lagu iibiyo sicirka Gudaha marka lagabixiyo canshuurta si waafaqsan Qodobka 3 aad ee heshiiska Guud janngoynta canshuuraha Ganacsiga ee 1994

### Qodobka 6aad

### Mudnaanta Gaarka ah

Si waafaqsan Ujeeddada Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waa in ay hubisaa is-fahamka iyo isweydaarsiga faa-iido ee ganacsi ee dhaexmara laba Dawlad ama kabadan ujeedkutahay meelmarinta heshiiskan

## Qaybta III

## Xoreynta Ganacsiga

## Qodobka 7aad

## Canshuuraha soo-dejinta Badeecada

1. Baabi'inta canshuuraha xad-dhaafka ee lasooro badeecadah taas oo dhibaato ku ah Dawlad xubin ah si waafaqsan jaantuska lifaaqa 1aad ee heshiiskan gaarka ah.
2. Ganacsiga xorta ah darteed Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa in aaney soo saarin canshuur cusub ee lasooro badeecada haddi aan heshiiskan gaarka si kale u sheegin
3. Canshuurta soodejinta Badeecadaha waxay tahay nooc kasta ee badeecada kamid ah ee katimid Dawlad xubin ah heshiiskan mana lasaari karo wax canshuur dheeraad ah balse kumajikaraan kuwa soosocda:
   a) Canshuurta u dhiganta tan lasaaro badeecada guda ah si waafaqsan Qodobka 3 aad Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994 waana in la'ilaaliyaa anshaxa tartanka Badeecadaha;
   b) Magdhawyada Canshuuraha si waafaqsan Qodobada 6aad iyo 16 ee Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994kii, Heshiiska Ururka Gnaacsiga Aduunka iyo Qodobada 18aad iyo 19aad ee heshiiskan Gaarka ah; iyo
   c) Qiimaha lacageed ee joogtada ah si waafaqsan Qodobka 8aad ee Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994kii.

## Qodobka 8aad

## Jaantuska Canshuuraha

1. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa in ku dhaqantaa canshuurta soodejinta badeecadaha si waafaqsan jadwalka kucad lifaaqa 1 aad ee heshiiskan Gaarka ah waana in lagawada xaajoodo si uu noqdo qeyb muhiim ah kamid ah heshiiskan
2. Iyadoo ay jiraan Qodobada heshiiskan gaarka ah, Dawlad xubin ka ah Urur Gobeedka Dhaqaalaha Afrika ee leh suuq xor ah oo ka heer sareyso kana gudbay caqabadaha Ganacsiga waxay Dawladda xubinta ka ah heshiiskan ula dhaqmeysaa sida Dawlad xubin ka ah heshiiska

## Qodobka 9aad

## Xaddidaad canshuuraha

Dowlaha xubnaha ka ah heshiiskan masamey karaan wax dulsaar ah canshuuraha dhoofinta iyo soo-dejinta badeecadaha haddii aan si kale loogu sheegin heshiiskan ama lifaaqa iyo Qodobka 15aad ee Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994 ama Qodobada heshiiska Ururka Dhaqaalaha ee Afrika

## Qodobka 10aad

## Canshuuraha Badeecadaha la dhoofiyo

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay saarayaan canshuur Badeecadaha ay dhoofiyaan canshuur u dhigata tan loo-soo dhoofiyo Dawladdaas.
2. Waa in canshuurta Badeeco kasta ee la ee la dhoofinayo Dawladaha xubnaha ka ah heshiishkan ay waa fajiyaan Qodobkan aydoo aaney jirin wax kala sooc ah.
3. Dawladda xubinta ah ee dooneysa in ay soo-bandhigto canshuurta badeecadaha ay dhoofiso si waafaqsan faqradda 2 aad ee Qodobkan waa in ogeeysiiskan u dirtaa Xog-haynta muddo 90 (sagaashan) cisho gudaheed ah

## Qodobka 11aad

## Wax ka-baddelka Canshuuraha Badeecadaha

1. Xaalado gaar ah darteed, Dawlad xubin ah waxay codsan kartaa wax-ka-baddel jadwalka qiimaha canshuurta
2. Dawladda xubinta ah ee dan kale wax-ka-baddelka jadwalka qiimaha canshuurta waa in lagu hagaajiyaa Xoghaynta codsiga qoraal lagu caddeynayo xaaladdaas gaarka ah.
3. Iyadoo la tixraacayo codsiga waa in xoghayntu ay codsiga u dirtaa dhammaan dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
4. Dawladda xubinta ka ah ee dan kaleh codsiga soo gaaray waxay ka faceli kartaa codsigan muddo aan kabadneen 30 (sodon) maalin oo ka billabaneysa

maalin uu soogaaray codsiga waana inay u geeyaan xoghaynta oo ay waajib tahay in uu gaarsiiyo dhammaan dawladaha xubnah ka ah heshiiskan.

5. Dawladda codsatay wax-ka-baddelka canshuurta iyo dawladaha kale heshiiska xubnaha ka ah ee kuxusan faqradda (3) ee Qodobkan waa in ka wada-xaajoodaan iyagoo qiimeynaya magdhawga.
6. Waa in lagaar siiyaa dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan natiijada kasoo baxda wada-xaajoodka iyo magdhawga ka dhashay wax-ka-baddelka canshuuraha, Magdhawga waxaa loo raacayaa si waafaqsan Qodobka 4aad ee heshiiska Gaarka ah
7. Wax-ka-baddelka wuxuu dhaqan-gelayaa marka dawladda xubinta ah ee la saaray magdhawga bixiso si waafaqsan faqradda (6) ee Qodobkan, waana inay ansixiyaan xukunka magdhawga Golaha Wasiirrada lana gaarsiiyaa dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.

## Qodobka 12aad

## Baabi'inta caqabadah aan ahayn canshuurta

Marka laga reebo Qodobada lagu caddeeyay heshiiskan, caddeymaha caqabadah, Nuuca iyo maamulka qaabka looga baabi'inayo caqabadaha ganacsiga ee Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa in looraacaa si waafaqsan lifaaqa 5aad ee heshiiskan

## Qodobka 13aad

## Asalka Badeecada

Shuruudaha lama huraanka u ah tayada Badeecada ay soo saarto dawlad xubin ka ah heshiisakan waxaa loo laraacaa si waafaqsan lifaaqa labaad ee heshiiskan.

# Qaybta IV

# Iskaashiga furdooyinka, fududeynta Ganacsiga iyo sii-haynta Badeecada

## Qodobka 14aad

## Iskaashiga furdooyinka iyo maamulka

Dawladah xubnaha ka ah heshiiskan waxay yeelan karaan wada-shaqeyn iyo iskaashi maamul dhinacyada canshuuraha si waafaqsan lifaaqa saddexaad ee heshiiskan.

## Qodobka 15aad

## Fududeynta howlaha Ganacsiga

Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa inay fududeeyaan hawlaha Ganacsi si waafaqsan lifaaqa afaraad ee heshiiskan.

## Qodobka 16aad

## Siiheynta Badeecada

Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa in ay sii hayaan badeecada si waafaqsan lifaqa siddeedaad ee heshiiskan.

# Qaybta V

# Badbaadada Ganacsiga

## Qodobka 17aad

## Badbaadada Ganacsiga

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan eek u xad-gudubka Qodobkan Qodobkan waxaa laga qaadayaa Magdhawga Ganacsi.
2. Dhaqan-gelinta magdhawga ee Qodobkan waxaa loo tix raacaya si waafaqsan Qodobka 9aad ee lifaaqa heshiiskan iyo Qodobada magdhaw ee Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ama waxaa loo raacaya hab waafaqsan magdhawga Ganacsiga ee heshiiska Ganacsiga Aduunka.

## Qodobka 18aad

## Ilaalinta Badqabka Ganacsiga

Dhaqan-gelinta Qodobkan waxaa loo dabaqayaa si waafaqsan lifaaqa sagaalaad iyo Qodobka 19aad ee Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994kii iyo Hesiishka Ururka Ganacsiga Aduunka.

## Qodobka 19aad

## Mudnaan-siinta Badqabka Ganacsiga

1. Dawlad xubin ah waa ka dacwoon kartaa haddii ay dawlad kale ee xubin ah kasoo gaaraan badeeco yeelata ceebo ama sababta waxyeello khatar ah ama dhibaato u geeysata wax soosaarka gudaheeda ah.
2. Dhaqan-gelinta Qodobkan waxaa loo dabaqayaa hab waafaqsan lifaaqa 9aad ee heshiiskan ee ku saabsan Magdhawga Ganacsiga iyo Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika.

**Qodobka 20aad**

**Iskaashi dhinaca Magdhawga iyo Baarista Badqabka Badeecada**

Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa inay iska kaashadaan Magdhawyada si waafaqsan lifaaqa 9aad ee heshiiskan iyo Qodobada nidaaminaya Magdhawga ee Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika.

## Qaybta VI

## Heerarka Waxsoosaarka

**Qodobka 21aad**

**Khataraha farsamo ee Ganacsiga ku horgudban**

Qodobkan waxaa lagu dabaqayaa si waafaqsan lifaaqa 6aad ee heshiiskan

**Qodobka 22aad**

**Tallaabooyinka bedqabka iyo fayadhowrka**

Qodobkan waxaa lagu dabaqayaa si waafaqsan lifaaqa 7aad ee heshiiskan.

## Qaybta VII

## Siyaasado is-dhameystiraya

**Qodobka 23aad**

**Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah**

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay taageeri karaan dhismaha Aag dhaqaale ujeedkiisu tahay sare u qaadidda Dhaqaalaha Afrika waxaana Maamulaya Golaha Wasiirrada

2. Dhaqaalaha kasoobaxa Aagga waxaa loo adeegsanayaa horumarinta shuruucda Afrika iyo warshadeeynta Qaaradda Afrika
3. Ganacsiga iyo Dhaqaalaha ka dhasha Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah ee Afrika waaxa waxaa lagu dhaqayaa si waafaqsan lifaaqa 2aad ee heshiiskan

**Qodobka 24aad**

**Warshadaha yaryar**

1. Dhismaha warshado cusub waa mid u baahan in ay ku timaad Qorshe heer Qaran ah oo u baahan taxadir khataraha ka'imaakara warshadaha waana in lagu qeybiyaa hab caddaalad ah
2. Golaha Wasiirrada ayaa waa in ay dhaliyaa qaabka dhaqangalka ee Qodobkan

**Qodobka 25aad**

**Waxyaabaah lama huraanka u ah Hufnaanta Shirkadaha Ganacsi**

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa in Xog-haynta u soo gudbiyaan hey'adahooda Ganacsi si loo hubiyo hufnaanta shaqada.
2. U jeeddada faqradda (1) ee Qodobkaoban, Hay'adda Ganacsi waxaa loo qaadan karaa Hay'ad dawladeed ama aan dawlad aheyn waxaa kamid Hay'adaha suuq-geynta Ganacsiga, ama ha'yad kasta ee leh awood Dastuuri ah ee iibka, dhoofin badeeco ama soo-dejin si waafaqsan Qodobka 17aad ee Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994kii.

## Qaybta VIII

## Qodobada Ka-reeban Heshiiskan

### Qodobka 26aad

### Qodobbo Guud

Lama Hirgalikaro Qodobkaobda Heshiiskan ee lama huraan u ah wada xaajood kudhisan caddaalad ee u dhexeeya Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ama kahor imaanaya xeerka caalamaiga ah ee laxiriira Ganacsiga iyoka hor imaanaya Qodobkaob sharci oo dhqangalay kana horreeyay heshiiskan Dawlad kasta mahirgeli karto heshiiskan:

a) Lama huraan ah in uu ilaaliyo anshaxa guud ee Dawladda;
b) Lama huraan ah in uu ilaaliyo Dadka, Xoolaha, Dhirta iyo caafimaadka;
c) In ku saabsanaadaa Dhoofin iyo soo-dejin Dahab ama Qalinka;
d) Aan ka shaqeyn addonsi maxaabiista;
e) Laga huraan ah ee aan lasoco Karin heshiiskan oo ay kamid yihiin caado Dhaqameed hirgalay;
f) Haddii uu heshiiskan uu khatar grlinayo Keydka dhaqaale ee Dawladda ama taariikhda Dawladda;
g) Haddii uu heshiiskan uu si toos ah uga hor-imaanayo ama dhaawac xun u geeysanayo daryeelka iyo wax soosaarka Dalka;
h) Haddii uu heshiiskan uu ka hor-imaanayo waajibaadka iyo heshiis ay wada galeen Dawlad Goboleed ee ansixiyeen Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan;
i) Haddii uu heshiiskan uu hhos u dhigayo tirade wax soo saarka ee Gudaha Dawladda ama uu hoos u dhigayo qorshaha iibka iyo qiimaha ee Dawladda ama uu hoos udhigayo wax soosaarka Gudaha dhiirigelinaya soo-dhoofinta badeecadaha; iyo
j) Haddii uu heshiiskan uu saameyn xun ku yeesho iibka gudaha iyo mabaadi'da guud ee ah wadaagga wax-soo-saarka Aduunka ama uu toos uga hor imaanayo Qodobkaob kale ee Heshiiskan gaarka ah.

### Qodobka 27aad

### Qodobada Bedqabka ee Ka-reeban Heshiiskan

Qodobada aan ku caddeyn Heshiiskan Gaarka ah waxaa loo fasirayaa:

a) Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxay ka caba kartaa waxkasta ee dhib ku ah Danaheeda bedqab ama

b) Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxay xaq u leedahay in ay is-hortaag ku sameyso waxkasto oo dhibaato ku ah badqabka wax-soo-saar ama Ganacsi ee dadkeeda:

   i. Alaabta kala dhambalmi kara ama kala bixi kara;
   ii. Aaladaha la xiriira shixnadaha hubka lagu fuliyo dagaalka ama qalabka kale ee ciidamada; iyo
   iii. Aaladaha la xiriira shixnadaha xaaladaha degdega ah ee caalamiga.

c) Dawlad kasta ee xubin ka ah heshisskan waxay qaadi kartaa tallaabo kasta ee uu waajib u siinayo si waafaqsan Axdiga Qaramada Midoobay ee ku saabsan Nabad-gelyada.

## Qodobka 28aad

## Habka lacag bixin

1. Haddii dawlad xubin ka ah heshiiskan ay bixin weydo lacagta go'aannada laga qaadanayo waxaa la dabaqayaa si waafaqsan xuquuqaha iyo waajibaadka caalamiga ah iyo heshiisyada kale ee Dawladdu xubin ka tahay sida Heshiiska Ururka Ganacsiga Aduunka, Qodobada Ha'adda lacagta Adduunka iyo Bankiga lacagta Afrika waa in la ilaaliyaa Niyad wanaagga, caddaaladda iyo sinnaanta.
2. Tallaabada laga qaadayo dawladda xubinta ka ah heshiiskan ee lagu eedeeday lacag bixin la'aanta waa in la ogeeysiiyaa dhammaan dawladah xubnaha ka ah heshiiskan kana soo jawaabaan sida ugu dhaqsiyaha badan oo maan-galka ah.

# Qaybta IX

## Iskaashiga Farsamo ee sare U-qaadidda Awoodda

## Qodobka 29aad

## Iskaashiga Farsamo iyo Aqooneed ee sare U-qaadidda Awoodda

Si loo dhaqan-geliyo heshiiskan Xoghaynta waa inay isku xirtaa dawladah xubnaha ka ah Ururka Dhaqaale Goboleedka Afrika iyo Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan si ay u sameeyaan iskaashi Ganacsi iyo dhismaha kaabayaal Dhaqaale si waafaqsan heshiiskan:

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ayaa ka heshiinaya qaabka wada-shaqeynta si uu u meelmaro heshiiskan.

2. Xoghaynta ayaa sahminaya wadiiqooyin lagu xaqiijinayo kheyraadka loogu baahan yahay fulinta Arrinmahan.

## Qaybta X

## QODOBBO ASAASI AH (INSTITUTIONAL)

### Qodobka 30aad

### La-tashiga iyo Xalinta Khilaafaadka

Haddii aan si kale loogu sheegin heshiiskan, waxaa la dhaqan-gelinayaa Qodobada iyo habraacyada kale ee ku cad heshiiskan ee la xiriira la-tashiga iyo Xalinta Khilaafaadka.

### Qodobka 31aad

### Qiimeynta iyo Fulinta heshiiska

1. Si waafaqsan Qodobka 11aad ee lagu dhisay Guddiga Ganacsiga Badeecadaha ayaa mas'uul ka ah hawlaha fulinta heshiiskan ayagoo Golaha Wasiirrada u gudbinaya natiijada tallaabada ay qaadeen. Guddiga wuxuu yeelan karaa guddi hoosaad si loo fududeeyo shaqada.
2. Haddii aan si kale loogu sheegin heshiiskan, Guddiga Ganacsiga Badeecadaha iyo Guudi hoosaadka ay dhistaan waxay wakiilo matala u yihiin dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
3. Guddoomiyaha Guddiga Ganacsiga Badeecadaha waxaa dooranaya Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
4. Si waafaqsan Qodobka 35aad (5) ee heshiiskan, hawlaha Xoghaynta waxay tahay la-talin, diyaarinta warbixin-sanadeedka, fududeeynta hawlaha shaqo, maamulka iyo kor-joogteynta.
5. Warbixinnada Xoghaynta waa in lasoo marsiiyaa ayna ansixiyaan Golaha Wasiirrada.

### Qodobka 32aad

### Habraaca wax-ka-beddelka Heshiiska

Wax-ka-baddelka heshiiskan gaarka ah waxaa loo samey karaa si waafaqsan Qodobka 29aad ee heshiiskan.

## Hordhac

## Baratokool gaar u ah Ganacsiga Adeeg-bixinta

Annagoo ah Dawladaha Xubnaha ka ah ururka midowga Afrika,

Annagoo ka duuleyna fulinta u jeedooyinka, mabaadi'da iyo sharciga lagu dhisay Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika, is-dhaxgalka iyo horumarinta Ganacsi ee Qaaradda Afrika.

Annagoo go'aansananay inaan sare u qaadno Ganacsiga Adeeg bixinta Adeeg Ganacsi ee xor ah kuna dhisan sharci asaasi ah iyo mid dhaqaale ee ujeeddada tahay in la helo bulsho leh dhaqaale fiican.

Annagoo og baahida loo qabo in la abuuro lana ballaariyo Adeeg bixiyayasha si loo helo Adeeg bixin horumarsan ee ku aaddan heerarka kala duwan sida Urur-goboleedka dhaqaale ee Afrika iyo Guud ahaan Qaarada.

Annagoo go'aan sananay in aan sare u qaadno ka ganacsiga Adeeg bixinta Afrika gaar ahaan Adeegyada yar-yar iyo dhexe ee quseeya Afrika

Waxaan aamin sannahay, xuquuqaha ay u leeyihiin Dawladaha xubnaha ka ah Ururka Midowga Afrika in ay xaq u leeyihiin inay dabaqaan shauruucdooda Gudaha hadane waxaa waa inlawaa fajinayaa heshiiskan si uu u helo sharciyad uu kula falgalo Ujeeddada siyaasadda guud ee Dawladda oo ay kamid tahay: Siyaasadda Tartanka, Daryeelka macaamiilka, dhiiri-gelinta horumarrada iyo gacan siinta Dawladaha u baahan iyadoo loo fiirinayo hadba heerka ay Dawladdu taagan tahay iyadoo aan marna laga tegi-karin Daryeelka macaamiilka, ilaalinta deegaanta iyo horumar joogta ah ee Adeeg bixinta.

Annag oo og jiritaanka xaalado adkeynaya horumarka oo ay kamid yimiin; Dawlad aan lahayn xeeb, Dawlad bad kuwareegsan iyo Dawlad dhaqaala ahaan liidata

Mahadcelin; waxaan u mahadcelineynaa Madaxda Midowga Afrika ee kulankoodi 30 (Soddon) aad ee caadiga ahaa Magaalada Addis-Ababa ee Dalka Eithopia, 28 janaayo 2018[kii] go'aanka ay ku dhiseen suuqa kaliya ee Gaadiidka Hawada iyadoo la fulinaayo go'aankii Yamoussoukro.

Annagoo aad u og ahmiyadda sare oo ay leedahay in wax la isku darsado adeeg-bixin is-gaarsiinta hawada gaar ahaan suuq kaliya ee Gaadiidka Hawada u jeeddadu tahay

sare u-qaadidda is-dhax-galka Ganacsi ee Qaaradda Afrika si waafaqsan Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika.

Waxaan ku heshiinnay Qodobada Soo-socda:

## Qaybta I

## Eray bixin Heshiiskan

### Qodobka 1aad
### Qeexitaanno

Ujeeddada Erayada kujira ee heshiiskan waxaa loo fasirayaa sida soo socota:

a) **"Laan Shirkad Ganacsi":** waxaa loola jeedaa nooc ganacsi kasta ee lagu ogolaaday si waafaqsan:

i. Dastuurka iyo xeerka kale ee lagu heli karo fasax Ganacsi; iyo

ii. Abuurista laan ama wakiil Dawlad xubin ka ah heshiiskan ujeedkiisu tahay adeeg-bixin.

b) **“Canshuurta Tooska ah”:** waxaa loola jeedaa dhammaan canshuuraha dakhliga oo ay ku jiraan canshuuraha hantida, canshuuraha guryaha, dhaxalka, hadiyadaha iyo canshuuraha Musharaadka

c) **"Shirkad leh shakhdiyad Qaanuuneed”:** waxaa loola jeedaa shirkad kasta nooc kasta hala-haatee oo faa-iido doon ah ama aan faa-iido doon ahayn oo sharci ahaan u diiwaan-gashan si waafaqsan sharci dhaqan-gal ah.

d) “**Shirkad leh shakhdiyad Qaanuuneed” waa sidan:**

i . “**Isku-xiran”:** waxaa loola jeedaa qof leh awood Kontarool kuna leh qof kale;

ii**. “Kontarool"**: waxaa loola jeedaa wakiillo ka socda Dawlad xubin ah oo magcaabo shakhsiyaadka iyadoo loo eegayo badnaashaha ama si waafaqsan sharciga;

iii. **"Milkiyadda**” shakhsiyaadka Dawladda xubinta ah haddii ay ka badan %50 ee tirada lacagta lamaal-geliyay faa-iidada waxaa iska leh shaqsiyaadka Dawladda xubinta ah heshiiskan.

e) **"Shirkad ka diiwaan-gashan Dawlad kale ee xubin ah**" waxaa loola jeedaa

Shirkad ku timid mid kamid ah qaababka soo socda:

i. Shirkada ganacsi oo lagu dhisay si waafaqsan Dastuurka iyo xeerka kale ee lagu heli karo fasax Ganacsi kana diiwaan-gashan dhulka Dawladda ama Dawlad kale ee xubin ka ah heshiiskan.

ii. Haddii ay dhacdo bixinta adeega iyadoo loo marayo ganacsi shirkad diiwaan-gashan, lahaansho ama ay maamusho waa in:
- In uu maamulo shakhsi dabiici ah ee metala dawlad xubin ka ah heshiiskan ama
- Shirkad diiwaan gahan sida kucad faqradda "i" ee Qodobkan

F) "**Sharci**": waxaa loola jeedaa sharci kasta ee leh qaab kasta iyo nuuc kasta ee uu yeesho sida xeer, Dekereeto, go'aan ama go'aan maamul.

g) **"Shuruucda ay soo saaraan Dawladaha xubnaha ka ah ee laxiriira**

**Adeegyada Ganacsiga**" waxaa loola jeedaa:

i. iibka, lacag-bixinta ee adeegga;

ii. isku-xirka Ageegyada loo qabto bulshada oo ay bixiyaan dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan;

iii. Marka shirkad ama shaqsiyaad ay bixinayaan adeeg Dawlad xubin ka ah heshiiskan ee aan ahayn Dawladda dalka ay u dhasheen.

h) "**Adeeg loo asteeyaay shirkad ama Qof u gaar ah":** waxaa loola jeedaa Qof ama shirkad gaar loo leeyahay ama Dawladi leedahay ee loo gaar yeelay in ay bixiso adeeg iyadoo aan la oggolayn tartan.

I) "**Qof caadi ah ee Adeeg ka haya Dawlad kale**" waxaa loola jeeddaa Qof caadi ah ee deggan Dawlad xubin ah ee aan ahayn Dawladda uu u dhashay waxaa lagu dhaqayaa sharciga Dowlaada uu degan yahay:

i. Wuxuu noqo karaa qof Muwaadin ah; ama
ii. Qof lasiiyay deganaasho ku meel gaar ah.

**j "Qof"**: waxaa loo jeedaa Qofka dabiiciga ah ama Qof uu abuuray sharciga

l) "**Qeyb:** waxaa loo la jeedaa qeyb adeeg oo ah:

i. Qeyb ama qeybo bixisa adeeeg gaar ah;
ii. Qeybta adeegga bixisa waxay yeelan karaan qeybo hoos tagta

m) **"Adeega Dawlad siiso Dawlad kale":** waxaa loo la jeedaa adeegga Dawlad siiso Dawlad kale wuxuu noqon karaa:

I. In Dawladi ay siiso Adeeg Dawlad kale sida in markab Dawlad kale ka sharciyeeysan uu adeeg u qabto Dawlad kale si waafaqsan shuruucda badda ama Xaaladaha Qof dabiici ah uu siiyo adeeg Dawlad kale

M) **"Qofka loo qabto Adeegga":** waxaa loola jeedaa Qofka adeegga ka helaya Adeeg bixiyaha

n) "**Adeeg Bixiye":** waxaa loola jeedaa Qofka adeegga bixiya ee siiya Adeegga loo adeegaha

O) "**Adeeg Bixin":** waxaa loola jeedaa Adeeg oo uu kamid yahay wax-soo-saar, wax-qeybin, suuq-geyn, iibka iyo gaarsiin Adeeg.

p) **"Ganacsi lagu bixiyo Adeeg":** waxaa loola jeedaa Adeeg waxaana kamid ah:

i. Adeeg laga bixiyo Dhul Dawlad xubin ka ah heshiiskan lan geynayo dhulka Dawlad kale ee xubin ah;
ii. Dawladda Adeegga loo fidiyaya waxaa ay Adeegga la siiyay gaarsii kartaa Dawlad kasta ee xubin ah;
iii. Dawladda Adeegga bixineysa waxaa ay adeeg u fidi kartaa Dawlad kaste ee xubin ka ah heshiiskan ee uu u dhexeeyo Ganacsi ayadoo joogta Dhulka Dawladda adeegga loo fidinayo; iyo
iv. Dawladda xubinta ah ee bixineysa adeegga waxay adeeg sii kartaa Qof dabiici ah ama Dawlad kasta ee xubin ah ayadoo joogta Dhulka Dawladda lasiinayo Adeegga.

## Qaybta II

## Baaxada Heshiiska

### Qodobka 2aad

### Baaxada Heshiiska

1. Heshiiskan waxaa lagu daba-qayaa shuruucda ay soo saaraan Dawladaha xubnaha ka ah ee ku saabsan Ganacsiga bixinta adeegga.
2. Ujeeddada Ganacsiga adeegga ee heshiiskan gaarka ah waxaa asaas u ah 4ta qeybood ee lagu sheegay Qodobka 1aad faqradiisa (p) ee heshiiskan gaarka ah.
3. Ujeeddada heshiiskan gaarka ah waxay tahay:

a) **"shuruucda ay soo saaraan dawladah xubnaha ka ah heshiiskan"**: waa shuruucda ay soo saaraan:

i. Dawladaha xubnaha ah, Dawlad dhexe, Dawlad Hoose;

ii. Hay’adaha aan Dawliga ahayn ee la siiyay awoodda wakaalashada inay shuruuc soo-saari karaan; iyo

Iyadoo la fulinayo waajibaadka ku xusan heshiiskan gaarka ah Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa inay qaadaa tallabo ay ku dhaqan-gelinayso si loo hubiyo faalladadooda ee Dawlad dhexe, Dawlad Hoose ama Hay’adaha aan dawliga ahayn ee shuruucdooda Gudaha.

b) **“Adeeg”:** adeeg waa qeyb kasta oo adeeg ah marka laga reebo adeega lagu bixiyo awoodda Dawladnimada; iyo

c) **“Adeega lagu bixiyo awoodda Dawladnimada”:** waxaa loola jeedaa Adeeg kasta ee la bixyay mid Ganacsi oo lagu tartamayo bixinta adeegga;

4. Xadka heshiiskan Gaarka ah waxaa aan ku jirin Agabka aan dib-loo-iibin karin ay soo iibiyaan hay’adaha dawladda.
5. Heshiiskan gaarka ah laguma dabaqayo shuruucdan:
   a) Xuquuqaha safaradda hawaha aan ka ahayn xuquuqaha la-isa-siiyay; iyo
   b) Adeegyada xiriirka la leh adeegsiga xuquuqaha safarrada hawada.
6. Heshiiskan gaarka ah waxaa lagu dabaqayaa shuruucdan:

a) Cillad bixinta iyo adeegyada diyaaradaha;

b) Iibka iyo suuq-geynta ee adeegyada Gaadiidka hawada; iyo

c) Adeegyada Qalabka Kumbiyuutaradda.

## Qaybta III

## U-jeeddo

### Qodobka 3aad

### Ujeeddo

1. Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee heshiiskan gaarka wuxuu kala mid yahay Ujeeddada Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ee lagu caddeeyay Qodobka 3aad ee heshiiskan gaar ahaan in la abuuro hal suuq Ganacsi ee Adeegga xorta ah.
2. Heshiiskan gaarka ah wuxuu leeyahay ujeeddooyin gaar u ah:
   a) Sare u-qaadidda tartanka Ganacsiga Adeegga iyadoo loo marayo: horumarin Dhaqaale hoos loo dhigo qiimaha Ganacsiga, sare u-qaadidda awoodda dhaqaale ee Qaaradda iyo horumarinta kaabayaasha Dhaqaale;
   b) Dhiiri-gelinta horumarka hiigsiga ee Qaaradda Afrika;
   c) Kobcinta Dhaqaalaha Gudaha iyo Maal-gashi dibadeed;
   d) Sare u-qaadidda dadaallda horumarinta warshadah Afrika si loo horumariyo Dhaqaalaha Qaaradda;
   e) In si deg-deg ah loo abuuro suuq Ganacsiga Adeegga ee Qaaradda Afrika oo asaaskiisu yahay caddaalad, is-dhaafsi Dano iyadoo labaabi'inayo caqabadaha ku hor-gudban Adeegga Ganacsiga;
   f) In la hubiyo lana dhameystiro suuqa xorta ah ee Adeegga iyo in la sameeyo lifaaqyo kala duwan ee gaar u ah Adeegga Ganacsiga;
   g) In la dabaqo xoriyaddda suuqa xorta ee Adeegga si waafaqsan Qodobka 5aad ee heshiiska guud ee Adeegga Ganacsiga si loo kordhiyo xadka xirriyadda ujeedadiisu tahay horumarinta Adeegga dhoofinta;
   h) Sare u-qaadidda is-kaashiga iyo wada-shaqeynta ee Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ujeeddadu tahay dhaqaale abuur iyo dhiiri-gelinta tartanka suuqa Adeegyada; iyo
   i) Sare u-qaadidda cilmi baarista iyo tiknoolajiyada ee la xariirta Adeegga si loo abuuro Dhaqaale iyo Bulsho horumarsan.

## Qaybta IV

## Waajibaad Guud iyo Anshax-marin

### Qodobka 4aad

### Dawladaha ugu habboon ee leh mudnaanta

1. Ayadoo la ilaalinayo Qodobkaob kasta oo ka mid ah heshiiskan gaarka ah Dawlad kasta oo qayb ka ah waa in ay ilaalisaa waana inay isa-siiyaan Adeegyo aan shuruud lahayn oo aan ka yarayn tan lagula macaamilo Dawladda aan xubin ka ahayn heshiiska.
2. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay xubin ka noqon karaan heshiisyo kale si waafaqsan Qodobka 5aad ee heshiiska guud ee adeegga Ganacsiga waana in heshiiska cusub aanu kahor imaaneyn heshiiskan waxaana qasab ah in la gaarsiiyo dhammaan dawladah xubnaha ka ah heshiiskan.
3. Iyadoo ay jiraan faqradda (1) (2) ee Qodobkan, laba Dawlad ama ka badan ayaa heshiis ku geli kara inay xor ka dhigaan Adeegga Ganacsiga si waafaqsan heshiiskan gaarka ah ee Dawladaha kale ee xubnaha ahna waa inay oggolaadaan.
4. In kastoo ay jirayaan faqradda (2) ee Qodobkan, waa in Dawladda xubinta aanay gelin heshiis ay ka doorbidayso kan markuu dhaqan-galo. Dawladda xubinta ka ah waxaa loo fasaxay wax is-dhaafsi.
5. Qodobada heshiiskan gaarka ah looma fasiri karo in uu hor-istaagay wada-tashiag Dawlad kasta ee xubin ka ah si waafaqsan heshiiskan ujeedkuna yahay fududeenta Ganacsiaga iyo wax soo saarka Gudaha am agabka laga keeno dibadda.
6. Dawladda xubinta ka ah waa ay hirgelin karaan sharci si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan, liiska Dawladaha Mudnaanta Macaamil leh waa inay dib loogu sameeyaa dib-u eegis joogta ah.

### Qodobka 5aad

### Hufnaan

1. Dawladda xubinta ka ah waa inay baahisaa fursadaha maal-gashi si daahfuran ayadoo ku qoraysa mid kamid ah luqadaha midowga Afrika marka laga reebo wax yaalaha ka dhasha xaalad deg-deg ah. Dawladda xubinta ka ah waa inay baahisaa shuruucda iyo heshiisyada kale oo ay qeyb ka tahay Daladdu.

2. Dawlad kasta ee xubin ka noqonaysa heshiiskan waa inay ogeysiisaa Xoghaynta inta aaanay xubin ka noqon ama aanu dhqan-gelin heshiis heer Goboleed ah ama heer caalami ah oo lid ku ah heshiiskan.
3. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa inay u gudbisaan xog-haynta warbixin sanadeed taasoo ku saabsan is-beddel kasta ee ku yimid shuruucdeeda gudaha sida xeeraka, dekerootooyinka ama go'aannada maamul ee lid ku ah heshiiskan.
4. Warbixinnada soo gaara xafiiska xoghaynta waa in la gaarsiiyaa dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
5. Dawlad kasta ee xubin ah waa in ka bixisaa jawaab codsiga, warbinnada iyo su'aalaha ka yimid Dawladda kale ee xubintaka ah ama saameynta guud ee shuruucda heerka Gobol ama heer Caalami ah ee lagu caddeeyay farqada (1) ee Qodobkan.
6. Dawladda xubinta ah ee ka jawaab celinaysa codsiga, su'aalaha ama warbixinnada sare ku xusan waa inay caddeysaa ayadoo magacaabaysa waxay ka jawaabayso si gaar ahaaneed.

## Qodobka 6aad

## Soo-bandhigid Xog leh kalsooni

Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa inay soo bandhigaan xogaha iyo waxa lidiga ku ah heshiiskan ee aan ka ahayn xogaha lidka ku ah Dahana Qaranka gaar ahaan hay'adaha Ganacsiga gaarka ah ama kan dawladeed

## Qodobka 7aad

## Mudnaanta Gaarka ah

Si loo hubiyo in kororka iyo ka-faa'iideysiga ganacsiga ee adeegyada lagu helo

Dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa in:

a) Dawladda xubinta ah tixgelin gaar ah siisaa is-baddelka horumarineed ee adeegyada iyo qaababka sare loogu qaadi karo;
b) Dawladda xubinta ah tixgelisaa caqabadaha ka hor-imaan kara bixinta adeegga waxayna bixin karaan dabacsanaan iyadoo loo marayo qaabaynta qorshayaasha dhaqaale ee asaasigaah si loo waafajiyo duruufaha dhaqaale ee gaarka ah; iyo
c) Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxaa ay heshiisyo farsamo iyo kaabayaal Dhaqaale ka geli karaan fulinta heshiiskan.

## Qodobka 8aad
## Xuqa Xeer Soo-saarid

Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxay xaq u leedahay inay soo saarto xeerar cusub oo ku saabsan adeegyada iyo adeeg-bixiyayaasha adeegyada gudaha waana in la hubiyaa in xeerarka aanay ka hor-imaanayn heshiiskan gaarka ah.

## Qodobka 9aad
## Xeerarka Gudaha

1. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa inay ka fuliyaan ballan-qaadyo gaar ah, waana inay hubisaa dhammaan shuruucdeeda gudaha inay waafaqsan yihiin heshiiskan iyadoo loo marayo si maan-gal ah ujeeddo iyo hufanaan leh.
2. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxay dhisi karaan sida ugu dhaqsaha badan ee suurto-galka ah, Dhex-dhexaadiyaal, ama maxkamadaha si ay u maareeyaan khilaafaadka ka dhasha Adeegyada Ganacsiga haddii nidaamyada noocan ah aysan u madax-banaanayn Hay’adaha lagu aaminay go'aanka maamulka ee ay khuseyso Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ayaa hubinaya in la raacay habraacyada iyo dib-u-eega Xeerka.
3. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxay bixin karaan dalabka iyo ogolaashaha adeeg fulin cidda awoodda u leh iyadoo aan dib-u-dhac jirin si waafaqsan heshiiskan.

## Qodobka 10aad
## Is-dhaafsi Aqoonsi

1. Gebi ahaan ama qeyb ahaan fulinta u jeeddooyinka iyo shuruudaha lagu bixiyo shatiga hay’adaha bixiya adeegga si waafaqsan faqradda (3) ee Qodobkan Aqoonsiga noocaas ah, oo lagu gaari karo si waafaqsan shuruucda lagu bixiyo shatiyada ama haddii kale waxaa lagu salayn karaa heshiis dhexmara Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
2. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan si waafaqsan farqadda (1) ee Qodobkan waxay wada-xaajood ka geli karaan is-aqoonsi si toos iyo iskaashi waxbarashadda, khibradaha, shatiyada ama shahaadooyinka iyo in Dawladaha xubnaha ay is aqoonsadaan dhul ahaan.
3. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan kuma geli karaan heshiis aqoosi-siin Dawlad xubin ka ah qaab caddaalad darro ah iyo adeegsiga shuruudaha oggolaanshaha, shati-siinta ama xayiraad ku soo rogtay deegyada ganacsiga gudaha.
4. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa in:

a) Muddo 12 (labo toban) bilood gudahood laga bilaabo taariikhda heshiiskan dhaqan-gal ku noqday Dawladda ku wargeliso xoghaynta tallaabooyinka aqoonsi oo ay bixisay Dawladda si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan;
b) in xoghaynta uu si deg-deg ah ugu wargeliyaa dhammaan Dawladah xubnaha ka ah heshiiskan iyo xilliga maan-galka ah ee furitaanka wadahadalada si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan iyo in fursad la siiyo fursad ku filan Dawlad kasta oo kale ee xubin ah si ay ugu qeyb noqoto wada-xaajoodka kahor inta uunsan gelin wejiga ugu muhiimsan; iyo
c) Xoghaynta waa inay sida ugu deg-deg ahu wargalisya dhammaan Dawladah xubnaha ka ah heshiiskan aqoonsiyada cusub oo asaaskiisu yahay heshiis wax weyn ka baddelaya si waafaqsan faqrada (1) ee Qodobkan.

5. Dawladah xubnaha ka ah heshiiskan ee sameeynaya aqoonsi waa inay ku saleyaan Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo shuruudaha kale ee Dawladda xubinta ah ama waxay la kaashan karaan Hay'adaha Dawladda ama kuwa aan dawliga ahayn, aygoo u sameynaya shuruudo iyo halbeeg xirfadlayaasha Ganacsi.

## Qodobka 11^aad
## Adeeg-bixiyayaal loo Gaar Yeelaya Adeegyo Gaar ah

1. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa inay hubisaa in dhulkeeda aanu ka jirin shirkad bixisa adeeg loo gaar yeelay oo aan lala tartami karin waana in la helaa hab lala jaan-qaadi karo waajibaadka iyo ballan-qaadyada gaarka ah si waafaqsan Barotokoolkan.
2. Shirkadaha bixiya Adeegga waa inay u tartamaan si toos ah ama si dadban bixinta adeegyada, Dawladdu waa inay hubisaa in aan lagu xadgudbin ujeeddada iyo ku xadgudubka barotokoolkan.
3. Dawlad xubin ka ah heshiiskan ee aragta sabab lagu rumeysan karo inuu Adeeg bixiye kali ku ah adeegga Dawlad kale, waxaa lagu dhaqayaa si waafaqsan faqrada (1), (2) ee Qodobkan, wuxuuna dalban karaa Dawladda xubinta ah haynta ama u oggolaanshaha Adeeg bixiye noocan oo kale ah inuu bixiyo sababo gaar ah macluumaadka ku saabsan hawl-gallada la xiriira.
4. Marka uu dhaqan-galo Baratokoolkan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan, waa inay ilaaliyaan xuquuqda hal-abuurka iyo Qodobka la xiriira waana in la ogeeysiiyaa xoghaynta 3 (saddex) bilood ka hor qorshihii loogu tallo-galay wax-ka-beddelka ballan-qaadyo gaar ah ayaa la isticmaalayaa.

5. Sidoo kale Qodobadan waxaa lagu dhaqayaa xaaladda adeeg-bixiyayaasha Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ee si rasmi ah u saameynayo:
    a) Awood loo siiyay adeeg-bixiyayaal yar yar; iyo
    b) Is-hortaaga tartamada badan ee adeeg bixiyayaasha.

## Qodobka $12^{aad}$

## Ganacsi aan Loo-tartamin

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay aqoonsan yihiin dhaqamada ganacsi qaarkood ee adeeg-bixiyayaal kuyimaadda qaab tartan furan oo aan ka ahayn ganacsiga gudah adeegyada lama huraanka u ah in laxadido.
2. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan ay codsato in laga gacan siiyo Adeegga macluumaad bixinta Dawlad xubin ka ah heshiiskan, waa in laga gacansiiyaa si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan, waxaa ay dalban kartaa in gacan laga siiyo sharciga gudaha iyo dhawrista xog warrankeeda.

## Qodobka $13^{aad}$
## Lacag Bixinta

1. Marka laga reebo xaaladah ku xusan Qodobka $14^{aad}$ ee heshiiskan gaarka ah Dawladda xubinta ah looma adeegsanayo xayiraad ku saabsan wareejinta caalamiga iyo bixinta lacagta ee la xiriirta ballan-qaadyadeeda gaarka ah.
2. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxaa qabanaya Qodobada la xariira lacag bixin iyo sarif ee Hay'adda lacagta Adduunka si waafaqsan Qodobada heshiiskan, wax is-hortaag ah laguma sameykaro Dawlad xubin ah si aan waafaqsanayn heshiiska marka laga reebo sida lagu sheegay Qodobka $14^{aad}$ ee heshiiskan.

## Qodobka $14^{aad}$
## Xannibaad Dhaqaale si loo helo Bad-qab

1. Dawladda kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxaa lasaarayaa xayiraado ganacsi ama dhaqaale iyo cadaadis marka ay ka gaabiso ama bixin weydo lacagta, haddii ay dhacdo isku dheelitirnaan culus oo xagga bixinta lacagaha.
2. Xayiraadda dhaqaale ee lagu sheegay faqrada (1) ee Qodobkan waa in:
    a) In lagu sameeyaa si caddaalad ah ee Dawladaha xubnaha ah;
    b) Waa in lawaafajiyaa Qodobada Hay'adda lacagta Adduunka;

c) In laga fogaado saameynta xun ee dhaqaale oo soo wajahi karta Dawlad kale ee xubin ka ah heshiiskan;
d) Kama badnaan karto la tacaalidda xaaladaha ku habboon ee lagu qeexay faqradda (1) ee Qodobkan; iyo
e) In xaaladda cadaadiska laga dhigaa kumeel-gaar iyo mid laga guul gaaro si waafaqsan faqrada (1) ee Qodobkan.

3. Dawladah xubnaha ka ah heshiiskan ayaa leh go'aaminta Xalinta dhibaatooyin xayiraadaha ayaga ayaa bixinaya adeegyada kuwaas oo muhiim u ah barnaamijyada dhaqaalaha ama horumarka. Si kastaba ha noqotee, xannibaadaha noocan oo kale ah lama sii wadi karo ujeeddada ilaalinta qaybta adeegga gaarka ah.
4. Xayiraad kasta oo la fuliyay si waafaqsan faqrada (1) ee Qodobkan ama is-baddel kasta ee yimaadda, waa in si degdeg ah loogu wargaliyaa Xoghaynta.
5. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan iyo guddiga ganacsiga ee adeegyada ayaa ka wada-tashanaya fulinta Qodobkan.
6. Guddiga Adeegyada Ganacsiga waa inuu dejiyaa habraac loogu tallo-galay la tashiyo ujeedku yahay in la xalliyo xayiraadda waqti ku habboon.
7. Wada-tashiyada noocan ah waxay qiimeynayaan isku-dheelitirka lacag bixinta Dawladda xubinta ah ee la saaray xayiraadda iyadoo la tixgelinayo Qodobada soo socda:
   a) nooca iyo tirada lacagta lagu leeyahay Dawladda xubinta ah iyo dhibaatooyinka dhaqaale ee dheeriga ah;
   b) Dhibaatada Dhaqaale ama ganacsi ee la kulantay Dawladda xubinta ah; iyo
   c) Tallaabooyin kale oo sixitaan ah oo la heli karo.
8. Wada-tashiyadu waxaa looga hadlayaa xannibaadda la saaray Dawladda xubinta ka ah si waafaqsan faqradda (2) tirsiga (e) ee Qodobkan.
9. Wada-tashiga noocan ah, dhammaan natiijooyinka iyo xaqiiqooyinka kale ee la soo bandhigay oo ay bixisay Hay’adda Lacagta Adduunka ee la xiriira sarrifka lacagaha iyo isku-dheellitirka sarifka waa la oggolaanayaa si waafaqsan halbeeyada Hay’adda Lacagta Adduunka.
10. Haddii ay Dawladda xubinta ka ah heshiiskan ay tahay Dawlad aan xubin ka ahayn Hay'adda Lacagta Adduunka ee la rabo in lagu dabaqo Qodobadan, Golaha Wasiirrada ayaa u samaynaya habraac ama waxaa la raacayaa habraac kale ee ku habboon.

**Qodobka 15aad**

**Qodobbo aan La-dabaqi Karin**

Waxaa jiri kara shuruuc aan la hirgelin karin sababtuna ay tahay dhax-dhaxaadin ama takoorid aan macquul ahayn ee u dhaxeya Dawladaha Dhinaca ka ah heshiiskan xaaladaha kale ee aan la hirgelin karin Qodobadan waxaa kamid ah:

a) Marka heshiiskan uu ka hor-imaanayo anshaxa guud ama kala-dambeynta guud;
b) Marka uu heshiiskan khatar ku yahay Nafta dadka, Xoolaha, dhirta ama caafimaadka;
c) Qodobada heshiiskan oo aan waafaqsanayn Shuruucda iyo xeerarka lama huraanka ah oo ay kamid yihiin:
   i. ka hortagga ficillada khiyaanooyinka iyo wax ka-qabasho la'aanta ay ku yeelan karto adeegyada heshiiska;
   ii. ilaalinta macluumaadka gaarka ah ee shaqsiyaadka iyo ilaalinta macluumaadka sirta ah ee diiwaanada shaqsiga iyoxisaabaadka; iyo
   iii. Amniga
d) Qodobada heshiiska oo aan waafaqsanayn hab-dhaqanka Qaranka ujeedkiisu yahay hubinta sinnaanta ama ururinta cashuuraha tooska ah iyo adeeg-bixiyayaasha qeybaha kale duwan ee Dawladaha; iyo
e) Qodobada heshiiskan aan la socon karin waajibaadka u gaarka ah ee ummada sida canshuuraha oo laba laab ka badan ama ku xiran heshiis caalami ah ama Dawlad kale ee xubin ka ah heshiiskan.

**Qodobka 16aad**

**Qodobbo aan lasoco Karin Amni ahaan**

1. Lama hirgelinayo hashiiskan Qodobada soo socota:
   a) In Dawladda xubinta ah ay bixiso macluumaad ay u aragto inay lid ku tahay ammaankeed asaasiga ah; ama
   b) In Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan looga hor-tago in ku kaco tallaabo kasta oo ay ku dhaqaaqdo waxay qaddarinaysaa inay lagama-maarmaan u tahay ilaalinta danaha amnigeeda:
      i. In uu bixiyo adeegyada amni oo toos ah ama aan toos ahayn u jeeddadu ay tahay bixinta qalabka ciidamada;
      ii. In Agabka la xiriira Alaabada la kala dirri karo iyo waxyaabaha la isku halleyn karo ama qalabka ay ka soo baxaan; iyo
      iii. In la galay waqti dagaal ama xaalad kale oo degdeg ah oo caalami ah.

c) In laga hor-tago in Dawlad kasta uu qaado wax tallaabo ah iyadoo la raacayo Waajibaadka ku xusan Axdiga Qaramada Midoobay ee ilaalinta nabad-galyada caalamka.

2. Xoghaynta waa in lagu wargaliyaa inta ugu macquulsan tallaabooyinka lagu qaaday faqradaha (1) tirsiyadeeda (b/c) ee Qodobkan.

## Qodobka 17[aad]

## Kab-dhaqaale

1. Heshiiskan gaarka ah ma reebayo kab-dhaqaale Dawlad xubin ah si looga hor-tago in Dawladda adeegsato barnaamijyo horumarineed.
2. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ayaa go'aan ka gaaraya habka loo adeegsanayo iyo dib-u-eegista dhammaan kaalmooyinka la xiriira Adeegyada Ganacsiga ay xubnaha ka ah heshiiskan siiyaan dadkooda.
3. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan ee isu arakta inay si xun u saamaysay kabida wuxuu codsan karaa wada-tashi uu la yeesho dawladda xubinta ah waanna in tixgelyaa codsiga.

## Qaybta V

## Hormarinta is-dhexgalka

## Qodobka 18[aad]

## Horumarinta is-dhex-galka

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxaa ay yeelanayaan wada-xaajood oo si loo meelmariyo suuq xor ah oo horumarsan oo ay weheliso horumarinta iskaashiga si waafaqsan sharciga, u jeeddooyinka heshiiskii Abuja ee 1991[kii] xoojinta is-dhex -galka Ganacsi ee Qaaradda Afrika.

2. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa inay kawada xaajoodaan waajibaadka gaarka ah ee qaab dhismeedka dhammaan waaxaha horumarineed ee loo baahanyahay si loo gaaro iskaashi heshiiska gorgortanka ee waaxaha sharci dejinta iskaashi. dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ayaa ka heshiinaya waxaa xigi kara ka dib Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ee ku saleysan barnaamijka shaqada ee guddiga Adeegyada Ganacsiga.
3. Nidaamka xoreynta suuqa Afrika wuxuu diiradda saarayaa ciribtirka horusocodka saamaynta xun ee tallaabooyinka Adeegyada Ganacsiga si loo meelmariyo is-dhexgalka Qaaradda Afrikaanka.
4. Liiska waaxaha leh mudnaanta iyo hababka Ganacsi ee Adeegyada waa in lagu lifaaqaa Heshiiskan.
5. Barnaamijka Shaqada ku-meel-gaarka ah oo uu soo diyaariyey Dawladaha xubinta ka ah waxay hagayaan dhammeystirka Wajiga 1[aad] ee wada- xaajoodka heshiiskan gaarka ah ka hor inta aan la dhaqan-gelin Heshiiska.

## Qodobka 19[aad]
## Suuq furan

1. Suuqa xorta ah ee lagu tilmaamay Qodobka 1[aad] tirsigiisa “p” ee heshiiskan shirkadaha dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxaa ay bixisaa adeegyo dawlad xubinta ah waxaa ay heshiis ka geli kartaa dawlad kasta ee dhinac ka ah heshiiskan si waafaqsan shuruudaha iyo xaddidaadaha lagu sheegay Jaaan-tuska 8[aad].
2. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa inay dhulkeeda ka dhaqan-gelisaa suuq Ganacsi oo xor ah haddii aan si kale lagu cayimin Jadwalka, waxaa lagu qeexaa sidan:
   a) in la xaddido tirada adeeg-bixiyayaasha ha ahaadeen qaab ahaan; Tiro-koobyada, adeeg-bixiyayaal gaar ah ama labaaro baahida Dhaqaale;
   b) in la xaddido tirada lacagta ee adeegga hantida ku jirta ama labaaro baahida dhaqaale ee jirta;
   c) In la xaddido tirada guud ee hawl-wadeennada adeeg-bixiyayaasha ha ahaado qof dabiici ah ama hay’ad leh shaqsiyad qaanuuni ah oo haysta shatiga adeeg-bixinta;
   d) in la xaddido tirada guud ee dadka dabiiciga ah ee bixiya adeegyada gaarka ah, iyadoo ay qasab tahay in labaaro baahida dhaqaale ee jirta;

e) in la xaddido tallaabooyin xakameynaya hay'ad sharci ama wadajirka kaasoo adeeg-bixiye ku siin karo adeeg; iyo

f) in la xaddido ka-qayb-galka maal-gashiga shisheeye marka loo eego saamileyda ajaanibta ee ka qeyb noqoshada adeeg-bixinta.

## Qodobka 20aad

## Mudnaan isku mid ah

1. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxaa ay heshiis la geli karaan dawlad kale si ay u hesho adeeg wanaagsan dhammaan qeybaha kala duwan ee adeegyada.
2. Dawladda xubinta ah ayaa soo saari karta shuruudo si waafaqsan faqrada (1) ee Qodobkan, hadba iyadoo la eegayo adeegyada danaha dawladda iyo sida ay u rabto adeegga.

3. Dawladda xubinta ka ah heshiiskan waa inay si rasmi ah oo cadaalad ah u sameysaa shuruudaha tartanka ee adeegyada.

## Qodobka 21aad

## Ballan-qaadyada Dheeraadka ah

Dawladdaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay ka wada-xaajoon karaan ballan-qaadyada iyadoo la tixraacayo tillaabooyinka saameynta adeegyada ganacsiga ee aan ku xirneyn jadwalka si waafaqsan Qodobada 19aad iyo 20aad ee borotokolka, ballan-qaadyada noocan ah waa in la waafajiyaa Jadwalka Dawladda ee ballan-qaadyada gaarka ah.

## Qodobka 22aad

## Jaan-tuska Ballan-qaadyada Gaarka ah

1. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa inuu dejiyaa jadwal ku cad ballan-qaadyo gaar ah si waafaqsan Qodobada 19aad, 20aad iyo 21aad ee Baratokoolkan.
2. Jaan-tuska ballan-qaadyo kasta ee la sameynayo waa in lagu fuliyaa Jadwalka ballan-qaadka gaar ka ah waana inuu cayimaa:

   a) xaddidaadaha iyo shuruudaha helitaanka suuq;

   b) shuruudaha iyo u qalmidda heer Qaran;

   c) hawlo la xiriira ballan-qaadyo dheeri ah; iyo

   d) goorta uu ku habboon yahay ee la hirgelin karo balan-qaadka, waxaa qiime yeelanaya taariikhda dhaqan-galka.

3. Lama tixgelinayo ballan-qaad kasta ee aan waafaqsaneyn Qodobada 19aad iyo 20aad ee heshiiskan.

4. Jadwalka ballan-qaadyada gaarka ah hababka adeegyada Ganacsi Waaxaha mudnaanta leh adeegyada la ansixiyay.

5. Barnaamijka Shaqada ku-meel-gaarka ah oo ay soo diyaariyeen Dawladaha xubnaha ka ah waana in lagu hagaa dhammeystirka wada-xaajoodka wajiga 1[aad], ka hor inta aan la dhaqan-gelin Heshiis.

## Qodobka 23[aad]
## Wax-kabaddelida Jaan-tuska Balan-qaadyada Gaarka ah

1. Dawladda xubinta ka ah heshiiskan waxba kama beddeli karto ama ka laaban karto ballan-qaad kasta oo waqtigiisa dhaafay 3 (saddex) sano ka dib marka uu dhaqan-galay.
2. Wax-ka-beddelka ama kalaabashada ballan-qaadka ee dawladda xubinta ka ah heshiiskan waa uu dhaqan-gelayaa marka ay dawladdu wargeliso xoghaynta muddo aan ka badaneyn 3 (saddex) bilood.
3. Codsi kasta ee dawladda xubin ka ah heshiiskan ee soo jeediso ka noqoshada si waafaqsan faqrada (2) ee Qodobkan, waxaa la gelayaa dulucda is-baddelka ama waa laga wada-xaajoonayaa magdhowga lama huraanka ah.
4. Magdhawyada lagooyay waa in lagu sameeyaa sida ay isku raacaan dawladaha ugu badan.
5. Haddii aan heshiis laga gaarin is-baddelka dawladda xubinta ah waa in lala galaa wada-hadal u noqo karta magdhow iyo inay qayb ka noqoto geedi-socodka.
6. Haddii aysan jirin dawlad xubin ka ah oo codsaday xalinta khilaafka, dawladdaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay xor u yihaiin hirgelinta soo jeedinta.
7. Wax-ka-beddelka ballan-qaadka ee dawlad xubunta ah wuxuu ku guntamayaa marka ay dawladda bixiso magdhawga la saaray.
8. Haddii dawladda xubinta ay hirgelinta wax-ka-baddelka iyadoo aan laga gelin wada-hadal ama xal laga gaarin khilaafka waxaa la raacayaa si waafaqsan Qodobka 4[aad] ee heshiiskan.
9. Wada-hadallada iyo wada-xaajoodyada waxaa fududeynaya Guddiga Adeegyada Ganacsiga.

## Qodobka 24[aad]
## Diidmada Faa-iidada

Dawladda xubinta ka ah heshiiskan waa diidi kartaa bixinta faa'iido marka la eego ogaysiinta hore iyo la tashiga adeeg-bixiyayaasha ee dawlad kale, adeeggaas oo ay bixisay shirkad aan lahayn shaqsiyad-qaanuuneed ama dawlad aan xubin ka ahayn heshiiskan ama adeegga xiriir ganacsi aan la lahayn ee dawlad kale oo xubin ka ah heshiiskan.

## Qaybta VI

## Qodobada Dastuuriga ah

### Qodobka 25aad

### La-tashiga iyo Xalinta khilaafaadka

Qodobada heshiiskan iyo habraaciisa waxaa lagu xalinayaa khilaafaadka iyadoo laga sameynayo wad-tashi si waafaqsan heshiiskan.

### Qodobka 26aad

### Maamulka hirgelinta

1. Golaha Wasiirrada si waafaqsan Qodobka 11aad ee Heshiiska waxay dhisayaan Guddiga Adeegyada Ganacsiga kaasoo fulinaya hawlaha loo xilsaaray. Guddigu waxay dhisi karaan guddi hoosaad haddii ay la haboonaato si waafaqsan heshiiskan.
2. Goddoomiyah Guddiga waxaa dooranaya dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
3. Shaqada Guddiga waxay tahay diyaarinta warbixin-sanadeedka ee dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan iyo fududeynta maamulka iyo fulinta heshiiskan.

### Qodobka 27aad

### Iskaashi caawimaad farsamo iyo dhismo kaabayaasha Dhaqaale

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay aaminsan yihiin in muhiimadda ay leedahay iskaashi caawimaad farsamo iyo dhismo kaabayaasha dhaqaale si loo dhameystiro xoriyadda adeegyada iyo in la gaaro ujeeddooyinka heshiiskan.
2. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ayaa isku raacaya meeshii ay suura-gal tahay in laga abuuro iskaashi dhaqaale si sare loogu qaado horumarta dhaqaalaha ee dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan iyadoo loo marayo hannaankan:
   a) Dhismaha kaabayaal dhaqaale iyo tababar adeeg-bixin;
   b) Sare u-qaadista kartida adeeg-bixiyayaasha inay soo ururiyaan macluumaad ku saabsan xeerarka heer caalami, Qaarad, Gobal ama Qaran;

c) Taageerida, ururinta iyo maaraynta macluumaadka tirakoobka Adeegyada Ganacsiga;
d) Hagaajinta awoodda dhoofinta ee adeegga gaar ahaan adeegga yar-yar ama dhexe iyadoo mudnaanta la siinayo haweenka iyo dhalinyarada bixiyayaasha ah;
e) Taageeridda wada-xaajoodka iyo heshiisyada dano is-dhaafsi;
f) Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ayaa fududeynaya is-dhex-galka iyo wada-hadalka u dhaxeeya adeegga bixiyayaasha ee ku salaysan wadaagida macluumaadka, is-dhaafsiga khibradaha, fursadaha suuqa, waa in wadaagista iyo waxbarashada ay noqotaa wax-qabadka ugu wanaagsan (Best practices);
g) Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa inay wax ka qabtaan tayada iyo heerarka baahiyaha ee adeegga si waafaqsan heshiiskan; iyo
h) Dhisidda iyo hirgelinta nidaam gaar u ah qaybaha adeegyada ee Qaaradda Afrika heer gobol iyo heer qaran si loo hirgeliyo ujeedooyinka heshiiskan.

3. Xoghaynta waxaa waajib ku ah isku dubaridka hawlaha adeegyada iyo bixinta kaalmada farsamo, iyadoo lala kaashanayo dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.

## Qodobka 28aad
## Lifaaqyada Heshiiska Gaarka ah

1. Dawladaha xubinta ka ah ayaa horumarin kara lifaaqyada ku saabsan hirgelinta Heshiiska gaarka ah iyo dhaqan-gelintiisa:

a) Jaan-tuska meelmarinta heshiiskan;

b) Mudnaan siinta dawlado gaar ah;

c) Adeegyada Gaadiidka Cirka;

d) Goobaha leh Mudnaanta; iyo

e) Qaabka fulinta iyo hirgelinta heshiiskan.

2. Heshiiskan gaarka ah waxaa lagu ansixinayaa Shir-madaxeed, lifaaqyada ku lifaaqan waxay qeyb ka yihiin heshiiska

3. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay horumarin ku samayn karaan hirgelinta heshiisyada gaarka ah iyo lifaaqyada.

## Qodobka 29aad
## Wax-ka-baddelka Baratokoolka

Heshiiskan gaarka ah waxaa laga samayn karaa wax-ka-baddelka si waafaqsan Qodobka 29aad ee heshiiskan.

## Baratokool kusaabsan xeerarka iyo habraacyada Xalinta khilaafaadka

Annaga oo ah Madaxda Midowga Afrika

Waxaan ku heshiinay Qodobada soosocda:

## Qodobka 1aad
## Qeexitaanno

a) **"AB"** waxaa loola jeedaa Golaha Rafcaannada ee lagu dhisay Qodobka **20aad** ee heshiiskan gaarka ah

b) **"Dhinaca cabtaha"** waxaa loola jeedaa Dawlad xubin ah ee hay'adda u soo gudbisa cabasho si waafaqsan heshiiskan

c) "**Wada ogol":** waxaa loola jeedaa in Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ee kasoo qeyb-galay kulanka Xalinta khilaafaadka ay gaaraan go'aan wada ogol ah.

d) "**Maalmaha":** macnaheedu waa maalmo shaqo oo cadiga ah oo lagu xisaabiyaa sida ku cad taariikhda miilaadiyada.

e) "**Khilaaf**"**:** waxaa loola jeedaa is-faham darro u-dhexeeya Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan kuna saabsan fasiraadda Qodobada ee laxiriirta xuquuqaha iyo waajibaadka ka dhasha,

f) "**DSB":** waxaa loola jeedaa Ha'yadda Xalinta Khilaafaadka oo lagu dhisay Qodobka 5aad ee heshiiskan gaarka ah

g) "**Ganaax":** waxaa loola jeedaa Ganaax ee lagu xalliyo khilaafaadka ee lagu dhisay Qodobka 9aad ee heshiiskan gaarka ah.

h) "**Dawladda xubinta ee Dacwadda wadata":** waxaa loola jeedaa Dawlada xuninta ee qabta dacwadda.

i) "**Dawladda xubinta ee Xalinta Khilaafaadka**" waxaa loo lajeedaa Dawladda xubinta ah ee loo xilsaaro katala-bixinta iyo Xalinta Khilaafaadka.

j) “**Dawladda saddexaad”:** waxaa loola jeedaa Dawlad xubin ah ee aan ahayn labada Dawlad ee u dhexeeyo Khilaafka balse danka leh.

## Qodobka 2aad
## Ujeeddo

Heshiiskan gaarka ah wuxuu dhisayaa hab-maamul ee xaliya khilaafaadka si waafaqsan Qodobka 20aad ee heshiiskan ujeedkiisu tahay in la hubiyo xalka oo ku dhisan hufnaan, isla-xisaabtan iyo caddaalad si waafaqsan Qodobka heshiiskan.

## Qodobka 3aad
## Baaxada Heshiiska Gaarka ah

1. Baaxada heshiiskan gaarka ah wuxuu khuseeyaa Xalinta khilaafaadka ee ka dhasha xuquuqda iyo waajibaadka ee ka-dhex-dhasha si waafaqsan Qodobada heshiiskan.
2. Xalinta khilaafaadka ee heshiiskan gaarka ah waxa loo raacayaa xeer nidaamiye iyo habraacyo si waafaqsan heshiiskan.
3. Ujeeddada ah Xalinta khilaafaadka waxay tahay in xal la gaaro tabashada dawlad xubin ka ah heshiiskan marka ay keensato arji si waafaqsan qodobka 7aad ee heshiiskan gaarka ah.
4. Xalinta khilaafaadka ee dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa in la raacaa xeerka iyo habka uu jideeyay heshiiskan.

## Qodobka 4aad
## Qodobbo Guud

1. Habka Xalinta khilaafaadka ee dhismaha heshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waa udub dhaxaadka ee amniga iyo hab abuuraya xaalad degenaasho dhaqaale. Hannaanka Xalinta khilaafaadka waa in uu ilaaliyaa xuquuqaha iyo waajibaadka dhinacyada si waafaqsan heshiiskan ama waxaa la raacayaa hannaanka sharci dhaqameed, ama sharciga caalamiga ee guud.
2. Ha’adda Xalinta khilaafaaka waa inay raacdaa habka Xalinta khilaafaadka ee heshiiskan waana in ujeedku noqdaa xal waara.
3. Xalka ay gaaraan Dawladaha uu ka dhexeeyo khilaafka ee xalisnta qaab is-weydaarsi dano waa inay ogeeysiiyaan Hay’adda Xalinta Khilaafaadka si waafaqsan heshiiskan.
4. Xalka laga soo saaro muran si rasmi ah iyadoo la raacayo wada-tashiyada iyo Qodobka lagu xalinayo khilaafka si waafaqsan heshiiska, waxay qeyb ka noqonayaan heshiiska.
5. Dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa inay raadiyaan xalinta khilaaf kasta ee ka dhex-dhasha Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan qaab

dhax-dhaxaadin ah. Dawladaha uu khilaafka u dhexeeyo waa in dhex-dhexaandinta u qaadato si niyad sami ah.

6. Xalka ay keenaan Dawladaha xubinta ka ah heshiiskan waa in aanay ku darin xalka Ganaax, tallaabooyin keeni kara yarayn xuquuq iyo waajibaad ee Dawladaha is-khilaafsan.

## Qodobka 5aad
## Hay'adda Xalinta Khilaafaadka

1. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waxaa lagu dhisay si waafaqsan qodobka 20aad ee heshiiskan u jeedkuna yahay meel-marinta heshiiskan iyo habraacyadiisa.
2. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waxay ka kooban tahay wakiillo ka socda dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskand.
3. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waxay leedahay awoodaha soo-socda:
   a) dhisidda Guddiyada Xaliinta Khilaafaadka iyo Rafcaan qaadashada
   b) guddiga wuxuu qabanayaa warbixinta cabashada iyo Rafcaanka.
   c) La socoshada fulinta xukunnada iyo dib-u-qaabeynta guddiyada iyo Rafcaan qaadayaasha; iyo
   d) Oggolaashaha joojinta ama ka-dhimista Ganaax la saary Dawlad iyo waajibaadka kale heshiiska.

4. Hay'adda Xalinta Kahilafaadka waxay yeelanaysaa gudoomiye u gaar ah oo ay soo dooranayaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxayna dejinayaan qorshe-hawleed lagama maarmaan u ah fulinta mas'uuliyadeeda.

5. Hay'adda Xalinta Kahilafaadka waa inay shaqadeeda u qabsataa si waafaqsan heshiiskan.

6. Go'aannada xeerarka iyo habraacyada ee Hay'adda Xalinta Khilafaadka waa in ay ku salaysan yahay wada ogol.

## Qodobka 6aad
## Habraaca Xalinta Khilaafaadka

1. Haddii labo Dawladood ama ka badan ee xubin ka ah heshiis uu u dhexeeyo khilaaf waa in wada-tashi laga sameeyaa si loo gaaro xal.

2. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan aanay dhinacyada dhaxdhigin heshiis waxay Dawladaha is-khilaafsani u gudbinayaan Guddiga Xalinta khilaafaadka si ay xal waara uga gaarto arrinta khilaafka.
3. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waxay soo dejineysaa Xeer-nidaamiye si lagu soo xulo Guddiyo oo ay ku jiraan arrimaha anshaxa u jeedkuna yahay in la hubiyo dhex-dhexaadnimo.
4. Guddigu ayaa soo saarayaa habraaca xalinta khilaafaadka si waafaqsan heshiiskan waana in dhinacyada is-khilaafsani ay dhawraan xeer-nidaamiyada habraacyada; iyo
5. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka ayaa ka gaaraysa go'aan kama-dambayn ah si waafaqsan heshiiskan waana waajib fulintiisa marka dhinacyada is khilaafsan ay u arkaan inay ku wanaagsan tahay in ay ku guuleystaan gar-qaadida wejiga hore ee Xalinta khilaafaadka; dhinacyada is khilaafsan waa ay ku sii wadi karaan gar-qaadida si waafaqsan qodobka 27aad ee heshiiskan.

**Qodobka 7aad**

**Wadatashiyo**

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan oo u jeeddadoodu tahay dhiirri-gelinta Xalinta Khilaafaadka, waxay caddeeyaan go'aankooda ku aaddan xoojinta hannaanka wada-tashiga ee ay galeen Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
2. Dawlad kastaa ee xubin ka ah heshiiskan waa in ay tixgelisaa wada-tashiyada ku saabsan wixii metelaad ah ee uu sameeyo Dawlad kale ee xubin ah oo la xiriira tallaabooyinka saameynta ku leh hawl-galka heshiiska.
3. Codsiyada la-tashiga oo qoran oo sababeysan waa in la dhigaa xafiiska Hay'adda Xalinta Khilaafaadka iyadoo lasoo marinayo Xoghaynta.
4. Marka ay Dawlad xubin ka ah heshiiskan ay codsato wadatashi si waafaqsan heshiiskan, Dawladda codsiga loo diray waa in ay uga jawaabtaa 10 (toban) maalmood gudaheed laga bilaabayo taariikhda la helay codsiga waana in la billaabaa wada-tashi si niyad-sami ah muddo aan ka badneyn 30 (soddan) maalmood laga billaabayo taariikhda la helay codsiga si loo helo xal waara.
5. Haddii Dawladda xubinta ah ee loo diray codsiga aanay ka jawaabin muddada 10ka maalin ama aan la billabin wada-tashiga muddada 30 (sodon) maalin ah ee lagu sheegay farqadda (4) ee qodobkan ama si kale aanay u heshiin Dawladda bixisay codsiga waxay u gudbin kartaa codsigeeda Hay'adda Xalinta Kahilafaadka si loo gaaro xal.

6. Inta lagu guda-jiro wada-tashiga iyo ka hor inta aan la bilaabin fulinta natiijada si waafaqsan heshiiskan, Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay isku dayayaan inay helaan xal lagu wada-qanacsan yahay.
7. Wada-tashiga waa inuu ahaadaa:
   a) qarsoodi; iyo
   b) waa in la ilaaliyaa xuquuqda Dawlad kasta ee dacwo gudbista.
8. Haddii Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ay xalli waayaan khilaafka tashiga muddo lixdan 60 (lixdan) maalmood gudahooda ah kadib taariikhda la keenay codsiga wada-tashiga, Dawladda wadata codsiga waxay u gudbin karaan Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waana in Hay'adda ku xalisaa khilaafka mudda aan ka badneyn 60 (lixdan) maalmood.
9. Xaaladaha degdegga ah, oo ay ku jiraan kiisaska alaabada halaabi karta waxaa loo nidaaminayaan sida soo socota:
   a) Dawladaha ay khuseyso waa inay billaabaan tashiga 10 (toban) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda la helay codsiga;
   b) haddii xal la gaari waayo muranka wada-tashiga muddo 20 (labaatan) maalmood ah ka dib taariikhda la helay codsiga, Dawladda wadata codsiga waxay u gudbin kartaa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka si ay xal uga gaarto khilaafka;
   c) iyadoo la raacayo Qodobka Lifaaqa shanaad ee xalinta caqabadaha adag, Lifaaqa labaad: habka Xalinta khilaafaadka iyo Iskaashiga Ciribtirka Caqabadaha ee Dawladda xubinta ah ku guul daraystay inay hirgeliso ka dib markii si wada-jir ah xal loogu wada heshiiyey. Dawladaha xubnaha ahi waxay u gudbinayaan Hay'adda Xalinta Khilaafaadka si loo gaaro xal si waafaqsan Qodobka 27$^{aad}$ ee heshiiskan.
10. Haddii Dawlad xubin ka ah heshiiskan oo aan kamid ahayn khilaafka balse dano Ganacsi la leh dhinac ka mid ah dhinacyada waxay codsan kartaa inay kusoo biirto wada-tashiga muddo 10 (toban) maalmood gudeheed ah laga bilabo maalinta codsiga tashi la gudbiyayay.
11. Goobta wada-hadalka waxay dhinacyada wada-hadlaya ku soo biiri karaan dhinac saddexaad haddii dan ay ugu arkaan. haddii codsiga dhinaca saddexaad aan la aqbalin, waa inay ogeysiisaa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka.

## Qodobka 8$^{aad}$
## Dhex-dhexaadinta iyo Dib-u-heshiisiinta

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay sameyn karaan dhax-dhaxaadin iyo dib-u-heshiisiin iskood ah ee Dawladaha dhinaca ka ah ee is-khilaafsan, waana inuu ahaadaa sir iyadoo la ilaalinayo xuquuqda dhinacyada.
2. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ee is-khilaafsani waxay Dawladaha kale xubinta ka ah heshiiskan ka dalban karaan Dhexdhexaadin waqti kasta. haddii dhinac ka mid ah dhinacyada wuxuu dalban karaa in la dhiso Guddi.
3. Marka ay bilaabaan dhax-dhexaadinta Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ama inta ay socota dhex-dhexaadinta dhinacyada is-khilaafsani waxay codsan karaan in la sameeyo Guddi, haddii la aqabalo codsiga dhinaca waa in lagu dhisaa muddo 60 (lixdan) maalmood gudaheed ah waa marka dhinacyada ay u arkaan in Dawladaha xubnahaa ka ah heshiiskan aan xalin karin Khilaafka.
4. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ee dhageysanaya dacwadaha si waafaqsan Qodobkan waxay joojin karaan Dacwadda waqti kasta, marka ay tixgeliyaan in geedi-socodka dhex-dhexaadinta ay ku guul dareysteen inay xaliyaan khilaafka.
5. Waxaa la dhisayaa Guddi Dhex-dhexaadin marka ay Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan ee khilaafku u dhexeeyo ay isku raacaan habka loo marayo dhax-dhaxaadinta.
6. Madaxa xoghaynta wuxuu ka codsan karaa Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan isagoo wargelinaya Hay'adda Xalinta Khilaafaadka in la fududeeyo hab-sami u socodka hawlaha dhex-dhexaadinta.

**Qodobka 9$^{aad}$**

**Dhismaha Guddi Dhax-dhaxaadin**

1. Guddiga dhexdhexaadinta waxaa dhisaya Hay'adda xalinta khilaafaadka marka ay hesho qoraal codsi Dawlad xubin ka ah heshiiskan oo caddeysay in aan xal laga gaarin la-tashiyo hore.
2. Codsiga lagu sheegay farqada (1) ee qodobkani waa inuu tilmaamaa in la-tashiyo la qabtay, in la caddeeyo in uu jiro khilaaf loo baahan yahay in xal waara laga gaaro.
3. Haddii ay dhacdo in codsaduhu codsado Dhismaha Guddi leh shuruudo gaar ah aan ahayn shuruudaha caadiga ah, qoraalka codsiga waa inuu raacaa soo jeedinta shuruudaha gaarka ah ee Dhismaha Guddiga.
4. Hay'adda xalinta khilaafaadka waa in ay 15 (shan iyo toban) maalmood laga bilaabo maalinta la codsaday ku ansixisaa codsiga dhismaha Guddiga.

5. Hay’adda xalinta khilaafaadka waa inay Guddiga ku dhistaa muddo 10 (toban) maalmood si waafaqsan faqradda (4) ee qodobkan.

## Qodobka 10aad

## Qaab dhismmeedka Guddiga Dhex-dhexaadin

1. Markay uu dhaqan-galo heshiiska Xoghayntu waa inay qabataa liiska dad u qalma awoodna u leh inay dhexdhexaadiyaan si waafaqsan heshiiskan
2. Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxay sanad walba u magacaabi karaan 2 (labo) shaqsi, Xoghaynta si loogu daro liiska dhexdhexaadiyayaal khibrad u leh heshiiskan waxaa ogolaashaha bixin kara Hay’adda Xalinta khilaafaadka.
3. Shakhsiyaadka kamid noqonaya dhexdhexaadiyayaasha waa in laga helaa shuruudahan:
   a) waa inuu leeyahay aqoon iyo waaya-aragnimo xagga sharciga ama ganacsiga caalamiga ama aqoonta Xalinta Khilaafaadka;
   b) loo soo xulay si ku saleysan Himil wanaagsan, lagu kalsoon yahay, lehna Siiqo Xukun;
   c) waa inuu a haadaa dhexdhexaad, madax-bannaan, oo aan cidna ka amar qaadan; iyo
   d) waa inuu u hogaansanaadaa sharciga anshaxa ee Hay’adda Xalinta Khilaafaadka ee uu meel-mariyay Golaha Wasiirrada.
4. Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha waa in lagu dhisaa aqoon, khibrad, madax-bannaani iyo dhexdhexaadnimo si uu u xaqiijiyo kalsooni dhammaan dhinacyada is-khilaafsan si waafaqsan heshiiskan.
5. Xubnaha Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha kama mid noqon karaan muwaadiniin ka soo-jeedda labada dawladood ee uu muranku ka dhexeeyo si loo hubiyo loona ilaaliyo dhexdhexaadnimada iyo madax-banaanida Guddiga.
6. Xoghaynta ayaa magcaabeysa xubnaha Guddiga Dhexdhexaadinta si waafaqsan heshiiskan, Dhinacyadana waa inay ogolaadan haddii aaney jirin sabab maan-gal ah oo ay ku diidi karaan.
7. Dawladaha is khilaafasani ayaga ayaa magacaabanaya Guddi Dhexdhaxaadiyayaal ayagoo la tashanaya Guddoomiyaha Hay’adda Xalinta Khilaafaadka haddii aan muddo 30 (sodon) maalmood ah laga billaabo maalinta codsiga loo geeyay Hay’adda Xalinta Khilaafaadka lagu dhisin Guddi dhexdhaxaadiyayaal.

8. Guddoomiyaha Hay'adda Xalinta Khilaafaadka wuxuu ogeysiinayaa tirade Guddiga 10 (toban) maalmood gudaheed Dawladaha is khilaafsan taariikhdan ka dib Gudoomiyaha wuxuu leeyahay codsi.
9. Haddii Dawlada xubnaha ka ah heshiiskani ee is khilaafsani yihiin labo Dawladood, Guddiga Xalinta khilaafaadka waa inuu ka koobnaadaa 3 (saddex) xubnood, haddii Dawladaha is khilaafasani ka badan yihiin labo Dawladood Guddiga Xalinta khilaafaadka waa inuu ka koobnaadaa 5 (shan) xubnood;
10. Guddiga Dhexdhexaadiyeyaasha waa in ay adeegaan awoodooda Qaanuuniga ah mana ahan wakiillo Dawlad ama wakiillo urur.
11. Guddiga Dhexdhaexaadiyayaasha ma ogolaanayaan tilmaamo iyo fara-gelin ka timid Dawlad kasta ayaga ayaa go'aanka iska leh.

**Qodobka 11aad**

**Shuruudaha Tixraaca ee Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha**

1. Guddiga Dhexdhexaadiyaasha waxay lahaanayaan shuruudaha soosocda haddii aaney Dawladaha is-khiulaafasani si kale ku heshiin 20 (labaatan) maalmood gudahood ah ee dhismaha Guddiga waana in la raacaa:
   a) In la baaro xubnaha Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha si waafaqsan heshiiskan, dhinacyadana ay aqbalaan; iyo
   b) Natiijada baarista ee Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha waxaa caawineysaa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka iyo go'aanno caddaalad ah.
2. Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha waxay fasirayaan Qodobka heshiiskan ee khilaafka ka taagan yahay.
3. Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha waxaa loo ogol yahay inay xalka ay raadinayaan ay u isticmaalaan Qodobbo ay iyagu u dejiyeen dhinacyada muranku u dhexeeyo. Haddii dhinacyada ay ku qanciwaayaan waxaa uu isticmaalaayan sxkssmts kucad faqrada (1) ee Qodobkan.

**Qodobka 12aad**

**Hawlaha Guddiga Dhexdhexaadiyaasha**

1. Shaqada ugu weyni ee Gudigu waa in ay ka caawiso Hay'adda Xalinta Khilaafaadka sidii ay kuguda lahayd Waajibaadkeeda si waafaqsan heshiiskan
2. Si loo gaaro u jeedka xal waara ee Dawladaha is-khilaafsan Guddi ayaa sameyanya qiimeyn hordhac ah xaqiiqdana waafaqsan adeegsiga iyo la jaanqaadida Qodobka heshiiskan si ay u caawiso Hay'adda Xalinta khilaafaadka.

3. Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha waa inuu si joogta ah ula tashadaa Dawladaha is-khilaafsan si loo gaaro xal waara.

## Qodobka 13aad
## Dhinaca Saddexaad

1. Guddiga Dhexdhexaadiyaasha waa in ay tixgeliyaan Danaha dhinacyada oo dhan oo ay ka mid yihiin dhinac saddexaad.
2. Guddiga Dhexdhexaadiyaasha waa in la ogeeysiiyaa dhinac saddexaad sida ay danahiisa muhiimka u yihiin ayaa soo saaray in dhinacyada is khilaafsan ay isku raaceen waana inay ku soo gudbiyaan qoraal ahaan fursad u helo Dhinaca saddexaad.
3. Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha waa in ay adeegsadaan nuqullada caddeymaha ah ay keenaan dhinacyada si runta loo caddeeyo.
4. Haddii Dhinaca saddexaad loo tixgeliyo in xeerka uu yahay mid aan la dabiqi karin si waafaqsan heshiiskan iyo habraaciisa habraacy hoos yimaadda. Khilaafka noocan oo kale ahi waa in loo gudbiyaa Guddigii asalka ahaa si kasta ay ku suuri-gali karto.
5. Dhinaca Saddexaad waxay la soconayaan dooda u dhexeeysa labada Dawladeed ee is-khilaafsan ee lagu furay kulanka koowaad ee Guddiga.

## Qodobka 14aad
## Habraaca Cabashooyinka badan

1. Haddii in ka badan “1” Dawlad ay keenaan codsiga cabsho ka dhan ah hal Dawlad, waxaa loo magcaabayaa hal Guddi si uu xal uga dhaliyo waana inuu ilaaliyaa dhammaan xuquuqaha dhinacya.
2. Guddiga keliya ayaa loo dhisayaa soo bandhiga wixii ka soo baxa Hay’adda xallinta khilaafaadka si halkaas ay uga muuqato xuquuqda dhinacyada muranku u dhexeey.

   Haddii cabashooyinku kabadan yihiin hal cabasbo lidna ay ku yihiin hal Dawlad waxaa loo dhisaa hal Guddi balse haddii cabashooyinku badan yihiin waxaa loo dhisayaa in ka badan hal Guddi mid walba oo ka mid ah Cabashadu muujinaya waxaa ay xaq u leedahay inay goob-joog ahaato markii mid ka mid ah dhinaca kale ee cabashada soo bandhigaya aragtidooda Guddiga.

3. Haddii la sameeyo wax ka badan hal Guddi si loo baaro cabashooyinka la xiriira isla hal arrinta, mid kasta oo ka mid ah Guddiyada kala duwan iyo jadwalka hawlaha Guddiga ee khilaafaadkaas waa in la is waafajiyaa.

## Qodobka 15aad
## Habraaca Guddiga

1. Guddiga waa inuu bixiyaa habraaca ku filan si loo helo xalin wax-ku-ool ah oo dhinacyadu ku qanceen.
2. Ka dib markii ay ka wada-tashadaan dhinacyada is-khilaafsan gar-wadeenna ay ka yihiin Guddiga Dhexdhexaadinta 7 (toddobo) maalmood ka dib markii la sameeyay Guddiga waa in loo gudbiyaa dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
3. Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha waa inay soo saaraan go'aan muddo 10 (toban) maalmood gudahood ah ee maalmo shaqo wuxuuna waqtigu ku dhacayaa 7 (todobo) maalin si waafaqsan faqrada (2) ee Qodobkan.
4. Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha waxay jiri karaan ugu badanaan 5 (shan) bilood laga bilaabo maalinta la dhisay illaa taariikhda la soo saaray go'aanka kama-dambeysta ah kiisaska muddada Alaabta burburi kara waa hal bil iyo badh (1½) kamana badan karo.
5. Haddii Dawladaha is-khilaafsani ay xal ka gaari waayaan khilaadka u dhexeeya Guddiga Dhexdhexaadiyayaasha wuxuu u gudbinayaan warbixin qoran oo ka kooban, natiijada xaqiiqda, talo-bixin iyo qodobka ku habboon ee heshiiskan waana in loo diraa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka.
6. Haddii Dawladaha is-khilaafasni ay xalka isla gartaan, Guddiga waana in warbixinta oo qoraal ah u diraa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka.
7. Muddada warbixinta Guddiga Dhexdhexaadinta kama badan karo 5 (shan) bilood ama hal iyo badh (1½) bilood gudahooda markay tahay xaalad degdeg ah, Golaha ayaa isla markaaba ogeysiinaya shirkadda Hay'adda Xalinta Khilaafaadka qoraalka waa in lagu caddeeyaa sababaha go'aanka iyo duruufaha uu soo maray Guuddigu wuxuu soo saari karaa warbixinta 9 (sagaal) bilood gudahood laga bilaabo taariikhda la sameeyay.
8. Go'aanka Guddiga waa go'aanno sababeeysan ka dib marka dhinacda doodu u dhaxeyso la dhageesto ayna soo bandhigaan caddeymahooda ama la dhageysto khabiir waana in Guddigu uu gaaraa go'aanka dhinacyada oo ka maqan goobta si waafaqsan heshiiskan.

9. Guddiga wuxuu soo saarayaan hal warbixin oo ka tarjumaysa aragtidiisa
10. Si waafaqsan Qodobbada heshiiskan, Guddigu waa inuu raacaa Shuruucda xiriirka la leh si waafaqsan Lifaaqa heshiskan warbixinnada Gudigu wuxuu soo saarayaa ka dib marku la-tashado dhinacyada is-khilaafsan.
11. Haddii Guddiga ay ka codsadaan labada dhinac ee is-khilaafasani in dacwadda la hakiyo muddo aan ka badnaan karin 12 (labo iyo toban) bilood, Galka waa xirayaan marka ay siddasi ka codsato dhinaca dacwoodaha ah dibna looma codsan karo isla dacwadii in lafuro, haddii aaney dhammaan muddada lagu heshiiyey hakinta dacwadda waa in aaney ka dhalaneyn meel ka dhac xuquuqeed ee mid ka mid ah labada dhinac uu khilaafku u dhexeeyo.

**Qodobka 16aad**

**Xaqa helidda xogta**

1. Guddiga wuxuu xaq u leeyahay inuu raadsado macluumaad iyo talo farsam meel kasta oo ku habboon ka dib marka la wargeliyo dhinacyada dacwadda.
2. Guddiga wuxuu xaq u leeyahay inuu raadsado macluumaad iyo talo farsamo Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan oo aan ku jirin dhinacyada is-khilaafsani.
3. Haddii Guddiga uu macluumaad ama talo-warsado Dawlad xubin ah waa in la siiyaa macluumaadka iyadoo aan lala daahin.
4. Guddiga waa inay ilaaliyaan macluumaadka qarsoodiga ah ee la siiyo mana shaacin karaan fasax la'aan cidda bixisay.
5. Guddiga wuxuu adeegsan karaa koox khubaro-cilmiyeed ama farsamo marka khilaafka dhinacyada uu leeyahay culeys.
6. Xeerarka iyo habraaca dhismaha kooxda khubarrada waxaa lagu qeexayaa lifaaqa dulucda dib-u-eegista.
7. Guddigu wuxuu macluumaad ka raadin karaa meel kasta oo ay khuseyso si aragtida khubarada uga mid noqoto gaaridda runta.

**Qodobka 17aad**

**Sir ahaanshaha Xogaha Guddiga**

1. Falanqaynta Guddiga ee go'aanka ka horeysa waa mid sir ah.

2. Guddiga waa in dhinacyada is-khilaafsani ay ula macaamileen si sir ah ama waxay u diri karaan Dawlad kale ee aan kamid ahayn dhinacyada.

3. Dawladaha is-khilaafsan waxay soo bandhigi karaan caddeymaha iyo dooda ay ka qabaan dhinaca kale si waafaqsan heshiiskan.

4. Go'aanka Guddiga wuxuu gaarayaa marka ay soo dhamaato caddeymaha dhinacyada iyo dooda u dhexeysa waana in go'aanku soo baxaa ayagoo maqan.

5. Guddiga waa in aanay sheegin fikradaha lagu muujiyey warbixinta iyo sida ay kala ahaayeen.

## Qodobka 18aad
## Warbixinta Guddiga

1. Guddiga waa inuu tixgeliyaa doodaha ay dhinacyada soo jeediyaan waana in lagu xusaa go'aanka Guddiga.
2. Dhinacyada muranku ka dhexeeyo waa inay faallooyinkooda ku soo gudbiyaan warbixinta qabyada ah ee Guddiga.
3. Faalooyinka Dhinacyada uu khikaafka u dhexeeyo ee lagu sheegay faqradda (2) ee Qodobkan waxay leeyihiin qiimo gaar ah waana in lagu sheegaa go'aanka ugu dambeeya ee Guddiga.
4. Dhinacyada is-khilaafsani waxay Guddiga ka codsan karaan inay dib-u-eegis ku sameeyaan warbixinta ku-meel-garka ah oo ay horey u soo gudbiyeen ka hor inta aan lasoo saarin go'aanka ugu dambeeya.
5. Dhinac kasta oo kamid ah dhinacyada muransan waxay xaq u leedahay in ay codsato kulan dib-u-eegis warbixinta ku-meel-gaarka ah Guddiguna waa inuu qabtaa kulanka.
6. Haddii dhinacyada aanay soo gudbin warbixinta xiliga loo cayimay, faallooyinka qoraalka ah ee Guddiga waxaa loo qaadanayaa inuu yahay warbixintii ugu dambeysay waxaana loo gudbinayaa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka.
7. Warbixinta ugu dambeysa ee Guddiga waa inay ku jirtaa doodihi lagu sameeyay marxaladda ku-meel-gaarka ah.

## Qodobka 19aad
## Habraaca warbinta Guddiga

1. Si loo siiyo waqti ku filan Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxaa la tixgeliyaan warbixinnada Guddiga, waanna inaan loo dirin Hay'adda Xalinta Khilaafaadka ka hor muddada dhamaadka waqtiga oo ah 20 (labaatan) maalmood.
2. Dawladaha xubnaha ka ah heshiishkan waxay diidi karaan go'aanka ka soo baxay Guddiga waana in diidmada oo Qoraal sababeysan ah loo diraa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka iydoo la ilaalinayo habraacan:

a) diidmada go'aannadada waa in Hay'adda Xalinta Khilaafaadka lagu horgeeyaa 10 (toban) maalmood kahor kulanka looga hadlayo isla warbixinta Guddiga ee diidmada laga qabo;
b) Dawladda muujisay diidmada waa in ay nuqul kasiisaa Dhinaca kale muranka kala dhexeeyo iyo Guddiga;

3. Dhinacyada is-khilaafsani waxay xaq u leeyihiin in ay ka qeyb-galaan kulamada Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waana in la dhageystaa dooda ay soo gudbiyaan.
4. Marka ay Guddiga shaaciyaan natiijada dooda u dhexeysay dhinacyada waxaa ka furan Rafcaan lagu qaadan karo 60 (lixdan) maalmood gudaheed laga billaabo maalinta lagu dhawaaqo go'aanka uu saxiixay Hay'adda Xalinta Khilaafaadka. Rafcaanka waa in la ogeysiiyaa Hay'adda waqtiga uu sheegay heshiiskan. Go'aanka Guddiga waa kama-dambeys haddii aan laga qaadan Rafcaan si waafaqsan heshiiskan.
5. Nuqulka Go'aanka Guddiga oo saxiixan ayaa la siinyaa Dhinacyada muranka u dhexeeyay muddo 7 (todobo) maalmood gudaheed ah laga billaabo maalinta la shaaciyay go'aanka.
6. Dawladda Rafcaanka ka qaadatay go'aanka Guddiga waa in muudo aan ka badneyn 30 (soddon) maalin loogu gudbiyaa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka.

## Qodobka 20$^{aad}$

## Golaha Rafcaanka

1. Golaha Rafcaanka waxaa dhisaya Hay'adda Xalinta Khilaafaadka. Golaha Rafcaanka waxay dhageeysanayaan Rafcaanka laga sooqaato Guddiga Dhexdhexaadiyaasha.
2. Golaha Rafcaanka wuxuu ka kooban yahay 7 qof, Seddax 3 kamid ah waxay u adeegi doontaa kiis kasat.
3. Dadka u adeega Golaha Rafcaanka ayada ayaa kazoo saareysa habraaca.
4. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka ayaa magcaabeyba xubnaha Golaha Rafcaanka oo yeelanaya muddo xileed 4 sano ah, dhammaadka muddo xileedka dib waa loo magcaabikaraa xubnaha, haddii xubin labedelo muddo xileedka waxaa dhameestiraya xubinta kale ee lagu beddelay.
5. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waxay magcaabeysaa xubinta kabannaanaata muddo 2 bilood ah gudohood laga billaabo maalinta ay bannaanaato booska.
6. Haddii Hay'adda Xalinta Khilaafaadka ku guuldarreysato magcaabidda booska xubinta muddo 2 bilood ah, Guddoomiyaha Hay'adda Xalinta Khilaafaadka

ayaa kala tashanaya Xog-hayntawaana in uu soomagcaabaa muddo aan kabadney hal bil gudaheed

7. Xubnaha Golaha Rafcaanka wuxuu ka kooban yahay shakhsiyaad leh khibrad xagga sharciga, ganacsiga caalamiga ah, waxayna soo bandhigayaan khibrad sharciyeed, ganacsiga caalamiga ah iyo ujeeddooyinka arrimaha heshiiska guud ahaan.
8. Xubnaha Xubnaha Golaha Rafcaanka waa in aaney la xariirin Dawlad waa inuu si buuxda u matalaan xubinimad Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika dhammaan xubnaheeda la heli karo waqti kasta kama qaybqaadanayaan tixgelinta wixii khilaaf ah ee abuuri kara khilaaf toos ah ama mid aan toos ahayn oo dano laga leeyahay.

## Qodobka 21aad

## Rafcaannada

1. Go'aannada Guddiga dhexdhexaadinta waxaa Rafcaan ka qaandan kara dhinacyada is-khilaafsan. Dhinaca saddexaad waxaa ay qaadan karaan Rafcaan xaaladaha ay jirto dan weyn waana in la ogeeysiiyaa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka si waafaqsan faqrada (2) ee Qodobka 13aad ee heshiiskan
2. Sida caadiga ah, dhageysiga dacwad kama badnaa karto 60 (lixdan) maalmood laga bilaabo taariikhda la qabtay codsiga go'aankiisa Rafcaanka, si waafaqsan faqradda (9) (d) ee Qodobka 7aad ee heshiiskan, haddii ay u aragto inaysan bixin Karin waa in lagu soo wargaliyo muddo 60 (lixdan) maalmood gudahood ah, waxay ku ogeysiinayaan Hay'adda Xalinta Khilaafadka qoraal sababeysan guud ahaan Dacwad qaadista madhaafi karto 90 (sagaashan) maalmood.
3. Rafcaanku wuxuu ku koobnaanayaa arrimaha sharciga ee lagu soo sheegay go'aanka guddiga iyo tarjumaadaha sharciyeed oo ay diyaariyeen Guddiga.
4. Golaha Rafcaanka waa in la siiyaa maamul ku habboon iyo sharci taageero hadba ayadoo la fiirinayo baahida jirta.
5. Kharashaadka dadka ku shaqeeya Golaha Rafcaanka oo ay ku jiraan safarka iyo Kaalmada raashinka, waxaa laga bixinayaa miisaaniyadda Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah ee Afrika iyadoo la raacayo Xeer-hoosaadka maaliyadeed iyo Shuruucda midowga Afrika.

**Qodobka 22aad**

**Habraaca Rafcaan qaataha**

1. Habraaca qaadashada Rafcaanka waxaa dejinaya Golaha Rafcaanka iyadoo lala tashanayo Guddoomiyaha Hay'adda Xalinta Khilaafaadka oo la hadlaya Dawlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan.
2. Habraaca Guddiga waa sir ah.
3. Habraaca Rafcaanka sida ku xusan Qodobkaan kama badnaan karo 90 (sagaashan) maalmood.
4. Go'aanada Golaha waa in la gaaraa iyadoo la jaan-qaadin Dhinacyada is-khilaafsani iyo macluumaadka laga dhageystay dhinacyada.
5. Waa in aan lamuujin Dadka ka dhiibtay aragtida lagu dhisay warbixinta Golaha Rafcaanka.
6. Go'aanka Golaha Rafcaannada waa inay ka hadasho arin kasta oo lagu soo qaaday kulanka si waafaqsan faqrada (3) qodobka 21aad ee heshiiskan inta lagu guda jiro Rafcaan.
7. Golaha Rafcaannada waxay taageeri kartaa, wax ka beddeli kartaa ama kala beddeli kartaa natiijooyinka sharciga iyo gunaanadka Golaha.
8. Golaha Rafcaannada waxay soo saari kartaa hal warbixin oo ka tarjumaysa aragtida aqlabiyadda xubnaheeda.
9. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waxay qaadanayaa Warbixinta Golaha Rafcaannada iyo Shuruud la'aan ay ogoolaadeen dhinacyadu in la gaarsiiyaa Hay'adda Xalinta Khiaafaadka ansxintii Golaha Rafcaankaa (AB) muddo soddon (30) maalmood gudahooda ka dib ku wareejinta Dawladda xubinta ah heshiiskan.

**Qodobka 23aad**

**Guddiga iyo Hay'adda Rafcaanka**

1. Haddii Guddiga Dhexdhexaadinta ama ay ku soo gaba-gabeeyaan in ha habraac la waafajiyo Heshiiskan, wuxuu ku talinayaa guddiga in Dawlad kasta ay keento halbeega ku habboon heshiiska. Waxaa intaa wehliya Guddiga ama Golaha waxay soo jeedin karaan hannaanka kor-joogteynta fulinta talooyinka iyo go'aannad Dawladda xubinta ka ah si waafaqsan Qodobka 24aad ee heshiiskan, waana inay u hoggaansamaan awaamiirta iyo go'aannada Hay'adda Xalinta Khilaafaadka.

## Qodobka 24aad

## Habka Ilaalinta fulinta shuruucda iyo talada Hay'adda Xalinta Khilaafaadka

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa inay u hoggaansamaan go'aannada kasoo baxa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka.
2. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waa inay wargelisaa Dawlaadda xubinta ah ay khuseyso in ay ixtiraamto fuliso go'aannada ka soobaxa Hay'adda si waafaqsan heshiiskan.
3. Haddii Dawladda xubinta ah ay u aragto in aaney suurta-gal ahayn in loo hoggaansamo lana fuliyo go'aanka kasoo baxay Hay'adda waa in la siiyaa waqti ku filan si waafaqsan habraaca soo-socda:
   a) Dhinacyada is-khilaafsan waxaa la siinayaa muddo go'aan ay kusoo gudbin karaan soo-jeedinta cabashada lidka ku ah go'aanka Hay'adda Xalinta Khilaafaadka.
   b) Mudada dhinacyada is-khilaafsan ay ku keeni karaan cabashada waa 45 (afantan iyo shan) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda uu soo baxay go'aanka
   c) Maqnaashaha heshiis la isla ogol yahay go'aanka Hay'adda waxaa kafuran dhexdhexaadin mudadeedu tahay 90 (sagaashan) maalmood laga billaabo maalinta go'aanka la shaaciyay. Go'aanka Hay'adda waxay dhaqan-gelaaysaa 15 (shan iyo toban) maalmood ka dib maalinta la shaaciyay, wuxuuna noqon karaa waqtiga mid gaaban ama mid dheer, waxayna ku xiran tahay duruufaha gaarka ah.
4. Haddii dhinacyada aaney ku heshiin dhexdhexaadinta muddo 10 (toban) maalmood waxaa loo gudbinayaa Xoghaynta iyadoo lala tashanayo Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waana in fuliyaa go'aanka 10 ((toban) maalmood ka dib tashiga.
5. Xoghaynta waa inay wargelisaa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka Xaaladaha fullintta go'aannada si waafaqsan heshiiskan.
6. Si waafaqsan faqrada (7) ee Qodobka 15aad ama faqrada (2) ee Qodobka 21aad ee heshiiskan muddada dhismaha Golaha Rafcaanka ee Hay'adda Xalinta Khilaafaadka kama badnaan karto 15 (shan iyo toban) bilood haddii dhinacyada aysan ku heshiin wax ka duwan mudadan. Halka Golaha Rafcaannada ama Guddiga dhexdheexaadinta ayaa kordhin kara muddo15 (shan iyo toban) bilood gudahood; waxaa shardi ah in haddii dhinacyada is-khilaafsan ay isku

waafaqaan in ay jiraan duruufo gaar ah kama badnaan karto 18 (siddeed iyo toban) bilood

7. Si loo dhaqan-geliyo go'aannada, la isku afgaran waayo waxaa lagu go'aaminayaa iyadoo loo tixraacayo nidaamyada Xalinta khilaafaadka, oo ay ku jiraan. Guddiga waxay warbixinta soo bandhigeysaa 90 (sagaashan) maalmood ka dib taariikhda lasoo saaray warbixinta waqtiga xaddidan, waana in lagu wargeliyaa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka si qoraal ah, sababaha dib-u-dhigista oo ay wehliso qiyaasta muddada ay ku gudbinayaan warbixintooda.
8. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waa inay isha ku haysaa hirgelinta go'aannada. Dawladaha is-khilaafsan waa inay shaaciyaan hirgelinta go'aannada ama Hay'adda ayaa ka soo saaraya war ku aaddan fulinta muddo 6 (lix) bilood kadib taariikhda lasoo saaray go'aanka si waafaqsan faqradda (3) ee Qodobkan, waana inuu ku jiraa ajandaha Hay'adda inta laga gaarayo xalka.
9. Dawladda xubinta ee qabta cabashada waa inay gudbisaa 10 (toban) maalin ka hor kulanka Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waana in warbixinta cabashada ay ka koobnaataa:
   a) heerka ay gaarsiisan tahay fulinta go'aanka iyo talo bixinno;
   b) in warbixinta lagu caddeeyo haddiii ay jiraan caqabado ka-hor-imaanaya fulinta;
   c) in warbixinta lagu caddeeyo muddada uu ku yaryahay dhinaca "Dawladda" una baahan tahay muddo si ay u hirgeliso go'aanka.

## Qodobka 25[aad]

## Magdhawga iyo waajibaadka kale ee Dhinacyada

1. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxaa waajib ku ah inay hirgeliyaan go'aannada ka soo baxa Hay'adda Xalinta Khilaafaadka iyo waajibaadyada ka joogsiga ama waajib kale ee la saaray Dawladda xubinta ah. Dawladda xubinta ah waa inay caddeysaa sababaha maan-galka ah ee keentay dib-u-dhac kasta ee Dawladdu dib-ugadhigay fulinta go'aanka si waafaqsan heshiiskan.
2. hakinta ama waajibaadka kale ee ku-meel-gaarka ah waa ku-meel-gaar inta ay la jaa-qaadayaan heshiiska ama wixii kale ee la go'aamiyay jebinta ayaa la saarayaa ama in Dawladda xubinta ah ama ay sababtay u hogaansanaan la'aan, ama in wax la isla wadaago xal raali ah ayaa laga gaarayaa.
3. Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waxay amri kartaa magdhaw haddii ay dhacdo in go'aannada ka soo baxay Hay'adda ay fulin weydo Dawlad xubin ka ah heshiiskan muddada loogu asteeyay.

4. Dawladda Xubinta ah ee dhinaca ka ah khilaafka waxay geli kartaa wada-xaajood haddii ay ku guul darreysato fulinta go'aannda Hay'adda Xallinta Khilaafaadka ee muddada loo asteeyay si waafaqsan faqradda (3) Qodobka 24aad ee heshiiskan. Haddii ay aqbasho codsiga Dawladda xubinta ah ee dhinaca ka ah heshiiskan waxaa la siinayaa magdhaw. Haddii aan magdhow lagu qanci karo lagu heshiin muddo 20 maalmood gudahood ah Dawladda wadata cabashada waxay codsan kartaa oggolaansho ku socota Hay'adda Xalinta Khilaafaadka una joojiso arjiga loo diro Dawladda xubinta ah si ay u tanaasusho ama waajibaadka kale ee hoos yimaada heshiiska.
5. Magdhawga ama waajibaadka kale ee la saarayo Dawladda xubinta ah waxaa lagu nidaaminayaa habraaca soo socda:
   a) Mabda'a guud ee ah in dhinaca cabtaha ay tahay in marka hore la la hakiyo xadgudubka uu ka keenay cabashada.
   b) Haddii xubintaasi u arakto inaysan waxtar u lahayn joojiso tanaasul ama waajibaadka kale waxay isku dayi kartaa inay joojiso waajibaadka kale waaxaha kale ee hoos yimaada heshiiska.
   c) Haddii xubintaasi u aragto inaysan waxtar u lahayn joojiso tanaasul ama waajibaadka kale waxay isku dayi kartaa duruufaha jira mid khatar ah, wuxuu isku dayi karaa in la hakiyo ama waajibaadka kale ku xusan heshiiska.
   d) Haddii dhinaca kale ee xubin ka ah khilaafka uu go'aansado inuu codsado oggolaansho joojinta waajibaadka kale ee lagu sheegay tirsiyada (b) ama (c) ee faqradan (5) ee qodobkan, waa inay xubinta ku caddeeysaa sababaha codsiga ee Hay'adda Xalinta Khilaafaadka.
6. Marka lagu dabaqayo mabaadi'da kor ku xusan Dawladaha dhinaca ka ah heshiiskan waa in tixgelin loo siiyaa sida soo socota:
   a) Ganacsiga qaybta ay hoos yimaadaan Guddiga ama Rafcaan qaadashada uu helay xadgudub ama nusqaan kale ama naafo ah oo ahamiyada ganacsiga u leh; iyo

   b) Qaybaha waaweyn ee burburka dhaqaalaha iyo daciifnimada ee ka dhalata cawaaqibka dhaqaale.

7. Heerka waajibaadka kale ay oggolaatay Hay'adda Xalinta Khilaafaadka waxay u dhigantaa heerka dhibaatada dhaqaale ee xubinta geeysatay.

8. Si waafaqsan faqradda (4) ee Qodobkan, ay Hay'adda Xalinta Khilaafaadka, waxay bixineysaa rukhsad ka-dhaafid waajibaadka 30 (sodon) maalmood gudahood laga

bilaabo taariikhda la soo codsaday marka laga reebo in Hey’addu ay go’aan satay inay ku raacdo go’aannada diidmada. haddii dhinaca uu codsado in la hakiyo waajibaadka kale ee ku xusan faqradda (5) (b) ama (c) ee Qodobkan waa in loo gudbiyaa dhexdhexaadiye ay soo magcaawdaan dhinacyada ama waxaa magacaabaya guddoomiyaha Hay’adda Xalinta Khilaafaadka muudo 60 (lixdan) maalin gudaheed laga billaabo taariikhda la magcaabay dhexdhexaadiyayaasha, ka tanaasulidda ama waajibaadyada kale looma hakinayo muddada ay socoto dhexdhexaadinta.

9. Dhexdhexaadiyaha ku xusan faqradda (7) ee Qodobkan, malaha awood kale oo ay wax ku xalin karaan laakiin waxay go'aan ka gaari karaan xal dhexdhexaadnimo si waafaqsan heshiiskan iyo mabaadi’da iyo habraacyadu ay tahay in la raaco, dhinaca cabtaha waxay ku dabaqayaan si waafaqsan faqradda (5) ee Qodobkan. Dhinacyada khilaafku ka dhexeeyo waa inay oglaadaaan go'aanka kama dambeysta ah ee dhexdhexaadiyayaasha waana in go’aanka laga diiwaan-geliyaa Hay’adda Xalinta Khilaafaadka lana siiyaa rukhsad lagu joojinayo waajibaadyo kale oo codsigu waafaqsan yahay go'aanka dhexdhexaadiyaha marka laga reebo codsiga aaney aqbalin Hay’adda.

## Qodobka 26aad
## Lacagta Qarashaadka

1. Hay’adda Xalinta Khilaafaadka ayaa go'aamineysa gunnada iyo Qarashaadka Garsoorayaasha, Garqaadayaasha iyo khabiirada si waafaqsan Xeer-hoosaadarka maaliyadeed iyo Shuruucda Midowga Afrika.
2. Qarashaadka safarrada iyo Hoyga ee gudiyada, garqaadayaasha iyo khabiirada, waxaa ku qaadanayaa dhinacyada khilaafka u dhexeeyo ama xeer ay go'aamisay Golaha Xalinta Khilaafaadka.
3. Dhinacyada khilaafka u dhexeeyo ayaa bixinaya dhammaan qarashaadka kale ee hawsha sida ay go'aamisay Golaha Xalinta Khilaafaadka.
4. Dhinacyada khilaafka u dhexeeyo waa in ay bixiyaan saamiga uga soo-aada qarashaadka ku baxaya xoghaynta ama Golaha Rafcaanka.

## Qodobka 27aad
## Dhexdhexaadiyayaal

1. Dhinacyada is-khilaafsan waxay qabsan karaan dhexdhexaadiyayaal heshiis ay ku yihiin iyadoo la raacayo hab ay raali kawadaa yihiin.

2. Dhinacyada is-khilaafsan ee dacwadoodu galeen dhexdhexaadiyayaal lama hor geyn karo isla dacwadda Golaha Xalinta Khilaafaadka.
3. Heshiiska ay dhinacyadu ku gaareen dhexdhexaadinta waa in lala socodsiiyaa Golaha Xalinta Khilaafaadka.
4. Dhinaca saddexaad waa lagu biirin karaa dhexdhexaadinta dacwadda ku socota oo keliya heshiiska qaybaha dacwadaha u kala gar-qaadidda.
5. Dhinacyada u kala gar-qaadaya Dawladaha is-khilaafsan waa la abaal-marinaaya, waana in lala socodsiiyaa Golaha Xalinta Khilaafaadka si loo dhaqan-galiyo.
6. Haddii ay dhacdo in Dawlad xubin ka ah heshiiskan loo diido inay iskaashi la yeelato Dawlad kale ee xubin ah, Cabasho ayey u gudbin kartaa Golaha Xalinta Khilaafaadka si go'aan looga gaaro.
7. Abaalmarinta dhexdhexaadiyayasha waxaa lagu dhaqan-gelinayaa si waafaqsan Qodobada $24^{aad}$ iyo $25^{aad}$ ee heshiiskan.

## Qodobka $28^{aad}$
## Iskaashiga farsamo

1. Haddii dhinacyada is-khilaafsani ay ka codsadaan Dawlad xubin ka ah heshiiskan ama Xoghaynta waa la siin karaa tallo-sharci ee dheeraad ah iyo hannaanka xalinta khilaafka si loo suura-geliyo in dhinacyada ay gaaraan heshiis.
2. Xoghayntu waxay abaabuli kartaa koorsooyin tababar gaar ah oo loogu tallogalay dadka hannaanka Xalinta khilaafaadka si loo suura galiyo in Dawladda xubinta ah ay horumariyaan awooda khubarada Xalinta Khilaafaadka.

## Qodobka $29^{aad}$
## Waajibaadka Xoghaynta

1. Xoghaynta waxaa saaran mas'uuliyadda caawinta Guddiyada, gaar ahaan sharciga, taariikhda iyo dhinacyada hab-sami u socodka hawlaha farsamo.
2. Xoghaynta waa inay fududayso xeerarka Guddiyada si waafaqsan heshiiskan.
3. Si loo fuliyo hawlaha ku xusan Qodobka $28^{aad}$ ee heshiiskan, Xoghayntu waa inay ka faa'iideysataa dadka waaya-aragga u ah sharciga ganacsiga caalamiga ah si loo caawiyo Guddiyada.
4. Xoghayntu waxay qabataa shaqooyinka kale iyo waajibaad kale ee suura-galka ah si waafaqsan heshiiska iyo habraacuadiisa.

5. Xoghaynta waxay mas'uul ka tahay dhammaan ogeysiisyada Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan, Golaha Xalinta Khilaafaadka iyo Guddiyada kale.

## Qodobka 30aad
## Fasiraadda Shirciga

Qodobka heshiiskan waxaa fasiraya Guddiga dhex-dheexaadinta iyo Golaha Rafcaannada waana inay ku fasiraan ayagoo raacaya qodobada xeer-dhaqameedka ee sharciga guud ee caalamiga ah oo a kamid tahay heshiiska caalamiga ee Viena 1969kii.

## Qodobka 31aad
## Habraaca wax-ka-bedelidda Heshiiska

Wax-ka-badelka heshiiskan waxa looga bedeli karaa si waafaqsan Qodobka 29aad ee heshiiskan.

Heshiiskan waxaa marag ka ah saxiixay oo shaabadeeyay annaga oo ah Madaxda Midowga Afrika iyo wakiillo matalaya Dawladaha xubnaha ka ah Ururka Midowga Afrika, heshiiskan oo ah qoraalka asal ah oo isku mid ah kuna qoran afafka Carabiga, Ingiriiska, Faransiiska iyo Boortaqiiska.

Waxa lagu saxeexay Kigali, Rwanda maanta oo ah 21ka Maarso sanadka 2018.

**SHARCI LR.53** **TAARIIKH: 14-TA FEBRAAYO 2026**

**AXDIGA URUR GOBOLEEDKA HORUMARINTA - IGAD**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.
**MARKUU ARKAY:** Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.
**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0828/B11/26**, ku taariikheysan **11/02/2026**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Axdiga Urur Goboleedka Horumarinta - IGAD.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo Axdigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Axdigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Axdiga Urur Goboleedka Horumarinta - **IGAD**.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Axdigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee **J.F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 040-2026
TAARIIKH 23/7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
DIRIR / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Madaxweynaha J. F.S.**

001485

# HESHIISKA
# LAGU DHISAY
# URUR GOBOLEEDKA
# HORUMARINTA
# (IGAD)

# HESHIISKA

# LAGU DHISAY

# URURKA GOBOLEEDKA

# HORUMARINTA

# (IGAD)

# GOGOLDHIG

**Annagoo ah, Madaxweyneyaasha iyo Madaxda Xukuumadaha dalalka Urur Goboleedka IGAD,**

**DIB U EEGEYNA** Baaqii lagu gaaray Addis Ababa, Ethiopia 18-kii Abriil 1995, kaasoo dhigayey baahida loo qabo in la ballaariyo iskaashiga dalalka xubnaha ka ah, iyagoo ku wada shaqaynaya kobcinta iyo xoojinta Maamulka Urur Goboleedka Maaraynta Abaaraha iyo Horumarinta (IGADD).

**DIB U XAQIIJINAYNA** ujeedooyinka heshiiska lagu aasaasay IGAD oo la saxiixay 1996-dii iyo annagoo siinay tixgelin fulintiisa;

**DHIIRI-GELINAYNA** ujeedooyinka sharfoon ee taabbo-gelinta nabadda iyo amniga, iskaashiga goboleed, is dhex galka iyo horumar waara;

**DHIIRI-GELIN KASII DHIGANAYNA** ujeedooyinka ay xambaarsan tahay Heshiiska lagu Dhisay Bulshada Dhaqaalaha Afrika (Heshiiskii Abuja) iyo iyadoo la waafajinayo xeerarka Qodobka 28(1) ee Heshiiska aan soo sheegtay iyo Qodobka 1(t) ee Heshiiska lagu dhisay Agaagagga Gancsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ee loo soo gaabiyo (AfCFTA);

**DIB U MILICSANAYNA** in IGAD, oo ah mid kamid ah Bulshooyinka Dhaqaale Goboleedka (RECs) ee ka tirsan Midowga Afrika, kana mid ah saxiixayaasha Habraacii 1998 ee ahaa Xiriirka ka dhexeeya iyo Bulshada Dhaqaalaha Afrika iyo RECs iyo Habraacyada 2020 ee ku saabsan Xiriirada ka dhexeeya Midowa Afrika iyo Bulshooyinka Dhaqaale Goboleedka;

**NA HAGAYO** Xeerka Dastuuri ah ee Midowga Afrika ee 2000 iyo mabaadiidiisa ku qotonta nabadgelyada, baraahaha iyo is dhexgalka Afrika;

**NA SII HAGAYAAN** Axdiga Qaramada Midoobay ee 1945 iyo iyadoo la waafajinayo ujeedooyinka iyo mabaadii'da lagu dammaanay qaaday Axdiga,

**NAGA GO'ANTAHAY** in lagu dhaqaaqo suuratalinta iskaashi dhamaystiran oo ku qotoma sinnaan iyo dheef-wadaaga taasoo looga gol leeyahay in lagu xaqiijiyo nabad, baraare iyo is dhex gal gobol;

**GARAWSAN** baahida loo qabo dedaallo wadajira ee looga hortegayo abaarta iyo curinta u adkaysiga xaaladaha ka dhasha saamaynta cimilada iyo arrimaha kale ee aafooyinka dhaqaale, deegaan ama kuwa aadanuhu sameeyaan;

**DOONAYNA** in la dardargaliyo ganacsiga, maalgashiga, iskaashiga horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada ee ka dhaxeeya Dalalka Xubnaha ka ah iyadoo hoos loo dhigayo caqabadaha ganacsiga iyo dhaqaalaha; sameynta suuq ballaaran oo leh fursado badan iyo dhaqaale wayn oo miisaan leh;

**KU KALSOON** in balaarinta waajibaadka IGAD, ay xoojinayso iskaashiga, una adeegaysa in la dhiso tiir muhiim u ah horusocodka is-dhex galka dhaqaale ee gobolka iyo taageeridda horumar dhaqaale oo waara;

**OGSOON** heerarka kala duwan ee horumarka ka dhaxeeya Dowladaha Xubnaha ka ah IGAD iyo baahida loo qabo debecsanaan, daadejin iyo is-kabidda.

**MAANKA KU HAYNA** caqabadaha balaaran oo isku mid ah oo hadda iyo mustaqbalka

**KU BARAARUGSAN** in dib u eegis lagu sameeyo Heshiiska lagu Dhisay IGAD, marka lagu daro, in ay ka dhalanayso baahida loo qabo in IGAD ay la jaan-qaaddo isbeddelada ka socda gudaha iyo dibadda iyo dib u habaynta Midowga Afria;

**GARWAAQSAN** baahida loo qabo in la xoojiyo Xog-haynta Fulinta oo la siiyo awood iyo dhaqaale ku filan, iyo

**NAGA GO'ANTAHAY** inaan ku beddelno Heshiiskii lagu Aasaasay IGAD taariikhdu markay ahayd 21 Maarso 1996, laguna bedelayo Heshiiskan,

Waxaan isku raacnay qodobadan soo socda;

## CUTUBKA KOOWAAD: QEEXIDDA UJEEDOOYINKA, HIIGSIGA, QAWAANIINTA IYO XUBINNIMADA IGAD

### Qodobka 1
### Qeexid

Heshiiskan ayaa lagu dhaqmayaa, haddii aan loo baahan faahfaahin kale oo dheeraad ah;

**"Heshiiska"** waxaa loola jeedaa Heshiiska bedelaya Heshiiskii ay horay u gaareen Urur Goboleedka Horumarinta ee IGAD oo ku taariikhaysan 21-kii Maarso 1996

**"Heshiiska Abuja"** waxaa loola jeedaa Heshiiskii Dhaqaalaha Bulshada Afrika ee la gaaray 1991;

**"AfCFTA"** waxaa loola jeedaa Heshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Afrika;

**"Heshiis"** waxaa loola jeedaa Heshiiska ay gaareen Urur Goboleedka Horumarinta IGAD ee dhaqan galay 21 March 1996;

**"Shirweynaha Guud "** waxaa loola jeedaa shirka guud ee ay Madaxda IGAD isugu yimaadaan kaasoo lagu qeexay Qodobka 10-aad ee Heshiiska;

**"Guddiga danjirayasha"** waxaa loola jeedaa gudiga danjireyasha ee ka socda dalalka heshiiska gaaray ee ku cad qodobka 10 ee Heshiiska;

**"Guddiga Xeeldheerayaasha"** waxaa loola jeedaa xubnaha xeeldheerayaasha oo ka kooban xeeldheerayaal shaqada xiriir laleh oo ka socda Dowladaha xubnaha ka ah kuwaasoo bixinaya taageero farsamo oo ay siinayaan unugyada kala duwan ee IGAD**;**

**"Golaha"** waxaa loola jeedaa Golaha Wasiirada ee lagu dhisay Qodobka 10-aad ee Heshiiska**;**

**"Ku-xigeennada Xoghayaha Fulinta"** waxaa loola jeedaa saraakiisha lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 22-aad ee Heshiiska;

**"Xoghayaha Fulinta"** waxaa loola jeedaa Madaxa Xoghaynta Fulinta ee IGAD ee lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 21-aad ee Heshiiska;

**"IGAD"** waxaa loola jeedaa Urur Goboleedka Horumarinta (Intergovernmental Authority on Development);

**"Dalka Xubinta ka ah"** waxaa loola jedaa dalka lagu tilmaamay Qodobka 8-aad ee Heshiiska;

**"Habraac"** waxaa loola jeedaa heshiis kasta oo kaabayo, dhaqangelinayo, wax ka bedelayo ama u qalma inuu lamid noqdo Heshiiska si waafaqsan Qodobka 56-aad ee Heshiiska**;**

**"Xoghaynta "** waxaa loola jeedaa Xog-haynta IGAD ee lagu dhisay sharciga ku cad qodobka 10-aad ee Heshiiska;

**"Gole Hawl-cayiman"** waxa loola jeedaa gole wasiiro ah oo ka socda Dawladaha Xubnaha ka ah oo hawl cayiman ay u wakiisheen Golaha Wasiirada taaso ka dhalatay arrimo taabanay Hehiiskan hadba sida Goluhu uu go'aamiyaan.

## Qodobka 2
## Ujeedka Heshiiska

Ujeedka Heshiiska waa in uu beddelo Heshiiskii lagu Dhisay Maamulka Horumarinta Urur Goboleedka taariikhdu markay ahayd 21-kii Maarso 1996, si loo ballaariyo, loona helo iskaashi qoto dheer si loo gaaro horumar waara.

## Qodobka 3
## Ujeedooyinka iyo Yoolalka IGAD

Ujeedooyinka iyo yoolalka IGAD wuxuu noqon doonaa in la dardargeliyo dhaqaalaha gobolka, arrimaha bulshada, deegaanka iyo is dhexgalka siyaasadeed iyo iskaashiga ka dhaxeeya ee xuduudaha Dalalka Xubnaha ka ah.

### Qodobka 4
### Mabaadii'da Aasaasiga ee lagu Maamulayo IGAD

Mabaadii'da aasaasiga ah ee lagu hagi doono sidii looga guul gaari lahaa ujeedooyinka iyo yoolalka IGAD ee Dalalka Xubnaha ka ah waxaa ka mid noqon doona:

**(a)** Gobonnimo siman oo ay leeyihiin Dalalka Xubnaha ka ahi

(b) nabad ku wada noolaasho, deris wanaag, in aan arrimaha gudaha ee Dalalka Xubnaha ka ah aan la faragelin karin arrimahooda gudaha iyo in hab nabadeed lagu xalliyo khilaafyada gudaha dalka iyo kuwa dalalka dhex mara iyadoo loo marayo wada hadal;

**(c)** joogtaynta nabadd gobolka, xasilloonida iyo amniga;

(d) in si siman oo wadaag ah oo loo qeybsado dheefaha ku yimaada iskaahsiga ku xusan Heshiiska.

(e) dowlad wanaag oo ay ku jirto u hogaansamidda mabaadii'da dastuuriga ah, dimoqraadiyadda, u hogaansamidda sharciga, isla xisaabtanka, hufnaanta, cadaaladda bulsho, fursado loo siman yahay, sinaanta xuquuqda raga iyo dumarka sidoo kalena Aqoonsiga, Kor u qaadista iyo dhawrista xuquuqda aadanaha iyo dadyowga.

## Qodobka 5
## Xeerarka hawleed ee IGAD

Mabaadii'da lagu maamuli doono ee ay tahay kuwa si muuqata looga miro-dhalin karo kuwaasoo ka turjumaya ujeedooyinka IGAD waxaa ka mid noqon doona;

(b) In helaan Dowladaha Xubnaha ka ah jawi ku filan, kuna habboon oo u suurtagalinaya siyaasado waxtar leh iyo kaabeyaasha aasaasiga ah;

(c) Mabda’a hoos u daadejinta oo adkeynaya ka qaybgalka baahsan iyo ku lug lahaansho ballaaran oo ay leeyihiin saamileyda marka loo eego hannaanka is dhexgalka, taasoo ay ka mid tahay iskaashiga isu gudubka xuduudaha, ka qayb galka bulshada iyo hannaanka hoos kasoo dhisidda;

(d) Mabda’a dabacsanaanta iyo joomitirka doorsooma kaasoo suurtagelinaya horumar laga sameeyo iskaashi IGAD dhexdeeda ah oo la xiriira heerarka is dhexgalka dhinacyada kala duwan iyo hannaan aan isku waqti ahayn.

(e) Wax-qeybi siman oo dhinaca dheefta ah kuwaasoo ka dhasha ama laga soo dhiraandhiriyo hawlaha ay IGAD qabanayso;

(f) Mabda’a kala gedisnaanta iyo is-dhammeystirka ; iyo

(g) Mabaadi'da asymmetry iyo dhammaystirka; iyo

(h) Iskaashi ku saleysan karaanka dadka iyo suuqa.

## Qodobka 6
## Masuuliyadda guud ee fulinta

**1.** Dowladaha xubnaha ka ahi waxay:

(a) Qorshayn iyo waafajin ku sameynayaan siyaasadahooda iyo khayraadkooda iyadoo maskaxda lagu hayo in la abuuro jawi ku habboon in lagu xaqiijiyo ujeedooyinka IGAD iyo dhaqangelinta qodobada ku xusan Heshiiska;

(b) isku dubaridka, iyadoo loo marayo unugyada IGD iyo siyaasadahooda ilaa xad inta ay suurtagal tahay si loo xaqiijiyo ujeedooyinka IGAD;

(c) kormeerka iyo qiimaynta fulinta Heshiiska, siyaasadaha iyo barnaamijyada;

2. Dal kasta oo ka mid ah Xubnaha wuxuu qaadayaa talaabooyinka lagama maarmaanka ah, oo ay ku jiraan meel marinta sharciyada, si hannaan hufan loogu dhaqangeliyo Heshiiska;

## Qodobka Article 7
## Hawlaha Gaarka ah ee la Qabanayo

1. Si loo xaqiijiyo ujeedooyinka iyo ahdaafta IGAD sida ku cad qodobada Heshiiska iyo hab raacyada lagu lifaaqay, Dalalka Xubnaha ka ah waxay;

(a) si adag ugu hoggaansamayaan waajibaadka saaran iyaga ee ka dhasha Heshiiska;

(b) in ay mabaadii;da ku xusan Heshiiska Abuja ku dhaqmayaan

2. Dalalka Xubnaha ka ah waxa kale oo dheeri ah oo laga rabaa inay ka shaqeeyaan;

(a) kobcinta iskaashi si loo fududeeyo wax soo saarka iyo ganacsiga badeecadaha iyo adeegyada;

(b) kobcinta iskaashi si meesha looga saaro caqabadaha horyaalla xorriyada isu socdka dadka, shaqaalaha, badeecadaha iyo adeegyada, si waafaqsan sharciyada heer qaran ee dalalka;

(c) bixinta adeegyad ku habboon iyo jawi fududaynaya sidii ganacsiyad gaarka loo leeyahay uga qayb geli lahaayeen horumarinta dhaqaalaha iyo iskaashiga ee u dhaxeeya dalalka IGAD;

(f) Sare u qaadista iyo joogtaynta jawi lagu hawl geli karo oo ah mid nabdoon oo amni ah, iyadoo loo marayo iskaashi iyo wadatashi laga yeesho arrimaha la xiriira dastuuriyadda, dimuqoraadiyadda, xuquuqda aadanaha iyo dadka, ku dhaqanka sharciga, isla xisaabtanka, hufnaanta, maamulka, amniga iyo nabadda;

(g) Xal u helista maamulka khayraadka dabiiciga iyo deegaanka iyadoo ay la socoto ka hortagidda, maamulid wanaagsan iyo garnaqa muranada iyo khilaafyada u dhexeeya dalalka xubnaha ah iyo guud ahaan gobolka;

(h) xoojinta iskaashiga lagu dhisayo mu'asasaadka ah si kor loogu qaado u adkaysiga abaaraha iyo haqab beelka cuntada.

(i) In si wadajir ah loo qaado tallaabooyinka suurto galka ee lagu gaarayo ujeedooyinka iyo yoolasha IGAD.

## Qodobka 8
## Xubinnimada IGAD

**1.** Dowladah Xubnaha ka ah Urur Goboleedka IGAD waa Jamhuuriyadda Jabuuti, Jamhuuriyadda Federaalka Dimuqraadiga Itoobiya, Dowladda Eretria, Jamhuuriyadda Kenya, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Jamhuuriyadda Koonfur Suudaan, Jamhuuriyadda Suudaan iyo Jamhuuriydda Uganda iyo dowladii kale ee laga ogolaado in ay xubin ka noqoto.

2. Dowladaha xubnaha ka aha waxay, go'aamada u gaarayaan wadar ogol, markay noqoto shuruudo iyo arrimo ay tahay in ay go'aan ka gaarayaan, haddii la ogolaanayo Dowlad Afrika ka mid ah taasoo buuxiso shuruudaha ku qoran Jumladda 3aad ee Qodobkan.

3. Arrimaha ay tahay in ay xil iska saaraan Dowladha Xubnaha ka ah markay noqoto in ay aqbalaan dal in uu ka mid noqdo xubnaha IGAD, waxaa kamid ah waxyaabahan soo socda;

   (a) aqbalidda mabaadii'da iyo ujeedooyinka IGAD ee lagu caddeeyay Heshiiskan**;**

   (b) u hogaansamidda xeerarka iyo ujeedooyinka dowlad wanaagga, dimuqoraadiyadda, ku dhaqanka sharciga iyo ku dhaqanka cadaaladda bulshada iyo xuquuqda aadanaha;

   (c) La-haanshaha ixtimaal sare oo ay wax ku kordhinayso xoojinta iskaashiga dhaqaale iyo is dhex galka gudaha dalalka gobolka IGAD;

   (d) juquraafi ahaan in uu ku dhow yahay dalalka iyo inay ka dhaxeeyso isku tiirsanaan isaga iyo Dalalka Xubnaha ka ah ee kale;

   (e) siyaasadahiisa bulsho iyo dhaqaale ee dalkaasi inay lamid yihiin kuwa dalalka IGAD.

4. In dal la siiyo martabad goobjooge, ama uu ka qayb galo hawlaha khuseeya IGAD oo ay tahay:

(a) haddii dalkaasi uusan xubin ka ahayn, waxaa leh awoodda Golaha Guud; iyo

**(b)** haddi ay noqoto urur dawladeed ama urur bulshada rayidka ah, waxa leh Golaha Wasiirada.

5. Habka loo raacayo xeerarka kor ku xusan ee Heshiiskan waxaa go'aamin doona Fadhiga Guud (Madaxeynayaasha).

## Qodobka 9
## Awoodda Sharciyeed ee IGAD

1. IGAD waxay yeelanaysaa awooda shakhiyad qaanuuni ah si ay u fuliso tallaabo kasta oo sharci ah oo ku habboon ujeeddooyinkeeda.

2. IGAD, iyadoo adeegsanaysa shakhiyadeeda qaanuunig ah, waxaa metelaya Xoghaynta Fulinta.

## CUTUBK LABAAD
## UNUGYADA IYO MU'ASASAADKA IGAD

### Qodobka 10
### Xubnaha IGAD

**1.** Qaybahaan soo socdaa waa unugyada IGAD:

**(a)** Fadhiga Guud ;

**(b)** Golaha

(c) Guddiga Danjirayaasha;

**(d)** Xoghaynta;

**(e)** wixii kale ee unugyo ah ee laga yaabo in ay dhisaan Fadhiga Guud ;

**2.** Unugyada IGAD waxay gudanayaan shaqooyinka, waxayna fulinayaan in ku siman awoodaha la siiyey ee ku cad Heshiiska ama habracayada ay kala leeyihiin.

### Qodobka 11
### Fadhiga Guud

1. Fadhiga Guud wuxuu noqon doonaa unuga ugu sarreeyaIGAD.

**2.** Fadhiga Guud wuxuu ka koobnaan doonaa Madaxda ugu saraysa Dowladaha Xubnaha ka ah, ama ciddii ay u soo magacaabeen in ay matalaan.

3. Fadhiga Guud wuxuu:

**(a)** go'aaminayaa siyaasadaha guud, wuxuuna kormeerayaa shaqooyinka IGAD;

**(b)** wuxuu kormeerayaa dhaqangelinta siyaasadaha iyo go'aamada la gaaro, sidoo kalena wuxuu xaqiijinayaan siday dhammaan Dowladaha Xubnaha ahi ugu hoggaansamaan;

(c) wuxuu siinayaan Golaha Wasiirada iyo qaybaha kale ee IGAD in ay si dhamaystiran u fulinyaan Heshiiska, xallinta khilaafaadka, dagaallada iyo xaaladaha kale ee degdega ah iyo nabad soo celinta;

**(d)** dhismaha unugyada IGAD;

(e) In la siiyo xubnimada IGAD dal kasta oo buuxiyey shuruudaha iyo xeerarka lagu xusay qodobka 8aad ee Heshiiska;

(f) magacaabista Xoghayaha Fulinta marka Golaha ay soo jeediyaan;

(g) tixgelinta warbixinnada ku saabsan guulaha la gaaray iyo xogaha kale oo loo gudbiyo Golaha sida uu dhigayo Heshiisku;

**(h)** meel marinta qiimeynta qiyaasta lacagaha xubinnimada Dowladaha Xubnaha ka ah ay ku bixiyaan misaaniyadda IGAD, marka Goluhu soo jeediyo iyo

(i) meel marinta misaaniyad sanadeedka IGAD oo waafaqsan talooyinka uu Goluhu soo jeediyey.

**4.** iyadoo la raacayo Heshiiska, Fadhiga Guud wuxuu Golaha u daadajin karaa hawlo gaar ah oo ka mid noqon kara waajibaadkiisa.

5. Xeerarka iyo go'aamada Fadhiga Guud waxaa soosaarayaa Xoghayaha Fulinta.

7. Dhammaan warbixinno maaliyadeedka IGAD ee sanad kasta waa in Goluhu dib u eegis ku sameeya, loona gudbiyaa Fadhiga Guud.

## Qodobka 12
## Kulamada Fadhiga Guud

**1.** Fadhiga Guud wuxuu sanadkiiba kulmi doonaa hal mar oo ah kulanka caadiga ah iyo sidoo kale wuxuu qabsan karaa kulamo aan caadi ahayn haddii xubin ka mid ah Dalalka Xubnaha ahi ay codsato, kadibna ay ku raacaan inta badan xubnuhu.

**2.** Saddex meelood oo laba guud ahaan xubnaha ah haddii ay joogaan waxaa guntamaya tirada (quorum) fadhiga shirka ee Fadhiga Guud .

**3.** Go'aamada Fadhiga Guud waa in ay noqdaan wada-ogol, haddii taas la waayo waxay noqonayaan cod dheeri iyo saddex meelood oo laba arrimaha muhiimka ah ama hababka kale ee ay isku raacaan Fadhiga Guud .

**4.** Iyadoo la raacayo xeerarka Heshiiska, Fadhiga Guud wuxuu go'aamin doonaa hab raacooda.

### Qodobka 13

### Guddoomiyaha Fadhiga Guud

**1.** Guddoomiyaha Fadhiga Guud wuxuu noqon doonaa mid meerto ah, iyadoo lagu salaynayo habka kala horaynta xarfaha oo lagu salaynayo Madaxda Dowladaha iyo Xukuumadaha Xubnaha ka ah.

**2.** Muddo xileedka Gudoomiyaha Fadhiga Guud uu xafiiska haynayaa waa hal sano.

**3.** Madaxda Dowladaha ama Xukuumadaha ee noqonaya Guddoomiye Ku Xigeen waxaa lagu xulayaa sida xarfaha alifbeetadu u kala horeeyaan, wuxuuna noqonayaa Gudodomiye ku xigeenka IGAD.

## Qodobka 14

## Golaha Wasiirda

**1.** Golaha wuxuu noqon doonaa unuga siyaasadda ee IGAD.

**2.** Goluhu wuxuu ka koobnaanayaa Wasiirada Arrimaha Dibadda ama wasiirkii kale ee Dowladaha Xubnaha ahi ay u soo magacaabaan ama cidii kale ee ay u wakiilato in ay u metesho.

## Qodobka 15
## Shaqada Golaha

**1.** Goluhu wuxuu u soo bandhigaya Fadhiga Guud talooyin ku saabsan arrimaha siyaasadda ee khuseeya habsami u socodka hawlaha iyo horumarinta IGAD si waafaqsan Heshiiska.

**2.** Goluhu wuxuu sare u qaadayaa, la soconayaa, oo korjoogtaynayaa dhaqan gelinta siyaasadaha, hab-raacyadaa iyo sharciyada , istiraatiijiyadaha iyo barnaamijyada IGAD, waxayna xaqiijinayaan habsami u socodka shaqada iyo horumarinta IGAD, si waafaqsan Heshiiska.

a) soo saarayaa xeerar, awaamiir iyo qaadashada go'aamo looga gol leeyahay in lagu xaqiijiyo dhaqangelinta siyaasadaha, hab-raacyada, istaraatiijiyadaha iyo barnaamijyada lagama maarmaanka ah, si hab wax ku ool ah loogu shaqeeyo horumarinta IGAD;

b) In ay u soo gudbiyaan talooyinka Fadhiga Guud  kuwaasoo ku saabsaan siyaasadaha aasaaska u ah ujeedooyinka si wacan loogu shaqayn karo iyo horumarinta IGAD;

c) tixgeliyaan tallaabooyinka ay tahay in ay qaadaan Dawladaha Xubnaha ka ah si loo xaqiijiyo gaaritaanka ujeedooyinka iyo himilooyinka IGAD

d) tixgeliyaann dib u eegista iyo soo gudbinta miisaaniyadda IGAD si ay Fadhiga Guud  u meel mariyaan;

e) dib u eegis iyo meelmarin ku sameeyaan shuruucda shaqaalaha iyo xeerarka IGAD;

f) magacaabaan Ku Xigeenka Xoghaynta Fulinta ama Xog-haynada

g) dib u eegaan, meelna mariyaan sharciyada maaliyadeed iyo xeerarka IGAD;

h) u gudbiyaan Fadhiga Guud warbixinnada waxqabadka;

i) diyaariyaan ajandayaasha kulamada Fadhiga Guud ;

j) dhaqangeliyaan go’aamada iyo awaamiirta ka soo baxa Fadhiga Guud ;

k) in ay helaan, dibna u eegaan waxrbixinaha ka yimaadda Xoghaynta

l) inay masuuliyad iska saaraan shaqo kastoo ay u soo xil saaraan Fadhiga Guud

**4.** Iyadoo la raacayo Heshiiska, Goluhu wuxuu u dirsan karaa wajibaad cayiman oo ka mid ah shaqooyinkeeda Guddiga Danjirayaasha, Gole Waaxeed, Guddiga Xeeldheerayaasha ama Xoghayaha Fulinta.

**5.** Goluhu wuxuu dhisan karaa Gole Waaxeed iyo Guddiyo Xeeldheerayaal ah oo wax ka qabta arrimaha waaxyahooda iyo shuruudaha hadba sida Goluhu uu go’aamiyo.

**6.** Go’aamada Gole Waaxeed gaaraan waxaa loo gudbin doonaa kulamada caadiga ah ee Golaha si ay dib ugu eegaan. Markay meel marinayaan, kaddib go’aamada Gole Waaxeedka waxaa loo tixi gelin doonaa go’aamo ka soo baxay Golaha.

**7.** Goluhu, isagoo raacaya qodobada Heshiiska iyo awoodda la siiyey, wuxuu qaadan karaa xeerar, awaamiir, iyo go'aammo.

## Qodobka 16
## Kulamada Golaha

**1.** Goluhu ugu yaraan sanadkiiba wuxuu kulmi doonaa labo goor oo ah kulan caadi ah, kulan ka mid ahi waa kulan si degdeg ah ugu xiga kulan sanadeedka guud ee Fadhiga Guud .

**2.** Kulamada Golaha waxaa guddoomin doona Wasiirka Arrimaha Dibadda ee dalka haya guddoonka IGAD ama wasiirkii kale ee uu u soo igmado isla dalkaasi.

**3.** Kulamada aan caadiga ahayn ee Golaha waxaa lagu qaban karaa codsi ka yimaadda Dal Xubin ah ama Guddoomiyaha Golaha ayaa ku qaban kara codsi uga yimaadd Dal Xubin ah ama Guddomiyaha Golaha marka ay ogolaadaan inta badan Dalalka Xubnaha ah.

4. Marka laga reebo sida ku qeexan Heshiiska, Goluhu wuxuu go'aanadiisa ku qaadan doonaa wada-ogol, haddii taasi dhici waydana aqlabiyad hal-dheeri ah oo ku saabsan

**5.** Sida uu qabo Xeerka Heshiisku, Goluhu wuxuu go'aamin doonaa xeerarkiisa.

### Qodobka 17
### Guddiga Danjirayaasha

Guddiga Danjirayaashu waxay ka koobnaan donaan Safiirada Dalalka Xubnaha ah ama Safiirada leh Awoodaha aan Caadiga ahayn ee ku sugn markaas dalka ay ku taaallo Xarunta Dhexe ee Hay'addu. Guddiga Danjirayaashu waxay xogta siinayaan Golaha.

## Qodobka 18
## Shaqada Guddiga Danjirayaasha

**1.** Guddiga Danjirayaashu waxay:

**(a)** Tala bixin siinayaan Xog-haynta, taasoo ku saabsan qorshe hawleedka barnaamijyada iyo waaxyaha kala duwan ee ay iskaashadaan, isna dhexgalaan, iyagoo taxliilinaya qorsheyaasha ay soo jeediso Xog-haynta iyo in ay xaqiijiyaan in ay la jaanqaadayso ujeedooyinka istiraatijiyadeed ee IGAD;

**(b)** Waxay ka talo bixinayaan tallaabooyinka dhammaan la qaadayo ee iskaashiga ah in ay la jaanqaadayaan ujeedooyinka IGAD, si Xog-hayntu u fuliso;

**(c)** hagista Xog-haynta ee dhaqangelinta qodobada heshiiskan ee ay fulinayaan Xoghaynta iyo guddiyada kale ee Xeeldheerayaasha ah ee uu aasaasi karo Goluhu isaga oo isticmaalaya sida ku cad awoodihiisa ku xusan Heshiiskan;

**(d)** Waxay talo bixin siinayaan Xog-haynta, taasoo ku saabsan fulinta xeerarka Heshiiskan;

**(e)** Talo-siinta Xog-haynta eek or u qaadista dadaalladooda ku aaddan xaqiijinta qorshe-hawleedka ay ansixiyeen Golaha Wasiirrada;

**(f)** Jihaynta Xog-haynta ee tarjumaadda siyaasadaha iyo habraacyada kuwaasoo u baahan kara in loo helo sharaxaad dheeraad ah;

(g) Waxay kale uu fulinayaan shaqooyinkii kale ee uu Goluhu u dhiibo.

2. Iyadoo la raacayo awaamiirta Golaha, Guddiga Danjirayaashu waxay yeelanayaan shirar joogto sidii loogu baahdo iyo markii loo baahdo si ay dib ugu eegaan hawlaha Xog-haynta.

3. Dhammaan go'aamada Guddiga Danjirayaasha waxaa lagu gaari doonaa wada-ogol. Haddii Guddigu ku guul daraysto in ay heshiis ku gaaraan wada-ogol, go'aanadu waxa lagu qaadan doonaa hab cod dheeri ah iyo saddex meelood oo laba xubnaha joogaa in ay isku raaceen arrimaha la taaban karo.

## Qodobka 19
## Dhismaha Xog-haynta

**1.** Xog-hayntu waxy noqon doontaa unug fulin oo ka tirsan IGAD.

**2.** Xog-hayntu waxaa loo dhisi doonaa sidaan soo socota:

**(a)** Xog-hayaha fulina;

**(b)** Lab ku xigeen oo Xog-hayaha fulinta ah;

(c) Xafiisyo kale, qaybaha ama hay'adaha maamul hadba sidii loogu arko in uu baahanyahay Goluhu.

waa in la siiyaa sugidda heerarka ugu sarreeya ee daacadnimada, hufnaanta iyo kartida farsamo, sinnaanta jinsiga, sinnaanta fursadaha iyo si siman loogu qaybiyo magacaabista xafiisyada shaqaalaha xafiisyada dhammaan muwaadiniinta Dawladaha Xubnaha ka ah.

## Qodobka 20
## Shaqooyinka Xog-hayaha

Si looga miradhaliyo ujeedooyinka iyo yoolasha IGAD, Xog-hayntu waxay qaban doontaa;

(a) keenista siyaasadaha, agabyada sharci, barnaamijyada iyo mashaariicda, waxayna talo bixin usoo diyaarinayaan Golaha, iyagoo soo jeedinaya go'aamada siyaasadeed iyo awaamiirta;

**(b)** waxay qabanayaan daraasado iyo cilmi baaris la xiriirta, fulinta barnaamijyada iyo mashaariicda;

(c) in ay hor mariyaan istiraatijiyadda qorshaynta, maamul iyo kormeerka barnaamijyada iyo mashaariicda IGAD;

**(d)** waxay la imaanayan hindisayashooda, ama waxay ku hawlgalayaan go'aamada Golaha, sida baaritaannada, xog ururinta ama xaqiijinta arimaha la xiriira wax kastoo saamaynaya IGAD, kuwaasoo u baahan in lagu sameeyo baaritaano;

(e) isku dubaridka iyo isku-dhafidda siyaasadaha iyo istiraatijiyadda la xariirta ujeedooyinka iyo yoolasha IGAD;

**(f)** diyaarinta iyo soo gudbinta warbixinadda maamulista iyo maaraynta maaliyadda, oo ay ku jirto miisaaniyadda Golaha siday ugu baahan yihiin;

**(g)** diyaarinta qorsheyaasha lagu raadiyo dhaqaalaha ee laga helayo bahwadaagta horumarinta iyo ilaha kale, si loogu fuliyo barnaamijyada iyo mashaariicda IGAD;

**(h)** kor u qaadista iyo faafinta xogaha guud ee ku saabsan IGAD oo la siinayo dhinacyada ay khusayso, dadweynaha iyo Beesha Caalamka;

(i) diyaarinta warbixinaha ku saabsan wax qabadka IGAD iyo in ay u gudbiyaan Golaha;

(j) in ay diyaariyaan qabyo-qoraalada ajanadayaasha shirarka unugyada IGAD:

(k) fuliyaan go'aamada Fadhiga Guud (madaxda) iyo Golaha (wasiirada);

(I) la socoshada arrimaha soo ifbaxa iyo kuwa soo noqnoqda ee saameeya gobolka;

(m) diyaarinta, agaasinka iyo kaydinka xogaha iyo qoraalada shirarka waaxyaha iyo hay'adaha maamul ee IGAD, iyo

**(n)** wixii kale ee arrimo ah ee loo dhiibo, kuwaasoo ka soo baxa Heshiiska.

## Qodobka 21
## Xog-hayaha Fulinta

**1.** Xog-hayaha Fulinta waxaa magacaabi doona Fadhiga Guud , muddada xil-hayntiisuna waa afar sano oo loo cusboonaysiin karo hal mar, waana xil meerto ah;

**2.** Xog-hayaa Fulinta wuxuu noqon doonaa sarkaalka madax fulinta ee IGAD, wuxuuna yeelanayaa xilalka iyo waajibaadyada soo socda:

**(a)** Wuxuu metelayaa IGAD, isagoo difaacaya danaheeda, kuna shaqaynaya hagista iyo waajibaadka ay siiyeen Golaha (Wasiirada) iyo Fadhiga Guud (Madaxda);

**(b)** wuxuu fulinayaa go'aamada ay gaareen unugyada IGAD;

**(c)** wuxuu u shaqaynayaa sida xog-hayaha Guddiga Danjirayaasha, Golaha (Wasiirada) iyo Fadhiga Guud (Madaxda);

wixii kale ee shir ah oo ku saabsan jihaynta Fadhiga Guud ama Golaha;

(e) waa ilaaliyaha dukumentiyada iyo hantida IGAD; waa kayd hayaha dhammaan heshiisyada IGAD iyo qoraallada kale ee sharciga ah iyo hawlaha la qabtay ee la mid ka ah;

**(f)** diyaarinta talo-bixinnada si loo fuliyo waajibaadka IGAD iyadoo la tix gelinayo siyaasadaha ku haboon ee unug kasta;

**(g)** diyaarinta miisaaniyadda IGAD, isagoo u gudbinaya Fadhiga Guud, wuxuuna u sii marinayaa Guddiga Danjirayaasha iyo Golaha;

**(h)** gudbinta warbixin sanadeedka ku saabsan hawlaha iyo qorshaynta IGAD iyo warbixinaha maaliyadeed isagoo u diraya Golaha, una sii marinaya Guddiga Danjirayaasha;

(i) wuxuu qaadayaa tallaabooyinka iyo barnaamijyada ay ujeedkoodu tahay kor u qaadista ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD, isagoo tix gelinaya unugyada IGAD;

(j) wuxuu xoojinayaa wada shaqaynta ururo goboleedka kale, Midowga Afrika, Qaramada Midoobay iyo kuwa gobolka qaaradaha iyo hay'adaha maaliyadda aduunka;

(k) wuxuu xoojinayaa wada shaqaynta lala leeyahay saaxiibada kale iyo bahwadaagta kale si loo joogteeyo ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD;

(l) la tashanayaa, la xiriirayaa Dowladaha iyo hay'addaha kale ee maamul ee Dowladaha Xubnaha ah;

(m) la xaajoonayaa isagoo haysta ogolaansha Gudoomiyaha Golaha, dowladaha kale, hay'adaha caalamiga ah iyo bahwadaagta si loo helo maaliyad iyo taageero farsamo, isagoo wakiil ka ah IGAD;

**(n)** in uu qabanqaabiyo hawlaha Xoghaynta iyo unugyada IGAD;

(o) qorista shaqaalaha IGAD si waafaqsan Sharciga shaqaalaha IGAD;

(p) kormeerka maaraynta shaqada Xoghaynta, maamulka maaliyadda iyo maamulka shaqaalaha ee IGAD;

(q) fulinta hawlaha kale ee laga yaabo in ay go'aamiyaan Fadhiga Guud ama Golaha waqti ka waqti.

3. Shuruudaha iyo xeerarka uu ku shaqaynayo Xog-hayaha Fulintu waxaa go'aaminiya Golaha, waxaana meel marinaya Fadhiga Guud.

## Qodobka 22
## Xog-haye Ku Xigeenada

**1.** Labad Ku Xigeen ee Xog-hayaha Guud waxaa magacaabi doona Golaha, muddada xil-hayntooduna waa afar sano, oo hal mar la cusboonaysiin karo, iyadoo loo raacayo xeerarka iyo mabaadii' ku dhisan wax qaybsi si siman

**2.** Ku Xigeenada Xog-hayaha Guud kama imaan karaan isku wadan, kamana imaan kara isla wadanka uu ka soo jeedo Xog-hayaha Fulintu.

3. Ku Xigeenada Xog-haynta Fulintu waxay waajibaad ahaan gacan siinayaan Xog-hayaha Fulinta si uu u guto waajibaadkiisa shaqo;

**4.** Shuruudaha iyo xeerarka shaqo ee Ku Xigeenada Xog-hayaha waxaa go'aaminaya Golaha.

### Qodobka 23
### Saraakiisha kale iyo Xubnaha Shaqaalaha ee Xog-haynta

**1.** Waxaa jiri doona saraakiil iyo shaqaale kale oo qabanaya shaqada IGAD hadba sida Goluhu u go'aamiyo.

2. Dhammaan shaqaalaha Xog-haynta waxaa lagu shaqaalaynayaa heshiis iyo nidaam waafaqsan Xeerarka Shaqada ee IGAD.

3. Mushaharka, tilmaamaha shaqada, shuruudaha kale iyo xaaladaha shaqada ee shaqaalaha waxaa lagu go'aaminayaa Xeerarka Shaqada ee IGAD.

**4.** Magacaabista xubnaha saraakiisha ee xafiisyada Xog-haynta, iyadoo la tix gelinayo waxaa lagu shaqaalaynaya heerka ugu sarreeya ee hufnaanta, wax qabadka farsamo, sinnaanta shaqada ee rag iyo dumar, u sinnaanta fursadaha iyo in fursadaha magaacaabista ay u siman u helan muwaadiniinta Dowladaha Xubnaha ah.

## CUTUBKA SADDEXAAD: DHINACYADA ISKAASHIGA

## Qodobka 24
## Dhinacyada Iskaashiga

Dowladaha Xubnaha ka ahi waxay iska kaashanayan dhinacyadaan soo socda;

(a) horumarinta iyo xornimada ganacsiga;

**(b)** gaadiid iyo isgaarsiinta;

**(c)** dalxiiska;

**(d)** tamarta, khaas ahaan horumarinta tamarta la cusboonaysiiyo;

**(e)** beeraha iyo haqab beelka cuntada;

(f) ilaalinta deeganka iyo maaraynta khayraadka dabiicig ah;

**(g)** abuurista jawi ay ku shaqeyn karaan ganacsiyada gaarka loo leeyahay;

**(h)** abuurista jawi ay ku hawlgali karaan bulshada rayidka ah hay'adaha xirfadlayaasha;

**(i)** sinnaanta jinsiga iyo awoosiinta haweenka iyo gabdhaha;

**(j)** maal gashiga;

**(k)** xornimada isu socodka badeecooyinka, dadka, muruq-maalka, adeegyada iyo hantida;

**(l)** dowlad wanaagga, nabadda iyo amaanka;

**(m)** horumarinta iyo ka faa'iidaysiga karaanka dadka;

**(n)** wax barashada, sayniska iyo tiknoolajiyada;

**(o)** daryeelka bulshada;

**(p)** caafimaadka;

**(q)** dhaqanka iyo ciyaaraha;

**(r)** iyo meelihii kale ee Dalalka Xubnaha ahi ay go'aansadaan si loo sii dhaqaajiyo ujeedooyinka iyo hiigsiga Heshiiska.

## Qodobka 25
## Horumarinta iyo Ganacsiga Xorta ah

**1.** Iyadoo la raacayo Qodobka 24, lana fiirinayo sida ku soo baxday Qodobka 56 ee Heshiiska, Dalalka Xubnaha ahi waxay horumarin karaa farsamad iyo wax qabadka si loo gaaro ujeedooyinka Heshiiska Abuja iyo Heshiiska Ganacsiga Xotga ah ee Qaaradda Afrika.

**2.** IGAD waxay soo saari kartaa xeerar, awaamiir iyo go'aamo ay gaarto iyadoo looga gol leeyahay yahay fulinta ujeedooyinka iyo himilooyinka Heshiiskii Abuja iyo Heshiiska Ganacsiga Xotga ah ee Qaaradda Afrika.

## Qodobka 26
## Gaadiidka iyo Isgaarsiinta

Si loo gaaro ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD, iyadoo la raacayo Qodobka 24, Dalalka Xubnaha ahi waxay isku duba ridayaan, dejinayaan siyaasadaha gaadiidka iyo isgaarsiinta, waxay ku samaynayaan horumarin iyo ballaarin isku xirkii gaadiid iyo isgaarsiin ee horay u jiray, waxayna abuurayaan kuwo cusub.

## Qodobka 27
## Dalxiiska

Si loo gaaro ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD iyo iyadoo la raacayo Qodobka 24, Dalalka Xubnaha ahi waxay isku dubaridayaan, mideynayaan, ayna horumarinayaan siyaasado kor loogu qaadayo dalxiiska gobolka dalalka IGAD.

## Qodobka 28
## Tamarta

Iyadoo la raacayo Qodobka 24, Dalalka Xubnaha ahi waxay garwaaqsanayaan in helista tamar leh sicir lagu tartami karo ay tahay shardi hor dhac u ah horumarinta dhaqaalaha iyo in la xaqiijiyo sicir macquul ah oo lagu bixin karo tamarta la siinayo dhammaan Dalalka Xubnaha ahi ee ay uga baahan yihiin horumrinta khayraadka tamarta gudaha iyo hannaanka maaraynta beekhaaminta ee ilihii horay u jiray.

## Qodobka 29
## Beeraha iyo Haqab-beelka Cuntada

Dowladaha Xubnaha ahi waxy isku raaceen guud ahaan ujeedooyinka ka wada shaqaynta dhinaca beeraha in ay tahay sida lagu gaarayo haqab-beelka cuntada iyo raashin ku filan oo ay helaan dalalka IGAD. Sidaas darted, iyadoo la raacayo Qodobka 24, Dalalka Xubnaha ahi waxay isku dubaridyaan, horumarinayaan, soona saarayaan siyaasado lagu xaqiijinayo haqab-beelka cuntada ee dalalka IGAD iyo joogtaynta kor u qaadista wax soo saarka dalaga beeraha, xoolaha nool, kalluumaysiga iyo kaymaha.

## Qodobka 30
## Maaraynta Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah

Iyadoo la raacayo Qodobka 24, Dalalka Xubnaha ka ah waxay aqoonsan yihiin in deegaan nadiif ah, caafimaad qaba uu lagama maarmaan u yahay joogtaynta horumar waara. Sidaa darteed, Dalalka Xubnuhu waxay isku raaceen in ay qaadaan tallaabooyin wada jira oo lagu kobciyo iskaashiga iyasoo si wadajir ah loo maamulayo sidii hannaan waara looga ka

## Qodobka 31
## Xoojinta jawi ay ku hawl galaan Ganacsiyada Gaarka loo leeyahay

Dowladaha Xubnaha ahi waxay isku raaceen in ay siiyaan jawi u fududaynaya ganacsiyada gaarka loo leeyahay in ay si buuxda uga faa'iidaystaan fursadaha ganacsi ee ka dhex jira dalalka IGAD. Si taas loo helo waa in Dalalka Xubanaha ahi horumariyaan xaaladaha ganacsiga ee heer qaran iyo heer goboleed si loo horumariyo ganacsiyada gaarka ah.

## Qodobka 32
## Xoojinta Bulshada Rayidka ah iyo Xirfadlayaasha

Dowladaha Xubnaha ahi waxay isku raaceen in ay siiyaan awood ay bulshada rayidka iyo xirfadlayaashu uga qayb galaan si ay wax ugu kordhiyaan kor u qaadista iyo xaqiijinta ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD.

## Qodobka 33
## Sinnaanta jinsiga iyo awood-siinta haweenka iyo gabdhaha

Dawladaha Xubnaha ka ah waxay aqoonsan yihiin in haweenku ay gacan weyn ka geystaan geeddi-socodka isbeddelka bulshada iyo horumar waara, waxayna u baahan yihiin inay si buuxda uga qayb-galaan horumarinta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo barnaamijyada IGAD iyo Dowladaha Xubnaha ka ah. Si taas loo gaaro, IGAD iyo dowladaha xubnaha ka ah waa in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon si loo xaqiijiyo in qof kasta oo dumar iyo gabar ahi ay helaan sinnaan buuxda oo jinsiga ah iyo dhammaan xuquuqda sharciga, siyaasadda, bulshada, dhaqaalaha, iyo in la xaqiijiyo ka qaybgalka haweenka iyo hoggaanka dhammaan noocyada go'aan qaadashada, iyo qaadista tallaabooyinka kale oo meesha ka saaraya faquuqa iyo xadgudubyada ka dhanka ah haweenka.

## Qodobka 34
## Maalgashiga

Dawladaha Xubnaha ka ah waxay isku raaceen inay abuuraan jawi awood siiinaya maalgashiga iyo horumarinta ganacsiga. Si taas loo gaaro, Dawladaha Xubnaha ka ah waxay ballan qaadayaan qaadashada siyaasado isku mid ah oo ujeeddadoodu tahay soo jiidashada maalgashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay ee gobolka IGAD, abuuritaanka iyo joogtaynta jawi maalgashi oo la saadaalin karo, loo siman yahay iyo xaalad maal gashi oo sugn.

## Qodobka 35
## Xornimada Isu socodka, Dadka, Xoogsatada, Badeecooyinka, Adeegyada iyo Hantida

Dowladaha Xubnaha ahi waxay isku raaceen iskaashiga in la fadudueeyo iyo la qaado tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo gaaro isu socod xor ah oo badeecooyinka, dadka, xoogsatada, adeegyada iyo hantida ee gudaha dalalka IGD iyadoo lagu shaqaynayo Heshiiska Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika.

## Qodobka 36
## Dowlad wanaagga, Nabad gelyada iyo Amniga

Si loo gaaro ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD, iyadoo la raacayo Qodobka 3, Dowladaha

ee IGAD. Dowladaha Xubnaha ka ahi waxay isku raaceen xoojinta dowlad wanaagga iyadoo la xaqiijinayo tix gelinta sarraynta sharciga iyo xuquuqda aadanaha iyo in la gaaro nabad iyo amni iyadoo loo marayo awoodooda in la xaliyo khilaafyada gudaha, murannada dowladaha iyo isku dhacyada.

## Qodobka 37
## Horumarinta iyo Ka-faa'iideysiga Karaanka Aadanaha

Dowladaha Xubnaha ahi waxay isku raaceen in ay qaadaan tallaabooyin wadajira si loo loo xoojiyo iskaashiga horumarinta kaaranka aadanaha iyo si weyn looga faa'iidaysto awoodda dadka, aqoonta farsamo iyo awoodaha hay'adaha maamul.

## Qodobka 38
## Aqoonta, Sayniska iyo Teknooljiyadda

Dowladaha Xubnaha ka ahi waxay qaadayaan tallaabooyin lagu abuurayo jawi ku habboon si ay u kobciyaan iskaashiga horumarinta waxbarashada, sayniska, teknoolojiyadda iyo hal abuurka, iyadoo loo marayo mideynta siyaasadaha iyo barnaamijyada

## Qodobka 39
## Daryeelka Bulshada

Dowladaha Xubnaha ka ah waxay ballan qaadayaan inay kobciyaan iskaashiga ilaalinta bulshada, horumarinta iyo fulinta tallaabooyin lagu ilaalinayo xuquuqda iyo daryeelka carruurta, waayeelka, dhallinyarada, dadka naafada ah, iyo dadka danyarta ah iyo kuwa la takooro.

## Qodobka 40
## Caafimaadka

Dowladaha Xubnaha ka ah waxay ballan qaadayaan inay qaadaan siyaasad wadajir ah iyo tallaabooyinka kale ee lagama maarmaanka u ah xoojinta iskaashiga waaxda caafimaadka ee ka hortagga iyo ciribtirka cudurrada, kor u qaadista waxtarka adeegyada daryeelka caafimaadka, kobcinta cilmi-baarista iyo horumarinta.

## Qodobka 41
## Dhaqanka iyo Ciyaaraha

Dowladaha Xubnaha ahi waa in ay horumariyaan iskaashiga dhaw oo u dhexeeya ee dhaqanka, ciyaaraha, waxayna ku heshiiyeen horumarinta iyo ilaalinta waxyaabaha dhaxal-dhaqameedka ah ee gobolka IGAD, iyo in kor loo qaaado doorka dhaqan iyo ciyaaro ee horumarinta dhaqan-dhaqaalaha bulshada gobolka.

### CUTUBKA AFRAAD: IKAASHIGA URUR GOBOLEEDYADA KALE, MIDOWGA AFRIKA IYO HAY'ADAHA KALE EE CAALAMIGA AH

## Qodobka 42
## Heshiisyada kaleEE Urur Goboleedyada, Midowga Afrika

1. Dowladaha Xubnaha ahi waxay adkaynayaa rabitaankooda iyo ka ballanqaadkooda ee guud ahaan Afrika, waxayna u arkaan is dhex galka dhaqaalaha ee IGAD ay tahay tallaabo loo qaaday gaaritaanka ujeedooyinka Heshiiska Asaaska Bulshada Dhaqaalaha Afrika

ee gobolka, qaaradda iyo hay'adaha caalamiga ah kuwaasoo hawlahoodu saamayn ku leeyihiin ujeedooyinka IGAD.

## Qodobka 43
## Qaramada Midoobay, Hay'adaha kale ee Caalamiga ah iyo Bah-wadaagta Horumarinta

**3.** IGAD iyo Dowladaha Xubnaha ka ahi, waxay muhiimad siinayaan iskaashiga ay la yeelanayaan Qaramada Midoobay iyo Hay'adaheeda kala duwan, ururada heer goboleed iyo heer caalami, bah-wadaagta uu ka dhaxeeyo iskaahsiga labada dhinaclaha ah iyo kan dhinacyada badan, sidoo kale bulshooyinka dhaqalaha ee goboleed iyo kuwa caalamiga ah.

# CURTUBKA SHANAAD: BIXINTA MAALIYADDA

## Qodobka 44
## Miisaaniyadda

**1.** Waxaa jiri doona miisaaniyad ay yeelanayaan unugyada iyo hay'adaha IGAD.

2. Xog-hayaha Fulinta wuxuu soo diyaarinayaa, soona gudbin doonaa miisaaniyad sanadeedka isagoo la tashanaya Guddiga Danjirayaasha, waxaana tixgelinaya Golaha, iyadoo lagu meel marinayo Fadhiga Guud.

3. Dhammaan waribixanadda maaliyadeed ee IGAD, iyadoo la tix gelinayo miisaaniyad sanadeed kasta waa in Golaha la socdaan, ayna meel mariyaan Fadhiga Guud.

**4.** Miisaaniyadda IGAD waxaa bixinaya Dowladaha Xubnaha ah oo midkasta ay qaybta loo qoondeeyey ay bixinayso iyo maaliyad ka imaanaysa deeq bixiyayaasha gobolka iyo kuwa caalamiga ah iyo ilaha kale, hadba sida ay ku meel mariyaan Goluhu.

**5.** Dhaqaalaha IGAD waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo hawlaha IGAD.

**6.** Miisaaniydda iyo xisaabaadka IGAD waxaa lagu salaynayaa lacagta doolarka Dowladda Maraykanka.

## Qodobka 45
## Ilaha kale ee dhaqaalaha

**1.** Ilaha kale ee dhaqaalaha IGAD waxaa ka mid noqon kara sida miisaaniyad dheeri ah oo meelaha laga helay ka mid noqon karaan;

**(a)** deeqaha, kaalmada, deeqaha mashaariicda iyo barnaamijyada iyo kaalmada farsamada; iyo

**(b)** dakhliyada laga helo hawlaha ay qabato IGAD.

2. Miisaaniyada dheeraadka ah ee ka baxsan dhaqaalaha IGAD waxaa loo isticmaali doonaa in lagu maalgeliyo hawlaha IGAD.

## Qodobka 46
## Hantidhowrka Xisaabaadka

**1.** [illegible]

**2.** Hanti-dhowraha guduhu wuxuu u gudbin doonaa Warbixinta Fatashaadda gudaha iyo bannaanka Golaha isagoo usii marinaya Guddiga Hantidhawrku sanadkiiba, waxaa iyana sidaas oo kale loo gudbinayaa warbixintaas oo kale Fadhiga Guud.

3. Marka ay gudanayaan waajibaadkooda shaqo ee ku xusan qodobkan, Hanti-dhawrka gudaha iyo Guddida Hanti-dhawrku, ma jiri doonto qof ama maamul jihayn kara ama xakamayn kara hawshooda.

## Qodobka 47
## Xeerarka iyo Sharciyada Maaliyadda

4. Golaha ayaa meel marinaya xeerarka iyo sharciyada maaliyadd IGAD si waafaqsan mabaadii'da caalamiga ah ee la isla ogol yahay.

# CUTUBKA LIXAAD: QODOBO GUUD, KU MEEL GAARKA IYO XEERARKA UGU DANBEEYA

## Qodobka 48
## Xarunta dhexe iyo xafiisyada kale ee IGAD

**1.** Xarunta dhexe ee IGAD waxay noqonaysaa magaalada Jabuuti, Jamhuuriyadda Jabuuti.

**2.** Waxaa jiri kara in la aasaaso xafiisyo kale oo IGAD leedahay oo laga furo Dowladaha Xubnaha iyo meelihii kale, hadba sida Golaha ay go'aamiyaan.

**3.**

## Qodobka 49
## Afafka Rasmiga ah

Afafka rasmiga ah ee IGAD waxay noqon doonaan English, French iyo Carabi.

## Qodobka 50
## Heerka, Mudnaanta iyo Xasaanadaha,

**1.** IGAD waxay heli doontaa shakhsiyad qaanuuni oo caalami ah.

**2.** Xog-hayaha Fulintu waa in uu la dhamaystiraa Dowladaha Xubnaha ka ah ee dhulkooda ay ku taallo Xarunta Dhexe iyo Dowladaha Xubnaha ka ah ee dhulkooda ay ku yaallaan xafiisyada IGAD, heshiisyada la xiriira in ay aqoonsadaan mudnaanta iyo xasaanadda, waana inay bixiyaan xiriirka sida waafaqsan waajibaadka IGAD.

**3.** Dowlad kasta oo xubin ka ah waxay siinaysaa IGAD, xafiisyadeeda iyo shaqaalaheeda mudnaanta iyo xasaanadda la siiyo ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah.

## Qodobka 51
## Cunaqabataymaha

**1.** Dowlad kasta oo xubin ah taasoo ku guul daraysata in ay bixiso qaadhaanka maaliyadeed muddo laba sano waxaa loo diidi doonaa xuquuqda ay kaga hadasho kulamada, xuquuqda ay ku martigeliso ama ku guddoomiso shirarka, xuquuqda codbixinta ama xuquuqda ay ugu tartamayso jago kasta ama jago ka mid ah IGAD, ama in ay nacfi ka hesho hawlaha

2. Dowlad kasta oo xubin ah taasoo ku guuldaraysata in ay u hogaansanto go'aamada iyo siyaasadaha waxaa loola dhaqmayaa in la saaro cunaqabatayn sida Golaha Sare, ay ugu soo talobixiyaan Golaha ama ay go'aamiyaan.

3. Fadhiga Guud, si kasta oo ay tahay, wuxuu u ogolaan karaa Dowladaha Xubnaha ah ee bixin kari waaya qaadhaankii laga rabay, in ay sii wadan karaan in ay si buuxda uga faa'iidaystaan Heshiiska, haddii Fadhiga Guud ay ku qancaan in sababta ay u bixin kari waayeen qaaraankii laga rabay ay tahay xaalad ka baxsan awoodda dowladaas.

## Qodobka 52
## Laalista Dowlad Xubin ah

1. Fadhiga Guud wuxuu laali karaa Xubinimada Dowlad, aysan ka qayb qaadan hawlaha IGAD muddo 18 bilood ah ama haddii aysan Dowlad xubin ahi aysan buuxin mabaadiida aasaasiga ah iyo ujeedooyinka Heshiiska oo ay ka mid tahay bixinta dhaqaalaha laga rabo.

2. Dowlad Xubin ah ee laga laalay xubinimada sida ku cad jumladda koowaad ee Qodobkaan, waxay waayeysaa in ay hesho faa'iidooyinka Heshiiskaani bixiyey, laakin waxay sii ku sii jiri doontaa xubinimada ilaa laga qaadayo hakintii lagu sameeyey.

## Qodobka 53
## Eryidda Dowlad Xubin ah

1. Fadhiga Guud waxay IGAD ka saari karaan Dowlad Xubin ah marka ay si cad ugu xad gudubto mabaadii'da iyo ujeedooyinka Heshiiska, waxaana la eryayaa marka Dalkaa Xubinta ah la siiyo 12 bilood oo ogaysiis qoraal ah.

2. Marka ay dhamaato mudada loo qabtay sida ku cad farqada 1 ee Qodobkan, Dowladda Xubinta ah ee digniinta la siiyey waxaa laga hakinayaa xubinimadeeda IGAD iyadoo la ogaysinayo, haddii aan ogaysiiska la hakin ama laga noqon.

3. Inta lagu jiro wakhtiga lagu sheegay farqadaha 1 iyo 2 ee Qodobkan, Dowladda Xubinta ah ee ay khusayso, waa in ay sii waddaa u hogaansanaanta qodobada Heshiiska, waxayna masuul ka tahay in ay ka soo baxdo dhammaan waajibaadka jira iyo ballan qaadyada mudada dheer ee la galay intay haysato xubinnimada.

4. Dowladda Xubin ah ee la eryey sida ku cad farqadda 1 ee Qodobka waxay xubinnimadeeda dib uga soo codsanaysaa Fadhiga Guud , markay buuxiso wajibaadyadii keenay in la eryo.

## Qodobka 54
## Ka-bixitaaka Dowlad Xubin ah

1. Dowlad Xubin ahi waxay ka bixi kartaa IGAD kaddib markay siiso 12 bilood oo ogaysiis ah Xoghayaha Fulinta oo ay ku dalbanayso in ay ka baxyso, haddii aysan Dowladaas Xubinta ahi ka noqonin qoraalkeeda ay ku dalbanayso ka bixidda ka hor inta 12 bilood aysan dhammaan.

2. Muddada laba iyo tobanka bilood ah ee ku xusan farqada 1aad ee qodobkan, Dawladaha xubinta ka ah ee doonaya inay ka baxaan IGAD waa inay si kastaba ha ahaatee dhawraan qodobada heshiiska, waxayna masuul ka tahay gudashada waajibaadkeeda ku xusan Heshiiska;

fogaadaan wax kastoo keeni kara in lagala noqdo Dowladda Xubinta ah iyo in Dowladda Xubinta ah la laga rabaa u hogaansanto dhammaan waajibaadka iyo fulinta balanqaadyada wakhtiga dheer ee lagu galay xubinnimada.

4. Hanti iyo raasamaal kasta oo ay leedahay IGAD oo ku taalla gudaha dal ka mid ah Dalalka Xubnaha ah, kaasoo xubinimadii ka tegey, hantidaasi waxay sii ahaanaysaa hanti IGAD leedahay, waxayna noqonaysaa hanti markasta ay isticmaali karto IGAD.

5. Dowlad kasta oo xubin ah oo ka baxay xubinimada sida ku cad farqadda 1 ee Qodobkaan wuxuu dib uga codsan karaa Fadhiga Guud in loo ogolaado xubinnimadii sida ku qoran mabaa'iida Qodobka 8 ee Heshiiska.

## Qodobka 55
## Wax ka bedelka Heshiiska

1. Dal kastoo xubin ah ama Golaha waxay soo gudbin karaan soojeedimo ku saabsan wax ka bedelka Heshiiska oo ay u dirayaan Xog-hayaha Fulinga. Xog-hayaha Fulintu waa inuu muddo 30 maalmood ku helaa, una kala dirayaa Dowladaha Xubnaha ah soojeedinta la keenay.

2. Dowladaha Xubnaha ah ee doonaya in ay dood ka dhiibtaan soo jeedimaha wuxuu samaynayaan sidaas muddo 90 maalmood gudahood ah oo ka bilamanaysa taariikhda soo jeedinta uu soo diray Xoghayah Fulintu.

3. Markay dhammaato waxkhtiga lagu qeexay jumlada 3 ee Qodobka, Xoghayaha Fulintu wuxuu u gudbinayaa soo jeedinta Fadhiga Guud isagoo u sii marsiinaya Golaha.

4. Wax ka bedel kastoo lagu sameeyey Heshiiska waxaa meel marinaya Fadhiga Guud.

5. Wax ka bedelka la sameeyey wuxuu dhaqan ku noqonayaa sida ku cad Qodobka 58 ee Heshiiska.

## Qodobka 56
## Hab-raac iyo Lifaaqyada Heshiiska

1. Dowladaha Xubnaha ahi waxay afmeeri karaan Habraac kasta hadba sida ay lagama maarmaan u tahay meel kastoo ay iskaashi ka lahaayeen, kuwaasoo qeexaya ujeedooyinka iyo xayndaabka iyo farsamada maamul ee iskaashiga iyo is dhex galka.

2. Habraac kasta waxaa meelmarinaya Golaha iyadoo la fulinayo talooyinka Golaha.
3. Habraac kasta wuxuu dhaqangal ku noqonayaa saxiixiya iyo meelmarinta Dowladda Xubinta ka ah.

4. Lifaaqyada iyo Habraacyada lagu daray Heshiiskan qayb muhiim ah ka yihiin Heshiiska.

## Qodobka 57
## Hannaanka Xallinta Muranada

1. Muranada ka dhahsha fasiraadda waajibaadyada xusan Heshiiska, waa in si aan buuq lahayn Golaha Wasiirada uu u xalliyo, iyadoo loo marayo wadaxaajoodyo.

2. Fadhiga Guud, kaddib soo jeedin talo bixinta Golaha, wuxuu sameyn doonaa hab ku meel gaar iyo farsamo oo lagu xallinayo khilaafyada, si xal loogu helo muran kastoo ka dhashay fasiraadda Heshiiska.

3 Farsamada Xalinta Khilaafyada waxaa loo dejin doonaa hab lifaaqyo ah oo u dhexeeya

## Qodobka 58
## Saxiixyada, Meel marinta iyo Ka-mid noqoshada

Heshiiskani wuxuu u furan yahay saxiixa, meel marinta iyo inay ka mid noqoshada Dowladaha Xubnaha ka ah IGAD si waafaqsan habraacyada dastuuriga ah ee ay leeyihiin inay u maraan.

## Qodobka 59
## Dhaqan galka

1. Heshiisku wuxuu ku dhaqan geliyaa lixdan maalmood kaddib marka lagu wareejiyo Xoghayaha Fulinta iyadoo ay meel marinayeen saddex meelood oo laba meel Dowladaha Xubnaha ka ah IGAD.

2. Markuu dhaqan galo Heshiisku, Heshiiskii 1996 ee lagu dhisay Urur Goboleedka Horumarinta (IGAD) waa la hakinaya, mana noqonaayo sharci lagu dhaqmo.

3. Marka uu dhaqan galo, Dowlad kasta oo xubin ahi wuxuu geli karaa heshiiska markuu waafajiyo hab raaciisa sharci ee gudaha.

## Qodobka 60
## Kaydinta iyo Diiwaangelinta

1. Heshiiska iyo dhammaan agabkiisa saxiixa, meel marin iyo ku biiris, waxaa kaydin doona Xog-hayaha Fulinta, kaasoo u gudbinaya nuqullo ka mid ah oo saxiixan dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah.

2. Xog-hayaha Fulinta wuxuu ka diiwaan gelinayaa Heshiiska Midowga Afrika, Qaramada Midoobay iyo hay'adaha kale sida hadba Golaha go'amiyaan.

## Qodobka 61
## Muddada Heshiisku jirayo

Heshiisku wuxuu ahaan doonaa mid rasmi ah ilaa ay baabi'iyaan Fadhiga Guud keddib soojeedinta Golaha.

## Qodobka 62
## Kaydinta Xeerarka

1. Iyadoo la raacayo qodobada Heshiiska, hawlaha hay'adaha IGAD, marka uu heshiiskaani dhaqan galo kaddib, ma saamayn doono dhaqan galkaas, laakiin habraacyada iyo farsamooyinka kale ee sharci ee lagu maamulayo waa in lagu saleeyaa wax ka beddelka, la qabsadaa, lagu cadeeyaa, waana in la waafajiya Heshiiska sida ay hadba lagama maarmaanka u tahay.

2. Baabi'in, beddelidda ama wax ka bedelidda lagu sameeyey Heshiiska lagu dhisay Urur Goboleedka Horumarinta (IGAD) ma saamaynayo go'aamada Fadhiga Guud, Golaha, waaxyaha iyo hay'adaha kale ee IGAD, balse waa in go'aammadaas lagu dhaqmaa, laguna dhaqaa, iyadoo la raacayo wax ka beddelka, meel marinta, cadaymaha iyo waxa laga reebayo, hadba sida loogu baahan yahay waa in la waafajiyaa Heshiiska.

## Qodobka 63
## Saxiixa

Nuqullada English, French iyo Arabic si isku mid ah ayaa lagu saxiixay…Djibouti……4tii
….. Juun, 2023

**AYAGOO RUMEYSAN** ayay saxiixayaasha hoos ku xusan ku lifaaqeen saxiixooda halkaan.

Mudane Ismaaciil Cumar Geelle
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti

Mudane Dr. Abiy Axmed
Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Dimuqraadiga Itoobiya

Mudane Ato Isaias Afwerki
Madaxweynaha Dowladda Eritrea

Mudane Dr. William Samoei Ruto
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Kenya

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Mudane Salva Kiir Mayardit
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Koonfur Suudaan

Mudane Janaraal Abdel Fattah al-Burhan
Hoggaamiyaha Dowladda Jamhuuiryadda Suudaan

Mudane Yoweri Kaguga Museveni
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Uganda

**XEER MADAXWEYNE LR.699** **TAARIIKH: 01 DA MAARSO 2026**

**MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA HEY'ADDA QAXOOTIGA & BARA-KACAYAASHA QARANKA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, xarafka 'k'ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Sharci Lr.2 ee 21/02/2016, dhismaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-kacayaasha Qaranka. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda summadeedu tahay **XRW/563/02/2026**, ku taariikheysan **23/02/2026**, kuna saabsan Go'aan Gole Ansixinta Magacaabidda Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-Kacayaasha Qaranka. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda summadeedu tahay **WAGF&D/XW/0093/2026**, taariikheysan **10/02/2026**, kuna saabsan Soo-Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-U-Heshiisiinta ee Magacaabidda Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-Kacayaasha Qaranka. |
| **MARKUU GARWAAQSADAY:** | In ay laga maarmaan tahay in la magacaabo Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara Kacayaasha Qaranka. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan. |

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Axmed Xuseen Cilmi**, laga qaaday xilkii **Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-kacayaasha Qaranka.**
2. waxa uu u magacaabay **Mudane Liban Cabdi Cigaal** in uu noqdo **Guddoomiyaha Hey'adda Qaxootiga iyo Bara-kacayaasha Qaranka.**

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa faafinta rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 060-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

001466

**XEER MADAXWEYNE LR.710** **TAARIIKH: 05-TA MAARSO 2026**

**MAGACAABIS KU-XIGEENKA AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA J.F.S.**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada $87^{aad}$ iyo $90^{aad}$ ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo magacaabista Ku-Xigeenka

Agaasimaha Guud ee ay yeelato Madaxtooyada J.F.S.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka $1^{aad}$**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay **Mudane Sakariye Yuusuf Xuseen** in uu noqdo Ku-Xigeenka Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada J.F.S.

**Qodobka $2^{aad}$**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 043-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

001461

**XEER MADAXWEYNE LR.723** **TAARIIKH: 26-DA MAARSO 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1625/2025**, ku taariikheysan **05/08/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Shafie Abdulle Mohamed.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Shafie Abdulle Mohamed,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Shafie Abdulle Mohamed**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIM
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 044-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

001470

**XEER MADAXWEYNE LR.727** **TAARIIKH: 31-DA MAARSO 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110aad ee** Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105aad Farqadaha 1aad iyo 2aad ee** Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1505/07/2024**, ku taariikhaysan **09/07/2024**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.
**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Sh. Cabdiraxmaan Maxamed Axmed.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Sh.Cabdiraxmaan Maxamed Axmed,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Sh.Cabdiraxmaan Maxamed Axmed**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 045- 2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

001464

**XEER MADAXWEYNE LR.728** **TAARIIKH: 31-DA MAARSO 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodobka 110[aad] ee** Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodobka 105[aad] Farqadaha 1[aad] iyo 2[aad]** ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2642/05/2025**, ku taariikheysan **24/05/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo. |
| **MARKUU TIXGELIYEY:** | Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Mire Maxamed Jeelle.** |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1[aad]**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Mire Maxamed Jeelle,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2[aad]**

Waxaa **Dr. Mire Maxamed Jeelle,** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3[aad]**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 046-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

001467

**XEER MADAXWEYNE LR.733** **TAARIIKH: 04-TA ABRIIL 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110aad ee** Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105aad Farqadaha 1aad iyo 2aad** ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2879/02/2026**, ku taariikhaysan **01/02/2026**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.
**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Jamaal Cismaan Muxyadiin.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Jamaal Cismaan Muxyadiin,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Jamaal Cismaan Muxyadiin,** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

001471

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 059-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR.735** **TAARIIKH: 20-KA ABRIIL 2026**

**XILKA-QAADIS AGAASIMAHA GUUD HORE EE HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodobka 110aad** ee **Dastuurka** J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodobka 105aad Farqadaha 1aad iyo 2aad** ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodabka 15aad Farqadiisa 1** ee **Sharciga** Hay'adda Socdaalka & Jinsiyadda Soomaaliyeed. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda summadeedu tahay **XRW/596/04/2026**, ku taariikheysan **15/04/2026**, kuna saabsan Go'aan Gole Ansixinta Magacaabidda Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda summadeedu tahay, **WAG/XW/225/2026**, taariikheysan **12/04/2026**, kuna saabsan Soo-Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Magacaabidda Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan. |

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Mustafa Sheikh Cali Dhuxuloow**, laga qaaday xilkii **Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda.**
2. waxa uu u magacaabay **Mudane Xuseen Qaasim Yuusuf,** in uu noqdo **Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda.**

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa faafinta rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 017-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

001474

**XEER MADAXWEYNE LR.740** **TAARIIKH: 20-KA MAAJO 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110aad** ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105aad**, Farqadaha **1aad** iyo **2aad** ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2059/2025**, ku taariikheysan **03/03/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Mustaf Diiriye Sabriye.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Mustaf Diiriye Sabriye,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Mustaf Diiriye Sabriye**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

001475

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 055-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Axmed Iise Gutale
Hantidhowrka Guud ee JFS

**XEER MADAXWEYNE LR.741** **TAARIIKH: 20-KA MAAJO 2026**

**MAGACAABIS TALIYAHA TALISKA TAAKULEYNTA EE C.X.D.S.**

**MADAXWAYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110aad** ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105aad Farqadaha 1aad** iyo **2aad** ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** **Xeer Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960,** kuna saabsan dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga warqadda summadeedu tahay **WG/XW/122/05/26**, ee soo baxday **20/05/2026,** Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabis Taliyaha Taakulaynta ee C.X.D.S.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Aqoonta iyo waaya aragnimada uu leeyahay Sarkaalkan.

**Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa ***S/Guuto Maxamed Maxamuud Xasan*** loo magacaabay in uu noqdo Taliyaha Taliska Taakuleynta ee C.X.D.S.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

001476

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 058-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Ise Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**XEER MADAXWEYNE LR.742** **TAARIIKH: 23-DA MAAJO 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110aad** ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105aad**, Farqadaha **1aad** iyo **2aad** ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WCAD/XW/3094/04/2026**, ku taariikheysan **05/04/2026**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Maxamed Cabdiqaadir Aadan.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Maxamed Cabdiqaadir Aadan,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Maxamed Cabdiqaadir Aadan,** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

001477

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 057-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR.755** **TAARIIKH: 06-DA JUUN 2026**

**MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE MADAXWEYNAHA J.F.S**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodobka 110aad** ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodobka 105aad**, Farqadaha **1aad** iyo **2aad** ee Dastuurka **J.F.S.** |
| **MARKUU ARKAY:** | Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha loo magacaabayo xilkan. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo magacaabista La-Taliye Sare ee Madaxweynaha. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa uu **Mudane Salaad Cali Jeelle**, u magacaabay in uu noqdo La-Taliye Sare ee Madaxweynaha **J.F.S.**

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee **J.F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 048-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S**

001478

**XEER MADAXWEYNE LR.761** **TAARIIKH: 20-KA JUUN 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110aad** ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105aad**, Farqadaha **1aad** iyo **2aad** ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1842/2025**, ku taariikheysan **05/03/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Mohamed Ghedi Jumale.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Mohamed Ghedi Jumale,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Mohamed Ghedi Jumale**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 049-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

001479

**XEER MADAXWEYNE LR.763** **TAARIIKH: 24-TA JUUN 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110**[aad] ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105**[aad], Farqadaha **1**[aad] iyo **2**[aad] ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2152/2025**, ku taariikheysan **03/05/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdiraxmaan Faarax Maxamuud.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1**[aad]

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdiraxmaan Faarax Maxamuud,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2**[aad]

Waxaa **Dr. Cabdiraxmaan Faarax Maxamuud,** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3**[aad]

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY: FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 051-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

001481

**XEER MADAXWEYNE LR.769** **TAARIIKH: 24 - TA JUUN 2026**

**MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA GANACSIGA IYO GANACSATADA.**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110aad** ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105aad**, Farqadaha **1aad** iyo **2aad** ee Dastuurka **J.F.S.**

**MARKUU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leedahay Marwada loo magacaabayo xilkan.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo magacaabista La taliyaha Madaxweynaha arrimaha Ganacsiga iyo Ganacsatada.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuha saxiixo xeerkaan, waxaa uu **Marwo Amina Jama Deble**, u magacaabay in uu noqdo La taliyaha Madaxweynaha arrimaha Ganacsiga iyo Ganacsatada.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee **J.F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 050 20 26
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S**

001480

**XEER MADAXWEYNE LR.783** **TAARIIKH: 18-DA LUULIYO 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110aad** ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105aad**, Farqadaha **1aad** iyo **2aad** ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2303/07/2025**, ku taariikheysan **03/08/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaáyo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdiraxmaan Muuse Axmed.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdiraxmaan Muuse Axmed,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Cabdiraxmaan Muuse Axmed**, uu ka howl galayaa Gobolka Benáadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 056-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
21 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

001510

**XEER MADAXWEYNE LR.784** **TAARIIKH: 18-DA LUULIYO 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110aad** ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105aad**, Farqadaha **1aad** iyo **2aad** ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2523/2025**, ku taariikheysan **13/06/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.
**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Abdirizak Salad Ahmed.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Abdirizak Salad Ahmed,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Abdirizak Salad Ahmed**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 053-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
21 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

001509

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

**XEER MADAXWEYNE LR.787** **TAARIIKH: 21-DA LUULIYO 2026**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110**^aad^ ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105**^aad^, Farqadaha **1**^aad^ iyo **2**^aad^ ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WCAD/XW/2770/12/2025**, ku taariikheysan **22/12/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.
**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdiraxmaan Cabdulle Maxamuud.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdiraxmaan Cabdulle Maxamuud,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Cabdiraxmaan Cabdulle Maxamuud**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 054-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
21 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

001514

**XEER MADAXWEYNE LR.788** **TAARIIKH: 22-DA LUULIYO 2026**

## MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA GANACSIGA IYO MAALGASHIGA

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 110aad** ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** **Qodobka 105aad**, Farqadaha **1aad** iyo **2aad** ee Dastuurka **J.F.S.**
**MARKUU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha loo magacaabayo xilkan.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo magacaabista La-taliyaha Madaxweynaha ee arrimaha Ganacsiga iyo Maalgashiga.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuha saxiixo xeerkaan, waxaa uu **Mudane Maxamuud Cabdi Cali Gabyre**, u magacaabay in uu noqdo La taliyaha Madaxweynaha arrimaha Ganacsiga iyo Maalgashiga.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 052-2026
TAARIIKH 23-7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
22 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S**

001517

XEER MADAXWEYNE LR.794 TAARIIKH: 29-KA MAARSO 2026

**XILKA-QAADIS TALIYIHII HORE EE CIIDANKA ASLUUBTA SOOMAALIYEED IYO MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA ASLUUBTA SOOMAALIYEED.**

**MADAXWAYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodobka 110aad ee Dastuurka J.F.S.** |
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodobka 105aad Farqadaha 1aad iyo 2aad ee Dastuurka J.F.S.** |
| **MARKUU ARKAY:** | Sharci Lr. **49** ee soo baxay **1970**, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda summadeedu tahay **XRW/578/03/2026**, ku taariikheysan **28/03/2026**, kuna saabsan Soojeedinta Magacaabis Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed. |
| **MARKUU ARKAY:** | Taariikh nololeedka, aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay **S/Gaas Maxamed Sheekh Xasan Xaamud.** |

**Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa **S/Gaas Mahad Cabdiraxmaan Aaden,** laga qaaday xilkii Taliyaha Ciidaanka Asluubta Soomaaliyeed, waxaana loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed **S/Gaas Maxamed Sheekh Xasan Xaamud**.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 042-2026
TAARIIKH 23-07-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

001536

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.196** **Taariikh: 01/02/ 2026**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA DIIWANGALINTA GAADIIDKA BADDA**

XRW - BIXIT
15 FEB 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Sharciga Badda (Sharci Lr. 5/1989).

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **XW/WDGB/010/01/26** ee ku taariikheysan **06/01/2026** ee Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Diiwaangalinta Gaadiidka Badda.**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.04.144.1.26** ee **29/1/2026,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Diiwaangalinta Gaadiidka Badda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay sugidda Sharciyadda , amniga & nidaamka Gaadiida Badda.

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.04.144.1.26** ee **29/1/2026,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Diiwaangalinta Gaadiidka Badda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**
**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

**Qodobka 3aad**
**Dhaqangal**

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO H24-030-2026
TAARIIKH 03-06-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Mudane, Hamza Cabdi Barre.**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.**

**Summad: XGG/004/2026** **05/01/2026**

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo:** Talo Sharci

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **WCAD/XAWSH&H/2765/2025** ee ku taarikheysan **24/12/2025** kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "XEER-NIDAAMIYAHA DIIWAANGELINTA GAADIIDKA BADDA"**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si Waafaqsan **Sharci Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idin kugu soo gudbinayaa Xeer-nidaamiyaha sare ku xusan oo ay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Haddaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda kadib markii uu darsay Nuqulka Xeer-nidaamiyahani, islamarkaana waafijayay Shuruucda Dalka, ayaa waxa uu Xafiisku ku talinayaa in Xeer-nidaamiyahan, loo gudbiyo Golaha Wasiirada, maadaama uusan kahor-imaaneyn Dastuurka iyo Shuruucda Dalka.

Ugu dambeyn, Xafiiska Garyaqaanka Guud waxa uu ku wargelinayaa Agaasimaha Golaha Wasiirrada in nuqulka ku lifaaqan warqaddan uu yahay nuqulka asalka ah ee loo gudbinaayo Golaha Wasiirrada sii ay u meel-mariyaan si waafaqsan **Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 125 ee 06 April 2023**

**FG: Waxa halkan ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha Sare ku xusan.**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA ★ OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL ★ مكتب المحامي العام للدولة

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamuud Xirsi**
**Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA
Address: State House, Villa Somalia
Tel: +252 (0)616658489, +252 (0)613242015 | E-Mail: sag@sag.gov.so,

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2765/2025** **Tr. 24/12/2025**

Mudane Garyaqaan,

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA DIIWAANGELINTA GAADIIDKA BADDA"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa "**Xeer-nidaamiyaha Diiwaangelinta Gaadiidka Badda"** oo ay diyaarisay Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda, Xukuumadda JFS.

Xeer-nidaamiyahani wuxuu qeyb weyn ka qaadanayaa nidaaminta Gaadiidka Badda iyo Sare u qaadista Hab-raac lagu Maamulayo Calan-bixinta Maraakiibta iyo Dejinta Nidaam looga Hortagayo isticmaalka Been-Abuurka ee Calanka Soomaaliyeed.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa, inuu waajibkiisa sharci ka guto, si hab-raaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

Mudane. Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID

# JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## WASAARADDA DEKADAHA IYO GAADIIDKA BADDA

# XEERNIDAAMIYAHA
# DIIWAANGELINTA GAADIIDKA BADDA

**MUQDISHO – SOOMAALIYA**
**2025**

## TUSMO:


**CUTUBKA KOWAAD**....4
**QODOBBO GUUD**....4
**Qod. 1aad: Magaca Xeer-nidaamiyaha**....4
**Qod. 2aad: Ujeeddooyinka iyo Baaxadda**....4
**Qod. 3aad: Qeexid**....4
**CUTUBKA LABAAD**....6
**NIDAAMKA DIIWAANGELINTA**....6
**Qod. 4aad: Maamulka iyo Fulinta**....6
**Qod. 5aad: Shuruudaha Diiwaangelinta Maraakiibta**....7
**Qod. 6aad: Dekadda Diiwaangelinta**....7
**Qod. 7aad: Xaddidaadda iyo Xaaladda aan la Diiwaangelin karin Markabka**....7
**Qod. 8aad: Xogta la Diiwaangelinayo**....8
**CUTUBKA SADDEXAAD**....9
**CADDEYMAHA DIIWAANGELINTA KOOWAAD, SAHANKA**....9
**MARKABKA IYO SHAHAADADA DIIWAANGELINTA**....9
**Qod. 9aad: Diiwaangelinta ugu horreysa ee markab**....9
**Qod. 10aad: Shahaadada Diiwaangelinta**....9
**Qod. 11aad: Muddada Diiwaangelinta Maraakiibta**....10
**Qod. 12aad: Shahaado Diiwaangelin Ku-meel-gaar ah**....10
**Qod. 13aad: Baarista iyo Sahanka Markabka**....11
**Qod. 14aad: Beddelka Magaca iyo Milkiyadda Markabka**....11
**Qod. 15aad: Ka Tirrtiridda Diiwaanada Maraakiibta**....12
**CUTUBKA AFARAAD**....13
**MAAMULKA CALANSIINTA MARAAKIIBTA**....13
**Qod. 16aad: Calansiinta Maraakiibta iyo Tilmaamaha Calanka**....13
**Qod. 17aad: Xuquuqda Ka babashada Calanka iyo Waajibaadka la Xiriira**....14
**CUTUBKA SHANAAD**....15
**DIIWAANGELINTA DOOMAHA**....15
**Qod. 18aad: Shuruudaha Diiwaangelinta Doomaha**....15
**Qod. 19aad: Sugidda Lahaanshaha Doonta**....15
**Qod. 20aad: Beddelka Magaca iyo Milkiyadda Doonta:**....16
**Qod. 21aad: Badqabka iyo Nabadgelyada Doomaha**....16
**CUTUBKA LIXAAD**....17
**GANAAXYADA, CIQAABAHA MAAMUL IYO ISTICMAALKA CALANKA**....17
**Qodobka 22aad: Ka-tagista Sharci-darrada ah ee Calanka Qaranka**....17
**Qod. 24aad: Ganaaxa Dib-u-dhaca Canshuurta Sannadlaha ah**....18

**Qod. 25aad: Fulinta Ganaaxyada** ........................................................................................18
**Qod. 26aad: Ganaaxyada ku Saabsan Sahan-la'aanta ama Xog-bixin Khaldan** .................................19
**Qodobka 27aad: Ganaaxyada Doomaha ka yar yar**................................................................19
**Qod. 28aad: Dhaqangal** ........................................................................................................19

# CUTUBKA KOWAAD
# QODOBBO GUUD

## Qod. 1aad: Magaca Xeer-nidaamiyaha

1. Xeernidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa "**Xeernidaamiyaha Diiwaangelinta Gaadiidka Badda"**.
2. Xeer-nidaamiyaan waxaa tixraac u ah qodobbada 38-50 ee Sharciga Badda Soomaaliyeed, Sharci Lr. 5 ee 1989.

## Qod. 2aad: Ujeeddooyinka iyo Baaxadda

1) Ujeedooyinka Xeernidaamiyahan waa sida soo socota ee hoos ku xusan:
   (a) Dejinta habraacyada iyo shuruudaha diiwaangelinta Maraakiibta.
   (b) Nidaaminta iyo diiwaangelinta doomaha gudaha ee dalka.
   (c) Hagidda iyo sameynta shuruudaha, waajibaadka iyo habraacyada lagu maamulayo calan-bixinta maraakiibta.
   (d) Sameynta iyo dejinta nidaam adag oo looga hortagayo isticmaalka been-abuurka ee Calanka Soomaaliyeed iyo unkidda nidaam qaran oo lagu keydiyo dhammaan xogta gaadiid badeedka dalka oo la jaanqaadaya xeerarka qaranka iyo kuwa caalamiga.

2) Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu dabaqayaa:
   (a) Maraakiibta leh cabbir/dherer ka weyn 24 mitir.
   (b) Doomaha leh cabbir/dherer ka yar 24 mitir.
3) Xeer-nidaamiyahan laguma dabaqayo maraakiibta iyo doomaha hoos ku xusan:
   (a) Maraakiibta dagaalka,dhammaan maraakiibta ciidanka badda iyo kuwa militari.
   (b) Doomaha Raaxada (Pleasure Craft); doomahan waa kuwa aan loo isticmaalin sababo ganacsi, balse loo adeegsado ujeeddooyin kale madadaalo, dalxiis, ama ciyaaraha badda.

## Qod. 3aad: Qeexid

1. **JFS:** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. **Markab**: waxaa loola jeeda doomaha waaweyn ee loo isticmaalo ama u qalmo in loo isticmaalo badmaridda biyaha korkiisa ama hoostiisa cabbirkooduna yahay **24 mitir** ama ka weyn, loona isticmaalo adeegyada ganacsiga ama hawlaha kale ee badda.
3. **Doon:** Waxaa loola jeedaa gaadiid-badeed kasta oo cabbirkiisu ka yar yahay **24 mitir**, loona isticmaalo kalluumaysiga yaryar ama gaadiidka gudaha ee biyaha Soomaaliya.

4. **Gaadiidka Badda (Vessel**): Waxaa loola jeedaa magac guud oo loo bixiyo kulmiyana dhammaan noocyadda maraakiibtaa iyo doomaha.
5. **Wasaaradda:** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee heer Federaal oo mas'uul ka ah dejinta xeerarka iyo siyaasadaha JFS ee la xariira dekadaha, arrimaha badda iyo badmarista.
6. **Waaxda Maamulka Badda**: Waxaa loola jeedaa waaxda mas'uulka ka ah diiwaangelinta iyo kormeerka gaadiidka badda.
7. **Diiwaangeliye:** Waxaa loola jeedaa sarkaalka magacaaban ee qeybta diiwaangelinta Waaxda Maamulka Badda ee Wasaaradda.
8. **Diiwaanka Maraakiibta Soomaaliyeed**: Waxaa loola jeedaa Kaydka Rasmiga ah ee sharciyeed oo diiwaanhayuhu ku qorto faahfaahinta markab kasta oo sita calanka Soomaaliyeed.
9. **Dekadda Diiwaangelinta:** Waxaa loola jeedaa Dekadda Rasmiga ah ee lagu sameeyn karo diiwaangelinta maraakiibta lagana maamulo hawlaha calansiinta maraakiibta, taas oo markabka si maamul ahaan loogu xiriiriyo.
10. **Calanka:** Waxaa loola jeedaa calanka JFS oo ah Jinsiyadda la siiyo laguna aqoonsado maraakiibta buuxisa shuruudaha diiwaangelinta iyo calansiinta ee dalka.
11. **Shahaadada Diiwaangelinta:** Waxaa loola jeedaa dokumenti sharciyeed rasmi ah oo caddaynaya in markabku buuxiyay shuruuraha iyo habraacyada diiwaangelinta ee Wasaaradda.
12. **Shahaado Diiwaangelin Ku-meel-gaar ah**: Waxaa loola jeedaa dokumenti ku-meel-gaar ah oo la siiyo markabka kaddib caddeymo rasmi ah iyo sababo meelmar ah sida in goordhow la iibsaday oo uu ku suganyahay dekad shisheeye.
13. **Diiwaangelin markii koowaad:** Waxaa loola jeedaa diiwaangelinta ugu horreysa ee markabku marayo kaddib sameyntiisa/soosaaristiisa.
14. **Tirtiridda Diiwaanka:** Waxaa loola jeedaa falka Sharci ee markabka looga saaro Diiwaanka Qaranka, taas oo joojinaysa xuquuqdiisa calanka.
15. **Baaritaan/Sahan:** Waxaa loola jeedaa kormeerka farsamo ee rasmiga ah ee lagu sameeyo markabka si loo hubiyo cabbirka iyo culeyska markabka, u qalmidda badmarista iyo u hoggaansanaanta shuruudaha badbaadada iyo farsamada ee laga doonayo markabka ka hor diiwaangelinta.
16. **Markab Soomaaliyeed**: Waxaa loola jeedaa markab kasta oo si sharci ah ugu diiwaangashan Calanka JFS.
17. **Markab Shisheeye**: Waxaa loola jeedaa Markab kasta oo lagu diiwaangeliyey calan aan ahayn calanka Soomaaliya, isla markaasna ku shaqeeya xukunka dawlad kale.

18. **Xeernidaamiyahan**: Waxaa loola jeedaa Xeernidaamiyaha Diiwaangelinta Gaadiidka Badda ee JFS.
19. **WDGB**: Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee Xukuumadda JFS.
20. **Diiwaangelin Furan**: Waxaa loola jeedaa nidaamka diiwaangelinta ee u oggolaanaya maraakiibta shisheeye diiwaangelinta iyo qaadashada calanka JFS.
21. **Shahaadada tirtirada diiwaanka**: Waxaa loola jeedaa dokumenti rasmi ah oo caddaynaya in markabka laga tirtiray diiwaanka, lagana saxiixay diiwaan-haye.
22. **Markab aan Jinsiyad lahayn:** Waxaa loola jeedaa markab kasta oo aan si sharci ah u haysan dhalasho dawladeed.

## CUTUBKA LABAAD
## NIDAAMKA DIIWAANGELINTA
### Qod. 4$^{aad}$: Maamulka iyo Fulinta

1) Waaxda Maamulka Badda ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda oo raacaysa tilmaamaha Madaxda/Hoggaanka Wasaaradda iyo shuruucda kale ee la xariira arrimaha diwaangelinta Gaadiidka Badda Soomaaliyeed ayaa fulineysa habraacyada uu qeexayo Xeer-nidaamiyahan.
2) Xafiiska diiwaangelinta ee Waaxda Maamulka Badda ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ayaa u xilsaaran Waajibaadkan:

    (a) Qabashada Codsiga diiwaangelinta gaadiidka badda iyo hubinta saxnaanta iyo sugnaanta xogta si waafaqsan habraacyada Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Badda Soomaaliyeed.

    (b) Bixinta iyo cusbooneysiinta ruqsadda; iyo shahaadada gaadiid-badeedka dalka.

    (c) Keydinta iyo ilaalinta xogta gaadiid-badeedka dalka.

    (d) Ilaalinta xuquuqda bad-maaxiinta, gaar ahaan kuwa ka shaqeeya maraakiibta ku diiwaan-gashan calanka Soomaaliya.

    (e) Diyaarinta warbixnno muddeysan oo joogto ah iyo kuwo gaar ahba hadba sidii looga dalbado xafiiska.

3) Agaasimaha Guud ee Wasaaraddu wuxuu soo saari karaa tilmaamo iyo habraacyo farsamo oo lagu jiheynayo diwaangelinta gaadiid-badeedka dalka, sidoo kalena wuxuu si joogta ah ugu korjoogteynayaa waaxda Maamulka Badda fulinta iyo dhaqangelinta Xeernidaamiyahan.

### Qod. 5aad: Shuruudaha Diiwaangelinta Maraakiibta

Codsade kasta oo doonaya in loo diwaangeliyo markab waa inuu dhowraa, soona buuxiyaa shuruudaha soo socda ee lagu maamulayo diwaangelinta maraakiibta:

1. Soo gudbinta codsi rasmi ah ee la xariira dalabka diiwaangelinta markabka.
2. Buuxinta iyo soo gudbinta foomka codsiga Wasaaradda ee la xariira dalabka diwaangelinta markabka.
3. Bixinta khidmadda diiwaangelinta
4. Soo gudbinta aqoonsi rasmi ah sida baasaboor ama Kaar Aqoonsi Rasmi ah.
5. Soo gudbinta caddeymaha dokumentiyada iyo shahaadooyinka soo socda:
    a) Caddenyta lahaanshaha markabka
    b) Shahaadada Diiwaangelinta haddii markabku hore dal kale uga diiwaan-gashanaa.
    c) Caddeyn muujinaysa in diiwaanka laga saaray calankiisii hore haddii uu ka diiwaan-gashanaa dal kale.
    d) Shahadada lagu dhisay markabka haddii markabku cusub yahay.
    e) Shahaadada Culeyska.
    f) Shahaadooyinka Badbaadada iyo Caymiska.

### Qod. 6aad: Dekadda Diiwaangelinta

1. Dekadda Muqdisho ayaa ah dekadda rasmiga ah ee diiwaangelinta maraakiibta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Magaca dekadda diiwaangelinta waa in si cad loogu muujiyo:
    (a) Shahaadada Diiwaangelinta Markabka; iyo
    (b) Dusha (Gadaasha iyo Dhinacyada) markabka.
3. Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda wuxuu xaalad gaar ah , u go’aamin karaa in dekad kale oo dalka ah ay noqoto dekad diiwaangelin ku-meelgaar ah, marka ay jirto baahi ama xaalad gaar ah oo meelmar ah.

### Qod. 7aad: Xaddidaadda iyo Xaaladda aan la Diiwaangelin karin Markabka

1. Markabkii aanan buuxin shuruudaha iyo habraaca ku xusan Qodobka 5aad ee Xeernidaamiyahan lama diiwaangelin karo.

2. Haddii markabku ku jiro muran, dacwad, ama khilaaf sharciyeed aan weli dhammaan ama la xallin.
3. Haddii marabku ku jiro liiska madow "blacklist" ee gudaha ama caalamka , ama lagu soo eedeyay kalluumeysi sharci darro ah, tahriibin, dhoofin dhuxul,daroogo iyo hub sharci darro ah , iyo xataa xoolo duur joog ah oo si sharci darro loogu dhoofiyey.
4. Haddii uu ku lug yeesho milkiile/milkiileyaal aan lahayn xuquuq saami/lahaansho sharciyeed oo la xaqiijiyey.
5. Haddii arrimaha ku xusan Qodobka 7aad ay dhacaan waxaa lagu fulinayaa markabka oo uu mutaysanayaa xaaladaha iyo qodobbada hoos ku xusan:

   (a) Lama diiwaangelin karo mana qaadan karo calanka Soomaaliya.

   (b) Waxaa loo tixgelin karaa markab aan jinsiyad lahayn (stateless vessel) si waafaqsan Qodobka 92 ee Xeerka Caalamiga ee Qaramada Midoobay ee Arrimaha Badda (UNCLOS).

## Qod. 8aad: Xogta la Diiwaangelinayo

1. Diiwaanhayuhu wuxuu diiwaangelinayaa oo laga rabaa inuu keydiyo xogta soo socto ee hoos ku xusan:

   (a) Magaca markabka

   (b) Magacyadii hore ee uu lahaa, haddii ay jiraan.

   (c) Faahfaahinta iyo shahaadada culeyska(Tonnage cert.).

   (a) Caddeynta heshiiska lahaanshaha markabka, haddii uu jiro milkiile ka badan hal qof ama shirkad ay leedahay, waa in si cad loogu qeexaa heshiiska lahaanshaha markabka.

   (d) Magaca, jinsiyadda iyo cinwaanka milkiilaha ama wakiilka sharciga ah.

   (e) Lambarka shahaadada diiwaangelinta (Certificate of Registry No.) haddii uu hore dal kale uga diiwaangashanaa

   (f) Dekadda diiwaangelinta (Port of Registry)

   (g) Numbarka aqoonsiga caalamiga ah (IMO Number) haddii markabku uu leeyahay.

   (h) Magaca, goobta shirkadda dhistay, iyo sannadka la dhisay.

   (i) Astaamaha farsamo ee markabka sida: (GT, NT, HP), dherer, ballac, awood matoor, nooca markabka, iyo iwm).

(j) Calaamadda wicitaanka caalamiga ah (Call Sign).

(k) Taariikhaha isbeddellada lahaanshaha iyo diiwaangelinta markabka.

## CUTUBKA SADDEXAAD
## CADDEYMAHA DIIWAANGELINTA KOOWAAD, SAHANKA MARKABKA IYO SHAHAADADA DIIWAANGELINTA

### Qod. 9aad: Diiwaangelinta ugu horreysa ee markab

1. Diiwaan-gelinta koowaad ee markab waxaa lagu samaynayaa caddeymaha soo socda:

   (a) Markab lagu sameeyay/dhisay gudaha dalka, milkiilaha markabku waa inuu soo gudbiyaa Shahaadada Dhismaha Markabka oo saxiixan, ayna ku cad yihiin magaca shirkadda dhistay markabka, xogta farsamo ee markabka (culeyska guud iyo mugga).

   (b) Haddii uu markabka lasoo gatay/iibsaday, warqadda iibinta (Bill of Sale) oo muujinaysa xaqa lahaanshaha ama saamiga markabka.

   (c) Markab lagu sameeyay dal shisheeye waxaa loo baahan yahay caddeymo la mid ah kuwa gudaha, iyo heshiiska dhismaha (Shipbuilding Contract), haddii markabka loo dhisay milkiile gaar ah, waa in la caddeyo in uusan markabku ku xirnayn/taagneyn wax deyn ah.

   (d) Haddii aan la heli karin xogta dhismaha,oo markabkuna yahay mid la gatay/iibsaday, warqadda gadashada oo keliya ayaa ku filan oo la aqbalayaa.

2. Milkiilaha ama wakiil kasta ee markab oo ku guuldareysta inuu fuliyo shuruudaha ku xusan Qodobka 9aad faqradda (1) ee Xeernidaamiyahan, ama si ulakac ah u been abuura shahaadada dhismaha markabka, ama ka been sheega xogta ku cad shahaadada dhismaha sida macluumaadka iyo mugga/baaxadda markabka, waxaa loo aqoonsanayaa inuu galay fal-dambiyeed, waxaana ka dhalanaya ciqaab ama ganaax ama wadajir ciqaab iyo ganaax isla socda.

### Qod. 10aad: Shahaadada Diiwaangelinta

1. Shahaadada Diiwaangelinta waa dokumenti sharci ah oo caddeynaya in markabka si buuxda loogu diiwaangeliyey calanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kaddib markii uu buuxiyay shuruudda iyo habraaca ku xusan Qodobka 5aad ee Xeernidaamiyahan.

2. Haddii markabka soo codsaday diiwaangelinta ay isla leeyihiin in ka badan hal milkiile, waa in la helaa heshiis qoraal rasmi ah oo soo maray nootaayo sharci ah, sidoo kalena lagu qeexay xuquuqda iyo saamiyada lahaanshaha ee qof kasta, heshiiskuna waa waa in qodobada soo socda ay ku cadyihiin:
    a) Saamiga milkiile kasta.
    b) Mas'uuliyadaha kala duwan ee saaran milkiilayaasha.
    c) Qaabka go'aan-qaadashada iyo maamulka markabka.
3. Waxaa waajib ah in shahaadadada diiwaangelinta lagu hayo dusha markabka waqti kasta, iyadoo aan ka maqnaan karin xilliga uu markabku ku jiro hawlo shaqo.
4. Shahaadada diiwaan-gelinta looma dhigi karo rahan, loomana isticmaali karo dammaanad deyn iyo waxii la mid ah oo galaya ama ka dhalan karto xannibaad sharciyeed.
5. Mas'uuliyadda ilaalinta, haysashada, iyo soo bandhigidda shahaadada diiwaan-gelinta markii loo baahdo waxaa leh oo laga rabaa kabtanka markabka.

## Qod. 11aad: Muddada Diiwaangelinta Maraakiibta

1. Muddada diiwaangelinta markabka, waxay shaqeynaysaa/noqoneysaa laba (2) sano oo ka bilaabata taariikhda lagu cayimay/la bixiyay shahaaddada diiwaan-gelinta.
2. Diiwaangelintu waxay dhacaysaa dhammaadka muddadaas, waxaana loo baahan yahay in si rasmi ah loo cusbooneysiiyo loona soo dalbado cusbooneysiin 3 bil ka hor waqtiga dhicidda shahaadada iyada oo loo hoggaansamayo ogeysiiska Wasaaradda ee dib-u-cusbooneysiinta si markabku u helo aqoonsi sharci.
3. Milkiilaha markabka waxaa waajib ku ah inuu si sanadle ah u bixiyo canshuurta culeyska (annual tonnage tax) loogu ilaaliyo diiwaangelinta markabka.

## Qod. 12aad: Shahaado Diiwaangelin Ku-meel-gaar ah

1. Wasaaraddu waxa ay bixin kartaa Shahaado Diiwaangelin Ku-meel-gaar ah haddii ay jiraan xaaladaha soo socda:
    a. Haddii markabku yahay mid goordhow la soo gatay kuna sugan yahay dekad dal shisheeye, una baahanyahay shahaado ku-meel-gaar ah oo uu ku soo socdaalo.
    b. Haddii markabka aan lagu sameyn karin sahan dhameystiran, markabkuna u sii socdaalayo dekad dayactir halkaas oo lagu sameyn doono sahanka.
2. Ma jiri karo markab la siinayo shahaado diwaangelin ku-meel-gaar ah illaa milkiiluhu uu soo gudbiyo codsi qoraal ah oo ay ku xusantahay sababaha meelmar ah oo khasbaya arrinkan iyo caddeymaha lahaanshaha markabka, sidoo kalena

ballanqaado u hoggaansanaanta Xeernidaamiyahan iyo shuruucda kale ee badda ee JFS.

3. Shahaadada diwaangelinta ku-meel-gaarka ah waxay leedahay awood sharci oo la mid ah midda rasmiga.
4. Muddada ugu badan ee shahaadada diiwaangelinta ku-meel-gaarka waa lix (6) bilood, waxaana la cusboonaysiin karaa hal mar oo keliya muddo saddex (3) bilood ah haddii ay jiraan duruufo meelmar ah.
5. Ka dib markii markabku yimaado dekadda diwaangelinta dalka,markabku waa inuu shahaadada diiwaangelinta ku-meel-gaarka ah ku wareejiyaa diiwaanhayaha si uu helo shahaaddada diiwaangelinta rasmiga ah si uu sharci ahaan u sii wato hawlaha badda.

## Qod. 13aad: Baarista iyo Sahanka Markabka

1. Markab kasta, ka hor inta aan la diiwaangelinm waa inuu maro sahan rasmi ah oo ay sameynayaan khubaro sahan yaqaanno ah oo la aqoonsan yahay oo ka socda WDGB ee JFS iyadoo la raacayo nidaamka cabbirka culeyska ee waafaqsan Xeerka Caalamiga ee Culeys Cabbirka ee IMO si loo xaqiiyo:
   a) U qalmidda badmaridda markabka
   b) Culeyska Guud(GT) ee Markabka
   c) Culeyska Saafiga ah (NT) ee Markabka
2. Sahan-yaqaanku wuxuu soo saarayaa shahaadada rasmiga ee culeyska oo ku saleysan natiijada sahanka lagu sameeyay markabka.
3. Shahaadada sahanka waa in lagu lifaaqaa faahfaahinta iyo tilmaamaha aqoonsiga markabka, waxaana loo gudbinayaa Xafiiska Diiwaangelinta si loo soo saaro loona siiyo Shahaadada Diiwaangelinta.
4. Haddii sahanku ka dhacayo meel ka duwan dekadda diiwaangelinta dalka, codsadaha waxaa laga rabaa inuu bixiyo dhammaan kharashaadka ku baxaya safarka hawsha loo qabanayo.
5. Markab kasta oo ku jira diiwaanka dalka, wuxuu marayaa sahan sanadle ah inta uu ku jiro diiwaanka si markasta loola socdo xaaladdiisa badmaridda, cabbirka markabka iyo hawlaha shaqo/ganacsi ee markabka, milkiiha markabkana waxaa laga rabaa inu bixiyo khidmadda sahanka ee markabka.

## Qod. 14aad: Beddelka Magaca iyo Milkiyadda Markabka

1. Qofna ma beddeli karo magaca markab hore loogu diiwaangeliyey illaa uu kasoo gudbiyo codsi qoraal ah oo uu ku caddeynayo soojeedinta magaca cusub.
2. Diiwaanhayuhu ma diiwaangelin karo magaca cusub illaa:

a. Uu ka xaqiijiyo in magaca cusub uunan ku jirin diiwaanka W asaaradda.
b. In magaca cusub uunan keeneyn jahwareer, khiyaanno iyo marin-habaabin.
c. In magaca cusub uunan ka hor imaameyn danaha guud ama laga dhadhansan karo aflagaaddo ama xumaan.
d. Diiwaanhayuhu waa inuu helaa oggolaanshaha Agaasimaha Guud ee Wasaaradad haddii:
    i. La beddelayo magaca ama milkiyadda.
    ii. Diiwaanka laga tirayo markab ama doon.
    iii. La dabbaqayo ganaax ama ciqaab ka dhalatay Xeernidaamiyahan.

3. Kaddib markii lagu qanco soojeedinta magaca cusub iyadoo la tixgelinayo shuruudaha ku xusan faqradda (2) ee Qodobkan, ayaa la beddelayaa magaca, laguna calaamadeynayaa dusha markabka.
4. Haddii magaca si sharci-darro ah loo beddelo, oo aan loo marin habraaca ku xusan faqradaha (2) iyo (3) ee Qodobkan, waxaa la amrayaa milkiilaha markabka inuu dib ugu noqdo magacii hore.
5. Haddii ay dhacdo isbeddel lahaansho, wareejin saamiyo, ama wax isbeddel ah oo saameynaya xuquuqda ama danaha milkiilayaasha, waa in isbeddelkaasi si degdeg ah oo rasmi ah loogu cusboonaysiiyaa diiwaanka markabka, iyadoo la raacayo habraaca iyo shuruudaha uu dhigayo Xeernidaamiyahan iyo Xeerka Badda Soomaaliyeed ee Sharci Lr.5 ee soo baxay 1989.
6. Ku xadgudubka habraaca magac-beddelka ee Xeernidaamiyahan waxaa ka dhalanaya ganaax lacageed.

### Qod. 15^aad^: Ka Tirrtiridda Diiwaanada Maraakiibta

1. Maraakiibta waxaa laga tirtirayaa diiwaannada qoraalka haddii ay jiraan duruufaha hoos ku xusan:
    a) Lumista dhabta ah;
    b) Lumista ku talagalka ah;
    c) Qallibaadda markabka;
    d) Xaaladda gubasho ee markabka;
    e) Ka tanaasulidda calanka;
    f) Dhiibista shahaadada diiwaangelinta ee milikiilaha markabka ama hawlgeliyaha oo iskiisa u dhiiba una codsada qoraal ahaan in laga tirtiro diiwaanka.
    g) Xaaladda burbur ee markabka

h) Markab kalluumeysi oo si sharci darro ah uga kaluumeysta kheyraadka badda ee Dalka.
i) Bixin la'aanta ujuurada culeyska ee sanadlaha ah.

2. Markii la tirtiro ama la iska dhiibo sida ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, Waaxda Baddu waxay diiwaanka khuseeya ugala noqonaysaa warqadaha markabka, iyadoo ogeysiinta tirtiridda faafinaysa sidii laga rabay, soona saaraysa shahaadada tirtirista diiwaanka.
3. Milkiilaha Markabka waxaa laga rabaa inuu bixiyo ujuurada ka tirtiradda diiwaanka $500(Shan boqol Doollarka Mareykanka) soona celiyaa shahaadada diiwaangelinta markabka.

## CUTUBKA AFARAAD
## MAAMULKA CALANSIINTA MARAAKIIBTA

### Qod. 16aad: Calansiinta Maraakiibta iyo Tilmaamaha Calanka

1. Markab aan ka diiwaan gashaneyn dalka ma isticmali karo calanka JFS ilaa uu ka maro habraaca rasmiga ee calan-siinta, laguna diiwaangeliyo diiwaanka joogtada ee gaadiid-badeedka dalka ee WDGB ee JFS.
2. Diiwaangelinta iyo calansiintu waxay u furantahay markab kasta, ha ahaado mid ajnabi ama mid Soomaali leedahay, oo buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 5aad ee Xeernidaamiyahan.
3. Ma jiri karo markab wada-haysan kara jinsiyadda labo dal oo halmar wada qaadan kara labo calan, illaa si rasmi ah loo baabi'iyo diwaanka calankii hore ee dalka kale, lana yimaado caddeymaha baabi'intaas, markaas kaddib, ayaa loo oggolaan karaa qaadashada calanka Soomaaliyeed asiga oo maraya habraaca iyo shuruudaha ku xusan Qodobka 5aad ee Xeernidaamiyahan.
4. Haddii markab ka diiwaangshan Soomaaliya lagu helo diiwaangelin kale oo uu haysto calan dal kale, waa lagala laabanayaa waana la tirtirayaa diiwaangelintiisa waxaana lagu soo rogi karaa ciqaab iyo ganaax si waafaqsan mabaadi'da caalamiga ah ee arrimaha badda iyo Heshiiska Qarmada Midoobay ee Xeerka Badda (UNCLOS, 1982).
5. Markab kasta waxa uu yeelanayaa hal magac oo rasmi ah oo lagu diiwaangelinayo, marnaba diiwaanka looma oggolaanayo in magac hore ugu jiray loo diiwaangeliyo markab kale.
6. Oggolaanshaha ugu dambeeya ee calan-siinta waxaa iska leh Wasiirka Wasaaradda kaddib markii la soo dhammeystiro shuruudaha iyo habraacyada ku xusan Xeernidaamiyahan.

7. Markab kasta oo la doonayo in lagu diiwaangeliyo calanka Soomaaliya waa inuu leeyahay dekad uu uga diiwaangashan yahay (port of registry) gudaha dalka, magac dekeddaasna waa in lagu muujiyaa shahaadada diiwaangelinta iyo markabka dushiisa (stern/side) si muuqata, Arrimaha la xariira Dekadda Diiwaangelinta waxaa lagu dhaqayaa axkaamta Qodobka 6aad ee Xeernidaamiyahan.
8. Si loo horumariyo nabadgelyada badmaridda, markab kasta oo wata calanka Soomaaliyeed waa inuu ahaado mid xaaladdiisa badmarineed ay fiican tahay intuusan safarka bilaabin.
9. U qalmidda badmaridda markabka waxaa lagu caddeynayaa shahaadada u qalmidda badmaridda ee ay bixiso Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS kuna saleysan kormeerka maraakiibta.
10. Calanka Markabka waa cad dhar ah ballarkiisu yahay 150cm iyo 100cm leeyahayna midabka buluugga dhexdana ku leh xiddig shan geesood leh, kuna wareegsan baroosinka oo xariggiisa lagu dhigay xarafka "S" oo ah tilmaanta Soomaaliyeed.

### Qod. 17aad: Xuquuqda Ka babashada Calanka iyo Waajibaadka la Xiriira

1. Markab kasta oo si buuxda loogu diiwaangeliyo Diiwaanka Maraakiibta Soomaaliyeed wuxuu xaq u yeelanayaa diiwaangelin badeed taasoo muujinaysa xiriir dhab ah (Genuine Link) sida ku xusan qodobka 91aad ee Sharciga Qaramada Midoobay ee Arrimaha Badda(UNCLOS).
2. Markabka uu ka babanayo calanka Soomaaliya wuxuu xaq u leeyahay inuu isticmaalo calanka qaranka iyo inuu helo difaac sharciyeed iyo mid diblomaasiyadeed oo ka yimaada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Milkiile kasta ee markab iyo wakiilkiisaba waxaa waajib ku ah u hoggaansanaanta Xeernidaamiyahan iyo shuruucda kale ee dalka ee la xariira maamulka badda iyo badmaridda, ilaalinta deegaanka iyo nabadgelyada badda iyo guud ahaan xeerarka caalamiga ee khuseeya arrimahan.

## CUTUBKA SHANAAD
## DIIWAANGELINTA DOOMAHA

### Qod. 18aad: Shuruudaha Diiwaangelinta Doomaha

1. Doon kasta waxaa waajib ku ah in la diiwaangeliyo oo ay qaadato shahaadada diiwaangelinta rasmiga ee WDGB ee JFS.
2. Doon aan ka diiwaangashanayn Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee Xukuumadda JFS oo aan marin habraaca rasmiga ah ee diiwaangelinta, looma oggolaanayo inay isticmaasho biyaha gudaha ee dalka ama qabato hawl badeed ilaa ay ka hesho rukhsadda WDGB ee Xukuumadda JFS.
3. Ka hor inta aan la diiwaangelin, doon kasta waa inay martaa sahan rasmi ah si loo ogaado looguna oggolaado u qalmidda badmaridda ee doonta.
4. Si loo diiwaangeliyo doonta, milkiilaha ama wakiilka doonta ha ahaato mid kalluumeysi ama mid xamuul, waxaa looga baahanyahay:
    (a) Soo gudbinta arji qoraal ah oo lagu dalbanayo diiwaangelinta iyo buuxinta foomka Diiwaangelinta Doomaha ee Wasaaradda;
    (b) Magaca, dhererka iyo nooca doonta;
    (c) Faahfaahinta milkiilaha oo buuxda;
    (d) Bixinta khidmadda diiwaangelinta;
    (e) Soo gudbinta aqoonsi rasmi ah sida Baasaboor ama Kaarka Aqoonsiga Qaranka ee NIRA; iyo
    (f) Labo (2) sawir oo goordhow ah.

### Qod. 19aad: Sugidda Lahaanshaha Doonta

Diiwaanhayuhu wuxuu xaqiijinayaa lahaanshaha doonta ka hor diiwaangelinta doonta asiga oo il gaar ah ku eegaya qodobadan soo socda:

1. Caddeynta kala iibsashada doonta (Transfer of Ownership Certificate):
    (a) Waa in la soo gudbiyaa warqad rasmi ah oo caddeyneysa kala iibsashada doonta.
    (b) Caddeyntan waxaa xaqiijinaya Nootaaayo sharciyeysan oo leh jiritaan qaanuuni ah.

(c) Warqaddu waa inay muujisaa qiimaha doonta, xogta iibsadaha iyo milkiilihii hore haddii uu jiray, iyo doonta inay cusub tahay iyo in kale, iyo sidoo kale shirkadda sameysay.

2. Dokumentiga dhismaha doonta :
   (a) Dokumentigan waxaa bixisa shirkadda sameysay doonta, ama nuqul rasiid caddeynaya qarashka laga bixiyay marka doonta la gadanayay/dhisayay.

   (b) Haddii loo baahdo, caddeymo kale oo lagu qanci karo oo dheeraad ah waa in codsaduhu soo gudbiyo markii laga dalbado.

2. Haddii aan la heli karin xogta dhismaha iyo warqadda gadashada ee doonta, waxaa lagu diiwaangelin karaa kaliya oo la ictimaadayaa heshiiska kala iibsiga doonta waana inuu ka dhacaa Nootaayada horteeda, sidoo kalena lagu caddeeyaa heshiiska ugu yaraan labo qof oo markhaati ah oo ka maragfuraya nuxurka heshiiska.
3. Doomaha lagu sameeyay dibadda waxaa looga baahan yahay caddeymo dheeri ah oo ay ka mid yihiin:

   (a) Shahaadada sameynta doonta (Builder's Certificate);

   (b) Caddeynta bixinta qarashka (Receipt of Payment);

   (c) Warqadda heshiiska sameynta doonta (IWL Agreement).

## Qod. 20aad: Beddelka Magaca iyo Milkiyadda Doonta:

Baddelka magaca iyo milkiyadda doonta waxa loo marayaa habraac iyo shuruudo la mid ah kuwa beddelka magaca iyo milikiyadda markabka ee lagu xusay Qodobka 14aad ee Xeernidaamiyahan**.**

## Qod. 21aad: Badqabka iyo Nabadgelyada Doomaha

1. Doon kasta waxaa laga rabaa inay hesho/qaadato rukhsadda WDGB ee hawlgalka badda iyo badmaridda.
2. Doomaha waa inay leeyihin ama ku rakibanyihiin qalab badbaadado iyo mid isgaarsiineed sida VHF raadiyo,jiheeye,dabdamis iyo jaakadaha badbaadada.
3. Doon kasta waxaa laga rabaa inay si degdeg ah u soo gudbiso warbixin haddii wax khasaaro ah ay dhacaan, sida burbur, shil ama geeri/dhimasho timaado.
4. Dhammaan doomaha waxaa laga rabaa inay leeyihiin oo ay qaataan taargada aqoonsiga oo ah lambar gaar u ah doon kasta.
5. Milkiilaha/wakiilka waa inuu Diiwaanhayaha u soo gudbiyaa, si degdeg ahna u soo ogeysiiyaa haddii shahaadada diiwaangelintu ay lunto, asiga oo kusoo

lifaaqaya caddeyn boolis.

6. Si loola socdo dhaqdhaqaaqa iyo nabadgalyada doomaha, doon kasta oo cabbirkeedu gaarayo 15M/Tan, waxaa laga rabaa in lagu rakkibo lambarka aqoonsiga ee otomaatiigga ah (AIS).
7. Lama damin karo lambarka aqoonsiga ee otomaatiigga ah (AIS) ee doonta.
8. Doomaha waxaa laga rabaa inay maraan kana gudbaan/baasaan baaritaanka/sahanka badqabka doomaha.
9. Qofna ma beddeli karo magaca doonta, sidoo kalena ma wareejin karo milkiyadda doonta illaa oggolaansho iyo la-socod laga helo Waraadda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee Xukuumadda JFS.
10. Dhamaan gaadiid-badeedka Dalka waxaa laga rabaa inay qaadaan tallaabooyinka ku habboon ee looga fogaan karo khataraha soo wajahi kara badqabka ,caafimaadka shaqaalaha iyo rakaabka, sidoo kale waa inay dhowraan/ilaaliyaan bii'ada badda.
11. Doomaha rakaabka waxaa laga rabaa inay oggolaanshaha Wasaaradda qaataan si joogta ahna looga helo warbixin.
12. Wasiirka Wasaaradda ayaa kusoo saari karta xeer-wasiir arrimo dheeraad oo la xariira badqabka iyo nabadgalyada badda si looga hortago khataraha ka dhalankara badda iyo badmarista.

## CUTUBKA LIXAAD

## GANAAXYADA, CIQAABAHA MAAMUL IYO ISTICMAALKA CALANKA

### Qodobka 22aad: Ka-tagista Sharci-darrada ah ee Calanka Qaranka

Markab si sharci ah ugu diiwaangashan Calanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo si ulakac ah uga tago ama u joojiyo isticmaalka calanka isagoo aan raacin habraacyada sharciyeed ee uu dhigayo Xeernidaamiyahan, waxaa uu mutaysanayaa ciqaabahan maamul ee hoos ku xusan:

a) Digniin maamul oo qoran;
b) Hakinta ku-meel-gaarka ah ee shahaadada diiwaangelinta muddo aan ka badnayn saddex (3) bilood;
c) Ganaax lacageed oo u dhexeeya $5,000 ilaa $15,000 USD, iyadoo lagu salaynayo heerka ku-tallaabsiga sharci-jabka iyo saameynta uu leeyahay;
d) Xayiraad ku-meel-gaar ah oo ku saabsan hawlgalka markabka ilaa laga saxo khaladka sharci.

### Qod. 23aad: Isticmaalka Been-abuurka ah ee Calanka Soomaaliyeed

Haddii milkiile, shirkad, ama hay'ad adeegsato Calanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyada oo aan lahayn oggolaansho sharciyeed ama samaysa been-abuur ku saabsan jinsiyadda/dhalashada markabka, waxaa lagu dabaqayaa ciqaabahan maamul:

1. **Markab Shisheeye:**
    a) Ganaax lacageed u dhexeeya $25,000 ilaa $50,000 USD;
    b) Xayiraad maamul oo lagu sameeyo markabka ilaa baaritaanku dhammaado;
    c) Joojinta oggolaanshaha ku-meel-gaarka ah haddii uu jiray;
    d) Diidmo rasmi ah oo calan-siinta mustaqbalka.

2. **Markab ay leeyihiin muwaadiniin Soomaaliyeed:**
    a) Ganaax lacageed u dhexeeya $10,000 ilaa $25,000 USD;
    b) Hakinta shahaadada diiwaangelinta muddo aan ka badnayn lix (6) bilood;
    c) Mamnuucid ku-meel-gaar ah oo isticmaalka calanka;
    d) Digniin maamul oo culus.

### Qod. 24aad: Ganaaxa Dib-u-dhaca Canshuurta Sannadlaha ah

Markab kasta oo leh waajibaadka bixinta canshuurta sannadlaha ah (annual tonnage tax) ee ku xusan Qodobka 11aad ee Xeernidaamiyaha, haddii uu ku guuldarreysto bixinta canshuurta waqtigii loogu talagalay:

a. Waxaa lagu soo rogi karayaa ganaax lacageed oo maalinle ah oo dhan $45 USD ama Shilin Soomaali u dhigma, ugu badnaan saddex (3) bilood;
b. Haddii dib-u-dhacu dhaafo saddex (3) bilood, waxaa lagu mutaysanayaa ganaax gaar ah oo dhan $7,000 USD ama Shilin Soomaali u dhigma, ganaaxa maalinlaha ahna wuu joogsanayaa;
c. Haddii muddada dib-u-dhacu dhaafto lix (6) bilood iyadoo aan jirin cudurdaar sharci ah, waxaa lagu dabaqayaa:
    i. Hakinta shahaadada diiwaangelinta;
    ii. Kala-noqosho ruqsad haddii falkaasi noqdo mid soo noqnoqda ama aan la saxin.

### Qod. 25aad: Fulinta Ganaaxyada

Ganaaxyada iyo ciqaabaha maamul waxaa fulinaya Diiwaanhayaha Maraakiibta iyo Waaxda Maamulka Badda ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda, iyagoo raacaya nidaamkan:

a) Soo saarista Ogeysiis Qoran (Notice of Violation);
b) Siinta muddada rafcaanka oo ah ugu yaraan shan-iyo-toban (15) maalmood;

c) Go'aan kama dambays ah oo maamul;
d) Diiwaangelinta ganaaxa;
e) Fulinta, xayiraad ama hakinta, sida uu qabo go'aanka maamul.

## Qod. 26aad: Ganaaxyada ku Saabsan Sahan-la'aanta ama Xog-bixin Khaldan

1. Haddii milkiile ama wakiil markab ku guuldareysto in uu:
   a) Soo gudbiyo xog sax ah oo la xiriirta diiwaangelinta;
   b) Farsameeyo sahanka khasabka ah (survey) ee ku xusan Qodobka 13aad;
   c) Bixiyo khidmadaha la xiriira diiwaangelinta.
2. Waxaa lagu soo rogi karaa:
   a) Digniin Maamul;
   b) Ganaax lacageed oo u dhexeeya $1,000 ilaa $10,000 USD ama Shilin Soomaali u dhigma;
   c) Hakinta hawlgalka markabka ilaa sahanka la dhammaystirayo; ama
   d) Joojinta diiwaangelinta (revocation) haddii khaladku noqdo mid soo noqnoqda.

## Qodobka 27aad: Ganaaxyada Doomaha ka yar yar

Doomaha ku jira baaxadda Qaybta Toddobaad ee Xeernidaamiyaha waxaa lagu dabaqayaa ciqaabahan maamul:

1. Diiwaangelin-la'aanta Doonta:
   a) Ganaax lacageed u dhexeeya $200 ilaa $1,000 USD ama Shilin Soomaali u dhigma;
   b) Xayiraad hawlgal ilaa diiwaangelinta la dhammeeyo.

2. Qalab-la'aanta Badbaadada:
   a) Ganaax lacageed u dhexeeya $100 ilaa $500 USD ama Shilin Soomaali u dhigma.

3. Beddelka Magaca ama Lahaanshaha oggolaansho la'aan:
   a) Ganaax u dhexeeya $300 ilaa $1,000 USD ama Shilin Soomaali u dhigma.

4. Daminta Nidaamka Aqoonsiga Otomaatigga AIS (Automatic Identification System):
   a) Ganaax u dhexeeya $500 ilaa $2,000 USD ama Shilin Soomaali u dhigma.

5. Soo-sheegis-la'aanta Shil, Burbur ama Dhimasho:
   a) Ganaax u dhexeeya $300 ilaa $1,000 USD ama Shilin Soomaali u dhigma.

## Qod. 28aad: Dhaqangal

Xeernidaamiyahan wuxuu dhaqangeliyaa marka Golaha Wasiirradu ansixiyaan, Ra'iisul Wasaaruhuna ku soo saaro Xeer, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

## Lifaaq 1: – KHIDMADAHA DIIWAANGELINTA MARAAKIIBTA

### A. Khidmadaha Diiwaangelinta Maraakiibta (0 – 15,000 GT)

| Lr | Culeyska Guud ee Markabka (GT) | Khidmadda Diiwaangelinta (USD) | Khidmadda Sannadlaha ah (USD/GT) |
|---|---|---|---|
| 1 | 101 – 250 | $350 | $6.00 |
| 2 | 251 – 350 | $400 | $5.00 |
| 3 | 351 – 500 | $550 | $4.00 |
| 4 | 501 – 850 | $850 | $3.00 |
| 5 | 851 – 1,500 | $1,000 | $2.50 |
| 6 | 1,501 – 2,500 | $1,250 | $1.80 |
| 7 | 2,501 – 5,500 | $1,550 | $1.20 |
| 8 | 5,501 – 10,000 | $1,950 | $1.00 |
| 9 | 10,001 – 15,000 | $2,000 | $0.95 |

### B. Khidmadaha Maraakiibta Ka Weyn 15,000 GT

| Lr | Culeyska Guud (GT) | Shahaadada Diiwaangelinta | Khidmadda Sanadeedka culeyska (Annual Tonnage Fee) |
|---|---|---|---|
| 1 | 15,001 – 20,000 GT | $2,500 | $0.50 per GT |
| 2 | 20,001 – 25,000 GT | $3,500 | $0.45 per GT |
| 3 | 25,001 – 35,000 GT | $4,500 | $0.35 per GT |
| 4 | Ka badan 35000 GT | $5,900 | $ 0.25 per GT |

### C. Khidmadaha Adeegyada Diiwaangelinta

| Lr | Nooca Adeega | Khidmadda (USD) |
|---|---|---|
| 1 | Ogolaashada qabashada Codsiga Diiwaangelinta | $200 |
| 2 | Baddelidda Magaca Gaadiid Badeedka | $500 |
| 3 | Baaritaanka/Sahanka Gaadiid Badeedka | $250 |
| 4 | Wax Ka Badalidda Shahaadada | $300 |
| 5 | Tirtiridda Shahaadada | $500 |
| 6 | Wareejinta Diiwaangelinta | $500 |
| 7 | Shahaadada Diiwaangelinta Ku-meel Gaarka | $500 |
| 8 | Beddelidda calaamadda wicitaanka caalamiga | $800 |
| 9 | Lumista Shahaadada | $750 |

**D. Shahaadada Culeyska(Markab leh Culays Guud 0–1000 GT)**

| Lr | Culeyska Guud(GT) | Shahaadada Culeyska(USD) |
|---|---|---|
| 1 | 0 – 100 GT | $125.00 |
| 2 | 101 – 200 GT | $185.00 |
| 3 | 201 – 300 GT | $225.00 |
| 4 | 301 – 400 GT | $275.00 |
| 5 | 401 – 500 GT | $350.00 |
| 6 | 501 – 1000 GT | $450.00 |

**E. Shahaadada Culeyska(Markab leh Culays Guud 1000-10,000 GT)**

| Lr | Culeyska Guud(GT) | Shahaadada Culeyska(USD) |
|---|---|---|
| 1 | 1,001 – 1,500 GT | $550.00 |
| 2 | 1501 – 3,500 GT | $650.00 |
| 3 | 3,501 – 10,000 GT | $750.00 |
| 4 | Ka badan (More than)10,001 GT | $1,500.00 |

**F. Shahadada u qalmida Badmaridda (Seaworthiness Certificate)**

| Lr. | CULAYSKA GUUD (GT) | KHIDMADDA (USD) |
|---|---|---|
| 1 | 0 – 250 GT | $200 |
| 2 | 251 – 450 GT | $350 |
| 3 | 451 – 500 GT | $450 |
| 4 | 501 – 850 GT | $550 |
| 5 | 851– 1,000 GT | $750 |
| 6 | 1,001– 2,000 GT | $900 |
| 7 | 2,000– 10,000 GT | $1,500 |
| 8 | Ka badan (More than)10,001 GT | $2,500 |

# Lifaaq 2: Khidmadda Diiwaangelinta Noocyada kala Duwan ee Doomaha

## A. DIIWAANGALINTA DOOMAHA KALUUMEYSIGA/DALXIISKA EE KA YAR 50 CULEYSKA GUUD

| Culeyska Doonta (GT) | | KhidmadaDiiwaangalinta Shahaadada | Khidmadda Sanadlaha (USD/GT |
|---|---|---|---|
| 1 | 0-10 | $80 | $4 |
| 2 | 11- 20 | $90 | $5 |
| 3 | 21- 30 | $100 | $6 |
| 4 | 31- 40 | $120 | $7 |
| 5 | 41-50 | $130 | $8 |

## B. DOOMAHA KALUUMEYSIGA/DALXIISKA IYO XAMUULKA CULUSKOODU GUUD YAHAY 51-100 GT.

| Culeyska Doonta (GT) | | Shahaadada Diiwaangelinta | Khidmadda Sanadlaha (USD/GT) |
|---|---|---|---|
| 1 | 51-70 | $140 | $10 |
| 2 | 71-90 | $150 | $12 |
| 3 | 91- 100 | $160 | $14 |

## C. KHIDMADDA ADEEGA DIIWAANGALINTA DOOMAHA

| Lr. | Nooca adeega | Khidmadda |
|---|---|---|
| 1. | Sugida lahaanshaha doonta | $100 |
| 2. | Badalida Magaca Doonta | $70 |
| 3. | Wax ka badalida Shahaadada Doonta | $80 |
| 4. | Kala wareejinta milkiyadda doonta | $120 |
| 5. | Cusbooneysiinta shahaadada doonta | $60 |

**D. Khidmahada Khararaashda aqoonsiga Doomaha:**

| Lr. | Noocayadda doomaha | Khidmadda Taarikadda Doomaaha |
|---|---|---|
| 1. | Doomaha aan matoor laheyn (Huuri) | $45 |
| 2. | Doomaha Dalxiiska kuwooda yar yar | $100 |
| 3. | Doomaha kaluumeysiga kuwa loo yaqaan (faaraboot) | $115 |
| 4. | Doomaha kaluumeysiga kuwa loo yaqaan Foolfada | $145 |
| 5. | Doomaha kaluumeysiga waaweyn sida Laashashka | $250 |
| 6. | Doomanka Xamuulka | $350 |

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.197 — Taariikh: 08/02/2026

XRW - BIXIT
28 FEB 2026
OPM - EXIT

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SANDUUQA QARAN EE MAAREYNTA KHATARAHA MUSIIBOOYINKA**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Sharciga Dhismaha Hay'adda Maareynta Musiiboyinka (Sharci Lr. 17/2016).

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **WAGF&D/XW/0012/26** ee ku taariikheysan **05/01/2026** ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha,Fedraalka & Dib-u-heshiisiinta kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Maareynta Khataraha Musiibooyinka.**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.05.145.2.26** ee **05/2/2026,** kuna saabsan Ansixinta**"Xeer-nidaamiyaha Maareynta khataraha Musiibooyinka"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay in la dardar geliyo wax-ka-qabashada musiibooyinka degdegga ah iyadoo la hubinaayo hufnaan, isla-xisaabtan iyo wax tar.

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.05.145.2.26** ee **05/2/2026,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Maareynta Khataraha Musiiboyinka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**
**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Arimaha Gudaha,Federaalka & Dib u-heshiinta loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

**Qodobka 3aad**
**Dhaqangal**

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.**

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO Han-031-2026
TAARIIKH 03-06-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

**Federal Republic of Somalia**
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2763/2025** **Tr. 23/12/2025**

Mudane Garyaqaan:

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA SANDUUQA QARAN . EE MAAREYNTA KHATARAHA MUSIIBOOYINKA (NATIONAL DISASTER RISK MANAGEMENT FUND-NDRMF)."**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbineysaa **"Xeer-nidaamiyaha Sanduuqa Qaran ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka (National Disaster Risk Management Fund).** Sanduuqan oo lagu Dardargelinayo wax-ka-qabashada musiibooyinka degdegga ah, iyadoo la hubinayo hufnaan, isla-xisaabtan iyo waxtar.

Xeer-nidaamiyahan oo ay diyaarisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, waxay Wasaaradda Cadaaladdu ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan hindise-sharciyeedyada.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu waajibkiisa sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyahan ka guto, si habraaciisa sharci ee ansixinta u dhammeystirmo.

Mahadsanidiin.

Mudane. Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka —Muqdisho—
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka —Muqdisho—
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka —Muqdisho—
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka —Muqdisho—
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka —Muqdisho—

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so
Tell: 0615847146

Dr. Saalax
27/12/2025

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh 27/12/2025

**SUMMAD: XGG/447/2025**

**30/12/2025**

**Ku: Wasaaradda Arr. Gudaha, Federaalka & Dib-u-heshiisiinta** — **Muqdisho**
**Ku: Agaasimaha Golaha wasiiradda** — **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Raiisul Wasaaraha JFS** — **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Sharci**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo tixraacaya Warqadda Summaddeeduna tahay: WCAD/XAWSHH/2763/2025, kuna taariikhaysan 23/12/2025 kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka, ayaa waxa uu halkan kusoo gudbinayaa talo sharci ah kuna saabsan **Xeer-Nidaamiyaha Sanduuqa Qaran ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka (National Disaster Risk Management Fund).**

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 Janaayo 1976, waxa uu Wasaaradda Arr. Gudaha, Federaalka & Dib-u-heshiisiinta u soo gudbinayaa: **Xeer-Nidaamiyaha Sanduuqa Qaran ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka (National Disaster Risk Management Fund),** oo horay loogu soo gudbiyay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu xafiisku uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda kadib markuu darsay, Xeer-Nidaamiyaha Sanduuqa Qaran ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka, waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha wasiirada, maadaama uusan ka hor-imaanayn Dastuurka, Shuruucda Dalka iyo Danta Guud, uuna Xafiiska ka gutay waajibaadkiisa Shaqo ee kaga aadanaa, si waafaqsan Sharciga.

**FG**: halkaan waxaa ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha Sare ku xusan.

Salaan qadarin leh

**Dr. Saalax Siidii Sh. C/raxmaan**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA * OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL * مكتب المحامي العام للدولة

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA & DIB-U-HESHIISIINTA**

# XEERNIDAAMIYAHA SANDUUQA QARAN EE MAAREYNTA KHATARAHA MUSIIBOOYINKA (NATIONAL DISASTER RISK MANAGEMENT FUND-NDRMF)

Waxaa diyaariyey:
Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta,

February 2025

## TUSMADA

***QAYBTA KOOWAAD: QODOBBADA GUUD*** ________ ***3***

Qodobka 1aad: Magaca iyo Saldhigga Sharci ee Xeer-nidaamiyaha ________ 3

Qodobka 2aad: Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha ________ 3

Qodobka 3aad Baaxadda Xeer-nidaamiyaha ________ 3

Qodobka 4aad: Micnaha Erayada ________ 4

***QAYBTA LABAAD ABUURISTA IYO UJEEDDOOYINKA SANDUUQA*** ________ ***4***

Qodobka 5aad: Abuurista Sanduuqa ________ 5

Qodobka 6aad: Ujeeddooyinka Sanduuqa ________ 5

Qodobka 7aad: Iskaashiga Wacyigelinta ________ 5

Qodobka 8aad: Mudnaanta Gurmadka ________ 5

***QAYBTA SADDEXAAD: MAAMULKA IYO QAAB-DHISMEEDKA SANDUUQA*** ________ ***6***

Qodobka 9aad: Guddiga Sare ee Maamulka Sanduuqa ________ 6

Qodobka 10aad: Waajibaadka Guddiga Sare ________ 7

Qodobka 11aad: Xoghaynta iyo Maamulka Hawlaha Maalinlaha ah ________ 7

***QAYBTA AFARAAD: MAALIYADDA IYO ISLA-XISAABTANKA*** ________ ***8***

Qodobka 12aad: Ilaha Dhaqaalaha iyo Maalgalinta Sanduuqa ________ 8

Qodobka 13aad: Hannaanka Maaraynta Maaliyadda Sanduuqa ________ 8

Qodobka 14aad: Bixinta Gargaarka Degdegga ah ________ 9

Qodobka 15aad: Dabagalka iyo Kormeerka ________ 9

***QAYBTA SHANAAD: QODOBBADA GUNAANAD*** ________ ***10***

Qodobka 16aad: Xeer-hoosaadyada ________ 10

Qodobka 17aad: Dhaqangalka Xeerka ________ 10

## QAYBTA KOOWAAD:
## QODOBBADA GUUD

### Qodobka 1aad:
### Magaca iyo Saldhigga Sharci ee Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabayaa “Xeer-nidaamiyaha Sanduuqa Qaran ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka (National Disaster Risk Management Fund – NDRMF)”.
2. Xeer-nidaamiyahan waxaa saldhig sharci u ah Qodobka 8(2) ee Sharciga Dhismaha Hay’adda Maareynta Musiibooyinka (Sharci Lr. 17/2016), kaas oo dhigaya in Hay’addu ay abuurto sanduuq dhaqaale oo ay ka qayb-qaataan ganacsatada iyo dadweynaha Soomaaliyeed, looguna talagalay in si degdeg ah looga jawaabo musiibooyinka dalka ka dhaca.

### Qodobka 2aad:
### Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyahan waa:

1. In la aasaaso lana habeeyo Sanduuqa Qaran ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka oo ku dhex shaqaynaya, waafaqsanna nidaamka maareynta maaliyadda Dowladd, gaar ahaan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud 2019 iyo wax-ka-beddelladiisa, si uu u noqdo il dhaqaale iyo madal isku-dubarid.
2. In la dardargeliyo ka hortagga, u diyaar-garowga, ka jawaabista degdegga ah iyo soo kabashada musiibooyinka.
3. In la kordhiyo wacyiga bulshada, ka-qaybgalka ganacsatada, iyo deeq-bixiyeyaasha gudaha iyo dibadda.
4. In la dhiirrigaliyo iskaashi iyo isku-duwid u dhexeysa hay’adaha Dowladda, kuwa gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka ah iyo hay’adaha caalamiga ah.
5. In la hirgaliyo siyaasadaha Dowladda Federaalka Soomaaliya ee ku saabsan maaraynta khataraha musiibooyinka.

### Qodobka 3aad
### Baaxadda Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan wuxuu khuseeyaa dhammaan Hay’adaha Dowladda Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka, ganacsatada, iyo hay’adaha samafalka ee ka howlgala Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 4aad:
## Micnaha Erayada

Xeer-nidaamiyahan gudihiisa erayada soo socda waxay leeyihiin macnaha ku hor qoran, haddii aan xeerka gudihiisa si kale loogu sheegin:

1. **Hay'adda:** Waxaa loola jeedaa Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya (SoDMA).
2. **DRMF**: Sanduuqa Maareeynta Khataraha Musiibooyina **(Disaster Risk Management Fund).**
3. **Guddiga**: Gudiga Sare ee Sanduuqa Maareeynta Khataraha Musiibooyinka (Board of the National Disaster Risk Management Fund).
4. **Guddoomiyaha Guddiga**: waxaa loola jeeda Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Sanduuqa Maareeynta Khataraha Musiibooyinka.
5. **Musiibo**: Dhacdo degdeg ah oo halis gelisa nolosha, hantida iyo deegaanka.
6. Deeq-bixiye: Hay'ad ama shaqsi bixiya taageero dhaqaale ama agab.
7. **Agaasime**: waxaa loola jeeda Agaasimaha Waaxda Maareynta Sanduuqa **(DRM Fund Director).**
8. **Guddoomiyaha Hay'adda**: waxaa loola jeedaa Gudoomiyaha Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya (SoDMA).
9. **Wasiir**: Waxaa loola jeedaa Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo dib u heshiisiinta XHFS.
10. **Golaha Wasiirrada**: Waxaa loola jeedaa Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS.
11. **SoDMA:** Waxaa loola jeedaa Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya.
12. **Dowladda**: waxaa loola jeedaa Dowladda Federaalka Soomaalya.
13. **JFS**: Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
14. **Xeerarka Maaliyadda:** waxaa loola jeedaa xeerarka (sharciyada) maaliyadda ee Dowladda, gaar ahaan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud 2019, wax-ka-beddelladiisa, iyo Xeerk Qoondada Miisaaniyadda (xeerka sanadlaha ah ee miisaaniadda Dowladda) ee JFS.

## QAYBTA LABAAD
## ABUURISTA IYO UJEEDDOOYINKA SANDUUQA

**Qodobka 5aad:**
**Abuurista Sanduuqa**

1. Waxaa la asaasay Sanduuqa Qaran ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka (NDRMF) si uu u noqdo il dhaqaale, madal wacyigalin iyo isku-dubarid, kana shaqeeya ururinta, maareynta iyo bixinta deeqaha iyo tabarucaadaha la xiriira musiibooyinka, si waafaqsan Qodobka 8(2) ee Sharciga Dhismaha Hay'adda Maareynta Musiibooyinka (Sharci Lr. 17/2016), iyo Xeerarka Maaliyadda.
2. Sanduuqu wuxuu yeelanayaa hab maamulkan soo socda:
   (a) Guddiga sare ee Maamulka Sanduuqa Qaran ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka;
   (b) Agaasimaha Sanduuqa ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka (NDRMF), oo ka tirsan Hay'adda.

**Qodobka 6aad:**
**Ujeeddooyinka Sanduuqa**

Ujeeddooyinka Sanduuqa waa:

1. Taageeridda ka hortagga, u diyaar-garowga, ka jawaabista degdegga ah iyo soo kabashada musiibooyinka.
2. Helidda ilo dhaqaale oo degdeg ah, oo daboola baahiyaha lama filaanka ah.
3. Kor u qaadidda wacyigelinta iyo isku-duwidda daneeyayaasha kala duwan.
4. Taageeridda ururinta iyo maamulka deeqaha iyo tabarucaadaha.
5. Fududeynta hawlaha gargaarka bini'aadannimo.

**Qodobka 7aad:**
**Iskaashiga Wacyigelinta**

Sanduuqu wuxuu si dhow ula shaqeyn doonaa daneeyaasha soo socda, si kor loogu qaado wacyigelinta ku aadan maareynta musiibooyinka:

1. Hay'adaha Dowladda, oo ay ku jiraan hay'addaha mas'uulka ka ah maareynta musiibooyinka ee heer federaal iyo heer Dowlad Goboleed.
2. Shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo bahda ganacsatada ee JFS.
3. Ururada bulshada rayidka ah ee ka howlgala JFS.
4. Hay'adaha iyo deeq-bixiyaasha caalamiga ah ee taageera maaraynta khataraha musiibooyinka iyo u diyaar-garowga xaaladaha degdegga ah.

**Qodobka 8aad:**
**Mudnaanta Gurmadka**

Sanduuqu waxaa uu mudnaan siinayaa marka uu sameynayo taageero gurmad arrimahan soo socda:

1. Hawlaha badbaadinaya nolosha dadka.
2. Bixinta adeegyada aasaasiga ah.
3. Gargaarka dadka nugul.
4. Dib-u-soo-kabasho degdeg ah iyo soo celinta adeegyada muhiimka ah.
5. Ka hortagga khataro cusub.

## QAYBTA SADDEXAAD:
## MAAMULKA IYO QAAB-DHISMEEDKA SANDUUQA

### Qodobka 9aad:
### Guddiga Sare ee Maamulka Sanduuqa

1. Waxaa la dhisayaa Guddiga Sare ee Maamulka Sanduuqa Qaran ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka.
2. Guddigu waxaa uu ka koobnaanayaa xubnahan hoos ku xusan:

| | |
|---|---|
| (a) Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dibuheshiisiinta | Guddoomiye; |
| (b) Wasiirka Maaliyadda | Gud. Kuxigeen; |
| (c) Wasiirka Qorsheynta | xubin; |
| (d) Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dirta, & Daaqa | xubin; |
| (e) Wasiirka Deegaanka & Isbadalka Cimilada | xubin; |
| (f) Wasiirka Caafimaadka | xubin; |
| (g) Wasiirka Ganacsiga & Warshadahad | xubin; |
| (h) Wasiiru Dowlaha Xafiiska Ra’iisul Wasaaraha | xubin; |
| (i) Guddoomiyaha Hay’adda | xubin; |
| (j) Rugta Ganacsiga Soomaliyeed | labo xubnood; |
| (k) Culimada Soomaaliyed | labo xubnood; |
| (l) Agaasimaha Sanduuqa (xubin aan cod lahayn) | Xoghaye. |

3. Guntanka kulamada Guddiga waxaa weeye cod dheeri tirada guud ee xubnaha Guddiga., xubin kastana waxay leedahay hal cod marka ay codeynayso.

4. Xubnaha Guddiga waxaa magacaabaya Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya kadib marka uu wasiirku soo jeediyo xubnaha aan ahayn Wasiirada.
5. Xubnaha Guddigu waxay xilka ku waynayaan marka ay dhacaan xaaladahan mid ka mid ah:

   (a) Waayid xilka uu ku helay ka mid noqoshada guddiga sare

   (b) Geeri

   (c) Is-casilaad

   (d) Xil gudasho la’aan

**Qodobka 10aad:**
**Waajibaadka Guddiga Sare**

Guddigu waa maamulka ugu sarreeya, waxa uuna bixiyaa ama tilmaamaa jihada istraatiijiyada iyo la socoshada howlaha sanduuqa, waxaana waajibaadkiisa ka mid ah:

1. Hagidda iyo ansixinta istiraatiijiyadda guud ee sanduuqa ee mudnaanta leh iyadoo la hubinayo in ay waafaqsan yihiin siyaasadda Sanduuqa ee ku xusan (Sharci Lr. 17/2016), Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, iyo xeerarka kale ee dalka.
2. La socoshada iyo hubinta maareynta sanduuqa, si loo xaqiijiyo daahfurnaanta, hufnaanta iyo isla xisaabtanka maaliyadeed si waafqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud,2019.
3. Hoggaaminta dadaalada dhaqaale ururinta, xoojinta iskaashiga ganacsayada, qaybaha kala duwan ee bulshada iyo deeq-bixiyeyaasha si waafqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud,2019.
4. Kor joogteynta waxqabadka sanduuqa iyo saameynta uu ku leeyahay ujeeddooyinka loo abuuray.
5. Ansixinta warbixinno maaliyadeed iyo kuwo hawleed si waafqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud,2019.
6. Qabashada kumada Guddiga sanadkiiba labo jeer iyo mar kasta oo kale oo loo baahdo, waxaana lagu nidaaminayaa habka iyo guntan kulamada xeer-hoosaadka.
7. Soo saarista xeer-hoosaadyo iyo habraacyo.

**Qodobka 11aad:**
**Xoghaynta iyo Maamulka Hawlaha Maalinlaha ah**

1. Waaxda Maareeynta sanduuqa Qaran ee Maareeynta Khataraha Masiibooyinka oo ka tirsan Hay’adda ayuu xeerkan u xil saarayaa xoghaynta iyo maamulka howlaha maalinlaha ah ee Sanduuqa,.

2. Agaasimaha waaxdaasi wuxuu noqon doonaa Xoghayaha Guddiga, wuxuuna mas'uul ka noqon doonaa:

   (a) Fulinta go'aamada Guddiga Maamulka;

   (b) Qaadista qoraalada (minutes) kulamada gudiga iyo hirgalinta go'aanada gudigga;

   (c) Mas'uul ka noqoshada maareynta hawlaha maalinlaha ah ee Sanduuqa;

   (d) Diyaarinta iyo fulinta istaraatijiyadaha iyo habraacyada dhaqaale aruurinta sanduuqa;

   (e) Abaabulidda iyo iskuduwidda dadaalo lagu raadinayo dhaqaale loogu talagalay Sanduuqa; iyo

   (f) Fulinta waajibaad kasta oo dheeraad ah oo uu ay u xil saaraan Gudiga sare Maamulka sanduuqa.

## QAYBTA AFARAAD:
## MAALIYADDA IYO ISLA-XISAABTANKA

### Qodobka 12aad:
### Ilaha Dhaqaalaha iyo Maalgalinta Sanduuqa

Si waafaqsan Qodobka 8aad faqradahiisa 5 iyo 6aad ee Sharciga Dhismaha Hay'adda Maareynta Musiibooyinka, ilaha dhaqaale ee Sanduuqa waxaa ka mid ah:

1. Qoondo maaliyadeed oo ka imanaysa qoondada ku-tala-galka lama filaanka ee Miisaaniyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya, si waafaqsan Xeerarka Maaliyadda.
2. Ganacsiyada gaarka loo leeyahay
3. Waxaa jiraya madallo iyo habab kala duwan oo ay uga qaybqaataan qurbajoogta iyo bulshada daljoogta ahba maalgalinta Sanduuqa, hababkaas waxaa ka mid ah:

   (a) Sakada;

   (b) Waqafka;

   (c) Tabarrucaad kasta.

4. Maalgalita sanduuqa waa mid loogu talagay mareeynta khataraha masiibooyinka; Ka hortga, ka jawabista xaaladaha degdeg ah iyo maalgalinta ka soo kabasho xilli hore saameeynta dhibaato ee aafooyinka si waafaqasan Sharciga Dhismaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliyeed, 2016, lana raacayo hab maalgalineed  waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud,2019 ee dalka si loo dhowro hufnaan maaliyeed.

### Qodobka 13aad:
### Hannaanka Maaraynta Maaliyadda Sanduuqa

Si loo xaqiijiyo hufnaanta, Sanduuqa Qaran ee Maareynta Khataraha Musiibooyinka waxaa uu u hoggaansamayaa Xeerarka Maaliyadda, waxaana ka mid ah tallaabooyinka lagu xaqiijinayo:

1. Dhaqaalaha Sanduuqa waxaa lagu shubi doonaa laguna maamuli doonaa Khasnadda Mideysan, laguna ilaalinayaa lacagtaas, sidoo kalena wa, iyada oo la raacayo maareyn hufan oo wax-ku-ool ah iyo habraacyada bangi ee loo dejiyey Xisaabta Khasnadda Mideysan ee Qaranka,  wuxuuna yeelanaya sanduuqa xisaab-hoosaad ka tirsan Xisaabta Khasnadda Mideysan si waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019 ee dalka.
2. Hannaanka ururinta dakhliga, bixinta kharaska, iyo xisaabaadka Sanduuqa waxaa loo raacaya habka xeerarka maaliyadda Dalku tilmaamayaan gaar ahaan Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud.
3. Xisaab xirka iyo warbixin sannadeedka waxaa diyaarinaya agaasimaha sanduuqa, waxaana loo gudbinayaa Guddiga oo ansaxinaya si loogu gudbiyo haya’daha kala duwan ee ay khuseyso si waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud,2019 ee dalka.
4. Guddigu Sanduuqa waxaa uu ilaalinayaa dhammaan buugaagta, diiwaannada xisaabta dakhliga, kharashaadka iyo hantida Sanduuqa si waafaqsan xeerarka maaliyadda Dowladda.
5. Warbixinada Maaliyadeed waxaa hubinaya Hantidhowraha Guud ee Qaranka.

**Qodobka 14aad:**
**Bixinta Gargaarka Degdegga ah**

1. Codsiyada gurmadka waxaa diyaarinaysa Hay’adda Maareynta Masiibooyinka oo kaashanaysa Dowlad Goboleedyada.
2. Guddiga Sare ayaa oggolaanaya qiimeynta lagu sameeyay baahiyaha.
3. Bixinta gargaarka waxaa lagu saleynayaa baahida degdegga ah iyo awoodda dhaqaale ee sanduuqa.

**Qodobka 15aad:**
**Dabagalka iyo Kormeerka**

1. Hay'adda waxay fulin doontaa dabagal iyo kormeer joogto ah oo ku saabsan howlaha Sanduuqa laga taageero.
2. Warbixinada kormeerka waxaa loo gudbin doonaa Guddiga.

## QAYBTA SHANAAD:
## QODOBBADA GUNAANAD

### Qodobka 16aad:
### Xeer-hoosaadyada

Guddiga wuxuu soo saari karaa xeer-hoosaadyo iyo habraacyo lagu dhammaystirayo Xeer-nidaamiyahan.

### Qodobka 17aad:
### Dhaqangalka Xeerka

Xeernidaamiyahani waxaa uu dhaqangalayaa marka Golaha Wasiirradu ansixiyaan, uuna saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.198** **Taariikh:07/03/2026**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA DHISMAHA HAY'ADDA DARYEELKA AGOONTA SHUHADDADA, NAAFADA & HOWLGABKA CIIDANKA XDS**

XRW - BIXIT
0 8 MAR 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 1aad Ee Sharciga Dhismaha Hay'adda Daryeelka Naafada & Howlgabka Ciidamada Qalabka Sida (Sharci Lr. 38/1984).

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **WG/XW/049/02/26** ee ku taariikheysan 21/**02/2026** ee Wasaaradda Gaashaandhigga kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Dhismaha Hay'adda Daryeelka Agoonta Shuhaddada ,Naafada iyo Howlgabka Ciidanka XDS ;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.07.147.3.26** ee **05/3/2026,** kuna saabsan Ansixinta"**Xeer-nidaamiyaha Dhismaha Hay'adda Daryeelka Agoonta Shuhaddada ,Naafada iyo Howlgabka Ciidanka XDS "** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay Dareyeelka Agoonta iyo Qoysaska Xubnaha Ciidanka XDS.

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.07.147.3.26** ee **05/3/2026,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Dhismaha Hay'adda Daryeelka Agoonta Shuhaddada ,Naafada iyo Howlgabka Ciidanka XDS** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad
## Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Gaashaandhigga loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 3aad
## Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO H94-029-2026
TAARIIKH 03-06-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Issa Gutale
Hantidhowrana Guud ee JFS

**Sumad: XGG/080/2026** **21/02/2026**

**Ku: Agaasimaha Golaha Wasiiradda XFS** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Gaashaandhigga** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo bixin sharci**

Xafiiska Garyagaanka Guud ee Dawladda oo tixraacaya Warqadda Summaddeedu tahay **WCAD/XAWSHH/2955/2026, ee ku taarikheysan 15/02/2026**, kana soo baxday Wasaaradda Caddaaladda iyo ArrimahaDastuurka XFS, Ujeeddadiisuna aheyd **Soo gudbin "Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Daryeelka Agoonta Shuhaddada, Naafada iyo Hawl-gabka Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed"**.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo gudanaya waajibaadka lagu tiimaamay Sharci L.r.18 ee 29 Janaayo 1976, waxa uu halkaan idin kuugu soo gudbinayaa Xeer-nidaamiyaha Ujeeddada sare ku xusan, kaas oo ay Wasaaradda Caddaaladda iyo ArrimahaDastuurka XFS ugu usoo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka, si uu uga guto Waajibaadkiisa Shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Haddaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, kadib markii uu si qoto dheer u dersay nuxurka Xeer-nidaamiyaha, kuna sameeyay toosin aan looga maarmin, waxaa usoo baxday in uu muhiimad gaar ah u leeyahay Dhisidda Hay'ad qaabilsan Xuquuqda iyo Daryeelka Agoonta Shuhaddada, Naafada iyo Hawl-gabka Ciidanka Xoogga Dalka.

**Sidaas darteed,** waxa uuna Xafiisku ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirada, maadaama uusan kahor-imaaneyn Dastuurka, Shuruucda Dalka iyo Danta Guud, kana gutay Xafiiska waajibaadkiisa Shaqo ee kaga aadanaa, si Waafaqsan Sharciga.

**F.G: halkaan waxaa ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha sare ku xusan.**

**Avv. Xuseen Xasan C/llaahi**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA * OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL * مكتب المحامي العام للدولة

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهـــورية الصـــومـــال الفيدراليـــة
وزارة العدل والشـــؤون الدســـتورية
مكـــتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2955/2026** **Tr. 15/02/2026**

Mudane Garyaqaan;

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA HAY'ADDA DARYEELKA AGOONTA SHUHADDADA, NAAFADA IYO HAWL-GABKA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxa ay halkan ku soo gudbinaysaa xeer-nidaamiyaha sare ku xusan oo abuuraya hannaan sharci iyo mid maamul oo lagu daryeelayo agoonta shuhaddada, naafada iyo hawl-gabka ciidanka xoogga dalka Soomaaliyeed.

Xeer-nidaamiyahan oo ay diyaarisay Wasaaradda Gaashaandhigga, waxa ay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurku ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyeyaasha.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa in uu ka guto waajibkiisa sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyeyaasha si habraaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Cadaaladda ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka = Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka = Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=

Address: Martini Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so
Tell: 0615847146

Dr- Xuseen
16/02/2026

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID

**TIX:WG/XW/0430/12/25** **Tr: 16/12/2025**

**Ku: Xafiiska Garyaqaanka Guud** **= Muqdisho=**
**Og: Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha XFS** **= Muqdisho=**

**Ujeeddo: Soo Gudbin Xeer Nidaamiyaha Dhismaha Hay'adda Daryeelka Agoonta Shuhaddada, Naafada, iyo Hawlgabka Ciidanka XDS**

Si waafaqsan Qod. 102(1) ee Dastuurka JFS oo lala akhrinayo Qodobbada 3aad iyo 13aad Sharciga Nidaamka Xukuumadda L. 3 ee soo baxay 3dii Juun 1962 iyo wax ka baddelladii lagu kaabay, waxaan halkaan si qadarin leh kuugu soo gudbinayaa Xeer-Nidaamiyaha Dhismaha Hay'adda Daryeelka Agoonta Shuhadada, Naafada, iyo Howlgabka Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

Xeer-nidaamiyahani ayaa ah mid muhiim u ah dhaqangelinta shuruucda nidaaminaysa daryeelka agoonta iyo qoysaska xubnaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya ee ku geeriyooday iyagoo gudanaya waajibka difaaca qaranka ee Ciidanka Xoogga Dalku u xilsaaran yahay gaar ahaan Sharci L.38 ee soo baxay 26 Sebtembar 1984.

Sidaa daraaddeed, waxaan idinka codsanayaa in aad ka gutaan waajibaadka dastuuriga ah.

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Danjire Axmed Macallin Fiqi**
**Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga XJFS**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
# WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

**XEER-NIDAAMIYAHA HAY'ADDA DARYEELKA AGOONTA SHUHADDADA, NAAFADA IYO HAWLGABKA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED**

**Febraayo 2026**

**TUSMO**

**CUTUBKA KOWAAD: QODOBBO GUUD ____ 6**
Qodobka 1aad: Magaca Xeerka ____ 6
Qodobka 2aad: Sharciyada Hay'ada ____ 6
Qodobka 3aad: Qaybaha Hay'adda: ____ 6
Qodobka 4aad: Xarunta Hay'adda ____ 6
Qodobka 5aad: Eraybixin ____ 6
Qodobka 6aad: Ujeeddooyinka Xeerka ____ 8

**CUTUBKA LABAAD: HOWLGALINTA HAY'ÁDA ____ 8**
Qodobka 7aad: Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Hay'adda ____ 8
Qodobka 8aad: Dhismaha Golaha Maamulka Sare (Board of Directors) ee Hay'adda ____ 9
Qodobka 9aad: Xubnaha Golaha Maamulka Sare ee Hay'addda ____ 9
Qodobka 10aad: Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Golaha Maamulka Sare ee Hay'addda ____ 10
Qodobka 11aad: Kulamada Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda ____ 10

**CUTUBKA SADDEXAAD: MAAMULKA FULINTA HAY'ADDA ____ 11**
Qodobka 12aad: Qaab-dhismeedka Hay'adda ____ 11
Qodobka 13aad: Kaalinta Wasiirka ____ 11
Qodobka 14aad: Hawlaha Maamulka Fulinta Hay'adda ____ 11
Qodobka 15aad: Magacaabista Maareeyaha Hay'adda ____ 11
Qodobka 16aad: Xilka iyo Mas'uuliyadaha Maareeyaha Hay'adda ____ 12
Qodobka 17aad: Maareeye Ku-xigeen Guud ____ 13

**CUTUBKA AFARAAD: MAAMULKA MAALIYADDA ____ 13**
Qodobka 18aad: Maaliyadda iyo Xisaabaadka ____ 13
Qodobka 19aad: Shaqaalaha iyo Howlwadeennada Hay'adda ____ 13

**CUTUBKA SHANAAD: QODOBBO GUNAANAD AH ____ 14**
Qodobka 20aad: Wax-ka-beddelka iyo Baabi'inta ____ 14
Qodobka 21aad Soo saarista xeer-hoosaadyo ____ 14
Qodobka 22aad: Dhaqangal ____ 14

# CUTUBKA KOWAAD: QODOBBO GUUD

## Qodobka 1aad: Magaca Xeerka

Xeer nidaamiyehan waxaa loogu yeerayaa **"Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Daryeelka Agoonta Shuhadada, Naafada iyo Hawlgabka Ciidanka Xoogga Dalka".**

## Qodobka 2aad: Sharciyada Hay'ada

Si waafaqsam Qoqobka 1aad ee shar. Lr. 38, taariikh 24 Sebt. 1984, kaas oo lagu dhisay Hay'adda Daryeelka Agoonta Shuahadada, qooysaskooda, Naafada Ciidanka Qalabka Sida (CQS), kaasoo dastuurku u aqoonsanyahay ciidanka Xooga dalka Soomaaliyeed, iyo Kuwa Rayidka mutadhawiciinta ah ee ka garab dagaalama ciidanka xooga dalka.

## Qodobka 3aad: Qaybaha Hay'adda:

Hay'addu waxa ay ka kooban tahay Mashruucyo kala duwan oo mid walba Maareeyntiisa iyo Maamul kiisaba u gaar yihiin, isla markaasna si toos ah ugu xiran Guddiga Sare ee Hay'adda.

## Qodobka 4aad: Xarunta Hay'adda

Xarunta Hay'addu waa Muqdisho, hase yeeshee, haddii loo baahdo, waxay laamo ka furan kartaa Gobollada iyo Degmooyinka Dalka oo katirsan Maamul Goboleedyada hoosyimaada Dawlada Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 5aad: Eraybixin

Haddii aan si kale loogu qeexin xeer nidaamiyehan gudihiisa, erayada hoos ku xusan mid kasta wuxuu yeelanayaa macnaha ku hor qoran:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | **JFS** | waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. |
| 2. | **Xubnaha Ciidanka** | waxaa loola jeedaa Ciidanka Difaaca Soomaaliyeed. |
| 3. | **Daryeel** | waxaa loola jeedaa bixinta adeegyada raashinka, dharka, hoyga, caafimaadka iyo waxbarashada. |

| | | |
|---|---|---|
| 4. | **Difaac** | waxaa loola jeedaa ilaalinta iyo ka-difaacidda cid kasta oo ku xad-gudubta madaxbannaanida, gobonnimada, midnimada dhuleed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed iyo Difaaca Qaranka. |
| 5. | **CXD** | waxaa loola jeedaa Ciidanka Xoogga Dalka. |
| 6. | **Guddoomiye** | waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed. |
| 7. | **Gunno** | waxaa loola jeedaa xuquuqda (Pension) la siiyo xubinta Hawlgabka ah ama qoyskiisa si waafaqasan shuruucda dalka. |
| 8. | **Maareeye** | waxaa loola jeedaa mas'uulka ugu sarreeya qeybta fulinta Hay'adda. |
| 9. | **Naafada** | waxaa loola jeedaa Xubnaha ka tirsan Ciidammada Xooga Dalka, darajo kasta ha lahaadeene, ee ku dhaawac- may goob dagaal ama iyagoo gudanaya waajib. qarameed, dhaawacaas oo u keenay naafo jireed ama maskaxeed oo buuxda ama dhiman (invali- din' totale o parziale). |
| 10. | **Shuhadada** | waxaa loola jeedaa halyeyada Ciidanka Difaaca Soomaaliyeed ee naftooda u huray difaaca dalka. |
| 11. | **Wasiirka** | waxaa loola jeedaa Wasiirka Gaashaandhigga Xukuumadda JFS. |
| 12. | **Wasaaradda** | waxaa loola jeedaa Wasaaradda Gaashaandhigga JFS. |
| 13. | **Hay'adda** | waxaa loola jeedaa Hay'adda Daryeelka Agoonta Shuhadada, Naafada iyo Qoysaska Xubnaha Ciidanka ee Qafaalka ku Maqan ama La Waayay ee Ciidanka Xoogga Dalka. |
| 14. | **Hawlgab** | waxaa loola jeedaa Xubnaha, darajo kasta ha lahaadee- ne. Sharcigu u aqoonsaday hawl-gabnimo, loona gartay in ayan qaban karin hawl ciidameed oo- bùuxda. |
| 15. | **Agoonta** | waxaa loola jeedaa carruurta ka yar da'da 18 sano ee waalidkood (xubin ka tirsan CXD oo naftiisa/nafteeda u huray/hurtay difaaca dalka. |
| 16. | **Qoys** | waxaa loola jeedaa xaasaska iyo carruurta naafada |

ciidanka, xaasaska iyo caruurta shuhaddada iyo xaasaska iyo caruurta xubnaha ciidanka ee qafaalka ku maqan ama la waayay.

## Qodobka 6aad: Ujeeddooyinka Xeerka

Iyadoo la tixraacayo qodobka 5aad ee shar. Lr. 38 ee 1984 ee ku xusan xeer nidaamiyehan, Hay'adda waxay xaqiijinaysaa ujeeddooyinka soo socda:

1. Daryeelka Agoonta iyo Qoysaska Xubnaha Ciidanka ee CXD kuwaa oo ku geeriyooday, ku naafoobay, lagu Qafaalay ama Lagu Waayay goob dagaal isagoo gudanaya waajibka qarameed ee CXD.
2. U ololeynta, tirakoobka, ka warqabka iyo hubinta helista daryeel buuxa oo nololeed (raashin, dhar, hoy, caafimaad, waxbarasho) intii suurtagal ah oo la gaarsiinayo xubnaha agoonta shuhadada, naafada, Hawlgabka iyo qoysaska xubnaha ciidanka ee qafaalka ku maqan ama la waayay ee CXD.
3. Xoojinta adeegyada caafimaadka maskaxda iyo la-talinta ee agoonta shuhadada iyo naafada CXD.
4. In agoonta shuhadada loo fidiyo adeeg waxbarasho, tababarro xirfadeed lana kobciyo hibooyinkooda gaarka ah.
5. Tababaridda iyo awood-siinta naafada ciidanka si ay xirfado shaqo u yeeshaan.
6. Hirgelinta sanduuqyo daryeel oo lagu taageero barnaamijyada agoonta shuhadada, naafada, Hawlgabka iyo qoysaska xubnaha ciidanka ee qafaalka ku maqan ama la waayay ee CXD.
7. Abuuridda ilo dhaqaale oo dakhli ka soo galo Hay'adda sida mashaariic wax-soo-saar iyo ganacsi.
8. Ururinta deeqo ka yimaada samafalayaasha Soomaaliyeed iyo saaxiibbada caalamiga ah.
9. Ururinta iyo ilaalinta diiwaanka Hawlgabka ciidamada XDS, qorshaynta Hawlaha kale ee qaranku uga faa'idaysan karo, ayadoo loo soo gudbinaya xafiiska wasiirka gaashaandhigga si lox biloodle ah.

# CUTUBKA LABAAD: HOWLGALINTA HAY'ÁDA

## Qodobka 7aad: Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Hay'adda

Waajibaadka iyo mas'uuliyadaha Hay'adda waxaa ka mid ah:

1. In ay u ururiso deeqo ka yimaada samafalayaasha Soomaaliyeed iyo saaxiibbada caalamiga ah.
2. In ay tirakoobto taageerana u fidiso Agoonta Shuhadada, Naafada, Hawlgabka iyo Qoysaska Xubnaha Ciidanka ee Qafaalka ku Maqan ama La Waayay ee CXD.
3. In ay ka taageerto naafada ciidanka sidii ay u baran lahaayeen una heli lahaayeen xirfado farsamo oo ay ku shaqaystaan.
4. In ay ka caawiso qoysaska agoonta shuhadada, naafada, xubnaha ciidanka ee

maareeyaan baahiyaha noloshooda.

5. In ay u fidiso ama ka kaalmayso agoonta shuhadada helitaanka deeqo waxbarasho.
6. In ay u fududayso agoonta shuhadada iyo naafada ciidanka helitaanka daryeel caafimaad.
7. In ay si joogta ahna ula socoto xaaladaha nololeed ee agoonta, naafada, Hawlgabka, xubnaha ciidanka ee qafaalka ku maqan ama la waayay ee CXD.
8. Baadigoobka, u ololaynta iyo bixinta xuquuqda Hawlgabka ciidamada XDS
9. Qabanqaabinta munaasabado sanadle ah oo lagu abaalmarinayo geesiyada ku naafoobay iyo ku gaaray da'da Hawlgabka difaaca dalka iyo guddoonsiintooda haddiyado u qalma.
10. Soo saarista talooyin iyo codsiyo ku wajahan dugsiyada waxbarashada iyo jaamacahada dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay in laga cafiyo qarashaadka waxbarashada geesiyada dhaawacyada culus ay ku soo gaareen hawlgallada difaaca dalka iyo caruuta shuhadada ee jecel in ay waxbartaan.
11. Kobcinta qiyamka daacadnimada iyo waddaniyadda iyadoo la maamuusayo hooyada ugu wanaagsan, aabbaha ugu wanaagsan ee qoysaska shuhadada, iyo caruurta waxbarashada ku fiican.
12. Hay'addu waxay sidoo kale qabanaysaa howlo kala duwan oo isugu jira; dhaqan, isboorti, madadaalo iyo tartanno noocayada kala duwan ee isboortiga ee munaasabka ku ah halyeeyada naafoobey ee ciidanka XDS iyo caruurta shuhadada.
13. Qabanqaabinta bandhigyo farshaxan oo kala duwan ee lagu soo bandhigayo alaabaha ay sameeyaan dadka naafada ah ee ciidamada ka tirsan.

## Qodobka 8aad: Dhismaha Golaha Maamulka Sare (Board of Directors) ee Hay'adda

Waxaa la dhisayaa Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda kaa oo mas'uulka ka ah kormeerka, korjoogteynta, jihaynta, la-socodka, dejinta siyaasadaha iyo xeerarka lagu maamulayo laguna maareynayo hay'adda iyo ka talo-bixinta hawlaha hay'adda.

## Qodobka 9aad: Xubnaha Golaha Maamulka Sare ee Hay'addda

1. Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda waxa uu ka koobanyahay shan (5) xubnood oo kala ah:
    a) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ahna Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka Sida – Guddoomiye Sharafeed.
    b) Wasiirka Gaashaandhigga XFS – Guddoomiye
    c) Wasiirka Maaliyadda XFS – Xubin
    d) Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare XFS – Xubin
    e) Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed – Xubin
2. Kulamada uusan joogin Madaxweynaha JFS, Wasiirka Gaashaandhigga ayaa noqonaya shir guddoonka Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda.

## Qodobka 10aad: Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Golaha Maamulka Sare ee Hay'addda

Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda waxaa ka mid ah:

1. Dejinta iyo ansixinta siyaasadaha, shuruucda, istiraatiijiyadaha iyo qorshayaasha Hay'adda.
2. Hubinta in qorshayaasha hay'addu ay waafaqsan yihiin waaajibaadka, shuruucda iyo siyaasadaha hey'adda leedahay.
3. Xoojinta iyo garabsiinta hawlaha hay'adda ee looga baahdo
4. Kormeer joogto ah iyo qiimeyn ku saabsan waxqabadka hay'adda iyo adeegyada ay bixiso.
5. Dib-u-eegista iyo ansixinta miisaaniyadda sannadlaha ah ee hay'adda.
6. Hubinta in dhaqaalaha hay'adda loo isticmaalo si waafaqsan qorshayaasha iyo ujeeddooyinka loo dejiyey.
7. Dejinta nidaamyo lagu xaqiijinayo isla-xisaabtanka iyo hufnaanta hawlaha hay'adda.
8. Abuuridda iyo korjoogtaynta sanduuqa daryeelka agoonta shuhadada, Hawlgabka iyo naafada CXDS.
9. Ansixinta iyo kormeerka maalgashiga hantida sanduuqa.
10. Dhiirigelinta abuuridda ilo dhaqaale oo dakhli ka soo galo Hay'adda sida mashaariic wax-soo-saar iyo ganacsi.
11. Ansixinta siyaasadaha iyo hab-raacyada hagaya maamulka iyo shaqooyinka hay'adda.
12. Tirakoobka hantida agoonta shuhadada CXD.
13. Hubinta in maamulka hay'adda uu ku shaqeeyo hab waafaqsan shuruucda iyo nidaamyada Qaranka.
14. Xallinta khilaafyada maamul ee hey'adda dhexdeeda ama hey'adda iyo dadka ay u adeegayso ah.

## Qodobka 11aad: Kulamada Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda

1. Golaha Maamulka Hay'addu waxa uu kulmayaa lixdii biloodba hal mar.
2. Haddii arrimo degdeg ah go'aan ka qaadasho u baahan ay soo baxaan kulamo degdeg ah golaha waa la isugu yeeri karaa.
3. Kulamada Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda waxaa soo qaban qaabinaya Wasiirka Gaashaandhigga.
4. Kulamada Golaha Maamulka waxaa lagu qaban karaa wasaaradda Gaashaandhigga, xarunta hey'adda ama madaxtooyada.
5. Guddoomiyaha Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda ayaa shir Guddoominaya Kulamada Golaha, haddii uu maqan yahay wasiirka waxbarashada ayaa shir guddoominaya.

# CUTUBKA SADDEXAAD: MAAMULKA FULINTA HAY'ADDA

## Qodobka 12aad: Qaab-dhismeedka Hay'adda

Qaab-dhismeedka maamulka fulinta ee Hay'adda waxaa lagu soo saarayaa Xeer Ra'iisul Wasaare.

## Qodobka 13aad: Kaalinta Wasiirka

Wasiirka ayaa Hay'adda ku leh korjoogteyn, iyo metelaadda siyaasadeed si waafaqsan xeerarka Dalka.

## Qodobka 14aad: Hawlaha Maamulka Fulinta Hay'adda

1. Diyaarinta iyo u gudbinta Golaha Maamulka Sare ee Hey'adda mashaariicda maalgashiga ay samaynayso;
2. Muulidooda iyo kormeerka si joogto ah mashaariic maalgelineed oo ay hay'addu samaynayso.
3. Samaynta tirakoob joogto ah iyo cusboynaysiinta liisaska shuhadada ayadoo xiriir joogta ah lala yeelanayo taliska ciidamada XDS.
4. Qaadashada go'aanka ku habboon ee ku saabsan noocyada taageerada la siinayo qoysaska shuhadada, iyo sidoo kale go'aaminta qadarka taageerada, habka bixinta, iyo ujeeddooyinka lagu wajahayo.
5. Go'aaminta xubnaha qoyska shahiidka ee mudan in ay gaaro taageerada.
6. Dejinta tilmaamaha maamulka iyo maaliyadeed ee lagama maarmaanka u ah hawlgalka sanduuqa ayadoo loo gudbinayo Wasaaradda Gaashaandhigga.
7. In uu si joogto ah ula socdo, horumariyana wada shaqeynta ka dhaxeysa Hay'adda iyo Wasaaradda Maaliyadda si loo xaqiijiyo bixinta gunnooyinka Hawlgabka ama xaqsiinta loo qoondeeyey.
8. In uu si gaar ah u hubiyo in diiwaanka xubnaha Hawlgabka ah uu sax yahay, dhameystiran yahay, lana cusbooneysiiyo sanadkiiba mar.
9. Ilaalinta anshaxa, akhlaaqda agoonta shuhadada, iyo ka ilaalintooda in wax ka baxsan sababta iyo danaha dawladdu ka leedahay daryeelkooda wax ka baxsan looga faa'idaysto ama lagu dhex faafiyo.
10. Dejinta tilmaamaha maamulka iyo maaliyadeed ee lagama maarmaanka u ah hawlgalka sanduuqa hey'adda.
11. Fulinta hawl kasta oo kale oo la xiriirta shaqada iyo ujeeddada hey'adda loo aasaasay.

## Qodobka 15aad: Magacaabista Maareeyaha Hay'adda

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa Maareeye Guud.
2. Waxaa Maareeyaha Guud soo jeedinaya Wasiirka, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirrada, waxaana xeer Madaxweyne ku soo saaraya Madaxweynaha.
3. Maareeyaha waxaa uu xafiiska Hay'adda haynayaa muddo afar (4) sano ah waxaana loo magcaaabi karaa xilkaas hal mar oo kale, marka uu dhammaado muddo

xileedkiisa.

4. Inta aysan dhammaan muddada xil-hayntu, Maareeyaha Hay'addu waxaa uu xilka ku waayi karaa:
    a) Xil-gudasho la'aan.
    b) Musuq-maasuq.
    c) Xanuun dhanka maskaxda/dhimirka ah.
    d) Iscasilaad qoraal oo uu u gudbiyo Wasiirka Gaashaandhigga uuna ka aqbalo.
    e) Dhimasho.
5. Waxaa Maareeyaha Guud xilka looga qaadi karaa qaabkii markii hore lagu magacaabay.

## Qodobka 16[aad:] Xilka iyo Mas'uuliyadaha Maareeyaha Hay'adda

1. Maareeyaha Hay'adda waa:
    a. Maamulaha guud ee Hay'adda.
    b. Mas'uulka ugu sarreeya maamulka fulinta Hay'adda.
    c. Xiriiriyaha iyo isku xiraha Hay'adda iyo Wasaaradda.
2. Hoggaaminta, maaraynta iyo fulinta hawlaha maamul, qorshe, iyo miisaaniyadeed ee Hay'adda.
3. Hirgelinta iyo dabagalka go'aannada Golaha Maamulka Hay'adda.
4. Hirgelinta siyaasadaha, istiraatiijiyadaha iyo qorshayaasha Hay'adda isaga oo fulinaya tilmaamaha Golaha Maamulka.
5. Diyaarinta miisaaniyadda iyo qorsheyaasha sannadlaha ah ee Hay'adda.
6. Hubinta in maaliyadda, hantida, agabka iyo qalabka Hay'adda loo adeegsado adeegga guud ee Hay'addu u xilsaarantahay oo keliya.
7. Shaqaaleysiinta hawl-wadeenada Hay'adda iyo maamulkooda si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dowladda.
8. Kormeerka, la xisaabtanka iyo la socodka waxqabadka hawl-wadeenada Hay'adda.
9. Horumarinta hufnaanta hawlaha maamul ee Hay'adda oo ay ku jiraan maamulka maaliyadda iyo wax iibsiga.
10. Kobcinta tayada maamulka iyo kor u qaadidda hufnaanta hawlaha Hay'adda.
11. Isku dubbaridka iyo diyaarinta warbixinta sanadlaha ah ee Hay'adda.
12. Maareeyaha Hay'adda waxaa kormeer, korjoogtayn iyo la xisaabtan ku leh Wasiirka Gaashaandhigga.
13. Maareeyaha Hay'adda waxa uu si joogto ah ugu warbixinayaa Wasiirka Gaashaandhigga.
14. Maareeyaha Hay'adda ayaa diyaarinaya warbixinta lixbilood laha ah ee Hay'adda.
15. Maareeyaha Hay'adda waxa uu ka qeyb galayaa shirka sanadlaha ah ee maamulka sare ee Hay'adda.
16. Fulinta hawlaha kale uu u idmado Golaha Maamulka Hay'adda.

## Qodobka 17aad: Maareeye Ku-xigeen Guud

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa Maareeya Ku-xigeen Guud.
2. Waxaa loo magacaabayaa, xilkana looga qaadayaa habka Maareeyaha Guud.
3. Maareeye Ku-xigeenka Guud waxaa uu qabanayaa xilka Maareeyaha Guud marka uu maqan yahay ama xilka banneeyo. Waxaa kale uu qabanayaa shaqooyinka uu Maareyaha Guud u xilsaarto.

# CUTUBKA AFARAAD: MAAMULKA MAALIYADDA

## Qodobka 18aad: Maaliyadda iyo Xisaabaadka

1. Miisaaniyadda Hay'addu waxay ka iman kartaa:
    a) Qoondada miisaaniyad-sanadeedka Dowladda;
    b) Qaaraan laga jaro mushaarka xubnaha CXD.
    c) Deeq ay bixiyaan ganacsatada Soomaaliyeed.
    d) Deeq ay bixiyaan samafalayaasha Soomaaliyeed.
    e) Waqafyo dhaqaale abuur leh.
    f) Sakada laga helo shirkadaha iyo bulshada Soomaaliyeed.
2. Dhammaan lacagaha soo gala Hay'adda waxaa lagu shubayaa khasnadda mideysan ee Dowladda, waxaana lagu maamulayaa si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17 ee 2019).
3. Hay'addu waxay si madax-bannaan u maamuli kartaa miisaaniyaddeeda oo ay ku fulin karto waajibaadkeeda si waafaqsan Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud.
4. Miisaaniyadda Hay'adda waxaa lagu saleynayaa qorshe-howleedka sannadle ah, waxaana qorshahaasi diyaarinaya Maareeyaha Hay'adda, waxaana ansixinaya Golaha Maamulka Hay'adda.
5. Sidoo kale, Haye'addani, mashaariicdieeda, hawlaheeda iyo adeegeeduba waxa ay ka faa'iidaysanayaan dhammaan ka-dhaafisyada iyo fududeymaha sharciyeed ee ay leeyihiin Ciidanka Qalabka Sida ee Soomaaliya.
6. Maareeyaha Hay'adda ayaa mas'uul ka ah diyaarinta xisaab xirka sanadlaha ah ee Hay'adda.

## Qodobka 19aad: Shaqaalaha iyo Howlwadeennada Hay'adda

1. Hay'addu waxay lahaanaysaa shaqaale si waafaqsan xeerara Dalka
2. Hannaanka shaqaaleysiinta ee Hay'addu waxaa uu noqonayaa mid daahfuran, ku saleysan istaahil-xulasho (merit based), iyadoo la raacayo xeerarka shaqaalaha ee Dalka.

# CUTUBKA SHANAAD: QODOBBO GUNAANAD AH

## Qodobka 20aad: Wax-ka-beddelka iyo Baabi'inta

Wax-ka-beddelidda ama baabi'inta Xeer nidaamiyehan waxaa loo marayaa habraacii loo maray markii la sameenayay.

## Qodobka 21aad Soo saarista xeer-hoosaadyo

Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa diyaarinaysa, soona saaraysa xeer- hoosaadyo faahfaahin iyo fasiraad looga bixinayo xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 22aad: Dhaqangal

Xeer-nidaamiyehani waxaa uu dhaqangalayaa marka Golaha Wasiirradu ansixiyo, Ra'iisul Wasaaraa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya-na saxiixo, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.200 Taariikh:05/04/2026

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA SHAQADA ARRIMAHA DIBADDA**

XRW - BIXIT
12 APR 2026
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

**Markuu arkay:** Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu arkay:** **Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda (Sharci Lr. 112/2013).**

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **MFA/FRS/OFM/2491/02/2026** ee ku taariikheysan **18/02/2026** ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.09.149.4.26** ee **02/04/2026,** kuna saabsan Ansixinta**"Xeer-nidaamiyaha Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda"**oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay Ilaalinta danaha Qaranka iyo nidaaminta xiriirrada caalamiga ah.

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.09.149.4.26** ee **02/04/2026,** kuna saabsan ansixinta "**Xeer-nidaamiyaha Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

**Qodobka 3aad**

**Dhaqangal**

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-023-2026
TAARIIKH: 27-4-2026
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.**

**SUMMAD: XGG/429/2025** **08/12/2025**

**Ku: Wasaaradda Arr. Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga** **Muqdisho**
**Ku: Agaasimaha Golaha wasiiradda** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Raiisul Wasaaraha JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Sharci**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo tixraacaya Warqadda Summaddeeduna tahay: WCAD/XAWSHH/2684/2025, kuna taariikhaysan 01/12/2025 kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka, iyo warqadda Ref: MFA/FRS/WSHH/18364/2025, kuna taariikhaysan 17/11/2025, kana soo baxday Wasaaradda Arr. Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga, ayaa waxa uu halkan kusoo gudbinayaa talo sharci ah kuna saabsan **Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda ee (Sharci Lr.112/2013)**

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 Janaayo 1976, waxa uu Wasaaradda Arr. Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga u soo gudbinayaa: **Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda ee (Sharci Lr.112/2013),** oo horay loogu soo gudbiyay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu xafiisku uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda kadib markuu darsay, Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda ee (Sharci Lr.112/2013), waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha wasiirada, maadaama uusan ka hor-imaanayn Dastuurka, Shuruucda Dalka iyo Danta Guud, uuna Xafiiska ka gutay waajibaadkiisa Shaqo ee kaga aadanaa, si waafaqsan Sharciga.

**FG**: halkaan waxaa ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha Sare ku xusan.

Salaan qadarin leh

**Dr. Saalax Siidii Sh. C/raxmaan**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA ★ OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL ★ مكتب المحامي العام لدولة

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
**Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada**

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشوون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والاتفاقيات

**Federal Republic of Somalia**
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
**Office of Director Legislations and Agreements Department**

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2684/2025** **Tr. 01/12/2025**

Mudane Garyaqaan,

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA SHAQADA ARRIMAHA DIBADDA EE (SHARCI LR.112/2013)"**

Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxa ay halkan ku soo gudbinaysaa "Xeer-nidaamiyaha Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda" oo lagu dhaqangelinayo Sharci Lr.112 ee 2013.

Xeer-nidaamiyahan oo ay diyaarisay Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga, waxa ay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurku ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyeyaasha.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa in uu ka guto waajibkiisa sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyeyaasha si habraaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA CADDAALADDA IYO DASTUURKA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
MINISTRY OF JUSTICE & CONSTITUTION

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Caddaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so
Tell: 0615847146

Dr. Saalax Siidii
02/12/2025

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 02/12/2025

MFA/FRS/WSHH/18364/2025

**Taariikh: 117/11/2025**

**Ku: Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka = Muqdisho**
**Og: Xoghayaha Joogtada ee WAD = Xarunta**
**Og: Wasiir-ku-xigeenkae e WAD = Xarunta**
**Og: Wasiiru-Dowlaha ee WAD = Xarunta**
**Og: Wasiirka ee WAD = Xarunta**

**UJEEDDO: Gudbin iyo Falanqayn Sharciyeed iyo Siyaasadeed — Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Shaqadda Arrimaha Dibadda (Sharci Lr.112/2013)**

Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, iyadoo u hoggaansamaysa waajibaadka ku xusan Qodobka 46aad ee Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda (Sharci Lr.112/2013), oo u oggolaanaya Wasaaradda in ay soo saarto Xeer-Nidaamiyayaal lagu fulinayo sharciga, waxay halkaan ku soo gudbinaysaa ***Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Shaqadda Arrimaha Dibadda*** ee dhammaystiran, ka kooban 10 Cutub iyo 51 Qodob, si loo helo aragtida sharci, talooyinkiina looga gudbiyo Golaha Wasiirrada.

Xeer-Nidaamiyahani wuxuu hagayaa dhammaan arrimaha la xiriira maamulka dibadda, dariiqa shaqaaleysiinta, darajooyinka, xuquuqda diblomaasiyiinta, mudnaanta iyo xasaanadaha, howlaha safaaradaha, gudashada waajibaadka dibadda, hannaanka xog-isweydaarsiga, iyo nidaamka ilaalinta Heshiisyada Caalamiga ah. Waxa uu ka kooban yahay tilmaamo cusub oo buuxiya farqiyo sharci iyo maamul oo soo ifbaxay, iyadoo loo marayo hab-waafajin dhammaystiran oo la jaanqaadaysa:

- **Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda (Sharci Lr.112/2013)**
- **Sharciga Shaqaalaha Rayidka (Sharci Lr.11)**
- **Axdiga Vienna ee Xiriirka Diblomaasiyadda (1961)**
- **Axdiga Vienna ee Xiriirka Qunsuliyadda (1963)**
- **Axdiyada iyo Heshiisyada Caalamiga ah ee Soomaaliya dhinac ka tahay**

## I. Dulmar Sharciyeed

Xeer-Nidaamiyahani wuxuu noqonayaa saldhig sharci oo mideeya dhammaan habraacyada diblomaasiyadda gudaha iyo dibadda, isagoo si gaar ah u nidaaminaya:

1. Hab-raaca ku biirista shaqaalaha (Qodobka 15aad & 16aad)
2. Darajooyinka gudaha iyo dibadda (Qodobka 29aad & 30aad)
3. Muddo-xileedka shaqada dibadda (Qodobka 17aad)
4. Waajibaadka danjirayaasha, siihayeyaasha, lataliyeyaasha iyo xoghayeyaasha (Qodobka 18–28)
5. Gunnada shaqada dibadda iyo xuquuqda diblomaasiyiinta (Qodobka 32–38)
6. Xasaanadda iyo mudnaanta hay'adaha caalamiga ah, safaaradaha iyo qunsuliyadaha (Qodobka 41–50)
7. Habraaca ilaalinta Heshiisyada Caalamiga ah (Qodobka 14aad)

Waxa uu noqonayaa xeer la jaanqaadaya xaaladda diblomaasiyadeed ee dalka maanta, isagoo wax ka qabanaya baahiyaha casriga ah ee Wasaaradda iyo ergooyinka.

## II. Falanqayn Sharciyeed (Cutub kasta – si dhammeystiran)

### CUTUBKA 1AAD – Qodobada Guud

Cutubkani wuxuu qeexayaa ujeeddada Xeer-Nidaamiyaha, xeerarka loo cuskaday, iyo mabda'a ah in heshiisyada caalamiga ah leeyihiin mudnaanta marka ay ka hor yimaadaan xeerka gudaha (null and void rule).

Tani waa waafaqsan Axdiga Vienna ee Heshiisyada (1969).

### CUTUBKA 2AAD – Mas'uuliyadaha Wasaaradda

Waxa uu nidaamiyaa:

- Siyaasadda Dibadda
- Wada-xaajoodyada iyo saxeexa Heshiisyada
- Maamulka ergooyinka
- Hab-maamuuska
- Iskaashiga hay'adaha dowladda
- Difaaca muwaadiniinta dibadda
- Oggolaanshaha hay'adaha ajnabiga ah

Address Afgoye Road-KM 5, Mogadishu, Somalia | Website http://www.mfa.gov.so

Email: Legal@mfa.gov.so

Qodobka 5aad wuxuu si gaar ah u xoojinayaa door muhiim ah oo ku saabsan ansixinta, dhaqangelinta, ilaalinta, iyo dabagalka Heshiisyada Caalamiga ah.

## CUTUBKA 3AAD – Ka-mid-noqoshada Diblomaasiyiinta

Waxa lagu xeerinayaa shuruudo adag oo ku saabsan shaqaaleysiinta, amni siyaasadeed, xirfadaha luqadaha, imtixaannada Machadka Diblomaasiyadda, iyo mamnuucidda guurka ajnabiga—waa qodob muhiim ah oo ilaalinaya amniga qaran (Qodobka 15).

## CUTUBKA 4AAD – Muddo-xileedka Dibadda

Waxa lagu qeexayaa:

- 8 sano ugu badnaan joogitaank dibadda (xirirrana)
- 2 sano joogitaan xarunta dib ugu soo laabashada
- 4 sano hal dal gudaheeda
- Kala duwanaanshaha danjirayaasha iyo lataliyeyaasha

Tani waxay waafaqsan tahay nidaamka rotation-ka caalamiga ah.

## CUTUBKA 5AAD – Waajibaadka Shaqaalaha Dibadda

Cutubkani waa mid ka mid ah kuwa ugu culus:

Waxa lagu xeerinayaa 29 waajibaad oo ku wajahan danjiraha, siihayaha, lataliyeyaasha iyo xoghayeyaasha oo ay ka mid yihiin:

- Wakiillnimada qaranka
- Warbixinaha joogtada ah (safaarad → Wasaaradda)
- Ilaalinta danaha muwaadiniinta
- Maamulka hantida qaran ee safaaradaha
- Kulanka xadidan, fasaxyada, habraacyada xog-isweydaarsiga

Waxay si gaar ah diiradda u saartaa warbixinaha sirta ah iyo waajibaadka la xiriira Heshiisyada Caalamiga ah (Qodobka 19aad).

## CUTUBKA 6AAD – Darajooyinka iyo Kala-sarrayuta

Waxa lagu abuuraa nidaam darajooyin oo siman gudaha iyo dibadda, lana jaanqaadaya shuruudaha Machadka Diblomaasiyadda iyo Sharciga 112/2013.
Waxa uu buuxinayaa farqiga u dhexeeya shaqaalaha siyaasadda iyo kuwa maamulka.

## CUTUBKA 7AAD – Gunnada Shaqada Dibadda

Waxa lagu nidaaminayaa:

- Bilowga iyo dhammaadka gunnada
- Xilliyada la sii wado (2–3 bilood)
- Kharashaadka safaaradaha (kirada, shaqaalaha maxalliga, caymiska, adeegyada)
- Xuquuqda diblomaasiga la soo celiyo iyo qoysaskiisa
- Business class loogu talagalay madaxda ergada

## CUTUBKA 8AAD – Xuquuqda & Xog-isweydaarsiga

Qodobkan, oo si gaar ah muhiim ugu ah maamulka safaaradaha, wuxuu nidaamiyaa:

- Warbixinaha toddobaadlaha, bille, saddexdii bilood, sanadle
- Xog qarsoon
- Mowqifyada siyaasadeed
- Habka ay Wasaaraddu farriimaha u dirayso ergooyinka

Waxa uu sidoo kale nidaamiyaa **gunnada lebiska**, **gunnada martigelinta**, iyo howl-gelinta diblomaasiyiinta la soo celiyo.

## CUTUBKA 9AAD – Asbaabaha Shaqo-ka-fariisin

Waxa lagu xusaa 12 qodob oo shaqo-ka-fariisin ah, oo ay ku jiraan:

- Faafinta xog sir ah
- Hawl siyaasadeed
- Musuqmaasuq
- Dambi maxkamadi caddeyso
- Kartixumo joogto ah
- Ku tagrifal awoodeed

Cutubkani wuxuu si gaar ah uga hor-tagaa falalka dhaawici kara magaca dalka dibadda.

## CUTUBKA 10AAD – Xasaanadda & Mudnaanta

Cutubkani wuxuu la jaanqaadayaa Axdiga Vienna (1961/1963) wuxuuna nidaaminayaa:

- Goobaha safaaradaha
- Mudnaanta isgaarsiinta
- Ka-dhaafista canshuuraha

- Xasaanadda shaqaalaha, khubarada, iyo ku-tiirsaneyaasha
- Xuduudaha dhaq-dhaqaaqa (30 km rule)
- Xorriyadda gelitaanka iyo deganaanshaha

Waxa uu sidoo kale nidaaminayaa waajibaadka **ergooyinka shisheeye** ee Soomaaliya jooga.

## III. Gunaanad iyo Soo-jeedin

Haddaba, waxaan ka codsaneynaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka:

1. Inuu ku sameeyo dib-u-eegis sharciyeed oo dhamaystiran, gaarahaan qodobada kor ku xusan;
2. Inuu ka guduto qoraalkaan waajibkiisa sharci kana dhiibto talo-sharciyeed rasmi ah oo loo gudbinayo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha si loogu dhameystiro habraaca.

**Wada Shaqen Wacan**

**Avv.C/rashiidMaxamedAadan**
**KusimahaAgaasimaha, WaaxdaSharciyadaiyoHeshiisyada**
**WasaaraddaArrimahaDibaddaiyoIskaashigaCaalamiga ah.**

# XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA SHAQADA ARRIMAHA DIBADDA EE (SHARCI LR.112/2013)

## ARAAR:

Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah oo ka mid ahayd Wasaaraddihii ugu horreeyey ee la aas-aasay markii xoriyadda la qaatay 1960, waa kaabadda isku xirta Soomaaliya iyo Caalamka, waa albaabka dowaladaha iyo hay'adaha Caalamku ka soo galaan Soomaaliya iyana u marta xiriirrada iyo iskaashiga Caalamiga ah ee ay la yeelanayso dalalka iyo hay'addaha kale ee Caalamka.

## TUSMO


........................................................................................................................ 1

ARAAR: ........................................................................................................................ 2

CUTUBKA KOWAAD: QODOBBADA GUUD ....................................................................10

*Qodobaka 1aad: Ujeeddada iyo Xeerka Loo Cuskaday* ........................................................ 10

CUTUBKA LABAAD: MAS'UULIYADAHA WASAARADDA ARRIMAHA DIBADDA ..........................11

*Qodobka 2aad: Siyaasadda Dibadda iyo Xiriirka Caalamiga ah* ........................................... 11

*Qodobka 3aad: Arrimaha Diblomaasiyadda, Maamulka Ergooyinka, iyo Difaaca Danaha iyo Muwaadiniinta Soomaaliyeed ee Dibadda* ........................................................ 12

*Qodobka 4aad: Iskaashiga iyo Isku-dubbaridka Hay'adaha Dawladda* ........................................ 12

*Qodobka 5aad: Heshiisyada Caalamiga ah iyo Wada-xaajoodyada* ........................................... 13

*Qodobka 6aad: Hab-maamuuska iyo Adeegyada Socdaalka* ........................................................ 13

*Qodobka 7aad: Maamulka iyo Tayaynta Shaqaalaha* ........................................................ 14

*Qodobka 8aad: Dokumentiyada iyo Oggolaanshaha Shaqada Ajaanibta* ........................................ 14

*Qodobka 9aad: Socdaalka iyo Maamulka Diiwaangelinta* ........................................................ 14

*Qodobka 10aad: Xudduudaha, Amniga, Xuquuqda Aadanaha iyo Arrimaha Caalamiga* ........................ 15

*Qodobka 11aad: Mudnaanta iyo Deeqaha Dibadda* ........................................................ 15

*Qodobka 12aad: Guddiyada iyo Ururrada Saaxiibtinnimada* ........................................................ 15

*Qodobka 13aad: Wufuudda iyo Booqashooyinka Rasmiga ah* ........................................................ 15

*Qodobka 14aad: Ilaalinta Heshiisyada* ........................................................ 16

CUTUBKA SADDEXAAD: KA-MID-NOQOSHADA IYO SHURUUDAHA DIBLOMAASIYIINTA............16

*Qodobka 15aad: Ka-mid-noqoshada Shaqaalaha, Diblomaasiyiinta Wasaaradda* ........ 16

*Qodobka 16aad: Shuruudaha diblomaasiga dibadda loo dirayo* ........ 17

CUTUBKA AFARAAD: MUDDADA IYO XILLIGA SHAQADA DIBADDA ........ **18**

*Qodobka 17aad: Muddo-Xileedka Shaqada Dibadda* ........ 18

CUTUBKA SHANAAD: WAAJIBAADKA SARAAKIISHA DIBLOOMAASIYIINTA ........ **19**

*Qodobka 18aad: Howlaha Saraakiisha Diblomaasiyiinta* ........ 19

*Qodobka 19aad: Waajibaadka Danjiraha* ........ 20

*Qodobka 20aad: Siihayaha Magacaaban Iyo Kan Waqtiga Cayiman* ........ 21

*Qodobka 21aad: Waajibaadka Lataliyaha Koowaad* ........ 22

*Qodob 22aad: Waajibaadka Lataliyaha Labaad* ........ 23

*Qodobka 23aad: Waajibaadka Xoghayaha Kowaad* ........ 24

*Qodobka 24aad: Waajibaadka Xoghayha Labaad* ........ 25

*Qodobka 25aad: Waajibaadka Xoghayha 3aad* ........ 26

*Qodob 26aad: Waajibaadka U-qaybsanaha Ganacsiga* ........ 26

*Qodob 27aad: Waajibaadka U-qaybsanaha Arrimaha Dhaqanka (Cultural Attache)* ........ 27

*Qodobka 28aad: Waajibaadka Qunsulka Guud* ........ 28

CUTUBKA LIXAAD: DARAJOOYINKA, KALA SARRAYNTA, IYO MAAMULKA GUDAHA ........ **29**

*Qodoba 29aad: Darajooyinka Gudaha iyo Muddada Xil Kale Lagu Gaaro* ........ 29

*Qodobka 30aad: Darajada Gudaha* ........ 34

*Qodobka 31aad: Kala Mudnaanta Wasaaradda* ........ 35

**CUTUBAKA TODOBOAAD: GUNNADA SHAQADA DIBADDA IYO ARIMAHA LA XIRIIRA .................37**

*Qodobka 32aad: Gunnada Shaqada Dibadda*........................................................................................ 37

*Qodobka 33aad: Shaqaalaha Maxalliga ah ee ka Hawl-gala Ergooyinka Dibadda* .......................................... 37

**CUTUBKA SIDDEEDAAD: XUQUUQDA, HANNAANKA XOG-ISWEYDARSIGA, IYO GUNNO XAQIIQO AH.........................................................................................................................39**

*Qodobka 34aad: Xuquuqaadka Diblomaasiyiinta Gudaha Iyo Dibadda*........................................................... 39

**Iyadoo laga duulayo sharciga shaqada arrimaha dibadda qodobka 46aad oo u ogolaanaya wasaaradda arrimaha dibadda inay xeer samaysato ayaa waxaa la xeeriyay xuquuqda diblomaasiyiinta gudaha iyo dibadda. ...........39**

**1. Diblomaasiyiinta Gudaha ..........................................................................................................39**

**Sida ku cad xeerka diblomaasiyadda gudaha darajadeedu waxa ay ka bilaabmaysaa U-qaybsane oo ah (attache) ilaa xoghaye joogto (PS) oo ah Danjire, waxayna noqonayaan sidan soo socota:..............................39**

**a. Sarkaal U-qaybsane.....................................................................................................................39**

**waxaa uu fasax waxbarasho dibadda u tegi karaa inta uu sharciga shaqaalaha u oggolyahay iyadoo la xaqiijinayo jaamacadda uu tegayo, lana marinayo habraaca ay shaqaalaha rayidka dawladdu u dejisay...........39**

**i. Wuxuu qaadan karaa marka shaqa dibadda ah loo diro baasaboorka diblomaasiga...............................39**

**ii. Inuu helo dallacaad waafaqsan xeerarka iyo sharciga arrimaha dibadda................................................39**

**b. Madax-unug xoghaye III...................................................................................................................39**

**i. waxaa uu fasax waxbarasho dibadda u tegi karaa inta uu sharciga shaqaaluha u oggolyahay iyadoo la xaqiijinayo jaamacadda uu tegayo lana marinayo habraaca ay shaqaalaha rayidka ee dawaladdu u dejisay......39**

**ii. Wuxuu qaadan karaa marka shaqo dibadda loo dirayo baasaboorka diblomaasiga ah. ...........................39**

**iii. In uu helo dallacaad waafaqsan xeerarka iyo sharciga arrimaha dibadda. ...............................................40**

**c. Madax-laan xoghaye II......................................................................................................................40**

**i. Wuxuu fasax waxbarasho dibadda u tegi karaa inta uu sharciga shaqaaluha u oggolyahay iyadoo la xaqiijinayo jaamacadda uu tegayo lana marinayo habraaca ay shaqaalaha rayidka ee dawalddu u dejisay. ......40**

**ii. Waxa uu qaadan karaa marka shaqo dibadda loo dirayo baasaboorka diblomaasiga ah. ........................40**

**iii. In uu helo dallacaad waafaqsan xeerarka iyo sharciga arrimaha dibadda. ..............................................40**

**d. Agaasime ku xigeen, madax qeyb, xoghaye 1aad iyo lataliyeyaal ...........................................................40**

**i. fasax waxbarasho dibadda waa u tegi karaan inta sharciga shaqaalaha u oggolyahay iyadoo la xaqiijinayo jaamacadda uu tegayo lana marinayo habraaca ay shaqaalaha rayidka ee dawalddu u dejisay..........................40**

**ii. Waa qaadan karaan marka shaqo dibadda loo dirayo baasaboorka diblomaasiga ah. .............................40**

**iii. In ay helaan dallacaad waafaqsan xeerarka iyo sharciga arrimaha dibadda. ...........................................40**

**e. Agaasime danjire ........................................................................................................................40**

**i. fasax waxbarasho dibadda waa u tegi karaan inta sharciga shaqaalaha u oggolyahay iyadoo la xaqiijinayo jaamacada uu tegayo lana marinaayo habraaca ay shaqaalaha rayidka ee dawalddu u dejisay. ........................40**

**ii. Waa qaadan karaan marka shaqo dibadda loo dirayo baasaboorka diblomaasiga ah. .............................41**

**iii. Wuxuu ku biirayaa golaha diblomaasiyiinta. ...........................................................................41**

**f. Xoghaye joogto /ambassador .....................................................................................................41**

**i. Wuxuu qaadan karaa marka shaqo dibadda ah loo dirayo baasaboorka diblomaasiga ah.......................41**

**ii. Haddii dibadda loo dirayo wuxuu qaadanayaa darajada danjiraha. ........................................................41**

**iii. Wuxuu ku biirayaa golaha diblomaasiyiinta. ...........................................................................41**

**2. Diblomaasiyiinta Dibadda ..........................................................................................................41**

**a. Diblomaasiyiinta dibaddu darajadoodu waxay ka billaabataa ku-qaybsane waxayna ku dhamaataa darajada danjire,Diblomaasiga dibadda loo diraa ee ka hawl-gelaya (Safaaradaha, qunsuliyadaha guud, ergada, waxaa lagu qiimaynayaa xeer ra'isulwasaare, xeer lr 152 (lifaaqa jaan-goynta tirada diblomaasiyiinta safaaradaha, qunsuliyadaha guud, ergooyinka, shaxdaas oo lagu sameeyay heerarka dalalka safaaradaha ama**

ergooyinku ka furanyahiin iyo tirada diblomaasiyiinta, sidoo kale waxaa lagu qeexay xarun walba inta diblomaasi ah ee ka hawl-gelaysa, jaan-goyntu waxay u qaybsantahay sidan; ..................41

i. Dalalka darjada A la siiyay waa 20 dal ..................41

ii. Dalalka darajada B la siiyay waa 16 dal ..................41

iii. Dalalka darajada C la siiyay waa 8 dal ..................41

b. Waxaa kale oo la xeeriyay safaaraduhu waa in ay helaan kharashaadka safaaradda lagu wado shaqadeeda oo ah sidan soo socoto; ..................41

i. Kiro guri (hadii ay guri kira ah degganyahiin) ..................42

ii. Kirada guryaha diblomaasiyiinta ..................42

iii. Mushaharka shaqaalaha hoose (local staff) ..................42

iv. Iyo dhammaan kharashaadka lagu wado safaaradda, qunsuliyadda guud, ergada. ..................42

v. Shaqaallaha hoose caymiskooda ..................42

c. Gunnada u dhaxaysa labo xil ..................42

i. Sida ku cad qodobka 18aad ee sharciga Shaqada arrimaha dibadda wuxuu caddeynayaa in gunnadii u sii socon doonto labo bilood haddii dal kale loo beddelo, sidoo kale haddii gudaha lagu soo xareeyo waa in ay usii socotaa gunnadu labo bilood, iyadoo ay go'aan ka gaari karaan hoggaanka wasaaradda markay qiimeeyaan. ..................42

ii. Haddii dal kale loo beddelo oo uu ka dallaco darajadii uu ku joogay dalka hore waxaa u billaabanaysa xilka cusub, gunnada darajadaas iyadoo lala qiimaynayo dalka uu tegay halka uu kaga jiro darajooyinka safaararadda ee ku xusan xeer ra'isulwasaare xeer lr 152 ee lifaaqa jaan-goynta tirada diblomaasiyiinta/ safaaradaha iyo ergooyinka ka hawl gala. ..................42

d. Diblomaasiga dalka lagu soo celiyo ..................42

i. Diblomaasiga soo dhamaystay muddadiisa shaqo ee xarunta dib loogu soo celiyo wuxuu yeelanyaa xuquuqda sharcigu u waajibayay. ..................42

ii. Dalka laga soo celiyay tigidh uu dalkiisa hooyo ku yimaado (ticket one way). ..................42

**iii. Hadii ay Reerkiisa la joogo tigidhada ay ku soo guuri lahaayeen reerka oo dhan. ....................................43**

**iv. Kharashkaadka sharciga arrimaha dibadda loogu qoondeeyay qodobkiisa 25aad ee gunnada xamuulka dheeriga ah, farqadiisa 1aad iyo 2aad iyo shaxda ka hooseysa ...................................................................43**

**v. Madaxda ergada ee loo soo beddelay Xarunta Wasaaradda ee kusii jeedda Dalkiisa hooyo si toos ah, wuxuu mudanyahay inuu ku safro tigidh darajada labaad (ticket business class) ...........................................43**

**vi. Afada madaxa ergada waxay kula safrieysaa tigidh darajada labaad, marka ay la socoto oo ay safarkiisa ku wehliso Seygeeda. xubnaha kale ee qoyska waxay ku safrayaan tigidh darajada caadiga ah (economic class ticket). Madaxda ergada waxaa loola jeedaa; Danjire, Siihaye (charge'd affairs), Qunsul Guud. ....................43**

**vii. Diblomaasiyiinta kale si la mid ah haddii xarunta dib loogu soo celiyo waxay yeelanayaan tigidh soo socod ah (one-way ticket economic class) haddii ay la socoto affadiisa (Reerkiisa iyo caruurtiisa dhamaantood waxay yeelanayaan tigidh caadi ah (one-way ticket economic class). ...............................................................43**

**viii. Waa in la siiyo muddada uu sharcigu siiyay, oo ah Waqti uu ku diyaar garoobo oo dalka uu degganaa kaga soo guuro, haddii uu waqti dheeraad ah u baahdo waa in waaxda ay khusayso iyo hoggaanka wasaaraddu isla eegaan.......................................................................................................................................43**

**ix. Dalka marka uu kusoo noqdo xuquuqda sharcigu siiyay waxaa ugu horreeya in uu leeyahay gunno xileed 2 labo bilood ah. .......................................................................................................................43**

**x. Waa in la siiyaa dib u dejin isaga iyo reerkiisa, haddii uu shaqsi keliya yahayna waa in uu helo dib u dejin mudda kooban oo ilaa 3 bilood ah oo laga bixiyaa kharashka kirada guriga. ................................................44**

*Qodobka 35aad: Hannaanka Xog-iswaydaarsiga Wasaaradda iyo Ergooyinka Dibadda.* ................................ 44

*Qodobka 36aad: Gunnada Huga Haybad-dhowrka (lebiska)* ............................................................................ 46

*Qodobka 37aad: Gunnada Martigelinta*.......................................................................................................... 46

*Qodobka 38aad: Howl-galinta Diblomaasiyiinta dib loogu soo celiyay xarunta Wasaaradda* .......................... 47

**CUTUBKA SAGAALAAD: SABABAHA SHAQADA LAGU WAYI KARO IYO HAWLGABNIMADA KARTI-XUMO ...................................................................................................................................................48**

*Qodobka 39aad: Asbaabaha Lagu wayn karo Shaqada* ..................................................................................... 48

*Qodobka 40aad: Hawl-gabnimo ku timaadda kart-xumo*........ 50

**CUTUBKA TOBANAAD: XASAANADDA IYO MUDNAANTA**........ **51**

*Qodobka 41aad: Xasaanadda iyo Mudnaanta Hay'adaha Caalamiga ah*........ 51

*Qodobka 42aad: Xasaanadaha iyo Mudnaanta Safaaraddaha iyo Xafiisyada Qunsuliyadaha*........ 55

*Qodobka 43aad: Ergooyinka Shisheeye ee Dalka Jooga Waxyaabaha laga rabo inay ilaaliyaan*........ 57

*Qodobka 44aad: Xasaanadda iyo Mudnaanta Shaqaalaha*........ 58

*Qodobka 45aad: Xasaanadda iyo Mudnaanta Khubarada*........ 60

*Qodobka 46aad: Ka Dhaafista Canshuuraha*........ 60

*Qodobka 47aad: Isgaarsiinta iyo Hantida*........ 61

*Qodobka 48aad: Xaaladda sharciyadeed iyo Awoodda*........ 62

*Qodobka 49aad: Gelitaanka, Deganaanshaha, iyo Bixitaanka*........ 63

*Qodobka 50aad: Maamulka iyo Maaliyadda Ee Hay'adaha Caalamiga ah*........ 63

*Qodobka 51aad: Sameynta Golaha Diblomaasiyiinta*........ 64

*Qodobka 52aad: Dhaqangal*........ 65

## CUTUBKA KOWAAD: QODOBBADA GUUD

### Qodobaka 1$^{aad}$: Ujeeddada iyo Xeerka Loo Cuskaday

1. Ujeeddo**:** Xeer-nidaamiyahani wuxuu hagayaa dhammaan arrimaha la xiriira Shaqada Arrimaha Dibadda gaar ahaan:
    a. Sal-u-dhigidda hawlaha rasmiga ah ee Wasaaradda, oo ay ku jiraan ilaalinta danaha qaranka, isku-dubaridka xiriirrada Caalamiga ah, iyo Matalaadda Soomaaliya ee dibadda.
    b. Qeexidda sidii loo horumarin lahaa danaha siyaasadeed ee Qaranka, oo loo abuuri lahaa, loona xoojin lahaa iskaashiga iyo xiriirrada kala duwan oo ay Soomaaliya la yeelanayso dalalka iyo hay'addaha Caalamka.
    c. Hab-raaca lagu oggolaanayo muwaadiniinta Soomaaliyeed in ay ku soo biiraan Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah (WADIC).
    d. Shuruudaha, xuquuqda, waajibaadka, darajooyinka, mudnaanta, iyo nidaamka hawl-gelinta diblomaasiyiinta iyo shaqaalaha kale ee Wasaaradda.
    e. Xeerarka ku saabsan ergooyinka shisheeye iyo hay'adaha Caalamiga ah ee ka hawlgala gudaha Soomaaliya.
2. **XEERKA LOO CUSKADAY:** Xeerkan wuxuu ku salaysan yahay:
    a. Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda (Sharci Lr. 112/2013) iyo Sharci Lr. 11 ee Shaqaalaha Rayidka
    b. Xeerar, xeer-nidaamiyeyaal, axdiyo, iyo heshiisyo Caalami ah oo ay Soomaaliya saxiixday ama qeyb ka tahay.
    c. Xeerarka Caalamiga ah sida Axdiga Vienna 1961 ee Xiriirka Diblomaasiyadda, Axdiga Vienna 1963 ee Xiriirka Qunsuliyadda, iyo qodobbada kale ee khuseeya.

3. **WAX-KA-BEDDEL:** Qodob kasta oo xeer-nidaamiyahan ku jira oo ka hor imaanaya axdiyada Caalamiga ah ama xeerarka, heshiisyada laba geesood ah oo Soomaaliya dhinac ka tahay, waxaa la raacayaa axdiga ama heshiiskaasi, qodobkii xeer-nidaamiyahanna "waa Waxba kama jiraan" (Null and Void) inta uu ka khilaafsan yahay qodobka Caalamiga ah.

## CUTUBKA LABAAD: M[AS'UULIYADAHA WASAARADDA ARRIMAHA DIBADDA

### Qodobka 2aad: Siyaasadda Dibadda iyo Xiriirka Caalamiga ah

a. Ilaalinta danaha siyaasadeed, dhaqan, dhaqaale, iyo Cilmiyeed, iyo abuurista xiriir wanaagsan oo iskaashi oo dhexmara Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dalalka Caalamka.

b. Dejinta mowqifyada siyaasadeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee arrimaha gobolka iyo Caalamiga ah, iyo muujinta siyaasadda guud ee Qaranka fagaarayaasha Caalamiga ah.

c. Dabagalka

d. heer Caalami iyadoo lagu salaynayo danaha Qaranka Soomaaliya.

e. Qabashada wada-hadallada iyo wada-xaajoodyada la xiriira dhammaystirka heshiisyada lala galo dalalka kale iyadoo la ilaalinaya danaha Qaranka.

f. Dhiirrigelinta wada-hadallada Caalamiga ah iyo xallinta khilaafaadka hab-nabadeed iyadoo loo adeegayo Nabadda, Amniga Caalamiga ah iyo horumarka dhaqaalaha.

## Qodobka 3$^{aad}$: Arrimaha Diblomaasiyadda, Maamulka Ergooyinka, iyo Difaaca Danaha iyo Muwaadiniinta Soomaaliyeed ee Dibadda

a. Abuurista iyo ilaalinta xiriirka diblomaasiyadeed ee dalalka Caalamka iyo ilaalinta danaha Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Qurba-joogta ah.

b. Soo saarista warqadaha aqoonsiga ee wufuudda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee ka qaybgalaysa shirarka Caalamiga ah iyo dokumeentiyada ansixinta heshiisyada Caalamiga ah.

c. Kormeerka Xafiisyada Diblomaasiyadda Soomaaliya iyo fududeynta hawlaha Ergooyinka iyadoo lala kaashanayo hay'adaha ay khuseyso.

d. Diyaarinta iyo Cusboonaysiinta liiska diblomaasiyiinta shisheeye iyo shaqaalahooda ee dalka laga aqoonsan yahay.

e. Kormeerka Ergooyinka Dibadda ku metela Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya Dalalka Caalamka iyo muhiimaddooda.

f. Ilaalinta danaha Qaranka Soomaaliyeed, lagana shaqeeyo sidii loo difaaci lahaa Muwaadiniinteeda ku sugan Dalka Dibaddiisa, iyadoo loo marayo dariiq diblomaasiyadeed iyo Shuruucda Caalamiga ah.

### Qodobka 4$^{aad}$: Iskaashiga iyo Isku-dubbaridka Hay'adaha Dawladda

a. Isku dubbaridka sahminta iyo horumarinta iskaashiga dhaqaale iyo farsamo ee dalalka saaxiibbada la ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

b. La-wadaagidda xogta muhiimka ah wasaaradaha iyo hay'addaha dowladda si loo sameeyo Go'aan midaysan oo ku saabsan arrimaha dibadda.

c. Noqoshada marinka Rasmiga ah ee u dhexeeya hay'adaha Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Hay'adaha Shisheeye ee Gudaha iyo Dibadda.

## Qodobka 5aad: Heshiisyada Caalamiga ah iyo Wada-xaajoodyada

a. Diyaarinta iyo ka-qayb-galka shirarka guddiyada labada dhinac iyo kuwa dhinacyo badan, iyo dhammeystirka heshiisyada iyo is-afgaradyada Caalamiga ah.

b. Diyaarinta wada-xaajoodyada heshiisyada lala galayo dalalka kale iyadoo la ilaalinayo danaha Qaranka.

c. Samaynta hab-raacyo lagu soo saarayo go'aannada Golaha Wasiirrada ee ku saabsan saxiixa iyo ansixinta heshiisyada Caalamiga ah, iyadoo la ilaalinayo dhaqan-gelintooda iyo fulintooda.

d. Qaban-qaabinta isgaarsiinta, wada-hadallada iyo wada-xaajoodyada lagu soo gabagabeynayo dhammaan heshiisyada Caalamiga ah iyo is-afgaradyada ay dawladdu qorsheyneyso inay ku biirto, fulinta hannaan kasta oo sharci ah oo looga baahdo ku biirista heshiisyadaas, iyo xaqiijinta ansixinta, dhaqan-gelinta iyo ilaalinta heshiisyada saxiixan iyadoo lala kaashanayo hay'adaha ay khuseyso.

## Qodobka 6aad: Hab-maamuuska iyo Adeegyada Socdaalka

a. Bixinta dalku-galka iyo adeegyada socdaalka ee madaxda iyo wufuudda shisheeye, shaqaalaha ergooyinka diblomaasiyadda iyo martida dalka timaadda.

b. Fulinta hawlaha iyo hab-raacyada hab-maamuuska iyo bixinta fiisaha gelitaanka iyo socdaalka madaxda dawladaha shisheeye, wufuudda Rasmiga ah, madaxda sare, martida Dawladda, xubnaha qoyskooda iyo, shaqaalaha ergada diblomaasiyadeed iyo xafiisyada Hay'adaha Caalamiga ah ee loo aqoonsan yahay dawladda, iyo kuwa ku tiirsan, iyadoo lala kaashanaysa hay'adda ay khuseyso.

c. Qabashada iyo gudbinta Cabashooyinka la xiriira Xafiisyada diblomaasiyadda iyo bixinta Xasaanadaha iyo mudnaanta diblomaasiyiinta shisheeye.

### Qodobka 7$^{aad}$: Maamulka iyo Tayaynta Shaqaalaha

a. Kormeerka iyo maamulka Machadka Diblomaasiyadda, diyaarinta barnaamijyada cilmiga ah iyo aqoonta shaqaalaha wasaaradda.

b. Kormeerka Naadiga diblomaasiyiinta ee wasaaradda iyadoo la raacayo xeerarka iyo shuruucda Dalka.

### Qodobka 8$^{aad}$: Dokumentiyada iyo Oggolaanshaha Shaqada Ajaanibta

a. Xaqiijinta iyo tasdiiqinta dhammaan shahaadooyinka iyo warqadaha Rasmiga ah ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda ama Safaaradaha Soomaaliya ee dibadda.

b. Oggolaanshaha iyo maamulka shaqada hay'adaha ajnabiga ah ee ka shaqeynaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

c. Kormeerka iyo nidaaminta hawl-galka dhammaan hay’adaha Caalamiga ah ee ajaanibta ah ee doonaya in ay ka shaqeeyaan Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, iyadoo la hubinayo in ay soo gudbiyeen faahfaahin ku saabsan shaqadooda iyo shaqaalahooda, islamarkaana ay heleen oggolaansho rasmi ah ka hor inta aysan hawlahooda billaabin.

### Qodobka 9$^{aad}$: Socdaalka iyo Maamulka Diiwaangelinta

a. Oggolaanshaha soo-saarista, cusboonaysiinta iyo baabi'inta baasaboorka diblomaasiga ah iyo shaqada, iyo haynta heshiisyada Caalamiga ah.

b. Gudashada waajibaadka xoghayaha diiwaan-gelinta hawlaha madaniga ah isagoo u socdaalaya dalka dibaddiisa si waafaqsan xeerarka iyo shuruucda Caalamiga ah.

### Qodobka 10aad: Xudduudaha, Amniga, Xuquuqda Aadanaha iyo Arrimaha Caalamiga

a. Isku dubbaridka arrimaha xuduudaha, socdaalka, amniga Qaranka, Xuquuqda-Aadanaha iyo Arrimaha cusub ee soo ifbaxaya, iyadoo lala kaashanayo Hay'adaha kale ee Dawladda.

b. Nidaaminta sharciyada la xiriira magan-galyada Siyaasadeed.

### Qodobka 11aad: Mudnaanta iyo Deeqaha Dibadda

a. Kala shaandhaynta mudnaanta iskaashiga Caalamiga ah iyo maamulka deeqaha dibadda iyadoo lala kaashanayo hay'adaha deeq-bixiyeyaasha ah.

### Qodobka 12aad: Guddiyada iyo Ururrada Saaxiibtinnimada

a. Nidaaminta shuruucda lagu dhisayo Guddiyada Saaxiibtinimada ama Ururrada Dalalka kale iyo bixinta shatiyada dhismahooda, iyadoo lagu saleynayo go'aan rasmi ah oo ka soo baxa hoggaanka Wasaaradda oo uu ugu horreeyo Wasiirka xilka haya.

### Qodobka 13aad: Wufuudda iyo Booqashooyinka Rasmiga ah

a. Qaban-qaabinta iyo maaraynta booqashooyinka Rasmiga ah ee Boqorrada, Madaxda Dawladaha, mas'uuliyiinta heerarka sare iyo wufuudda shisheeye oo dalka imaanaya, iyadoo la raacayo hab-maamuuska diblomaasiyadeed iyo shuruucda Caalamiga ah.
b. Diridda wufuud rasmi ah iyo shaqaale ka socda wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda si ay uga qaybgalaan shirarka Caalamiga ah.
c. Dejinta tirada iyo heerarka wufuudda Rasmiga ah iyo shaqaalaha ka socda Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda ee loo dirayo ka-qaybgalka shirarka heer-

gobol iyo heer- Caalami, iyadoo la waafajinayo danaha Qaranka, miisaaniyadda la heli karo, iyo baahida shirarkaasi iyo muhiimadda ay Dalka u leeyihiin.

### Qodobka 14aad: Ilaalinta Heshiisyada

a. Ilaalinta iyo haynta dhammaan heshiisyada Caalamiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay gashay.

## CUTUBKA SADDEXAAD: KA-MID-NOQOSHADA IYO SHURUUDAHA DIBLOMAASIYIINTA

### Qodobka 15aad: Ka-mid-noqoshada Shaqaalaha, Diblomaasiyiinta Wasaaradda

Muwaadinka Soomaaliyeed ee doonaya in uu ka mid noqdo shaqaalaha, /diblomaasiyiinta Wasaaradda Arrimaha Dibadda Iyo Iskaashiga Caalamiga ah waa in la waafajiyaa (qodobka 3aad ee Sharciga Shaqadda arrimaha dibadda) xarfaha uu ka koobanyahay oo dhan sida, (a b, c, d, e, f, g, h, i,) waxaa si gaar ah loo xeeriyay qodobbadan;

a. Waa in la waafajiyaa nidaamka shaqaalaysiinta sharciga arrimaha dibadda iyo kan shaqaalaha rayidka dawladda.
b. Waa in shaqaale ama diblomaasi kasta oo la shaqaalaysiinaya uu maraa hab-raaca amni ee ay dowladdu u dajisay sida NISA iyo in uu haysto warqadda danbi-la'aanta ee C.I.D, sidoo kale uu keenaa sedex qof oo dammiin ah.
c. Haddii diblomaasi laqaadanayo waa in imtixaan lagaga qaadaa machadka diblomaasiyadda ee wasaaradda, iyadoo laga hubinayo luqadaha sharcigu xaddidayo oo ah (carabiga, ingiriis iyo faransiis) mid ka mid ah waa inuu qori karo kuna hadli karo, sidoo kale haddii uu yahay xirfadle ama shaqaalaha hoose waa in ay imtixaan ka qaadaan hay'adaha ku shaqada leh si looga qaado imtixaan la xariira xirfaddiisa.

d. Waa in dhimirkiisu ka fayowyahay xanuunnada maskaxda ku dhaca kana bed-qaba, jir ahaan qaab-dhismeedkiisu Caafimaad qabo,
e. qofka diblomaasiga ah ma guursan karo qof ajnabi ah, sidoo kalana looma qaadan karo shaqaale haddii uu yahay lammaanaha isqaba mid kamid ah ajnibi.
f. Qofka shaqaale diblomaasi ahaan ay u qaadanayso wasaaraddu waa ineysan da'diisu ka yarayn inta ay sharuucda kale ee shaqaalaha dawladdu tilmaymayso.
g. Diblomaasiyiinta cusub ee ku soo biiraya wasaaradda iyo ergada dibadda loo dirayo, waa in ay ku hor dhaartaan Wasiirka Wasaaradda iyadoo lagu dhaarinayo in ay dalka, dadka, diinta ay daacad u yihiin, shuruucda iyo xeerarka Wasaaraddana u hogaansamayaan.

## Qodobka 16aad: Shuruudaha diblomaasiga dibadda loo dirayo

Sida ku cad sharciga Shaqadda arrimaha dibadda qodobkiisa 4aad, diblomaasiga dibadda loo diraayo waa inuu marka hore buuxiyaa shuruudaha ka mid noqoshada shaqaalaha Wasaaradda ee ku xusan qodobka 3aad ee xarfaha "A ilaa I" waxaana la xeeriyay qodobadaan soo socoda.

1. Qodobka 4aad, xarafka 2aad ee sharciga shaqada arrimaha dibadda, wuxuu tilmaamayaa qofka shaqaalaha noqonaya ee dibadda loo dirayaa waa inuu ugu yaraan 2(laba sano) xarunta ka shaqeeyaa shaqaalaysiintiisa kaddib, waxaana lagu qiimayn doonaa dallacaaddiisa, sanadaha la xisaabinayaa kuma jiri doonaan fasax dheer iyo fasax waxbarasho.
2. Danjirayaasha magacaabida Siyaasadeed ku yimaada (political appointees) waa inay sadex (3) bil xarunta Wasaaradda ka hawl-galaan, si ay u bartaan shaqada wasaaradda iyo waaxyaheeda, qaataanna tababarka machadka diblomaasiga ah. xilalka iyo waajibaadka laga rabo iyo inay helaan macluumaad siyaasadeed, dhaqan iyo dhaqaale ee dalka loo magacaabay.

3. Shakhsiga xilka faqrada labaad ku xusan ee loo magacaabayo (danjire magacaabid siyaasadeed) waa inuu xilal sare oo dawladeed hore usoo qabtay, sida wasiir ama taliyeyaal ciidan, iyo guddoomiye-yaal gobol, waana inuu buuxiyay qodobka 3aad ee sharciga shaqada arrimaha dibadda "A ilaa I".

## CUTUBKA AFARAAD: MUDDADA IYO XILLIGA SHAQADA DIBADDA

### Qodobka 17aad: Muddo-Xileedka Shaqada Dibadda

1. Diblomaasiga ka shaqeeya safaaradda, ergo, qunsuliyadda guud, sida uu qabo sharciga shaqada arrimaha dibadda qodobakiisa 39aad lagama beddeli karo goobta shaqada, isagoo aan ka shaqayn ugu yaraan laba sannadood, laga soo billabo maalinta uu shaqada la wareegay, haddii uusan qodobbadan soo socda ku dhicin:
    a. Haddii aan dan-guud darteed loogu baahan oo xarunta dib loogu soo celin.
    b. Qaladaad sharci oo ka hor imanaya shaqada uu qaranka u hayana uusan ku kicin.
    c. Goobtiisa shaqada oo laga waayo 2 bilood oo xiriir ah fasax la'aan, ama 3 bilood oo aan xiriir ahayn, balse waa in madaxa ergadu bil walba warbixin ay ka soo diraan iyo haddii uu xanuun jirin, sarkaalkana ogaysiin la siiyay.
2. Waxaa la xeeriyay in loo kala qaybiyo sidan soo socota.
    a. Danjire/ ama madaxa ergada oo noqon kara qunsul guud.

Wuxuu goobtiisa shaqo joogi kara (hal dal) afar sano, marka uu dhamaysto waxaa loo baddalayaa dal kale ama xarunta, kumana maqnaan karo dalka dibiddiisa muddo kabbadan 8 sano oo xariir ah sida uu qabo sharciga shaqada arrimaha dibadda qodobka 39aad, kaddibna uu ugu yaraan xarunta wuxuu ka shaqaynayaa muddo labo sano ah.

b. Lataliye-yaal iyo Xoghaye-yaal iyo U-qaybsanayaal

goobtiisa shaqo wuxuu joogi karaa (hal dal) 4(afar sano, marka uu dhammaystane waxaa loo baddali karaa dal kale ama xarunta, kumana maqnaan karo dalka dibaddiisa wax ka

badan 8 (sidded sanadood) oo xariir ah, xarunta wasaaradda wuxuu ka shaqaynayaa ugu yaraan labo sano oo xiriir ah, kaddib ayaa dal kale loo beddeli karaa.

## CUTUBKA SHANAAD: WAAJIBAADKA SARAAKIISHA DIBLOOMAASIYIINTA

### Qodobka 18aad: Howlaha Saraakiisha Diblomaasiyiinta

Madaxa ergada oo ahaan kara danjire, siihaye, qunsul guud, waa inuu fuliyaa hawlaha uu u-xilsaaranyahay si waafaqsan shuruucda dalka wuxuuna si gaar ah mas'uul uga yahay, safaaradda, ergada, qunsuliyadda guud, kormeerka iyo isku xirka dhammaan hawl-wadeennada, isagoo ku ilaalinya sarkaal walba waajibaadkii dawladdu u soo xil saartay in uu u gudanayo si habsami-leh.

1. Inay dalkooda ku metelaan Dalka ay ka hawl-galaan iyagoo raacaya xeerarka Caalamiga ah.
2. Inay ilaaliyaan danaha Dalkooda iyo Dadkoodu ku leeyahiin dalkaas dhinac kasta.
3. Inuusan ka maqnaan karin goobtiisa shaqo 2(laba bilood) oo xiriir ah, ama 3 (saddex bilood) oo aan xiriir ahayn fasax la'aan ama xanuun lagu ogyahay.
4. Inay warbixinno joogta ah oo la xiriira siyaasadda, dhaqaalaha, dhaqanka, amniga iyo cilmiga ka soo diraan dalka ay joogaan si waafaqsan shuruucda Caalamiga ah, si dijital ah iyagoo raacaya hab-raaca u degsan xarunta dhexe ee Wasaaradda dhinaca warbixinnada.
5. Inay horumariyaan xiriirka saaxiibtinimo ee dhinac walba leh oo ka dhaxeeya dalkooda iyo dalalka ay joogaan iyo kuwa ay wakiilka ka yahiin.
6. Inay u soo saaraan baasaboorrada iyo dokumeentiyada kale ee ay u baahanyahiin muwaadiniinta ku nool dalka safaaraddu ka-hawl-gasho iyo dalalka ay wakiilka ka yahiin (ma degganyaasha ka yahiin).

## Qodobka 19aad: Waajibaadka Danjiraha

1. Wuxuu wakiil uga yahay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya dalka uu joogo iyo kuwa uu wakiilka ka yahay (non-resident ambassador) adkaynta iyo horumarinta xiriirka diblomaasiyadeed si waafaqsan shuruucda Caalamiga ah.
2. Wuxuu madax u yahay dhammaan hawlwadeennada safaaradda ama ergada, ha ahaadeen kuwa wasaaradda arrimaha dibadda iyo u qaybsanayaasha hay'adaha kale isagoo raacaya xeerarka iyo shuruucda u degsan dalka Soomaaliya.
3. La-xaajoodka guud iyo daba-galka dhaqan-gelinta heshiisyada dhexmara J F S ee uu metelo iyo dawladda uu la joogo iyo kuwa uu wakiilka ka yahay isagoo u soo gudbinaya waaxda uu hoostago dabagalna ku sameeyaa (heshiisyada sharci iyo is-af-garad (legal agreements and m.o.u)

   Kobcinta xiriirka saaxiibtinimo ee jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dawladda uu la joogo iyo dalalka uu u xilsaaranyahay ee dhinacyada dhaqaalaha, dhaqanka iyo xiriirka-cilmiga ah si waafaqsan danaha Qaranka iyo axdiga vienna 1961 ee xiriirka diblomaasiyadda,
4. U-kuurgelidda sida lagu hor marin karo wax-wada qabsiga iyo wax-is-dhaafsiga labada dawladood ee arrimaha ganacsiga, isagoo wixii xog ah ee arrintaas ku saabsan usoo gudbinaya waaxda uu ka tirsanyahay iyo xarunta dhexe ee wasaaradda iyo guud ahaan dawladda J F S hay'addaha ay khusayso.
5. Wuxuu mas'uul ka yahay dhammaan hantida Qaranka ee guurta iyo ma-guurtada ah ee safaaradda ama ergadu ku leedahay dalka uu ku metelo J. F. S.
6. Danjiruhu wuxuu xarunta dhexe ee Wasaaradda gaar ahaan waaxda uu hoos yimaado u soo gudbinayaa warbixin gaar ah (qarsoon) haddii uu diblomaasigu ku kaco fal anshax-xumo ah oo waxyeellaynaya sumcadda safaaradda ama fal-dembiyeed dhaawacaya xiriirka labada dal, sidoo kale hoos u dhigaya maqaamka Qaranka.

7. Xilliyada uu fasaxa galayo waa inuu danjiruhu warqad soo diraa, marka loo oggalaadana waa inuu ogaysiis soo siiyaa waaxda uu hoos yimaado kuna xusaa siihayaha shaqada sii wadaya.
8. Kulammada shaqo ee uu galo Danjiraha waa inuu la-soo wadaagaa Xarunta.

### Qodobka 20aad: Siihayaha Magacaaban Iyo Kan Waqtiga Cayiman

1- Siihayaha magacaaban (Charge D' Affairs En Titre) waxaa magacaaba Wasiirka Wasaaradda Arrimaha dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, waxaana warqadaha aqoonsiga siihayennimada ka guddooma Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda Dalka loo magacaabay, siihayahan waxaa sida badan loo magacaabaa marka labada dal xiriirkoodu uusan wanaagsanayn, hooseeyo ama bilow yahay, wuxuuna sii qabanayaa shaqada uu danjire qaban lahaa. Ama marku isbaddal jiro.

2- Siihayaha waqtiga Cayiman (charge d' affairs a,t) Marka Danjiraha goobta shaqada uu ka maqanyahay waxaa xilka sii haynaya lataliyaha siyaasadda oo noqonaya siihaye waqtiga cayiman haddii uu lataliyaha maqanyahay waxaa xilka qabanaya sarkaalaka ku xiga xaga darajada. Shuruudaha laga doonayo qofka noqonaya siihayaha magacaaban waa sidan soo socota;

a. Waa in uu noqdaa qof buuxiya shuruudaha ku qoran sharciga shaqada arrimaha dibadda qodobkiisa 3aad farqadahiisa "A ilaa I".

b. Waa in uu noqdaa qof Wasaaradda ka shaqaynayay ugu yaraan toddoba sano oo leh khibrad ku filan.

c. Waa in uu noqdaa qof xilalkan loo magacaabay kuna soo shaqeeyay, xogahaye-joogto, agaasime-guud, agaasime iyo lataliye.

d. Waa in uu noqdaa qof ku hadli kara, qorina kara luqadaha sharicga shaqada arrimaha dibaddu mid ka mid ah.

e. Waa in uu noqdaa qof wadaniyadda soomaalinimadu ku dheertahay.

f. Waa in uu 45 maalmood oo tababar ah galaa machadka diblomaasiga si uu u barto dalka loo magacaabay arrimihiisa siyaasadeed, dhaqan-dhaqaale iyo bulsho.

A-Siihayaha waqtiga cayiman wuxuu yimaadaa marka danjire Xarunta lagu xareeyo ama fasax galo sidoo kale shaqo u baxo, qofkaasna wuxuu noqonayaa lataliyaha 1aad ku-xigeenka madaxa ergada, hadduu maqanyahana waxaa qabanaya qofka darajo ahaan ku soo xiga saraakiisha diblomaasiyiinta ee jooga xarunta ergada.

## Qodobka 21aad: Waajibaadka Lataliyaha Koowaad

1. Iyadoo laysla akhrinayo qodobbada sharciga Shaqada arrimaha dibadda ee 5aad iyo 8aad oo ka hadlaya hawlaha ay qabanayaan saraakiisha diblomaaasiyiintu, sidoo kale la xeerinayo xeer Ra'isulwasaare ee qaraarka dhamaystirka dhaqan-gelinta sharciga shaqada arrimaha dibadda.
2. Waajibaadka La-Taliye Koowaad waxaa lagu sheegay Qodobka 5aad ee Sharciga Arrimaha dibadda Farqadiisa Labaad ee 1aad ilaa 4aad iyadoo lagu faahfaahiyay in uu u xilsaaranyahay Kuxigeenka Danjiraha ama madaxa Ergada iyo sidoo kale in uu kala shaqeeyo Arrimaha Siyaasadda iyo Amniga. Sidaas darteed, iyadoo la tixraacayo qodobbada kor ku xusan, waxaa si rasmi ah loo qeexayaa waajibaadka lataliyaha koowaad sida soo socota:

a. Waa kuxigeenka danjiraha xagga mas'uuliyadda Safaaradda ama Ergada, waxaana marka uu danjiruhu maqanyahay uu qabanyaa dhammaan xilalkiisa iyo shaqooyinkiisa, isagoo noqonaya Siihaye (Charge d' affairs a.i).

b. Si Gaar ah ayuu ugu xil saaranyahay xuuraansiga iyo ka shaqaynta arrimaha Siyaasadda Dalka uu joogo Abuuridda iyo horumarinta xiriirka labada Dal.

c. Wuxuu Joogteynayaa warbixinnada Cilaaqaadka Siyaasadeed, Dhaqan-dhaqaale iyo iskaashi oo u-dhaxeeya Soomaaliya iyo dawladdaha ay Safaaraddu wakiilka ka tahay (Non-resident Embassies) oo aysan xafiis uga furnayn Soomaaliya.

d. Waa in uu kala taliyaa danjiraha arrimaha xeerarka diblomaasiyadda, dhaqanka, dhaqaalaha, heshiisyada iyo sharciyada Caalamiga ah.

### Qodob 22aad: Waajibaadka Lataliyaha Labaad

1. Wuxuu ka shaqaynayaa arrimaha qunsuliyadda ee Safaaradda halka aan Qunsuliyad guud ka furnayn, isaga oo qabanaya shaqada arrimaha Qunsuliyadda ee safaaradda uu ka tirsanyahay, sidoo kale Dalkii Qunsuliyad guud ay ka furantahay mayeelan doono lataliye 2aad maadaama Qunsuliyadda guud ay u xilsaarantahay shaqadaas, waxaana loo wareejin doonaa booska lataliyaha 2aad ee Qunsuliyadda guud xoghayaha 1aad.
2. Shaqooyinka uu qabanayo waa arrimahan soo socda:
   a. Si dhaw ayuu ula soconayaa ka-warqabka jaaliyadda Soomaaliyeed ee deggan Dalka uu joogo arrimahooda sharci, xaaladahooda iyo degganaanshahooda.
   b. Wuxuu shaqada si gaar ah ugu kormeerayaa unugga ka shaqaynaya arrimaha qunsuliyadda ee uu ugu horreeyo xoghayaha koowaad iyo dadka ka sii hooseeya.
   c. Ilaalinta danaha dalka J. F. S. iyo dadkeedu ku leeyihiin dalka ay joogaan ha ahaato mid shaqsiyadeed iyo mid hay'adeed, inta uu xaddidayo sharciga Caalamiga ah.
   d. Bixinta baasaboorrada, Dokumentiga Arrimaha Madaniga ah safarka iyo cusboonaysiinta ay u baahanyihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo bixinta dal-ku-galka (visa) ama dokumeentiga la siiyo dadka doonaya in ay u socdaalan Soomaaliya (gohome) sharciyaynta dokumeentiga Soomaaliga ah (tasdiiqin).
   e. Dhawrista danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed, mid shaqsi iyo mid hay'adeed marka ay timaado geeri iyo dhaxal gudaha dalka martida loo yahay si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dalkaas.

f. Taakulaynta da'yarta iyo naafada Somaaliyeed, gaar ahaan haddii shaqsiyaadkaasi ay dammaanad daryeel u baahanyihiin, iyadoo la dhawrayo xuduudda uu u-oggol-yahay shuruucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay iyo soo dhawaynta mas'uuliyiinta Qaranka.
g. Matalaadda ama suurto-gelinta cid matasha dadka Soomaaliyeed ee laga doonayo maxkamadaha ama hay'ad kale oo ka tirsan dalka martida loo yahay iyadoo la dhawrayo shuruucda iyo xeerarka dalkaas, si loo badbaadiyo danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ay u suurtageliwayday in ay iyagu waqtigaas difaacdaan xuquuqdooda ama qareen qabsadaan.
h. Xaq u lahaanshaha kormeeridda iyo baaritaanka maraakiibta iyo dayuuradaha ku diiwan gashan magaca Soomaaliya iyo shaqaalahooda sida uu qabo sharciga Soomaaliya ee khuseeya arrimahaas
i. Caawinaadda maraakiibta iyo dayuuradaha lagu xusay tirsiga 8$^{aad}$ ee qodobkaan iyo shaqaalahooda, hubsashada qoraalka safarkooda iyo warqadaha maraakiibta, shaabadeynta waraaqaha markabka iyo baaritaan hadii ay is qabtaan saraakiisha iyo badmaaxyada sida uu qabo sharciga Soomaaliya iyadoo la xurmaynayo shuruucda iyo xeerarka Dalka martida loo yahay.

## Qodobka 23$^{aad}$: Waajibaadka Xoghayaha Kowaad

Wuxuu kala shaqaynayaa lataliyaha labaad ama qunsulka guud arrimaha soo socda;

1. Bixinta, Cusboonaysiinta Baasaboorrada, Dokumentiga dhoofitaanka, dal-ku-galka (Visa) sharciyeynta(Tasdiiqinta) dokumeentiga iyo hawlaha madaniga ah ee Dadka Soomaaliyeed.
2. Diiwaangelinta iyo tira-koobka jaaliyadda soomaaliyeed ee ku nool dalka ay safaaraddu ka furantahay iyo daryeelkooda. Sidoo kale ku gacansiinta in ay sameystaan guddiyo sharciyaysan oo Safaaraddu ogtahay si waafaqsan Dalka martida loo yahay shuruucdiisa iyo xeerarka qurba-joogta soomaaliyeed.

3. Abaabulka barnaamijyada iyo soo bandhigista fanka, hiddaha iyo dhaqanka, isboortiga iyo Cilmiga teknoolajiyadda ee Soomaaliya  iyo is-dhaafsiga inta kor lagu soo sheegay ee labada dal.
4. La socodka horumarka iyo waxbarashada ardayda Soomaaliyeed iyo kala shaqaynta in ay sameystaan guddiyo iyo dallado ku haga danahooda waxbarasho ee ay dalkaa u joogaan, uuna korjoogteeyo doorashooyinkooda si waafaqsan xeerarka ay dhigteen iyo guud ahaan gacansiintooda.
5. Wuxuu danjiraha kala shaqaynayaa kor u qaaddida arrimaha ganacsiga iyo dhaqaalaha ee ka dhaxeeya labada dawaladood.

## Qodobka 24aad: Waajibaadka Xoghayha Labaad

Waxaa la xeeriyay sida uu qabo sharciga shaqada arrimaha dibadda qodobkiisa 5aad faqradiisa 4aad,

1. Inuu ka shaqeeyo tirakoobka, diiwaangelinta iyo xannaanada dhammaan hantida Guurtada iyo maguurtada ah ee dawladda u taal xafiiska safaaradda, ergada, guriga Danjiraha, Qunsulka guud iyo Guryaha Xubnaha kale ee diblomaasiyiintu deggan yihiin oo ay dawladdu bixiso kiradooda qalabkana ay leedahay.
2. Wuxuu maamulayaa Xisaabaadka lacagta ee Safaaradda ama ergada, iyo qunsuliyadda guud, bixinta kharashaadka iyo xisaab-celinta bil walba si waafaqsan hannaanka maaliyada ee wasaaradda maaliyadda ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. isagoo wixii lacag bixin ah la saxiixaya danjiraha ama ciddii markaas mas'uul ka ah safaaradda, ergada ama qunsuliyadda guud.
3. Kormeerka iyo la socodka hawsha shaqaalaha aan joogtada ahayn (local staff) ee ka shaqaynaya safaaradda, ergada, Qunsuliyadda guud, isagoo si gaar ah isha ugu haynaya diiwaan-galintooda, Caymiskooda, fasaxyadooda, warbixintooda iyo marka ay shaqadu ka dhamaato xuquuq-siintooda.

## Qodobka 25aad: Waajibaadka Xoghayha 3aad

Iyadoo la cuskanayo Xeer-Ra'isulwasaare **xeer Lr 152**, waxaa la xeeriyay waajibaadka Xoghayaha 3aad, Sidoo kale marka laysla akhriyo Qodobka 5aad iyo Qodobka 8aad Ee sharciga Shaqada arrimaha dibadda oo ka hadlaya xoghayeyaasha kuma uusan xirin (Kuma-Gaar-yeelin) Xoghaye 1aad iyo Xoghaye 2aad, sidoo kale xoghayaha 3aad waxaa loo magaacabi karaa kaliya Safaaradaha u diiwaan gashan A.

Waajibaadka xoghaye 3aad wuxuu noqonayaa sida soo socota:

1. Ilaalinta iyo isku dubbaridka muwaadiniinta dalbanaya baasaboorka Soomaaliga ah isagoo la shaqaynaya unugga qunsuliyadda oo uu ugu horreeyo qofka markaas ku magacaaban arrimaha Qunsuliyadda.
2. Ka caawinta xoghayaha 2aad arrimaha maaliyadda iyo hawlaha kale haddii loo baahdo.
3. Haddii uu fasax galo xoghayaha 2aad isaga ayaa shaqadii maamulka iyo maaliyadda sii wadaya ilaa uu ka soo noqonayo waana inuu la-ogaadaa qunsulka.
4. Inuu kala shaqeeyo arrimaha dhaqanka iyo waxbarashada xoghayha 1aad ka war-qabka iyo isku-dubarididda shirarkooda si waaafaqsan xeerarka Caalamiga ah.

## Qodob 26aad: Waajibaadka U-qaybsanaha Ganacsiga

Isla qodobka 5aad sharciga Shaqada arrimaha dibadda, faqradiisa 5aad ee waajibaadka U-qeybsanaha arrimaha ganacsiga (commercial attache) waxaa la xeeriyay sidan soo socota.

Waa in shahaadadiisa jaamacadeed noqotaa Ganacsiga Caalamiga ah, dhaqaalaha ama wax la mid ah, tababar ganacsi waa inuu ka qaataa Machadka diblomaasiga ee Wasaaaradda Arrimaha Dibadda mudo 45 maalmood ah.

1. Waa in lagu saleeyaa xaaladda ganacsi ee ka dhaxaysa labada dal Soomaaliya iyo Dalka loo dirayo
2. Wuxuu si gaar ah masuul uga yahay hawlaha ganacsiga ee Soomaaliya kala dhexeeya Dalka uu joogo, isagoo ku dhaqmaya shuruucda Caalamiga ah.
3. Mas'uulka ugu sarreeya ee Safaaradda ama ergada ayuu warbixin joogta ah siinayaa.
4. Wuxuu ka shaqaynayaa iib-genyta iyo suuq u raadinta wax-soo saarka Dalka isagoo ku dadaalaya in uu kor u qaado xiriirka Ganacsatada Soomaaliyeed ee wax dhoofisa iyo Ganacsatada Dalka u joogo.
5. Wuxuu u-xil-saaranyahay horumarinta iskaashiga dhaqaalaha iyo Ganacsiga si waafaqsan axdiga **Vienna ee xiriirka Qunsuliyadaha 1963**.
6. Wuxuu kala shaqaynayaa howlaha ganacsi Waaxyaha ka shaqeeya arrimaha dhaqaalaha ee wasaaraadda arrimaha dibadda.

## Qodob 27aad: Waajibaadka U-qaybsanaha Arrimaha Dhaqanka (Cultural Attache)

Iyadoo laga duulayo qodobka 5aad ee sharciga Shaqada arrimaha dibadda faqrada 6aad ee ka hadlaysa waajibaadka U-qaybsanaha arrimaha dhaqanka waxaa la xeeriyay sidan soo socota:

1. Mas'uulka ugu sarreeya Safaaradda ama ergada ayuu warbixin joogta ah siinayaa.
2. U-qaybasanaha dhaqanku wuxuu ka shaqayn doonaa meeshii aan looga marmayn arrimaha la-xariiro dhaqanka iyo waxbarashada.
3. Wuxuu si toos ah mas'uul uga yahay Ardayda Soomaaliyeed ee wax ka barata dalka uu joogo, isagoo xoogga saaraya arrimahooda waxbarashada.
4. Hagaajinta xidhiidhka dhaqan iyo waxbarasho ee Soomaaliya iyo Dalka uu joogo.

## Qodobka 28$^{aad}$: Waajibaadka Qunsulka Guud

Qunsulka guud waa madaxa ugu sarreeya Qunsuliyadda guud isagaa uga mas'uul ah dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Wuxuu maamulayaa shaqada Qunsuliyadda oo dhan:

1. Waxaa hoos imaanaya dhammaan saraakiisha ka shaqaysa arrimaha qunsuliyadda
2. Wuxuu mas'uul ka yahay dhammaan hantida Qaranka guurto iyo maguurtada ee qunsuliyadda guud.
3. Qunsulka guud wuxuu xarunta dhexe ee wasaaradda gaar ahaan waaxda uu hoos yimaado u soo gudbinayaa warbixin gaar ah (qarsoon) haddii diblomaasigu ku kaco fal anshax xumo ah oo wax-yeellaynaya sumcadda Qunsuliyadda ama fal dembiyeed dhaawacaya xiriirka labada Dal, sidoo kale hoos u dhigaya Maqaamka Qaranka. Sarkaalkana wuxuu ka siinayaa ogaysiin.
4. Ilaalinta danaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya iyo dadkeedu ku leeyahiin Dalka ay joogaan ha ahaato mid shaqsiyadeed iyo mid hay'adeed inta uu xaddidayo sharciga Caalamiga ah.
5. Bixinta baasaboorrada, documeentiga safarka iyo cusboonaysiinta ay u baahanyahiin muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo bixinta dal-ku-galka (visa) ama dokumeentiga la siiyo dadka doonaya in ay u socdaalan Soomaaliya (Go home) iyo dhamman dokumeentiga ubaahan tasdiiqin (caddayn).
6. Matalaadda ama suurto-galinta cid matasha dadka Soomaaliyeed ee laga doonayo Maxkamad ama hay'ad kale oo ka tirsan dalka martida loo yahay iyadoo la dhawrayo shuruucda iyo xeerarka dalkaas, si loo badbaadiyo danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ay u-suurtageliwaydo in ay iyagu waqtigaas difaacdaan xuquuqdoodaa.
7. Soo gudbinta dokumeentiga shuruucda iyo xeerarka gaarka ah (juridical and extra juridical) si laysu barbardhigo Qawaaniinta Maxkamadaha Soomaaliya iyo kuwa

Caalamiga ah, haddii aysan jirin heshiis Calami ah oo u dhigma shuruucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay,

8. Xaq-u-lahaanshaha kormeeridda iyo baaritaanka maraakiibta iyo dayuuradaha ka diiwan gashan Soomaaliya iyo shaqaalahooda sida uu qabo sharciga Soomaaliya ee khuseeya arrimahaas.
9. Caawinaadda maraakiibta iyo dayuuradaha lagu xusay tirsiga 8aad ee qodobkaan iyo shaqaalahooda, hubsashada qoraalka Safarkooda iyo warqadaha Maraakiibta, shaabadeynta waraaqaha Markabka iyo baaritaan haddii ay is-qabtaan saraakiisha iyo badmaaxyada sida uu qabo sharciga Soomaaliya iyadoo la xurmaynayo shuruucda iyo xeerarka Dalka Martida loo yahay.

   10-Fulinta hawl kasta oo ay u wakiilato dawladdu oo aan ka hor imanayn shuruucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay ama waafaqsan axdiga vienna ee xiriirka Qunsuliyadaha ee 1963 qodobkiisa 5aad.

## CUTUBKA LIXAAD: DARAJOOYINKA, KALA SARRAYNTA, IYO MAAMULKA GUDAHA

### Qodoba 29aad: Darajooyinka Gudaha iyo Muddada Xil Kale Lagu Gaaro

Iyadoo la cuskanayo sharciga shaqada arrimaha dibadda (sharci lr.112/2013 lagana ambaqaadayo qodobka 3aad ee ka mid noqoshada shaqaalaha Wasaaradda iyo qodobka 46aad ee awoodda nidaam dejinta waxaa la xeeriyay in shaqaalaha, diblomaasinta Wasaaradda (xarunta) loo kala qaybiyo labo qaybood, (Diblomaasiyiin iyo Maamul)

A. **Qaybta Siyaasadda** waa kuwa si toos ah uga qayb qaata siyaasadda, iyo xiriirka Caalamiga ah ee Wasaaradda, isla markaana loo habeeyey darajooyin diblomaasiyadeed iyo xilal Siyaasadeed.

B. **Qaybta Maamulka** waa kuwa ka howl-gala maamulka gudaha ee Wasaaradda, oo leh darajooyin iyo xilal taageera shaqada, hab-maamuuska, maaliyadeed, Qurbojoogta, qorsheyn, iyo amni.

1. **Diblomaasiyiin**

Darajooyinka diblomaasiyiintu waa sidan waxayna ka bilaabmayaan Sarkaal. isagoo ku soo gelaya Wasaaradda qodobka 15[aad] ee ka mid noqoashada Wasaaradda faqradihiisa oo dhan.

a. **Sarkaal**: diblomaasiga la qaadanayaa wuxuu ku soo gelayaa U-qaybsane **(attache**) 2 labo sano marka uu joogo imtixaan ayuu marayaa, kaas oo uu diyaarinayo machadka diblomaasiga iyadoo lagu kala qaadanayo hadba sida imtixaanka loogu kala horreeyo dadka ka gudba ayaa u dallacaya xoghaye 3[aad], fasax dheer iyo fasax waxbarasho loo xisaabin maayo marka uu dallacayo, haddii ay dhacaanna sanad kaddib ayay isu diyaarinayaan imtixaanka, waana inuu maro oo laga hubiyaa ( qodobka 3[aad] ee Sharciga Shaqada arrimaha dibadda) xarfahiisa“ A ilaa I ”
b. **Madax unug**: darajadiisu waa xoghaye 3[aad] marka uu 2 (labo sano) joogo ayuu marayaa imtixaan, kaas oo uu diyaarinayo machadka diblomaasiga haddii uu ka gudbana xoghaye 2[aad] ayuu u-dallacayaa, fasax dheer iyo fasax waxbarasho loo xisaabin maayo marka uu dallacayo, haddii uu dhacana sanad kaddib ayuu isu diyaarinayaa imtixaanka.
c. **Madax-laan**: darajadiisu waa xoghaye 2[aad] marka uu 2 (labo sano) joogo ayuu marayaa imtixaan kaas oo uu diyarinayo machadka diblomaasiga, haddii uu ka gudbana xoghaye 1[aad] ayuu u dallacayaa, fasax dheer iyo fasax waxbarasho loo xisaabin maayo marka uu dallacayo, haddii uu dhacana wux uu isu diyarinayaa sanad kaddib imtixaanka.

d. **Madax-qaybeed**: darajadiisu waa xoghaye 1[aad] marka uu joogo 8 (siddeed sano) ayuu marayaa imtixaan kaas oo uu diyaarinayo machadka diblomaasiga, haddii uu ka gudbana wuxuu u dallacayaa lataliye-labaad, fasax dheer iyo fasax waxbarasho loo xisaabin maayo marka uu dallacayo, haddii uu dhacana wuxuu isu diyaarinayaa sanad kaddib imtixaanka.

e. **Agaasime-ku-xigeen,** darajadiisu waa lataliye-labaad wux uuna ku soo gaadhayaa 10 (toban sano) imtixaan ayuu marayaa, kaas oo uu diyaarinayo machadka diblomaasiga haddii uu ka gudbo wuxuu u dallacayaa Lataliye 1[aad] ama Agaasime, fasax dheer iyo fasax waxbarasho loo xisaabin maayo marka uu dallacayo, haddii uu dhacana wuxuu isu diyaarinayaa sanad kadib imtixaanka.

f. **Agaasime:** darajadiisu waa Lataliye 1[aad] ama Danjire

Darajada agaasime waxay ku xirnaan doontaa waqtiga uu wasaaradda joogo, khibradda shaqo iyo aqoonta uu u leeyahay waxayna kala yahiin sida soo socoto:

i. Agaasimuhu waa inuu joogaa mudda ku siman 10 (Toban sano) ahaadana 4 sano oo ka mid ah agaasime, markaas ayuu noqon karaa danjire.
ii. Agaasimuhu hadduu magacaabis toos ah ku yimaado waa in uu joogaa muddo 6 sano oo agaasime ah markaas ayuu u dalacayaa danjire.
iii. Agaasimihii joogay muddo ka badan 14 (Afar iyo toban sano) wasaaradda 2 (labao sano) ka mid ah waqtigaas uu ahaado agaasime wuxuu u dallacayaa danjire.
iv. Wuxuu marayaa qodobka 3[aad] ee ka mid noqoshada wasaaradda ee sharciga shaqada arrimaha dibadda xarfahiisa oo dhan "A ilaa I "
v. Waa inay heerkiisa aqoonta garsiisantahay heer jaamacadeed oo la xiriira shaqada wasaaradda arrimaha dibadda sida (Culuumta siyaasada, xiriirka Caalimaga iyo diblomaasiyadda, dhaqaalaha, maamulka iwm.

vi. Agaasimihii aan buuxin shuruudaha sare ku xusan xarfaha (i ilaa vii) wuxuu u dallaci karaa Lataliye 1aad

vii. Magacaabista Agaasime go'aankeeda waaxaa leh Wasiirka Wasaaradda.

g. **Agaasimaha Guud**: darajadiisu waa Danjire,

Darajada Agaasime Guud waxay ku xirnaan doontaa waqtiga uu wasaaradda joogo, khibradda shaqo iyo aqoonta uu leeyahay waxayna kala yahiin sida soo socoto:

i. Agaasime Guud haddii uu ka soo shaqeeyo wasaaradda muddo ku siman 10 (Toban sano) 2 labo sano oo ka mid ah uu noqdo Agaasime Guud, waxay darajadiisu noqonysaa Danjire.

ii. Agaasime Guud haddii uu ka soo shaqeeyay hay'adaha dawladda darajo agaasime ka soo noqday hay'addaas ugu yaraan 4 (Afar sano) agaasime guud ka noqday wasaaradda wuxuu u dallacayaa Danjire.

iii. Agaasime Guud haddii uu ku yimaado magacaabis, isagoo aan soo marin hay'addaha dawladda kana shaqeeyay wasaaradda muddo 6 (Lix sano) ah, wuxuu u dallacayaa Danjire.

iv. Waa in uu maraa qodobka 3aad ee sharciga arrimaha dibadda ee ah ka mid noqoshada wasaaradda arrimaha dibadda ee xarfaha "A ilaa I "

v. Wuxuu ku yimaadaa soo jeedin Wasiir iyo dekreeto Ra'isulwasaare.

h. **Xoghayaha joogtada**: darajadiisu waa Danjire,

Darajada Xoghayaha joogtada ah waxay ku xirnaan doontaa waqtiga uu wasaaradda joogo, khibradda shaqo iyo aqoonta uu u leeyahay waxayna kala yahiin sida soo socota:

vi. Xoghayaha Joogtada ah haddii uu ka soo shaqeeyo wasaaradda muddo ku siman 10 sano 2 labo sano oo ka mid ah uu noqdo xoghayaha joogtada ah, waxay darajadiisu noqonysaa Danjire.

vii. Xoghayaha joogtada ah haddii uu ka soo shaqeeyay hay'adaha dawladda darajo agaasime ka soo noqday hay'addaas ugu yaraan 4 (Afar sano) Xoghaye joogto ah ka noqday wasaaradda wuxuu u dallacayaa Danjire.

viii. Xoghayaha haddii uu ku yimaado magacaabis, isagoo aan soo marin hay'addaha dawladda kana shaqeeyay Wasaaradda muddo 6 (lix sano) ah, wuxuu u dallacayaa Danjire.

ix. Waa in uu maraa qodobka 3aad ee sharciga arrimaha dibadda ee ka mid noqoshada Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee xarfaha " A ilaa I "

x. Wuxuu ku yimaadaa soo jeedin Wasiir iyo dekreeto Ra'isulwasaare.

2. **Waaxyaha Siyaasadeed ee La Xeeriyay**:

Agaasimeyaasha ka howl-gala Waaxaha Siyaasadda waxay noqonayaan danjireyaal hadday buuxiyaan shuruudaha kor ku xusan hawl-wadeennaduna waa diblomaasiyiin iyagoo qaadanaya darajooyinka ku xusan isla Qodobkaan 29aad.

1. Waaxda Afrika
2. Waaxda Carabta
3. Waaxda Asia iyo Austraaliya
4. Waaxda Yurub iyo Ameerika
5. Waaxda Iskaashiga Caalamiga
6. Waaxda Ururrada Aduunka

3. **Maamul**

Waxaa la xeeriyay in ay maamul noqdaan waaxyaha ka shaqeeya maamulka oo loo kala qaybiyo labo qaybood kuwa noqon kara diblomaasiyiin iyo kuwa ahaanaya maamul waaxyahaas oo ah sida soo socota:

1- Waaxda Hab-maamuuska
2- Waaxda Sharciyada
3- Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda
4- Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha
5- Waaxda Qorsheynta iyo Cilmibaarista
6- Waaxda Qunsuliyadaha
7- Waaxda Qurbajoogta Iyo Jaaliayadaha
8- Waaxda Xusuus-reebka

## Qodobka 30aad: Darajada Gudaha

Qodobka 8aad ee sharciga shaqada arrimaha dibadda oo ka hadlaya darajooyinka diblomaasiyiinta iyo qunsuliyadaha oo lala akhriyey qodobka 9aad oo ka hadlaya saraakiisha xarunta dhexe wasaardda ka hawl-gala iyo qodobka 46aad ee awoodda nidaam dejinta, kaasoo u oggolaanaya in wasaaraddu samaysan karto xeer-nidaamiye iyadoo la tashanaysa guddiga dibadda ee baarlamaanka J.F.S., waxaa la xeeriyay in saraakiisha ka shaqaysa xarunta Wasaaradda Arrimaha Dibadda loo sameeyo Darajooyinka kala mudnaanta si la mid ah Diblomaasiyiinta Dibadda. Darajooyinkooduna waxay noqon doonaan sidan soo socota:

| Tiro | XILKA QOFKU HAYO | DARAJADA |
| --- | --- | --- |
| 1- | Xoghaye joogtada | Danjire |
| 2- | Agaasime | Danjire ama Lataliye 1aad |
| 3- | Agaasime-kuxigeen | Lataliye 2aad |
| 5- | Madax qaybeed | Xoghaye 1aad |
| 6- | Madax laan | Xoghaye 2aad |
| 7- | Madax unug | Xoghaye 3aad |
| 8 | Sarkaal | U-qaybsane |
| 9 | Hawl-wadeen | Xirfadle |
| 10 | Shaqaale hoose | |

## Qodobka 31aad: Kala Mudnaanta Wasaaradda

Iyadoo laga ambaqaadayo qodobka 8aad iyo 9aad ee Sharciga Shaqada arrimaha dibadda sidoo kale la-is-waafajinayo diblomaasiyiinta gudaha iyo dibadda, lagana ambaqaadayo qodobka 46aad ee Sharciga shaqada arrimaha dibadda ee awoodda Nidaam dajinta Wasaaradda, waxaa la xeeriyay kala mudnaanta wasaaradda in ay sidan tahay;

| Tiro | Xilka |
| --- | --- |
| 1 | Xoghaye joogto/Agaasime guud |
| 2 | Agaasime |
| 3 | Danjire |
| 4 | Siihaye-magacaaban (charge d' affairs in term) |
| 5 | Qunsul guud |
| 6 | Lataliye 1aad |
| 7 | Lataliye 2aad |
| 8 | Agaasime Ku-xigeen |

| | |
|---|---|
| 9 | Madax qaybeed |
| 10 | Xoghaye 1aad |
| 11 | Xoghaye 2aad |
| 12 | Xoghaye 3aad |
| 13 | U-Qaybsane |
| 14 | Xirfadle |
| 15 | Shaqaale hoose |

## CUTUBAKA TODOBOAAD: GUNNADA SHAQADA DIBADDA IYO ARIMAHA LA XIRIIRA

### Qodobka 32aad: Gunnada Shaqada Dibadda

Saraakiisha ka hawl-gala safaaradaha ama qunsuliyadaha, waxaa la siiyaa gunnada shaqada dibadda sida uu qabo qodobka 17aad ee sharciga shaqada arrimaha dibadda oo uu leeyahay waxaa lagu qeexayaa xeer gaar ah kaddib markii la helo go'aanka golaha wasiirrada oo cuskanaya soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo iskaashiga caalamiga ah, waxaana loo raacayaa habraacan soo socda:

1. Gunnada lagu bixiyo shaqada dibadda waxay u bilaabanaysaa maalinta sarkaalka si rasmi ah loogu magacaabay xilka shaqada dibadda.
2. Marka uu sarkaalkan goobtiisa shaqada uga tago sababahan, beddel rug-kale, dib ugu-yeerid xarunta, hawl-gab, gunnada shaqada dibadda waxaa la siin kara; danjire, siihaye magacaaban, iyo qunsul guud, muddo ku siman sadex bilood.
3. Diblomaasiyiinta kale goobtooda shaqada hadii ay uga tagaan sababahan, beddel rug-kale, dib ugu-yeerid xarunta, hawl-gab, gunnada shaqada dibadda waxaa la siin kara labo bilood oo gunna ah.

### Qodobka 33aad: Shaqaalaha Maxalliga ah ee ka Hawl-gala Ergooyinka Dibadda

1. Shaaqalaha hoose (local staff) ee ka shaqeeya safaaradaha, Qunsuliyadaha guud, ergooyinka, waxay noqon karaan shaqaale u dhashay dalka martida loo yahay ama shaqaale Soomaaliyeed oo Wasaaradda Arrimaha Dibadda laga diray qodobka 41 aad ee sharciga shaqada arrimaha dibadda wuxuu xeerinayaa labadaba faqrooyinkiisa 1aad iyo 2aad, waxaa loo qaadanayaa shaqaalaha maxalliga ah (local staf) ayadoo la raacayo habraacan soo socda;

a. Heshiiska lala gelayo waxaa diyaarinaysa wasaaradda arrimaha dibadda waaxda shaqaalaha.
b. Safaaraddii shaqaale qaadanysa waxay soo sheegaysaa muhiimadda ay u qaadanayso iyo sababta loogu baahanyahay iyadoo kusoo diraysa waaxda shaqaalaha ogaysiinna ka siinaysa waaxda ay hoos tagto.
c. shaqooyinka diblomaasiyiinta waa ka mamnuuc in loo dhiibo shaqaalaha maxalliga ah (local staf).
d. waxaa reebban in madaxa ergadu uu shaqaalaysiiyo Carruurtiisa, ehelkiisa, qaraabadiisa iyo cid kasta oo loo arko inuu xilka uga faaiidaysanayo.

2. Shaqaalaha maxalliga ah (local staff) waxay ka koobanyahiin saddex qaybood oo kala ah sidan soo socota;
   a. **Darawallo**: way noqon karaan dalka martida loo yahay iyo muwaadiniin Soomaaliyeed.
   b. **Xoghaynnada:** waxaa la adkaynayaa in ay noqdaan muwaadiniin Soomaaliyeed oo gacanta ku haya shaqooyinka muhiimka sida;
      i. Emaillada.
      ii. Dokumentiyada muhiimka ah.
      iii. Kanaalka diblomaasiyadeed (diplomatic channel).
      iv. Kaydka xogta (archives).
   C- **Shaqaalaha hoose:** way noqon karaan dalka martida loo yahay ama muwaadiniin Soomaaliyeed

## CUTUBKA SIDDEEDAAD: XUQUUQDA, HANNAANKA XOG-ISWEYDARSIGA, IYO GUNNO XAQIIQO AH

### Qodobka 34aad: Xuquuqaadka Diblomaasiyiinta Gudaha Iyo Dibadda

**Iyadoo laga duulayo sharciga shaqada arrimaha dibadda qodobka 46aad oo u ogolaanaya wasaaradda arrimaha dibadda inay xeer samaysato ayaa waxaa la xeeriyay xuquuqda diblomaasiyiinta gudaha iyo dibadda.**

1. Diblomaasiyiinta Gudaha

**Sida ku cad xeerka diblomaasiyadda gudaha darajadeedu waxa ay ka bilaabmaysaa U-qaybsane oo ah (attache) ilaa xoghaye joogto (PS) oo ah Danjire, waxayna noqonayaan sidan soo socota:**

**a. Sarkaal U-qaybsane**

**waxaa uu fasax waxbarasho dibadda u tegi karaa inta uu sharciga shaqaalaha u oggolyahay iyadoo la xaqiijinayo jaamacadda uu tegayo, lana marinayo habraaca ay shaqaalaha rayidka dawladdu u dejisay.**

**i. Wuxuu qaadan karaa marka shaqa dibadda ah loo diro baasaboorka diblomaasiga.**

**ii. Inuu helo dallacaad waafaqsan xeerarka iyo sharciga arrimaha dibadda**

**b. Madax-unug xoghaye III**

**i. waxaa uu fasax waxbarasho dibadda u tegi karaa inta uu sharciga shaqaaluha u oggolyahay iyadoo la xaqiijinayo jaamacadda uu tegayo lana marinayo habraaca ay shaqaalaha rayidka ee dawaladdu u dejisay.**

**ii. Wuxuu qaadan karaa marka shaqo dibadda loo dirayo baasaboorka diblomaasiga ah.**

iii. In uu helo dallacaad waafaqsan xeerarka iyo sharciga arrimaha dibadda.

c. Madax-laan xoghaye II

  i. Wuxuu fasax waxbarasho dibadda u tegi karaa inta uu sharciga shaqaaluha u oggolyahay iyadoo la xaqiijinayo jaamacadda uu tegayo lana marinayo habraaca ay shaqaalaha rayidka ee dawalddu u dejisay.
  ii. Waxa uu qaadan karaa marka shaqo dibadda loo dirayo baasaboorka diblomaasiga ah.
  iii. In uu helo dallacaad waafaqsan xeerarka iyo sharciga arrimaha dibadda.

d. Agaasime ku xigeen, madax qeyb, xoghaye 1aad iyo lataliyeyaal

  i. fasax waxbarasho dibadda waa u tegi karaan inta sharciga shaqaalaha u oggolyahay iyadoo la xaqiijinayo jaamacadda uu tegayo lana marinayo habraaca ay shaqaalaha rayidka ee dawalddu u dejisay.
  ii. Waa qaadan karaan marka shaqo dibadda loo dirayo baasaboorka diblomaasiga ah.
  iii. In ay helaan dallacaad waafaqsan xeerarka iyo sharciga arrimaha dibadda.

e. Agaasime danjire

  i. fasax waxbarasho dibadda waa u tegi karaan inta sharciga shaqaalaha u oggolyahay iyadoo la xaqiijinayo jaamacada uu tegayo lana marinaayo habraaca ay shaqaalaha rayidka ee dawalddu u dejisay.

ii. **Waa qaadan karaan marka shaqo dibadda loo dirayo baasaboorka diblomaasiga ah.**

iii. **Wuxuu ku biirayaa golaha diblomaasiyiinta.**

f. **Xoghaye joogto /ambassador**

i. **Wuxuu qaadan karaa marka shaqo dibadda ah loo dirayo baasaboorka diblomaasiga ah.**

ii. **Haddii dibadda loo dirayo wuxuu qaadanayaa darajada danjiraha.**

iii. **Wuxuu ku biirayaa golaha diblomaasiyiinta.**

2. Diblomaasiyiinta Dibadda

a. **Diblomaasiyiinta dibaddu darajadoodu waxay ka billaabataa ku-qaybsane waxayna ku dhamaataa darajada danjire,Diblomaasiga dibadda loo diraa ee ka hawl-gelaya (Safaaradaha, qunsuliyadaha guud, ergada, waxaa lagu qiimaynayaa xeer ra'isulwasaare, xeer lr 152 (lifaaqa jaan-goynta tirada diblomaasiyiinta safaaradaha, qunsuliyadaha guud, ergooyinka, shaxdaas oo lagu sameeyay heerarka dalalka safaaradaha ama ergooyinku ka furanyahiin iyo tirada diblomaasiyiinta, sidoo kale waxaa lagu qeexay xarun walba inta diblomaasi ah ee ka hawl-gelaysa, jaan-goyntu waxay u qaybsantahay sidan;**

i. **Dalalka darjada A la siiyay waa 20 dal**

ii. **Dalalka darajada B la siiyay waa 16 dal**

iii. **Dalalka darajada C la siiyay waa 8 dal**

b. **Waxaa kale oo la xeeriyay safaaraduhu waa in ay helaan kharashaadka safaaradda lagu wado shaqadeeda oo ah sidan soo socoto;**

i. **Kiro guri (hadii ay guri kira ah degganyahiin)**
ii. **Kirada guryaha diblomaasiyiinta**
iii. **Mushaharka shaqaalaha hoose (local staff)**
iv. **Iyo dhammaan kharashaadka lagu wado safaaradda, qunsuliyadda guud, ergada.**
v. **Shaqaallaha hoose caymiskooda.**

**c.** Gunnada u dhaxaysa labo xil

i. **Sida ku cad qodobka 18aad ee sharciga Shaqada arrimaha dibadda wuxuu caddeynayaa in gunnadii u sii socon doonto labo bilood haddii dal kale loo beddelo, sidoo kale haddii gudaha lagu soo xareeyo waa in ay usii socotaa gunnadu labo bilood, iyadoo ay go'aan ka gaari karaan hoggaanka wasaaradda markay qiimeeyaan.**

ii. **Haddii dal kale loo beddelo oo uu ka dallaco darajadii uu ku joogay dalka hore waxaa u billaabanaysa xilka cusub, gunnada darajadaas iyadoo lala qiimaynayo dalka uu tegay halka uu kaga jiro darajooyinka safaararadda ee ku xusan xeer ra'isulwasaare xeer lr 152 ee lifaaqa jaan-goynta tirada diblomaasiyiinta/ safaaradaha iyo ergooyinka ka hawl gala.**

**d.** Diblomaasiga dalka lagu soo celiyo

i. **Diblomaasiga soo dhamaystay muddadiisa shaqo ee xarunta dib loogu soo celiyo wuxuu yeelanyaa xuquuqda sharcigu u waajibayay.**

ii. **Dalka laga soo celiyay tigidh uu dalkiisa hooyo ku yimaado (ticket one way).**

iii. Hadii ay Reerkiisa la joogo tigidhada ay ku soo guuri lahaayeen reerka oo dhan.

iv. Kharashkaadka sharciga arrimaha dibadda loogu qoondeeyay qodobkiisa 25$^{aad}$ ee gunnada xamuulka dheeriga ah, farqadiisa 1$^{aad}$ iyo 2$^{aad}$ iyo shaxda ka hooseysa

v. Madaxda ergada ee loo soo beddelay Xarunta Wasaaradda ee kusii jeedda Dalkiisa hooyo si toos ah, wuxuu mudanyahay inuu ku safro tigidh darajada labaad (ticket business class)

vi. Afada madaxa ergada waxay kula safrieysaa tigidh darajada labaad, marka ay la socoto oo ay safarkiisa ku wehliso Seygeeda. xubnaha kale ee qoyska waxay ku safrayaan tigidh darajada caadiga ah (economic class ticket). Madaxda ergada waxaa loola jeedaa; Danjire, Siihaye (charge'd affairs), Qunsul Guud.

vii. Diblomaasiyiinta kale si la mid ah haddii xarunta dib loogu soo celiyo waxay yeelanayaan tigidh soo socod ah (one-way ticket economic class) haddii ay la socoto affadiisa (Reerkiisa iyo caruurtiisa dhamaantood waxay yeelanayaan tigidh caadi ah (one-way ticket economic class).

viii. Waa in la siiyo muddada uu sharcigu siiyay, oo ah Waqti uu ku diyaar garoobo oo dalka uu degganaa kaga soo guuro, haddii uu waqti dheeraad ah u baahdo waa in waaxda ay khusayso iyo hoggaanka wasaaraddu isla eegaan.

ix. Dalka marka uu kusoo noqdo xuquuqda sharcigu siiyay waxaa ugu horreeya in uu leeyahay gunno xileed 2 labo bilood ah.

x. **Waa in la siiyaa dib u dejin isaga iyo reerkiisa, haddii uu shaqsi keliya yahayna waa in uu helo dib u dejin mudda kooban oo ilaa 3 bilood ah oo laga bixiyaa kharashka kirada guriga.**

3. Danjirayaasha iyo Lataliyayaasha koobaad {Danjire Ku-xigeennada} ee ku yimaada Magacaabis Siyaasadeed {Political appointees} haddii dalka lagu soo celiyo Xarunta dhexe ee Wasaaradda. Mushaharku wuxuu u sii soconayaa muddo Lix bilood ah, kaddib wasaaraddu way la noqonysaa oo waa laga goynayaa.

## Qodobka 35aad: Hannaanka Xog-iswaydaarsiga Wasaaradda iyo Ergooyinka Dibadda.

1. Warbixinnada ay Safaaraddu, Ergadu ama Qunsuliyaddu u soo dirayaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxay noqonayaan sidaan soo socoto:
   a. **Warbixin Toddobaadle ah-** Xogta siyaasadeed, dhaqaale, amni, & warbixinta warbaahinta ee dalka martida loo yahay.
   b. **Warbixin Bille ah** – Falanqayn ku saabsan dhacdooyinka waaweyn ee dalka martida loo yahay ka dhacay & saameynta ay ku leedahay Siyaasadda.
   c. **Warbixin Saddex-Biloodle ah** – Xog faahfaahsan oo ku saabsan isbeddellada siyaasadeed, dhaqaale, iyo amni ee dalka martida loo yahay ka dhaca.
   d. **Warbixin Sannadle ha ah** – Qiimeyn guud oo ku saabsan wax-qabadka Safaaradda iyo Caqabadaha ka jira hawlaha diblomaasiyadeed ee sannadka oo dhan & warbixinnadii hore oo la soo ururiyay.
   e. **Warbixinta Xaaladaha Deg-degga ah** – Warbixin deg-deg ah oo ku saabsan qalalaasaha siyaasadeed, amni, ama musiibooyinka dabiiciga ah ee saameynaya muwaadiniinta ama xiriirka diblomaasiyadeed.

f. **Warbixinta Xaaladaha Muwaadiniinta** – Warbixin ku saabsan xaaladaha muwaadiniinta ku sugan dalka martida loo yahay, sida xadhigga, musaafurinta, ama xaaladaha deg-degga ah ee ay la kulmaan.
g. **Warbixinta Kulammada Rasmiga ah** – Xogta kulammada Rasmiga ah ee lala yeesho madaxda, diblomaasiyiinta, iyo hay'adaha Caalamiga ah, iyo saameynta ay ku leedahay xiriirka labada dal.
h. **Warbixin gaar ah (Qarsoodi)** - Warbixintani waa xog sir ah kuna saabsan madaxa Safaarada/Ergada/Qunsuliyadda Guud/ iyo Agaasimaha uu hoostago, loona sii gudbin doono madaxda sare ee Wasaaradda.

2. Warbixinnada ay Wasaaradda Arimaha Dibeddu u dirto Safaaraddaha/ Ergooyinka/ Qunsuliyadaha waxay noqonayaan sidaan soo socoto:
   a. **Tilmaamaha Siyaasadeed iyo Diblomaasiyadeed** – Mowqifka Rasmiga ah ee dalka iyo tilmaamaha siyaasadeed ee saameynaya xiriirka diblomaasiyadeed (Safaaradaha/Ergooyinka/Qunsuliyadaha)
   b. **Dib-u-eegis Ku Saabsan Xiriirka Labada Dal** – Warbixin ku saabsan isbeddellada siyaasadeed ee xiriirka labada dal & qaababka lagu horumarin karo iskaashiga labada dhinac.
   c. **Digniino Amni iyo Xaalado Degdeg ah** – Xog ku saabsan khataraha amni ee Safaaradaha/Ergooyinka/Qunsuliyadaha iyo muwaadiniinta ka soo wajahi karto Dalka martida loo yahay.
   d. **Warbixin Ku Saabsan Miisaaniyadda iyo Kharashaadka** – Tilmaamaha maaliyadeed ee Safaaradaha/Ergooyinka/Qunsuliyadaha, iyo qiimeynta isticmaalka kharashaadka.
   e. **Warbixin Arrimaha Shaqaalaha** – Xog ku saabsan shaqaalaha ka-hawl-gala Safaaradaha/Ergooyinka/Qunsuliyadaha, & xoojinta awooda shaqo, iyo qiimeynta wax-qabadkooda.

f. **Warbixinta Shirarka Caalamiga ah** – Warbixin ku saabsan shirarka Caalamiga ah ee la qabtay & kuwa laqaban doono ama laga qeyb gali doono iyo mowqifka rasmiga ah ee dalka ee ku aaddan shirarkaas.

## Qodobka 36aad: Gunnada Huga Haybad-dhowrka (lebiska)

1. Qodobka 22aad ee sharciga shaqada arrimaha dibadda wuxuu ka hadlayaa gunnada huga haybad-dhawrka ee uu ku sheegayo in sharci kale ama xeer kale lagu qeexayo, wuxuuna sheegay cidda la siinayo. Gunnada huga haybad-dhawrka waxaa la siin karaa oo qura sarkaalka diblomaasiga ah ee laga beddelo xarunta ee ku sii jeeda ergo, Safaaradda, ama qunsuliyadda guud oo loo beddelay.
2. Gunnada huga haybad-dhawrka waxaa looga danleeyahay in la daryeelo, la ilaaliyo haybadda Qaranka, sarkaalka hawsha dibadda loo dirayo, lagana gacansiinayo kharashka uga baxaya dharka iyo qalabka kale ee uu u baahdo marka dibadda loo beddelo. Sidaas daraadeed waxaynu xeerinay in ay lagama maarmaan tahay in diblomaasiga la dirayo loo qoondeeyo gunnada (lebiska) iyadoo ay jiraan in safaaradaha loo sameeyay darajaad balse lebisku ma yeelanayo darajo.

## Qodobka 37aad: Gunnada Martigelinta

1. Diblomaasiga dibadda loo dirayaa wuxuu metalayaa Qaranka wuxuuna ka qaybgalayaa shirar xafalado (reception) sanad guurada dalalka (National Day) iyo kulammo gaar-gaar ah oo lagaga shaqaynayo danaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya iyo danaha Muwaadiniinta Soomaaliyeed waxaa lagama maarmaan ah in loo qoondeeyo diblomaasiga gunnada martigelinta.
    a. Safaaradaha, ergada iyo qunsuliyadaha waa in loo qoondeeyaa gunno martigelin sannadeed, taas oo ay Wasaaradda Arrimaha Dibadda xaddidayso qoondada loo qoondeeyo, waxayna kala xisaabtamaysaa madaxa ergada.

b. Kutala-galka gunnada martigelinta waa in lagu daraa miisaaniyadda -sannadlaha ah ee wasaaradda arrimaha dibadda, xisaab celinta waxaa loo marayaa hab-raaca ay dejisay wasaaradda maaliyadda.

2. Waxaa la xeeriyay sidan soo socota iyadoo lagu qiimaynaayo dalalka Caalamka iyo kala duwananshaha heerka nolosha waxaa la raacayaa xeer Ra'isulwasaare xeer lr 152 oo loogu sameeyay darajooyinka safaaradaha.
Waxaa la dhaqan-gelin doonaa marka ay duruufaha dhaqaale saamaxaan.

## Qodobka 38aad: Howl-galinta Diblomaasiyiinta dib loogu soo celiyay xarunta Wasaaradda

1. Diblomaasigu markii si rasmi ah dib loogu soo celiyo xarunta wuxuu ku howl-galayaa sida soo socota:
   **a) Danjire, Siihaya magacaaban iyo Qunsul guud**
      i. Xoghaye joogto
      ii. Agaasime guud
      iii. Agaasime waax
      iv. Lataliyayaasha sare ee siyaasadda arrimaha dibadda
      v. Golaha guud ee diblomaasiyiinta iyo
      vi. Xilkii kale oo loo arko inuu munaasab ku yahay.
      vii. Danjiruhu wuxuu yeelanayaa tilmaantiisa danjirannimo.
      viii. Waxay ka hawlgelayaan xarunta ugu yaraan labo sano, kaddib ayaa loo diri karaa dal kale.
   **b) Lataliye-yaal**
      i. Agaasimeyaal
      ii. Lataliye-yaal wasaaradda iyo wasiirka
      iii. Xilal kale oo loo arko inay munaasab ku yihiin

iv. Sidoo kale hoggaanka wasaaraddu waxay u dhiibi karaan fayl siyaadeed ama fayl arrimaha qunsuliyad.

v. Waxay ka hawl-gelayaan xarunta wasaaradda ugu yaraan labo sano, kaddib ayaa loo diri karaa dal kale

**c) Xoghaye-yaal**

i. Waxay ka shaqaynayaan dalka laga soo celiyay waaxda uu hoostago.

ii. Waxay ku shaqaynayaan darajada ay ku soo noqdeen, iyagoo dallacaad helaya waqtiga uu xeerku caddeeyay.

iii. waxay ka hawl-gelayaan xarunta wasaaradda ugu yaraan labo sano, kaddib ayaa loo diri karaa dal kale.

iv. Wixii kale ee xaquuq ah wuxuu kala mid yahay diblomaasiyiinta kale.

**d) U-qaybsanayaasha**

i. U-qaybsanaha wuxuu ka shaqaynayaa dalka laga soo celiyay waaxda uu ka tirsanyahay, iyo waaxaha kaleba.

ii. Wuxuuna ku shaqaynayaa darajadiisa uu ku soo noqday isagoo dallacaad helaya waqtiga xeerarku u oggolyahey.

iii. waxay ka hawl-gelayaan xarunta wasaaradda ugu yaraan labo sano, kaddib ayaa loo diri karaa dal kale.

iv. wuxuuna qabanayaa agaasimaha waaxdaas shaqada uu u xil saaro.

## CUTUBKA SAGAALAAD: SABABAHA SHAQADA LAGU WAYI KARO IYO HAWLGABNIMADA KARTI-XUMO

### Qodobka 39aad: Asbaababaha Lagu wayn karo Shaqada

1. Saraalka iyo diblomaasiga ka shaqeeya wasaaradda arrimaha dibadda wuxuu shaqada ku waayi karaa haddii uu ku kaco waxyaabahan soo socdo mid ka mid ah:

a. Hadduu faafiyo warbixin sir ah oo uu ku helay maqaamka xilkiisa Rasmiga ah una gudbiyay cid aanay khusayn.
b. Haddii uu qayb ka noqdo dhaqdhaqaaqyo siyaasadeed gudaha dalka iyo dibaddaba, oo ka qayb-galkaasi ka hor imaanayo xilkiisa diblomaasi ama shuruucda iyo xeerarka Dalka.
c. Haddii uu taageero, maal-gelin ku bixiyo hawlo sharciga iyo xeerarka Dalka ka soo horjeeda.
d. Guddoon-hadiyad qiimo sare leh ama maamuus "testimonial" haddii uusan hore ugu oggolaan madaxa ergada iyo wasaaradda, marka ay arrintu madax ergada khusayso.
e. Ka qayb-qaadashada shirkado iyo arrimo ganacsi, gaar ahaan diblomaasiyiinta dibadda.
f. In uu aqbalo xil ama hawlo ka hor imaanaya xilkiisa Rasmiga ah.
g. Shaqaalaha wasaaradda iyo diblomaasiyiinta waa in aysan u oggolaan qoysaskooda ama xigtadooda la nool in ay ku kacaan arrimaha kor ku xusan.
h. Haddii uu is casilo ama istaqaalad bixiyo iyo in uu arrimo Caafimaad shaqada u gudan kari waayo.
i. Haddii uu ku iman waayo muddada dib ugu soo noqoshada xarunta oo ku siman labo bil, si uu uga hawl-galo kuna darsado bil dheeri ah sabab la'aan.
j. Haddii ay ku caddeeyaan hay'addaha ku shaqada leh in uu xilka uu hayo u isticmaalay ku takri-fal awoodeed ama uga faaiidaysto dano gaar ah.
k. Haddii uu khilaaf ka dhex dhaco hawlwadeennada iyo diblomaasiyiinta oo lala wadaago dalka martida loo yahay.
l. Xubnaha diblomaasiyiinta, qunsuliyadaha iyo saraakiisha xarunta dhexe wasaaradda ee ka baxsada xafiiskooda ama bixiya warbixin sir ah, waxaa lala tiigsanayaa sharciga khuseeya ee J. F. S.

## Qodobka 40[aad]: Hawl-gabnimo ku timaadda kart-xumo

1. Iyadoo la xeerinayo sharciga shaqada arrimaha dibadda qodobka 36[aad] ee ka hadlaya hawl-gabnimo ku timaada diblomaasiyiinta iyo hawl-wadeennada wasaaradda oo loo arko in waxtarkiisu liito muddo labo sano oo xiriir ah waa in laga soo beddelo meesha uu ka shaqaynayo loona wareejiyo meesha uu ka shaqayn karo. Sidaas daraadeed waxaa loo kala saaray diblomaasiyiinta dibadda iyo diblomaasiyiinta xarunta ka hawlgasha.

   **a. Diblomaasiyiinta Gudaha**

   Sarkaalka ka shaqaynaya xarunta ee shaqo loo idmaday gudan kari waaya muddo labo sano oo xiriira ah, sababa la xiriira karti-xumo;

   i. Waxaa waajib ah in shaqada laga wareejiyo loona dhiibo shaqo uu qaban karo.
   ii. Haddii shaqada ay u baahantahay in tallaabo deg-deg la qaado waxaa la raacayaa soo jeedinta hoggaanka Wasaaradda waana in laga wareejiyaa.
   iii. Haddii ay timaaddo hawl-gabnimo aan u saamaxaynin in uu sii shaqeeyo oo xagga da'diisa oo waynaatay darteed, waa in loo xeeriyaa sarkaal hawl-gabay mushaharkiisana loo daayaa, waana in la marsiiyaa sharciga liil-tirka shaqaalaha Rayidka Dawladda.
   iv. Haddii uu galo dembi la xiriira waxyaabaha uu sharcigu u-ddiiday waxaa laga qaadayaa tallaabo sharci ah.

   **b. Diblomaasiga Dibadda**

Diblomaasiga ka shaqaynaya dibadda ee gudan waaya shaqadiisa sababa la xiriira karti-xumo mudda labo sano oo xiriira ah:

i. Haddii shaqada uu haya ay u baahantahay tallaabo deg-deg ah in la qaado waxaa la raacayaa talo bixinta madaxa ergada iyo go'aanka hoggaanka wasaaradda hadday isku raacaan waa la soo xareynayaa.
ii. Haddii ay timaaddo hawl-gabnimo aan u saamaxaynin inuu sii shaqeeyo oo xagga da'diisa ah oo waynaatay waa in loosoo xeeriyaa sarkaalka hawl-gabay mushaharkiisana looddaayaa, lana marsiiyaa sharciga liil-tirka shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.
iii. Diblomaasiga uu dal shisheeye soo eryo dalkii uu ka shaqaynayayna lagaga soo saaro ( Persona Non Grata) oo lagu helo arrima la xiriira akhlaaq-xumo iyo falal kale oo liddi ku ah sharafta iyo sumcadda diblomaasiga awgeed (xiriirna aan la lahyn danta qaranka, dalka uu ka hawl-gelayana dacwado maan-gal ah ka soo gudbiyeen (dacwaddaasi oo gaadhay heer maxkamadeed loo gudbiyo, kaddibna u caddaato wasaaradda arrimaha dibadda in uu galay dembiga lagu soo eedeeyay,  wasaaraddu waxay ka qaadaysaa tallaabo sharciga waafaqsan.

## CUTUBKA TOBANAAD: XASAANADDA IYO MUDNAANTA

### Qodobka 41aad: Xasaanadda iyo Mudnaanta Hay'adaha Caalamiga ah

1. **Mabaadii'da Guud**
   a. Dawladda Soomaaliya  waxay aqoonsantahay doorka muhiimka ah ee Hay'adaha Caalamiga ah ee horumarinta iskaashiga Caalamiga ah, si loo fududeeyo hab-sami u socodka iyo madax-bannaanida hawlahooda, hay'adaha Caalamiga ah ee ka hawl-gala Soomaaliya  waxay leeyahiin xasaanadda iyo mudnaanta lagu qeexay xeerkan.

b. Xasaanadda iyo mudnaanta uu bixiyo xeerku waxaa la siinayaa iyadoo si buuxda loo ixtiraamayo madax-bannaanida, shuruucda, iyo xeerarka Soomaaliya. sidoo kale hay'adaha Caalamiga ah waxaa laga filayaa inay ixtiraamaan oo raacaan shuruucda iyo xeerarka Soomaaliya  iyadoo aysan ku xadgudbaynin xasaanadda iyo mudnaanta la siiyay.
c. Xasaanadda iyo mudnaanta uu xeerkan bixiyay waxaa la siiyay iyadoo lagu saleynayo baahida hawl-galka, taas oo macnaheedu yahay inay lagama maarmaan u tahay fulinta madax-bannaanida iyo waxtarka hawlaha hay'adaha Caalamiga ah, baaxadda xasaanadda iyo mudnaantaas waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo la eegayo hawlaha gaarka ah iyo waajibaadka hay'adaha Caalamiga ah ee khuseeya.
d. Xasaanadda iyo mudnaanta uu bixiyay xeerkan waxaa la marsiin doonaa iyadoo aan wax takoor ah lagu sameynin jinsiyadda, diinta, jinsiga, ama heerarka kale ee dhammaan hay'adaha Caalamiga ah iyo xubnaha shaqaalaha waa in si siman loogu dhaqo xeerkan.

**2. Xasaanadda iyo Mudnaanta Gaarka ah**

1. Hay'adaha Caalamiga ah waxay leeyihiin shakhsiyad sharci iyo awood gudaha Soomaaliya. taasoo u suurtagelineysa inay;
    i. Qandaraas galaan.
    ii. Hantida guurta iyo maguurtada soo iibsan karaan, iskana iibin karaan.
    iii. Dacwad ka furan karaan maxkamadaha.
2. Hay'adaha Caalamiga ah waxay leeyihiin xasaanad ka hor istaagaysa in laga dacweeyo maxkamad marka ay ku guda jiraan howlahooda rasmiga ah, marka laga reebo arrimahan.
    i. Hay’addu si cad looga xayuubiyo xasaanadda.
    ii. Xasaanaddan ma saameyn doonto dacwadaha madaniga ah ee ka dhasha murannada qandaraaska iyo dacwadaha ku saabsan sheegashada mag-

dhowga ee ka dhalanaya shilalka gawaarida ay leeyihiin ama ay ku shaqeeyaan hay'adaha Caalamiga ah.

3. Goobaha hay'adaha Caalamiga ah waa kuwo aan la geli Karin, saraakiisha dowladda Soomaaliya ma geli karaan goobahan ilaa la helo qodobbadan:
    a. Oggolaanshaha madaxa hay'adda Caalamiga ah ee arrinkan uu khuseeyo.
    b. Goobaha, hantida, iyo agabka hay'adaha Caalamiga ah, meel kasta oo ay ku yaallaan iyo cid kasta oo ay gacanta ugu jiraan, waa kuwo xasaanad leh oo aan labaari karin, dalbashada, la wareegidda, haynta, iyo nooc kasta oo faragelin ah, haddii ay tahay mid fulineed, maamul, garsoor, ama sharci dejin.
4. Hay'adaha Caalamiga ah, hantidooda, dakhliga, iyo hantida kale waa in;
    a. Laga dhaafo dhammaan Canshuuraha tooska ah; si kastaba ha ahaatee, hay'adaha Caalamiga ah ma dalban karaan ka dhaafidda Cashuuraha marka laga reebo khidmadaha adeegyada dadweynaha.
    b. Waa in Laga dhaafaa cashuuraha kastamka iyo xayiraadaha iyo diidmada ku saabsan soo dejinta iyo dhoofinta alaabta ay soo dejiyaan ama dhoofiyaan hay'adaha Caalamiga ah ee loo isticmaalo hawlahooda Rasmiga ah alaabta lagu soo dejiyo xasaanaddan laguma iibin karo Soomaaliya ilaa xaalado qaar oo lagala heshiiyey Dowladda Soomaaliya.
5. Hay'adaha Caalamiga ah waxay heli doonaan mudnaanta ay ku leeyihiin Soomaaliya. marka la eego isgaarsiintooda rasmiga ah, daryeelka aan ka yarayn midka loo fidiyo hay'ad kale oo Caalami ah ama dowlad kale, oo ay ku jiraan safaaradaha dowladahaas kale, marka la eego mudnaanta, heerarka, iyo Canshuuraha ku saabsan warqadaha, xargaha, taleefoonnada, raadiyowga, sawirrada taleefanka, iyo isgaarsiinta kale, iyo sidoo kale heerarka saxaafadda ee macluumaadka loo gudbiyo saxaafadda iyo raadiyowga.

6. Wakiillada dawladaha xubnaha ka ah hay'adaha Caalamiga ah, inta ay gudanayaan hawlahooda iyo intii ay u safrayaan meelaha ay shirarka ka dhacayaan, waxay huwanyihiin xasaanadda iyo mudnaanta soo socota:
    a. Xasaanadda ka hortagidda xadhigga shakhsi ahaaneed ama xiritaanka iyo ka hortagga qabsashada boorsooyinkooda shakhsiyadeed.
    b. Xasaanadda ka hortagidda dacwadaha sharciga ee nooc kasta ah marka la eego ereyada ay ku hadleen ama qorayeen iyo dhammaan falalka ay ku qabteen xilka Rasmiga ah.
    c. Ilaalinta dhammaan warqadaha iyo dokumentiyada.
    d. Xuquuqda isticmaalka koodka iyo helitaanka warqadaha ama qoraallada xir-xiran ama ku jira shandadaha.
7. Xubnaha shaqaalaha hay'adaha Caalamiga ah waxaa la siin doonaa:
    a. Xasaanadda ka hortagidda dacwadaha sharciga marka la eego ereyada ay ku hadleen ama qoreen iyo dhammaan falalka ay ku qabteen xilka Rasmiga ah.
    b. Ka-dhaafid Cashuuraha ku saabsan mushaharka iyo lacagaha ay u bixiyaan hay'adaha Caalamiga ah.
    c. Xasaanadda ka hortagidda waajibaadka adeegga Qaranka.
    d. Ka-dhaafidda xayiraadaha socdaalka iyo shuruudaha diiwaangelinta ajaanibta.
    e. Mudnaanta la midka ah ee ku saabsan adeegyada lacaga- isdhaafsiga la siiyo Saraakiisha heerkooda la midka ah ee ka mid ah Safaaradaha Soomaaliya.
    f. Fursadaha la midka ah ee dib u celinta wakhtiga xiisadaha Caalamiga ah sida ergayga diblomaasiga ah.
    g. Xuquuqda keenista alaabta guriga iyo agabka iyagoo aan canshuur laga qaadin markii ugu horreysay ee ay xilka ka qabtaan Soomaaliya.

## Qodobka 42aad: Xasaanadaha iyo Mudnaanta Safaaraddaha iyo Xafiisyada Qunsuliyadaha

1. **Hawlaha Diblomaasiyadda**
    a. Goobaha hawlaha diblomaasiyadda waa inay ahaadaan kuwo aan la gali karin.
    b. Saraakiisha dawladda Soomaaliya ma geli karaan goobahaas, marka laga reebo ogolaanshaha madaxa hawlaha diblomaasiyadda.
    c. Goobaha, qalabka iyo hantida kale ee halkaas ku yaal, iyo gaadiidka hawlaha diblomaasiyadda waa in aan la baari karin, sidoo kale soo celin, xiritaan, ama fulin amar maxkamadeed.
    d. dawladda Soomaaliya waa inay qaaddaa dhammaan tallaabooyinka ku habboon si ay u ilaaliso goobaha hawlaha diblomaasiyadda ee ka hortagista, faragelin ama dhaawac iyo si ay uga hortagto wax kasta oo carqalad gelin kara nabadda iyo sharafta.
    e. Goobaha hawlaha diblomaasiyadda waa in laga dhaafaa dhammaan canshuuraha qaran, gobol, ama degmo, marka laga reebo kuwa u taagan bixinta adeegyo gaar ah oo la qabtay. Hawlaha diblomaasiyadda waa inay leeyihiin xorriyadda isku xirka dhammaan ujeeddooyinka rasmiga ah.
    f. qoraallada rasmiga ah ee hawlaha waa inay yihiin kuwo aan la gali karin, hawlaha diblomaasiyadda waxay isticmaali karaan koodh iyo rarayaal diblomaasiyadeed, kuwaas oo leh xasaanadda iyo mudnaanta la midka ah hawlaha diblomaasiyadda.
2. **Xafiisyada Qunsuliyadda**
    a. goobaha xafiisyada qunsuliyadda waa inay ahaadaan kuwo aan la gali karin sida uu qabo sharciga Caalamiga ah. Goobaha Qunsuliyadda looma isticmaali karo si

ka baxsan hawlaha qunsuliyadeed, sidoo kale goobaha qunsuliyadda, kaydka dukumentiyada waa in ay ka madax-banaanyahiin nooc kasta oo baaritaan ah.

b. Dowladda Soomaaliya waa inay qaaddaa dhammaan tallaabooyinka ku habboon si ay u ilaaliso goobaha qunsuliyadda ee ka hortagista faragelin ama dhaawac si ay uga-hortagto wax kasta oo carqalad gelinaya nabadda Xafiiska qunsuliyadda.

c. Goobaha qunsuliyadda waa in laga dhafaa dhammaan Canshuuraha, waajibaadka, iyo khidmadaha, marka laga reebo kuwa u taagan bixinta adeegyo gaar ah oo la qabtay.

3. **Xasaanadda iyo mudnaanta wakiillada diblomaasiyadeed**
   a. Wakiillada diblomaasiyadda lama xiri karo ama lama xannibi karo nooc kasta. Dawladda Soomaaliya waa inay si ixtiraam leh ula dhaqantaa wakiillada diblomaasiyadda oo ay qaaddaa dhammaan tallaabooyinka ku habboon si ay uga hortagto weerar kasta oo ku saabsan naftooda, xorriyaddooda, ama sharafkooda.
   b. Wakiillada diblomaasiyadda waxay huwanyihiin Xasaanadda ka hortagidda Xeerarka Ciqaabta ee Soomaaliya. Sidoo kale waa in lagu xurmeeyaa xasaanadda ka hortagidda Xeerarka Madaniga iyo Maamulka, marka laga reebo xaaladaha ay sharciga Caalamiga ah uu sheegayo, sidoo kale wakiillada diblomaasiyadda looma baahna inay Caddeyn bixiyaan marag ahaan.
   c. Wakiillada diblomaasiyadda waa in laga dhafaa dhammaan Canshuuraha iyo waajibaadka, kuwa shakhsiyeed ama kuwa dhabta ah, Qaran, gobol, ama degmo, marka laga reebo kuwa u taagan bixinta adeegyo gaar ah oo la qabtay.
   d. Wakiillada diblomaasiyadda waa in ay u madax-bannaannadaan xorriyadda dhaq-dhaqaaqa iyo safarka gudaha Soomaaliya. sidoo kale waa inay raacaan shuruucda iyo xeerarka ku saabsan meelaha laga mamnuucay ama laga xaddiday sababo amniga Qaran dartood sidoo kalena waa in ay ka haystaan oggolaansho wax ka baxsan 30 km wasaaradda arrimaha dibadda.

4. **Xasaanadda iyo Mudnaanta Saraakiisha iyo Shaqaalaha Qunsuliyadda**
   a. Ilaalinta shakhsiyaadka sida kuwan hoose:
      i. Saraakiisha qunsuliyadda lama xiri karo ama lama xannibi karo, marka laga reebo dembi culus oo ay ka go'aansato hay'adda garsoorka ee awoodda u leh.
      ii. Shaqaalaha Qunsuliyadda lama xiri karo lamana xannibi karo marka laga reebo haddii ay sameeyaan fal ka baxsan hawlaha rasmiga ah.
   b. Xasaanadda ka hortagidda xukunka
      i. Saraakiisha iyo shaqaalaha Qunsuliyadda waa in loo tixgeliyaa xasaanadda ay huwanyahiin ee ka hortagidda xukunka maxkamadaha iyo hay'adaha Soomaaliya marka ay fulinayaan hawlaha Qunsuliyadda.
      ii. Saraakiisha Qunsuliyadda looma baahna inay Caddeyn bixiyaan marag ahaan marka ay la xiriirto hawlaha shaqadooda.
   c. Saraakiisha iyo shaqaalaha Qunsuliyadda waa in laga dhaafaa dhammaan Canshuuraha iyo waajibaadka ku saabsan mushaharka iyo gunnooyinka ay helaan iyagoo fulinaya hawlaha Qunsuliyadda.
   d. Qoraallada rasmiga ah ee xafiiska Qunsuliyadda waa inay ahaadaan kuwo aan la gali karin. Saraakiisha Qunsuliyadda waxay isticmaali karaan koodh iyo rarayaal Qunsuliyadeed oo ah isku xirka rasmiga ah.

## Qodobka 43aad: Ergooyinka Shisheeye ee Dalka Jooga Waxyaabaha laga rabo inay ilaaliyaan

1. Sida ay qabaan xeerarka Caalamiga ah ee (Vienna Convention+Geneva Convention) waxaa la siiyay xasaanad lagu ilaalinayo sidoo kale waxaa la qeexay waxyaabaha laga rabo inay ilaaliyaan: -
   a. Dhammaan diblomaasiyiinta ergooyinka shisheeye waa in ay iska soo diwaangeliyaan wasaaradda arrimaha dibadda & iskaashiga Caalamiga ah.

b. Waa in ay raacaan shuruucda dalka iyo dhammaan xeerarka Caalamiga ah.
c. Caasimadda moqdishu 30 k/mitir hareeraheeda wax ka fog hadday u baahdaan waxay oggolaansho soo waydiisanayaan wasaaradda arrimaha dibadda.
d. Shaqo kasta oo dalka ay ka qabanayaan waxay usoo marayaan wasaaradda.
e. Kulan kasta ay qabsanayaan oo ka baxsan Xarumahooda waa in ay la soo wadaagaan hab-maamuuska Wasaaradda.
f. Shirarka Siyaasadda ee maamul-goboleedyada kama qaybgeli karaan.
g. Hay'addaha dawladda kulammo ka baxsan shirarka shaqada lama geli karaan.
h. Xafaladaha ay qabsanayaan (Receptios and National Day) waa in ay soo wargeliyaan hab-maamuska Wasaaraddaa waqtiga la qabanayo, goobta lagu qabanayo, dadka lagu Casuumay ee dhanka Soomaalida.
i. Waxkasta oo ay dalka soo gelinayaan waa in ay la soo wadaagan hab-maamuska.
j. Canshuur-dhaafka loo sameeyay ergooyinka shisheeye wuxuu yeelanyaa xudduud aan la dhaafi karin. Oo ah mid waafaqsan xeerarka diblomaasiyadda Caalamiga ah

## Qodobka 44aad: Xasaanadda iyo Mudnaanta Shaqaalaha

**1. Shaqaalaha Hay'adaha Caalamiga ah.**

a. Shaqaalaha hay'adaha Caalamiga ah waxay huwanyihiin xasaanadda ilaalinta shakhsiyeedka inta ay gudanayaan hawlahooda rasmiga ah gudaha Soomaaliya. Lama xiri karo lamana xannibi karo, dawladda Soomaaliya waa inay qaaddaa dhammaan tallaabooyinka ku habboon si ay uga hortagto weerar kasta oo ku saabsan naftooda, xorriyaddooda, ama sharafkooda.
b. Shaqaalaha waxay huwanyihiin xasaanadda ka hortagidda xukunka Ciqaabta, Madaniga, iyo Maamulka ee Soomaaliya marka ay fulinayaan hawlahooda

rasmiga ah. Xasaanaddan waxay sii socon doontaa xitaa marka shaqaaluhu joojiyaan hawlahooda.

c. Mushaharka iyo gunnooyinka ay bixiyaan hay'adaha Caalamiga ah ee shaqaalaha waxaa laga dhaafi doonaa Canshuurta dakhliga Qaranka iyo noocyada kale ee Canshuurta tooska ah.

d. Shaqaalaha iyo qoysaskoodu waxaa laga dhaafayaa xayiraadaha socdaalka, shuruudaha diiwaangelinta ajaanibta, iyo waajibaadka adeegga Qaranka.

e. Shaqaalahu waa in ay helaan oggolaansho isticmaalka koodhka iyo dirista iyo helitaanka qoraallada rasmiga ah iyadoo loo marayo rarayaal ama boorsooyin shaabadaysan, kuwaas oo la siin doono xasaanad iyo mudnaan la mid ah rarayaal diblomaasiyadeed iyo boorsooyin.

f. Shaqaalaha waa in loo oggolaadaa lacagaha iyo sarrifka ilaa inta loo baahan yahay si ay u gutaan hawlahooda, oo ay ku jirto xaqa haysashada akoonno lacag qalaad ah.

**2. Ku Tiirsaneyaasha Shaqaalaha.**

a. Ku tiirsaneyaasha shaqaalaha waxay huwanyihiin xasaanadda iyo mudnaanta la mid ah shaqaalaha laftooda, marka laga reebo xasaanadda ka hortagidda xukunka madaniga iyo maamulka ilaa iyo inta ay si toos ah ula xiriiraan hawlaha rasmiga ah ee shaqaalaha.

Ku tiirsaneyaashu waxaa laga dhaafi doonaa xayiraadaha socdaalka, shuruudaha diiwaan-gelinta ajaanibta, iyo waajibaadka adeegga Qaranka.

b. Ku tiirsaneyaashu waxay ka xoroobi doonaan dhammaan Canshuuraha iyo waajibaadka hantidooda gaarka ah ee la soo dejiyey 6 (lix) bilood gudahood marka ugu horrayso ee ay yimaadaan Dalka.

c. Ku tiirsaneyaashu waxay heli doonaan fursado waxbarasho oo waxay raadin karaan shaqo iyadoo la raacayo heshiisyada khuseeya ee u dhexeeya hay'adda Caalamiga ah iyo Dawladda Soomaaliya.

d. Ku tiirsaneyaashu waxay heli doonaan adeegyada Caafimaadka iyo bulsho sida kuwa la siiyo shaqaalaha hay'adda Caalamiga ah.

## Qodobka 45[aad]: Xasaanadda iyo Mudnaanta Khubarada

1. Khubarada ay shaqaaleysiiso hay'adaha Caalamiga ah ama Dawladda Soomaaliya waxay huwanyihiin xasaanadda ka hortagidda Xukunka Ciqaabta, Madaniga, iyo Maamulka ee Soomaaliya marka ay fulinayaan hawlahooda.
2. Mushaharka iyo gunnooyinka ay bixiyaan hay'adaha Caalamiga ah ama dawladda Soomaaliya ee khubarada waxaa laga dhaafi doonaa Canshuurta dakhliga Qaran iyo noocyada kale ee Canshuuraha tooska ah.
3. Khubarada lama xiri karo lamana xannibi karo marka ay fulinayaan hawlahooda, Dawladda Soomaaliya waa inay qaaddaa dhammaan tallaabooyinka ku habboon si ay uga hortagto faragelin kasta oo dhib u keeni karo khubaa sida handadaad, hujuum IWM.
4. Khubaradu waxay heli doonaan fasax dhaqdhaqaaqa gudaha Soomaaliya si ay u gutaan hawlahooda, iyadoo lagu xaddidayo oo kaliya xeerarka lagama maarmaanka u ah ilaalinta nidaamka guud iyo amniga Qaranka.
5. Khubaradu waxay xaq u leeyihiin inay isticmaalaan koodhka, dirista iyo helitaanka qoraallada rasmiga ah iyadoo loo marayo rarayaal ama boorsooyin shaabadaysan, kuwaas oo leh xasaannad iyo mudnaan la mid ah rarayaal diblomaasiyadeed iyo boorsooyinkooda.

## Qodobka 46[aad]: Ka Dhaafista Canshuuraha

1. **Ka Dhaafista Canshuuraha Tooska ah**
    a. Hay'adaha Caalamiga ah, Saraakiishooda, khubaradooda, iyo shaqaalahooda, iyo sidoo kale wakiillada deggan Soomaaliya. waa laga dhaafayaa Canshuurta dakhliga Qaranka ee mushaharka iyo gunnooyinka ay bixiyaan hay'adda Caalamiga ah.

b. Hantida ay leeyihiin hay'adaha Caalamiga ah oo loo Isticmaalo Ujeeddooyinkooda Rasmiga ah waa laga dhaafayaa Canshuurta Hantida ee ay soo rogtay Dawladda Soomaaliya.

**2. Ka Dhaafista Canshuuraha iyo Xayiraadaha Kastamka**

a. Hay'adaha Caalamiga ah, saraakiishooda, khubaradooda, iyo shaqaalahooda, iyo sidoo kale wakiillada deggan Soomaaliya. waa laga dhaafi doonaa Canshuuraha iyo waajibaadka kastamka ee alaabta iyo agabka loo soo dejinayo ee lagama maarmaanka u ah isticmaalka rasmiga ah.

b. Alaabta iyo agabka, oo ay ku jiraan alaabta shaqsiga ah, ee ay leeyihiin shaqaalaha Hay'adaha Caalamiga ah oo aan laga qaadin Canshuuraha ama waajibaadka, waxaa laga dhaafayaa Canshuuraha dhoofinta iyo waajibaadka.

c. Alaabta iyo Agabka ay soo dejiyaan ama dhoofiyaan hay'adaha Caalamiga ah, saraakiishooda, khubaradooda, iyo shaqaalahooda, iyo sidoo kale wakiillada loo aqoonsaday Soomaaliya. Waxaa laga dhaafayaa baaritaanka, marka laga reebo xaqiijinta nooca iyo tirada alaabta iyo Agabka.

## Qodobka 47aad: Isgaarsiinta iyo Hantida

1. **Mudnaanta Isgaarsiinta**

a. Wakiillada hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, iyo Xafiisyada Qunsuliyada waa in ay helaan xorriyadda Isgaarsiinta si ay u gutaan hawlahooda Rasmiga ah.

b. Isgaarsiinta Rasmiga ah, oo ay ku jiraan wadahadallada telefoonka, farriimaha, iyo qoraallada, ee hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, iyo Xafiisyada Qunsuliyadaha waa inay ahaadaan kuwo aan la faragelin karin.

2. **Mudnaanta Hantida**

a. Hantida hay'adaha caalamiga ah, Safaaradaha, iyo Xafiisyada Qunsuliyadaha way ka madax-banaanyahiin baaritaan, qaadasho, qabasho, ama dhulbixin.
b. Goobaha, Hantida, Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, iyo Xafiisyada Qunsuliyadaha waa in ay ilaaliyaan oo ay ixtiraamaan dowladda Soomaaliya.
c. Hantida Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, iyo Xafiisyada Qunsuliyadda laguma soo rogi karo qabasho ama xayiraad, marka laga reebo Dacwadaha fulinta xukunka kama dambaysta ah ee Maxkamadda ee la xiriira hawlaha Ganacsiga.

## Qodobka 48aad: Xaaladda sharciyadeed iyo Awoodda

1. **Shakhsiyadda Qaanuuneed**
   a. Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, iyo Xafiisyada Qunsuliyadaha waxay leeyihiin Shakhsiyad Qaanuuneed oo lagama-maarmaanka ah si ay u gutaan hawlahooda sidoo kalana u gaaraan ujeeddooyinkooda.
   b. Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, iyo Xafiisyada Qunsuliyadaha waxay leeyihiin awoodda inay Qandaraasyo galaan, hanti helaan, gadi karaan, iyo inay dacwad sharci ah furan karaan.
2. **Xasaanadda Garsoorka**
   a. Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, iyo Xafiisyada Qunsuliyadaha waxay huwanyihiin Xasaanadda ka hortagga Xukunka Maxkamadaha Soomaaliya. marka laga reebo Dacwadaha la xiriira ka-noqoshada Xasaanadda ama hawlaha Ganacsiga.

Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, iyo Xafiisyada Qunsuliyadaha waa laga dhaafayaa nidaamka sharciga, oo ay ku jiraan Xadhigga, Xayiraadda, iyo fulinta xukunnada, marka laga reebo Dacwadaha fulinta xukunka kama dambaysta ah ee maxkamadda la xiriirta hawlaha Ganacsiga.

**3. Iska qaadidda Xasaanadda**

a. Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, iyo Xafiisyada Qunsuliyadaha waxay iska qaadi karaan xasaanaddooda ka hortagga xukunka iyo nidaamka sharciga Dacwadaha gaarka ah.

## Qodobka 49aad: Gelitaanka, Deganaanshaha, iyo Bixitaanka

**1. Fiisooyinka iyo Oggolaanshaha Degganaanshaha**

a. Wakiillada Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, Xafiisyada Qunsuliyadaha, iyo shaqaalahooda waa laga dhaafayaa shunruudaha fiisaha galitaanka Soomaaliya. marka ay haystaan magacaabid Rasmi ah oo ah in ay soomaaliya ka shaqaynayaan.

b. Wakiillada Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, Xafiisyada Qunsuliyadaha, iyo shaqaalahooda waxaa la siinayaa oggolaanshaha degganaansho ah inta ay ku guda jiraan hawlahooda Rasmiga ah ee Soomaaliya.

**2. Xorriyadda Dhaq-dhaqaaqa**

a. Wakiillada hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, Xafiisyada Qunsuliyadaha, iyo shaqaalahooda waxay leeyahiin xorriyadda dhaqdhaqaaqa gudaha Soomaaliya. marka laga reebo tilmaamaha gaarka ah ee la xariira amniga iyo bad-baadadooda.

## Qodobka 50aad: Maamulka iyo Maaliyadda Ee Hay'adaha Caalamiga ah

1. **Maal-gelinta iyo Arrimaha Miisaaniyadda**

a. Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, Xafiisyada Qunsuliyadaha, iyo shaqaalahooda ayaa mas'uul ka ah maal-gelinta hawlahooda, oo ay ku jiraan bixinta Mushaharaadka, Gunnooyinka, iyo kharashaadka hawl-galkooda.

b. Dawladda Soomaaliya kuma soo rogeyso Canshuur ama khidmooyin ku saabsan lacagaha, hantida, ama mucaamalada Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, Xafiisyada Qunsuliyadaha, iyo shaqaalahooda, ilaa ay isku afgarteen labada dhinac.

2. **Fududeynta Maaliyadeed**
   a. Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, Xafiisyada Qunsuliyadaha, iyo shaqaalahooda waxay xaq u leeyihiin inay xisaabaad banki ku yeeshaan lacagaha qalaad iyo inay fuliyaan mucaamalada maaliyadeed si waafaqsan baahidooda.
   b. Hay'adaha Caalamiga ah, Safaaradaha, Xafiisyada Qunsuliyadaha, iyo shaqaalahooda waxaa laga dhaafayaa Canshuuraha kastamka, iyo xeerarka lacagta marka la soo dejinayo ama la dhoofinayo alaabada, lacagaha, iyo waxyaabaha shakhsiga ah ee lagama maarmaanka u ah hawlahooda Rasmiga ah.

## Qodobka 51[aad]: Sameynta Golaha Diblomaasiyiinta

1. Waxaa uu noqonayaa gole ay wasaaradda arrimaha dibadda leedahay oo lagu magacaabo golaha diblomaasiyadda iyo qunsuliyadda, waxaana lagu sameynayaa go'aan wasiir, Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda.
2. Waxayna noqonayaan guud ahaan tirada 13 ilaa 15 xubnood oo ahaan jiray xubnahaan soo socda.
   a. Xogahayaha joogtada ah.
   b. Danjirayaashii hore ee Khubarada Wasaaradda
   c. Danjirayaal khibrad leh oo wasaaradda ka shaqaynayay ugu yaraan 10 sano.
   d. Siihaye-yaal (charge'd affairs) ugu yaraan leh khibrad 10 sano ah.
   e. Lataliye-yaal khibrad sare leh oo ugu yaraan ka soo shaqayay safaaradaha 10 sano.
   f. Agaasimayaal khibraddoodu ay udhiganta 10 sano.

3. **Waajibaadkooda**
   a. Abuuridda Fikrado Cusub oo waxtar ku soo kordhiya Diblomaasiyadda Soomaaliya.
   b. Diyaarinta Barnaamijka Siyaasadda ee lagu hagayo Wasaardda Arrimaha Dibadda.
   c. La Shaqaynta Machadka Diblomaasiga Ee Wasaardda arrimaha Dibadda.
   d. Qabashada Dood-Cilmiyeedyo Diblomaasiyadeed iyo kuwa Siyaasi ahba.
   e. Shir Lix-biloodle ah ama Sannadkii mar oo uu yeelanayo goluhu.
   f. Ka talo bixinta Arrimaha Diblomaasiyadda ee kala Dhexeeya Soomaaliya Dawladdaha Caalamka.
   g. Ka talo bixinta Sharciyada iyo Xeerarka Loo sameynayo Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Dib-u-eegistooda.
   h. Usoo gudbinta Fikradaha Dhaxal-galka ah Hogaanka Wasaaradda.

## Qodobka 52aad: Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan wuxuu dhaqangeliyaa marka Golaha Wasiirradu meelmariyaa, Ra'iisul Wasaaruhuna ku soo saaro xeer, waxaana lagu faafinayaa faaafinta rasmiga ah.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.201** **Taariikh:09/05/2026**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA CAFISKA GUUD**

XRW - BIXIT
24 MAY 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu arkay:** Qodobka 30aad Ee Xeerka La dagaalanka Argagixisada & Qodobka 144aad Ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (Sharci Lr. 5/1963).

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **WCAD/XW/2822/01/26** ee ku taariikheysan **12/01/2026** ee Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Cafiska Guud;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.10.150.4.26** ee **15/04/2026,** kuna saabsan Ansixinta**"Xeer-nidaamiyaha Cafiska Guud"**oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay kor uqaadidda nabadda iyo xasiloonida dalka.

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**
**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.10.150.4.26** ee **15/04/2026,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Cafiska Guud** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad
## Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 3aad
## Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 494-028-2026
TAARIIKH 03-06-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

**Summad: XGG/441/2025** **20/10/2025**

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Dastuurka** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo:** Talo Sharci

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **WCAD/XAWSH&H/2674/2025** ee ku taarikheysan **29/11/2025** kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "XEER-NIDAAMIYAHA CAFISKA GUUD"**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si Waafaqsan **Sharci Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idin kugu soo gudbinayaa Xeer-nidaamiyaha sare ku xusan oo ay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Haddaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda kadib markii uu darsay Nuqulka Xeer-nidaamiyahani, islamarkaana waafijayay Shuruucda Dalka, ayaa waxa uu Xafiisku ku talinayaa in Xeer-nidaamiyahan, loo gudbiyo Golaha Wasiirada, maadaama uusan kahor-imaaneyn Dastuurka iyo Shuruucda Dalka.

Ugu dambeyn, Xafiiska Garyaqaanka Guud waxa uu ku wargelinayaa Agaasimaha Golaha Wasiirrada in nuqulka ku lifaaqan warqaddan uu yahay nuqulka asalka ah ee loo gudbinaayo Golaha Wasiirrada sii ay u meel-mariyaan si waafaqsan **Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 125 ee 06 April 2023**

**FG: Waxa halkan ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha Sare ku xusan.**

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamuud Xirsi**
**Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA · OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL · مكتب المحامي العام للدولة

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2674/2025** **Tr. 29/11/2025**

Mudane Garyaqaan,

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA CAFISKA GUUD"**

Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxa ay halkan ku soo gudbinaysaa "Xeer-nidaamiyaha Cafiska Guud" oo abuuraya hannaan sharci iyo mid maamul oo lagu nidaaminayo cafiska guud.

Xeer-nidaamiyaha waxa uu qeyb ka yahay qorshaha Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee 2025 iyo sidoo kale hawlaha hortabinta u leh Xukuumadda Danqaran ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa in uu ka guto waajibkiisa sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyeyaasha si habraaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Caddaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=



Dr. Cabdiraxmaan
06/12/2025

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## WASAARADDA CADDAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA

# XEER-NIDAAMIYAHA CAFISKA GUUD

***Waxaa diyaariyay: Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, 2025***

**ARAAR**

Qaranka Soomaaliyeed waxaa uu dembiyada iyo ciqaabahooda ku maareeyaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (X.C.S.), Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed (XHC), iyo xeerarka gaarka ah sida Xeerka La-dagaallanka Argagixisada. Sida caadiga ah, xeerarku waxa ay aqoonsan yihiin Cafis Guud (Amnesty), Siidayn Guud (Indult) iyo Cafis Gaar ah (Pardon).

Cafiska Guud (Qod. 144 X.C.S.) waa marka dad aan la cayimin la siiyo cafis waxa uuna **baabi'inayaa dembiga/dembiyada**, halka Siideynta Guud iyo Cafiska Gaarka ah (Indult iyo Pardon, Qod.149 X.C.) loo sameeyo dad la tilmaamay dembiyada ay galeen ama qof ahaantooda loo sheegay waxa ayna **baabi'inayaan ciqaabta** ku dhacday dambiilaha. Halka **cafiska guud** uu saamaynayo raad kasta oo ciqaabeed oo heer ahaan gaareysa haddii ay socoto dacwad ciqaabeed in si degdeg ah loo gabagabeeyo "islamarkaana lagu dhawaaqo in aan dacwadaas la socodsiin karin" (Qod. 77 X.H.C.), **siideynta guud** waxa ay baabi'inaysaa oo keliya ciqaabta la riday, haseyeeshee ay dacwaddu sii soconeyso, ayna suurtagal tahay in xukun kale lagu rido, garsooraha wuxuu amrayaa dhaqangelinta siideynta guud oo natiijada ka dambeysa ay tahay in aan la fulin ciqaabta ama fulinta ciqaabta hartay. **Cafiska gaarka ah** (**pardon)** waa uu ka duwan yahay siideynta guud (indult) maadaama uu yahay go'aan uu ka soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda qof gaar ah, sidaas darteed xiriir lama laha dad badan, waxa uuna baabi'inayaa oo keliya ciqaabta aasaasiga ah (principal penalty) sida xarigga, ee ma baabi'inayo ciqaabaha dulsaarka ah (ciqaabaha raaca kuwa asalka ah), haddii dekeretadu aysan si ka duwan sidaasi u sheegin.

In kasta oo uu uusan Dastuurka KMG ah ka hadleyn cafis guud iyo siideyn guud, ee uu ka hadlayo oo keliya cafiska gaarka ah kaas oo ku xiran in uu qof soo weyddiisto uuna soo jeediyo Golaha Adeegga Garsoorka, haddana Dastuurkii 1960-kii ayaa si cad uga hadlayay cafiska guud iyo siidaynta guud Qodobkiisa $64^{aad}$, halka uu cafiska gaarka ah uga hadlayo Qodobkiisa $75^{aad}$ ee awoodaha iyo xilalka Madaxweynaha, iyada oo uusan ku xiraynin soo jeedin gole kale oo toos loo weyddiisan karo, xeerarka ciqaabta iyo habka ciqaabta oo ka soo farcamay dastuurkaasna sidaas ayay uga hadlayaan. Sidaas daraadeed, cafiska guud iyo siidaynta guud waxa ay u baahan yihiin xeer sidaasi oggolaanaya ama faahfaahinaya.

Sida oo kale, waxaa cafiska la xiriira ururrada argagixisada ka hadlay Sharciga La-dagaallanka Argagixisada, Qodobkiisa 30aad, oo sheegay in dembiyada argagixisada ee ku xusan sharciga La-dagaallanka argagixisada laga cafin karo xubnaha ka tirsan ururrada argagixisada markii laga helo shuruudo cayiman.

Sidaas daraadeed, waxaa lagama maarmaan ah in la helo xeer-nidaamiye lagu dhaqangelinayo Qodobka $30^{aad}$ ee Xeerka La-dagaallanka Argagixisada iyo Qodobka $144^{aad}$ ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed laguna maareeyo xaaladaha xubnaha ka soo goosanaya ururrada argagixisada ah.

## Qodobka 1^aad
## Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa loona xiganayaa "Xeer-nidaamiyaha Cafiska Guud".

## Qodobka 2^aad
## Eraybixin

Ereyada soo socda waxa uu mid kasta leeyahay micnaha ku hor qoran:

1. **Cafis Guud:** Cafiska lagu sheegay Qodobka 30^aad ee Xeerka La-dagaallanka Argagixisada iyo Qod. 144 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed kaas oo baabi'inayaa dembiga/dembiyada la cafiyay.
2. **Ururrada Argagixisada ah:** Ururrada uu Xeerka La-dagaallanka Argagixisadu u aqoonsan yahay in ay yihiin argagixiso sida Al-shabaab iyo Daacish.
3. **Muwaadin:** Qofka ay xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya u aqoonsan yihiin in uu yahay muwaadin xaqna u leh in uu qaato kaarka aqoonsiga ee Qaranka.

## Qodobka 3^aad
## Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxa uu xaqiijinayaa ujeeddooyinka soo socda:

1. In la soo saaro xeer-nidaamiye lagu dhaqangelinayo Qodobka 30^aad ee Xeerka La-dagaallanka Argagixisada iyo Qodobka 144^aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed laguna caddaynayo in Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu cafis guud u fidin karo xubnaha ururrada argagixisada ee buuxiyay shuruudaha cafiska guud si waafaqsan dhaqanka dastuuriga ah ee taabbagalay.

2. In la abuuro hannaan sharci ah oo lagu bixin karo laguna maarayn karo cafiska guud ee loo fidinayo xubnaha ururrada argagixisada ah si waafaqsan Dastuurka Qaranka iyo xeerarka kale ee dalka.

3. In la ilaaliyo xuquuqda dhibbaneyaasha iyada oo la sheegayo hannaanka lagu xallinayo tabashooyinka iyo xadgudubyada madaniga ah.

## Qodobka 4aad
## Bixinta Cafiska Guud

1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu bixin karaa cafis guud isaga oo xeerinaya duruufaha ku xeeran dagaalka ka dhanka ah ururrada argagixisada, si waafaqsan qodobbada xeer-nidaamiyahan.

2. Cafiska guud ee loo fidiyo xubnaha ururrada argagixisada, waxaa uu baabi'inayaa dhammaan dembiyada ay xubnahaasi galeen ee laga cafiyay, marka laga reebo:

    a) Dembiyada caadiga ah ee aan lahayn dabeecad siyaasadeed ama fikradeed isla markaana aan lagu galin xayndaabka iyo amarka ururrada argagixisada, oo ay ka mid yihiin dembiyada sida shakhsiga ah ay xubnuhu u galeen iyaga oo ka duulaya dano shakhsi ah; iyo

    b) Dembiyada ku qeexan Shareecada Islaamka iyo dembiyada uu Madaxweynuhu ka reebo ama ku xiro shuruudo gaar ah isaga oo ka duulaya danta guud ee Qaranka.

## Qodobka 5aad
## Shuruudaha Cafiska Guud

1. Qofka muwaadinka ah ee ka tirsan ururrada argagixisada, waxa uu ka faa'iidaysan karaa cafiska guud ee Madaxweynuhu uu fidiyo, haddii uu qaado dhammaan tallaabooyinka soo socda:
    a) In uu ku soo wargeliyo hay'adaha amniga ee ku shaqada leh isaga oo si iskiis ah isugu soo dhiibaya hay'adahaasi, warbixin dhammaystiranna ka bixinaya dhammaan arrimaha iyo hawlaha uu xog-ogaalka u yahay;
    b) In uu aqoonsado/aqbalo xuduudaha, xeerarka, gobonnimada qarameed, iyo dowladnimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya isaga oo caddaynaya in uu ka tanaasulay in uu gacan-ka-hadal (violence) ku raadiyo talada dalka ama ujeeddooyin kale oo siyaasadeed;
    c) In uu joojiyo wax kasta oo fal-dembiyeed ah isaga oo caddayn sugan ku sheegaya in uu ka baxay kooxda ama ururka uu ka tirsanaa kuna shaqayn doonin fikirkooda mar dambe; iyo
    d) In uu buuxiyo wixii shuruudo kale ah ee uu ku xiro Madaxweynaha.

2. Xubnaha shisheeye ee ku jira ururrada argagixisada, waxaa lagu maareynayaa siyaasad gaar ah oo ay Golaha Wasiiradu ansixiyaan.

## Qodobka 6aad
## Raadadka Qaanuun ee Cafiska Guud

1. Xubinta ka faa'iidaystay Cafiska Guud laguma soo oogi karo dembiyada ku jira cafiska guud ee Madaxweynuhu u fidiyay mana la saari karo ciqaabtooda inta ay nooshahay.
2. Haddii xubinta ka faa'iidaystay Cafiska Guud ay jebiso shuruudaha ay ku mutaysatay cafiska, waxaa lagala laabanayaa cafiskii ay ka faa'iidaystay iyada oo xubinta ay khusayso laga soo qaadayo in aan hore loo cafin.
3. Cafiska guud ma baabi'in karo xuquuqda iyo xadgudubyada gaarka ah ee si shakhsi ah looga galay qof ama dad gaar ah waxaana lagu maaraynayaa nidaamka caddaaladeed ee dalka si waafaqsan Shareecada Islaamka iyo xeerarka dhaqangalka ah.

## Qodobka 7aad
## Dhaqangelinta Cafiska Guud

1. Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka ayaa u xilsaaran qiimaynta, hubinta, iyo maaraynta arrimaha xubnaha ka faa'idaysanaya cafiska guud, iyada oo Agaasimaha/Taliyaha Hay'adda uu warqad rasmi ah ku caddaynayo xubnaha buuxiyay shuruudaha Cafiska Guud kana faa'iidaystay si waafaqsan xeer-nidaamiyahan iyo shuruudaha uu Madaxweynuhu ku xiro.
2. Hay'addu waxa ay warbixin lix biloodle ah siinaysaa Madaxweynaha, Ra'iisulwasaaraha, Golaha Wasiirrada, iyo Golaha Amniga Qaranka.
3. Liiska magacyada xubnaha cafiska guud ka faa'iideeyey waxaa la gaarsiinayaa Hoggaanka Baarista Dembiyada ee Boliiska Soomaaliyeed iyo Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka

## Qodobka 8aad
## Taageerada iyo Dib Ugu Celinta Bulshada

1. Xukuumadda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa ay taabbagelinaysaa barnaamijyo lagu fududaynayo dib ugu celinta bulshada ee xubnaha ka faa'iidaystay Cafiska Guud, gaar ahaan arrimaha waxbarashada iyo shaqooyinka ay qabankaraan.

2. Xarunta Qaran ee La dagaallanka Argagixisada iyo Ka hortagga Fikirka Xagjirka ah ee Tubsan oo hoostagta Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha oo kaashaneysa Wasaaradaha ku shaqada leh, ayaa u xilsaaran hirgelinta barnaamijyadaasi iyada oo si toos ah ula shaqaynaysa hay'adaha labada heer ee dowladda iyo cid kasta oo danaynaysa arrimaha xubnaha ka faa'iidaystay cafiska guud

## Qodobka 9aad
## Xaaladda Kalaguurka

1. Cafiska Guud ee Madaxweynuhu fidiyay ka hor inta aan la soo saarin Xeer-nidaamiyahan, waxaa laga soo qaadayaa in loo fuliyay si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

2. Xubnihii hore ee ka faa'iidaystay Cafiska Guud ka hor inta aan la soo saarin Xeer-nidaamiyahan, waxaa laga soo qaadayaa in loo dhammaystiray habraacyada ku qoran halkan.

## Qodobka 10aad
## Dhaqangal iyo Habraacyo

1. Madaxweynuha waxa uu soo saari karaa habraacyo lagu dhaqangelinayo arrimaha uu xeer-nidaamiyahani ku saabsan yahay.

2. Xeer-nidaamiyahan waxa uu dhaqangelayaa marka Golaha Wasiiradu ansixiyaan Madaxweynuhuna ku meelmariyo xeer madaxweyne waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.202** **Taariikh: 09 /05/2026**

**XEERKA: XARUNTA ADEEGYADA MIDEYSAN EE HALMEEL**

XRW - BIXIT
12 MAY 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.11.151.4.26** ee **23/04/2026,** kuna saabsan **Ansixinta "Xeerka Xarunta Adeegyada Mideysan Ee Halmeel"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeerkaan u leeyahay u fududeynta Dadweynaha Adeegga Dowladda

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.11.151.4.26** ee **23/04/2026,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Xarunta Adeegyada Mideysan Ee Halmeel** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

**Hirgalin**

Waxaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha loo igmaday in uu hirgaliyo meelmariyana Xeerkan.

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

## Qodobka 3aad

## Dhaqangal

Xeerkaan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamze Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO Han-026-2026
TAARIIKH 03-06-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**XAFIISKA RA'IISALWASAARAHA**

**XEER RA'IISALWASAARE Lr: ____ / 2026**

Taariikh: ____ / ____ / 2026

**Xeer: Xarunta Qaran ee Bixinta Addegyada Mideysan (Halmeel)**

Ra'iisalwasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

| | |
|---|---|
| Markii uu arkay: | Qodobada $116^{aad}$, $119^{aad}$, iyo $120^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; |
| Markii uu tixgaliyey: | Baahida loo qabo in la mideeyo, la jaangooyo, lana casriyeeyo bixinta adeegyada dadweynaha si loo helo adeeg hufan, degdeg ah, daahfuran, kana jawaabaya baahiyaha muwaadiniinta; |
| Markii uu tixgaliyey: | Dadaallada Dowladda Federaalka ee ku aaddan dhijitaaleynta adeegyada, mideynta hannaanka maamulka, iyo horumarinta dowlad-wanaagga casriga ah; |
| Markii uu tixgaliyey: | Mas'uuliyadda Xukuumadda ee horumarinta adeegyada bulshada iyo xoojinta isla xisaabtanka; |
| Markii uu tixgaliyey: | Baahida loo qabo yareynta caqabadaha muwaadiniinta iyo ganacsiyada ka haysta adeeg helidda; |
| Markii uu tixgaliyey: | Waajibaadka Guddiga Qaran ee Fulinta Dowladnimada Danabaysan ee uu magacaabay 8 Oktoobar 2025; |
| Markii uu tixgaliyey: | Tilmaamaha, hiigsiyada iyo awaamiirta ku qeexan Qorshaha Isbaddelka Qaranka 2025 - 2029 |

Isaga oo adeegsanaya awoodaha dastuurku uu siiyey, waxa uu soo saaray Xeerkan:

DRAFT

**XEERKA: XARUNTA QARAN EE BIXINTA ADDEEGYADA MIDEYSAN (HALMEEL, 2026)**

QAYBTA I: QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad: Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa “Xeerka Xarunta Qaran ee Bixinta Addeegyada Mideysan, Halmeel.”

Qodobka 2aad: Qeexidda Erayada

Erayada hoos ku xusan haddii aan si kale loogu adeegsan Xeerkan dhexdiisa, waxaa loola jeedaa macnaha halkan ku qeexan:

1. Xeerka: Waxaa loola jeedaa “Xeerka Xarunta Qaran ee Bixinta Addeegyada Mideysan, Halmeel.”
2. Dowladda: Waxaa loola jeedaa Dowladda Federaalka Soomaaliya.
3. Agaasimaha Guud: Waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee loo xilsaaray maamulidda howlaha maalinlaha ah ee Xarunta Qaran ee Bixinta Addeegyada Mideysan.
4. Xarunta Adeegga Halmeel: Waxaa loola jeedaa xarun mideysa adeegyada dowladda ee kala duwan, lagana helo Halmeel oo ay ku jiraan adeegyada danabaysan, si muwaadinku uu u helo adeegyo kala duwan oo isku xiran.
5. Heerarka Adeegga: Waxaa loola jeedaa jaangooyinka lagu cabbiro adeegga (shuruudo, tallaabooyin, khidmad, iyo waqtiga ugu badan ee lagu dhammeynayo).
6. Axdiga Muwaadinka: Waxaa loola jeedaa dukumenti dadweynaha loo bandhigo oo qeexaya adeegyada, shuruudaha, khidmadaha, waqtiyada adeeg bixinta, iyo qaabka cabasho loo gudbiyo.
7. Doorsoocasho: Waxaa loola jeedaa tartanka shaqada ee furan, la xayeysiiyey, daahfuran ee ay muwaadiniintu u siman yihiin.

Qodobka 3aad: Aasaaska Xarunta Halmeel

1. Xeerkani waxa uu aasaasayaa Xarunta Qaran ee Bixinta Addeegyada Mideysan, taa oo hoos tagta Xafiiska Ra’iisalwasaaraha.
2. Xarunta Halmeel waxa ay u xilsaaran tahay isku duwidda, mideynta, jaangooynta, iyo horumarinta adeegyada dadweynaha ee Dowladda Federaalka, si loo xaqiijiyo bixinta adeegyo wax ku ool ah, hufan, daahfuran, isla markaana ku dhisan danaha iyo baahiyaha muwaadiniinta.

QAYBTA II: WAAJIBKA IYO SHAQADA

Qodobka 4aad: Waajibaadka Xarunta Halmeel

Xarunta Halmeel waxaa waajib ku ah:

1. Dib u habeynta iyo isku duwidda bixinta adeegyada Dowladda.
2. Aasaasidda, maamulka, iyo horumarinta Xarumaha Adeegyada Halmeel.
3. Jaangoynta habsocodyada adeegyada, foomamka, shuruudaha, iyo khidmadaha, si loo yareeyo kala duwanaanshaha addeegga ay hay’adaha Dowladdu bixiyaan.

4. Taageeridda adeegsiga adeegyada danabaysan ee Dowladda, iyada oo aan la dejin ama la baddelin heerarka farsamo ama siyaasadaha dhijitaalka.
5. Hagaajinta adeegga muwaadinka.
6. Adkeynta wadashaqeynta heerarka kala duwan ee dowladda, Federaalka, Dowlad Goboleedyada, iyo degmooyinka, ee jaangooynta adeegyada.
7. Soo saaridda, ansaxinta, iyo dhaqangalinta habraacyo, tilmaamo, iyo qaababka hawlgalka si loo mideeyo shaqada bixinta adeegyada dadweynaha.

Qodobka 5aad: Shaqada Xarunta Halmeel

1. Mideynta bixinta adeegyada;
   a) Dhisidda madal is dhaafsi xogeed taa oo suurtagalineysa in Dowlad Goboleedyadu ay ku xirmaan hannaanka mideysan iyada oo la dhowrayo xogta;
   b) Iskuduwidda adeegyada Dowladda iyo mideyntooda;
   c) Dib u habeynta adeegyada adag iyo yareynta lakab xafiiseedka (ila meeraysiga);
   d) Yareynta isku noqnoqoshada iyo habraacyada is khilaafsan;
   e) Fududeynta xog is dhaafsiga u dhexeeya hay’adaha Dowladda si uu muwaadinku uga maarmo in uu hal xog marar kale duwan iyo meelo kala duwan ku bixiyo.

2. Xarumaha Adeegga Halmeel
   a) Aasaasidda iyo maareynta xarumaha adeegyada urursan;
   b) Ku mideynta adeegyada wasaarado/hay’ado kala duwan Xarunta Halmeel;
   c) Hirgalinta xarumo negi iyo, marka loo baahdo, xarumaha guurguura ee degmooyinka fogfog.

3. Isla Jaanqaadsiinta Dowladaha
   a) La shaqeynta Dowlad Goboleedyada iyo degmooyinka si loo jaangooyo habraacyada;
   b) Taageeridda dhisidda karaanka shaqaalaha bixinaya adeegyada;
   c) Kordhinta xarumo adeeg wadaag ah marka ay suuragal tahay.

Qodobka 7aad: Agaasimaha Guud

1. Agaasimaha Guud waxa uu ku imanayaa doorsoocasho - tartan furan, la xayeysiiyey, daahfuran, cadli iyo sinnaan ku dhisan.
2. Agaasimaha Guud waxa uu masuul ka yahay hoggaaminta, iskuduwidda, iyo kormeerka dhammaan hawlaha Xarunta Halmeel.
3. Agaasimaha Guud waxa uu warbixin joogto ah u gudbinayaa Ra’iisalwasaaraha.

Qodobka 8aad: Awoodda iyo Waajibinta Xarunta

Xarunta Halmeel waxa ay awood u leedahay:

1. In ay mideyso adeegyada la oggolaaday in lagu daro Xarumaha Halmeel iyada oo la raacayo jadwal hirgalin oo la isla meeldhigay.
2. In ay hagto dib u naqshadeynta habsocodyada adeegga si loo yareeyo tallaabooyinka aan loo baahnayn.
3. In ay soo saarto xeerhoosaadyo, habraacyo, iyo tilmaamo farsamo kuwaa oo lagu nidaaminayo bixinta adeegyada.

4. In ay kormeerto fulinta heerarka adeegga, isla markaana soo jeediso tallaabooyin maamul iyo saxitaan.
5. In ay ansixiso Axdiga Muwaadinka iyo heerarka adeegga ka hor inta aan dadweynaha loo bandhigin.

Qodobka 9aad: Shakhsiyad Qaanuuneed

1. Xarunta Halmeel waxa ay leedahay shakhsiyad qanuuneed.
2. Iyada oo ku shaqeynaysa magaca Dowladda Federaalka Soomaaliya, Xarunta Halmeel waxa ay awood u leedahay in ay:
   a) gasho heshiisyo la xiriira mideynta adeegyada;
   b) maamusho ama adeegsato hantida guurta iyo midda maguurtada ah ee Dowladda;
   c) la shaqeyso hay'ado qaran, kuwo caalami ah, iyo kuwo gaar loo leeyahay, si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka dalka.
   d) Dhammaan waajibaadka sharciyeed ee Xarunta Halmeel waxay ku dhacayaan mas'uuliyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya.

QAYBTA IV: SOCODSIINTA XARUMAHA ADEEGGA

**Qodobka 10aad: Kala-soocidda Waajibaadka Hay'adaha**

Si looga fogaado is-dulsaarka shaqooyinka, waxaa si cad loo kala saarayaa waajibaadka Xarunta Halmeel iyo hay'adaha Dowladda ee maamula dhijitaalka:

- Xarunta Halmeel:
  - Waxay bixisaa helitaanka adeegyada (service access)
  - Waxay fududeysaa isticmaalka adeegyada
  - Waxay isku dubbariddaa adeegyada iyada oo aan lahayn lahaansho ama maamul
- Hay'adaha Dowladda ee maamula dhijitaalka:
  - Waxay dejinayaan siyaasadaha dhijitaalka
  - Waxay maamulayaan kaabayaasha iyo nidaamyada
  - Waxay dejinayaan heerarka farsamo iyo is-waafajinta nidaamyada

Qodobka 11aad: Aasaasidda Xarumaha Adeegyada Halmeel

1. Xaruntu waxay mideynaysaa adeegyada mudnaanta leh, oo ay ka mid yihiin (balse aan ku koobnayn):
   a) Aqoonsiga/diiwaangalinta madaniga ah iyo ajaanibta;
   b) Baasaboorka iyo dukumentiyada safarka;
   c) Shatiyada maalgashiga, ganacsiga iyo canshuuraha;
   d) Dukumentiyada waxbarashada iyo shahaadooyinka;
   e) Adeegyada ilaalinta bulshada;
   f) Warqadaha dembi-la'aanta;
   g) Maamulka dhulka;
   h) Ruqsadda gaadiid wadida
   i) Diiwaangalinta gaadiidka
   j) iwm.

2. Wasaaradaha iyo hay'adaha bixiya adeegyadan iyo kuwa la midka ah waxa ay geeynayaan Xarunta Halmeel shaqaale shaqada qabta ka dib marka la hubiyo diyaargarowga Xarunta.

Qodobka 12aad: Heerarka Adeegga, Daahfurnaanta, iyo Cabashooyinka

1. Xarunta Halmeel waxa ay diyaarinaysaa Axdiga Muwaadinka oo caddeynaya shuruudaha, khidmadaha, talaabooyinka, iyo waqtiga adeeg bixinta kaa oo la dhigayo meel muwaadinku arki karo;
2. Xarunta Halmeel waxa ay hirgalinaysaa hannaan lagu xalliyo cabashooyinka la xidhhiidha adeeg bixinta si muwaadinku uu jawaab ugu helo cabashooyinkiisa;
3. Si loo yareeyo musuqmaasuqa iyo faragalinta aan loo baahnayn, Xarunta Halmeel waxa ay hirgalinaysaa nidaamyo yareeya kulamada iyo xiriirka fool-ka-foolka ah ee aan lagama maarmaanka ahayn;
4. Xaruntu waxa ay si joogto ah xogta dakhli ururinta iyo hufnaanta adeeg bixinta ugu soo gudbinaysaa Xafiiska Ra'iisalwasaaraha;
5. Xarunta Halmeel waxay bixinaysaa adeegyo danabaysan oo dhammaystiran kuwaa oo u sahlaya muwaadiniinta, qurba-joogta iyo ajaanibtaba in ay helaan adeegyada ay u baahan yihiin iyaga oo isticmaalaya aqoonsiga qaranka iyo baasaboorada si waafaqsan Hannanka Hal-koonto (Single Sign on);
6. Kaabayaasha farsamo iyo nidaamyada ay adeegsanayso Xarunta Halmeel waa inay noqdaan kuwo dowladda Soomaaliyeed ay leedahay, si loo dhowro amniga qaranka iyo xogta muwaadiniinta, loogana hortago ku tiirsanaanta shirkado shisheeye;
7. Dhisidda hal daaqad oo si gaar ah loogu talagalay ajaanibta iyo maalgashadayaasha si loogu fududeeyo helidda dukumintiyada dowladeed, deganaanshaha, iyo oggolaanshaha ganacsiga.

QAYBTA V: GUNAANAD

Qodobka 13aad: Dib u eegis

Xeerkan waxaa dib u eegis lagu samaynayaa markii loo baahdo.

Qodobka 14aad: Dhaqangal

Xeerkani waxa uu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Golaha Wasiirradu, Ra'iisalwasaaruhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

Md. Xamze Cabdi Barre
Ra'iisalwasaaraha Xukuumadda
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

DRAFT

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.203** **Taariikh: 09/05/2026**

**XEERKA: HAGAHA NIDAAMKA HANTI-DHOWRKA GUDAHA.**

XRW - BIXIT
09 MAY 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu arkay:** Qodobka 9aad Farqadiisa 9aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, ee (sharci Lr. 17, 2019).

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **MOF/OM/0095/2026** ee ku taariikheysan **06/05/2026** ee Wasaaradda Maaliyadda kuna saabsan codsiga soojeedinta **Hagaha Nidaamka Hanti-dhowrka Gudaha;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.12.152.05.26** ee **07/05/2026,** kuna saabsan Ansixinta**"Hagaha Nidaamka Hantidhowrka Gudaha"**oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Hagahani u leeyahay la xisaabtanka Hay'adaha Dowladda.

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.12.152.05.26** ee **07/05/2026,** kuna saabsan Ansixinta**"Hagaha Nidaamka Hanti-dhowrka Gudaha"**oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**
**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Hagaha Nidaamka Hanti-dhowrka Gudaha.

**Qodobka 3aad**
**Dhaqangal**

Hagahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA ★ XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA | OFFICE OF THE PRIME MINISTER ★ FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO Hm-033-2026
TAARIIKH 03-06-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.203** **Taariikh: 09/05/2026**

**<u>XEERKA:</u> <u>HAGAHA NIDAAMKA HANTI-DHOWRKA GUDAHA.</u>**

XRW - BIXIT
09 MAY 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu arkay:** Qodobka 9[aad] Farqadiisa 9[aad] ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, ee (sharci Lr. 17, 2019).

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **MOF/OM/0095/2026** ee ku taariikheysan **06/05/2026** ee Wasaaradda Maaliyadda kuna saabsan codsiga soojeedinta **Hagaha Nidaamka Hanti-dhowrka Gudaha;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.12.152.05.26** ee **07/05/2026,** kuna saabsan Ansixinta**"Hagaha Nidaamka Hantidhowrka Gudaha"**oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Hagahani u leeyahay la xisaabtanka Hay'adaha Dowladda.

**Wuxuu Meelmariyay**

**<u>Qodobka 1[aad]</u>**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.12.152.05.26** ee **07/05/2026,** kuna saabsan Ansixinta**"Hagaha Nidaamka Hanti-dhowrka Gudaha"**oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Hagaha Nidaamka Hanti-dhowrka Gudaha.

**Qodobka 3aad**

**Dhaqangal**

Hagahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA ★ XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA ★ FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA | OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUÚD EE JFS
DIIWAAN NO
TAARIIKH
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

---

Ref: MOF/OM/0095/2025 May 6, 2026

**Ku:** Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
**Og:** Agaasimaha Golaha Wasiirada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha
**Og:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda
**Og:** Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda
**Og:** Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda
**Og:** Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirada ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

**Ujeedo: Usoo Gudbinta Hagaha Nidaamka Hantidhawrka Gudaha Ansixinta Golaha Wasiirrada**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**

Aniga oo raacaya Qodobka 9(9) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, walibana ogsoon baahida loo qabo in la xoojiyo hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo nidaamka kormeerka gudaha ee hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxaa sharaf ii ah inaan halkan ku soo gudbiyo Hagaha Nidaamka Hantidhawrka Gudaha si ay u ansixiyaan Golaha Wasiirrada.

Hagahan waxa uu dejinayaa xeerar iyo habraacyo mideysan oo hagaya shaqada hantidhawrka gudaha ee Hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, isaga oo diiradda saaraya qiimeynta khataraha, xoojinta nidaamyada xakamaynta gudaha, iyo horumarinta tayada warbixinnada iyo dabagalka.

Diyaarinta Hagahan waxaa lagu saleeyay la-tashiyo farsamo oo lala yeeshay khubaro iyo hay'adaha ku takhasusay maamulka maaliyadda, si loo hubiyo in uu waafaqsan yahay hannaanka hantidhawrka gudaha ee caalamiga ah iyo baahiyaha nidaamka maaliyadeed ee dalka.

Mudane Ra'iisul Wasaare, hirgelinta Hagahan waxay muhiim u tahay in la mideeyo habka hantidhawrka gudaha, lana hubiyo in dhammaan hay'adaha dowladdu ay ku shaqeeyaan hannaan hufan, isla markaana la isku halayn karo.

Sidaas darteed, waxaan si xushmad leh ugu soo gudbinayaa Golaha Wasiirrada Hagaha Nidaamka Hantidhawrka Gudaha si loo ansixiyo.

**Mahadnaq iyo qadarin,**

**Xil. Biixi Iimaan Cige**
**Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**

# Hagaha Nidaamka Hantidhawrka Gudaha

**Waxaa diyaarisay Wasaaradda Maaliyadda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya**

| Tusmo | Bogg Lr. |
|---|---|
| **Qodobka 1:** Qeexitaanno/Erey bixin | **1** |
| **Qodobka 2-aad:** Saldhiga Sharciyeed | **1** |
| **Qodobka 3:** Qaab-dhismeedka Unugyada Hantidhawrka Gudaha | **1-2** |
| **Qodobka 4:** Hawsha iyo Ujeeddada Unugga Hanti-dhawrka Gudaha | **2-3** |
| **Qodobka 5:** Baaxadda Shaqada Unugga Hantidhawrka Gudaha | **3** |
| **Qodobka 6:** Awoodaha Unugga Hantidhawrka Gudaha | **4-5** |
| **Qodobka 7:** Nidaamka La Xisaabtanka Hantidhawrka Gudaha | **5** |
| **Qodobka 8:** Madaxbannaanida | **5-6** |
| **Qodobka 9:** Mas'uuliyadda Unugga Hantidhawrka Gudaha | **6-8** |
| **Qodobka 10:** Dhaqan-galka | **8** |

## Hagaha Nidaamka Hantidhawrka Gudaha

### Qodobka 1: Qeexitaanno/Erey bixin

1. Ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran:

(b) **Hay'ad Dowladdeed:** Waxa loola jeedaa hay'ad kasta oo ka tirsan Dowladda Federaalka Soomaaliya oo ku dhaqanta Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019.

(t) **Sarkaal Idman:** Waxa loola jeedaa sarkaalka loo magacaabay si waafaqsan Qodobka 12(1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud 2019, kaas oo ah sarkaalka mas'uulka ka ah xisaabaadka iyo maamulka maaliyadeed ee hay'adda Dowladdeed. Mas'uuliyadaha Sarkaalka Idman waxaa lagu qeexay Qodobka 12(2) ee isla Sharcigaas.

(j) **Madaxa Hantidhawrka Gudaha:** Waxa loola jeedaa hantidhawraha gudaha ee Hay'ad Dowladdeed, oo uu magacaabo Sarkaalka Idman, isla markaana si toos ah u hoos taga Sarkaalka Idman sida ku xusan Qodobka 46 ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019.

(x) **Guddiga Hantidhawrka:** Waxa loola jeedaa guddi ay Hay'ad Dowladdeed samaysan karto si uu u kormeero hawlaha hantidhawrka gudaha; haddii aan guddigaas la aasaasin, hawlahaas waxaa fulinaya Sarkaalka Idman.

(kh) **Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud:** Waxa loola jeedaa Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud (Sharci Lambar 17 ee 25 Diseembar 2019).

(d) **Shuruudaha Aqooneed:** Waxa loola jeedaa heerka ugu yar ee waxbarasho, iyo khibrad shaqo oo looga baahan yahay Madaxa Hantidhawrka Gudaha, taasoo go'aamiyo Wasiirka Maaliyadda.

### Qodobka 2-aad: Saldhiga Sharciyeed

1. Hagahan waxaa loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 9(9) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019, kaas oo awood u siinaya Wasiirka Maaliyadda inuu dejiyo habraacyada hantidhawrka gudaha ee ku habboon Hay’adaha Dowladda.

2. Sidaa darteed, Hagahani waxaa ka dhalanaaya waajibaad sharciyeed saaran dhammaan hay'addaha Dawladda.

### Qodobka 3: Qaab-dhismeedka Unugyada Hantidhawrka Gudaha

1. Hagahani waxa uu dejinayaa habraacyada jihaynaya shaqada iyo hawlgalka hantidhawrka gudaha ee ka jira hay'ad kasta ee ka tirsan Dowladda Federaalka Soomaaliya.

2. Hay'ad kasta ee Dawladdeed waxaa waajib ku ah in ay ka dhex abuurto gudaheeda, unug gaar ah oo u xilsaaran fulinta shaqada hantidhawrka gudaha. Unuggaas waxa si

rasmi ah u hoggaaminaya sarkaal loo magacaabo, kaas oo jagadiisu tahay "Madaxa Hantidhawrka Gudaha (Head of Internal Audit)".

3. Madaxa Hantidhawrka Gudaha waxa uu si toos ah u hoos imaanaya Sarkaalka Idman ee hay'adda Dawladeed, si waafaqsan Qodobka 46-aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019.

4. Wasiirka Maaliyaddu waxa uu dejinayaa heerarka qasab ah ee lagu maamulo hantidhawrka gudaha, hannaanka mideysan ee ku saleysan qiimeynta khatarta (risk-based methodology), qaababka warbixinnada rasmiga ah (reporting formats), tilmaamayaasha waxqabadka muhiimka ah (KPIs), iyo xeerarka anshaxeed ee hagaya saraakiisha maamulka maaliyadda guud, kuwaas oo si buuxda uga dhaqan-gala dhammaan hay'addaha Dowladda Federaalka Soomaaliya.

5. Unug kasta oo hantidhawrka gudaha ah oo ka tirsan hay'ad Dawladdeed waxa uu hoos imaanaya Sarkaalka Idman ee hay'addiisa, waxaana waajib ku ah in uu si buuxda u adeegsado isla markaana u raaco heerarka, qaababka warbixinta, hannaanka hantidhawrka ee ku saleysan qiimaynta khatarta (risk-based methodology), iyo xeerarka anshaxeed ee hagaya saraakiisha maamulka maaliyadda guud, kuwaas ee uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda.

6. Qorshaha hantidhawrka, hawlgalinta shaqaalaha unugga, iyo gudbinta warbixinnada waxaa go'aaminaaya Madaxa Hantidhawrka Gudaha, isagoo si dhow ula tashanayo Sarkaalka Idman ee hay'adda ay khusayso.

7. Haddii Guddi Hanti-dhawr uu ka dhisan yahay Hay'ad Dawladeed, guddigaasi waxa uu oggolaan karaa habraacyo dheeraad ah oo gudaha ah oo si gaar ah u khuseeya hay'addaas, iyadoo shuruuddu tahay in habraacyadaasi ay si buuxda ula jaanqaadaan Hagahan.

8. Sarkaalka Idman waa inuu xaqiijiyaa in Madaxa Hanti-dhawrka Gudaha iyo dhammaan shaqaalaha hanti-dhawrka gudaha ay buuxiyaan shuruudaha aqooneed iyo waayo-aragnimo ee uu dejiyo Wasiirka Maaliyadda.

9. Magacaabista iyo xilka-ka-qaadista Madaxa Hanti-dhawrka Gudaha waa in lagala tashadaa Sarkaalka Idman, iyo Guddi Hanti-dhawrka (haddii uu jiro).

10. Hay'ad kasta oo Dawladeed waa in ay u qoondeysaa unuggeeda Hanti-dhawrka Gudaha miisaaniyad ku filan, taasoo awood u siin karta in uu si hufan u guto dhammaan waajibaadkiisa iyo masuuliyadihiisa ku xusan Hagahan iyo Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019.

11. Wax ka beddel kasta oo lagu sameeynaayo Hagahan waxa soo jeedinaya Wasiirka Maaliyadda, kadibna waxaa ansixinaya Golaha Wasiirrada.

**Qodobka 4: Hawsha iyo Ujeeddada Unugga Hanti-dhawrka Gudaha**

1. Hawsha mid kasta oo ka mid ah unugyada hanti-dhawrka gudaha ee Hay'addaha Dowladda waa in uu bixiyo adeegyo kormeer iyo korjoogtaynta madax-bannaan oo sugan (independent and objective assurance) iyo adeegyo talo-bixin (advisory

services) oo ujeeddadoodu tahay in ay ka caawiyaan Hay'addaas Dowladdeed in ay gaarto ujeeddooyinkeeda. Unugyada hanti-dhawrka gudaha ayaa gudanayaa waajibaadkaan iyagoo qiimeynaya, walibana horumarinaya hufnaanta maaraynta khataraha, wax-ku-oolnimada nidaamyada xakamaynta gudaha, iyo habraacyada maamul-wanaagga ee ka dhex jira Hay'addaas Dowladdeed.

2. Hanti-dhawrka gudaha waxa uu Hay'adda Dowladda ka taageeraa gaarista ujeeddooyinkeeda isagoo adeegsanaya hannaan nidaamsan (systematic approach) iyo habraac sugan oo joogto ah (disciplined and continuous approach) si loo qiimeeyo loona horumariyo waxtarka nidaamyada maaraynta khataraha, xakamaynta gudaha, iyo habraacyada maamulka iyo maamul-wanaagga.

**Qodobka 5: Baaxadda Shaqada Unugga Hantidhawrka Gudaha**

1. Baaxadda shaqada ee unugyada hantidhawrka gudaha ah ee Hay'addaha Dowladda waa qiimeeynta nidaamyada maareynta khataraha, xakamaynta gudaha, iyo habraacyada maamulka iyo maamul-wanaagga ee Hay'adda Dowladda, si loo hubiyo in ay yihiin nidaamyo ku filan isla markaana si wax ku ool ah u shaqeynaya si loo xaqiijiyo arrimaha soo socda:

(b) Khataraha si sax ah ayaa looga war helaa, walibana loo maareeya.

(t) Unugga hantidhawrka gudaha wuxuu wada-shaqaynta hawlihiisa muhiimka u ah ka helaa waaxyaha, xafiisyada iyo unugyada kala duwan ee Hay'adda Dowladdeed, marka loo baahdo.

(j) Macluumaadka muhiimka ah ee maaliyadeed, maamul iyo hawlgal waa kuwo sax ah, lagu kalsoonaan karo, isla markaana lagu helo waqtiga ku habboon.

(x) Ficillada shaqaaluhu waxa ay u hoggaansanyihiin siyaasadaha, heerarka, habraacyada, xeerarka anshaxeed ee hagaya saraakiisha maamulka maaliyadda guud iyo dhammaan sharciyada iyo xeerarka dhaqan-galka ah ee khuseeya Hay'addaas.

(kh) Kheyraadka iyo dhaqaalaha Hay'adda Dowladda waxaa loo adeegsadaa si beeqaansan, wax-ku-ool ah, isla markaana waxaa loo ilaaliyo si ku filan.

(d) Barnaamijyada, qorshayaasha iyo ujeeddooyinka Hay'adda Dowladda ee la dejiyey waxaa looga miro dhaliyaa sidii loogu talagalay.

(r) Tayada adeegyada xakamaynta gudaha ee Hay'adda Dowladda si joogta ah ayaa loo horumariyaa.

(s) Hay'adda Dowladdu waxay u hoggaansantaa sharciyada iyo xeerarka muhiimka ah, isla markaana wixii u hoggaansan la'aan ah waxaa loo loo xalliya sida ku habboon.

(sh) Fursadaha lagu horumarin karo korjoogtaynta maamulka iyo waxqabadka Hay'adda Dowladda waxaa lagu ogaada inta lagu jiro hantidhawrka gudaha, waxaana lala wadaaga Sarkaalka Idman, si looga faa'ideeysto.

**Qodobka 6: Awoodaha Unugga Hantidhawrka Gudaha**

1. Shaqaalaha unugyada hantidhawrka gudaha ee Hay'ad Dawladda waxaa loo oggol yahay, oo awood loo siiyay inay:

(b) U helaan marin aan xadidnayn dhammaan hawlaha socda, diiwaannada, hantida, iyo shaqaalaha Hay'addooda.

(t) U helaan fursad buuxda oo xor ah oo ay kula xiriiri karaan Guddiga Hantidhawrka ee Hay'addooda (haddii la dhisay) iyo sidoo kale Sarkaalka Idman.

(j) Qorsheeyaan hannaanka shaqo-galinta shaqaalaha hantidhawrka gudaha, isla markaana u qoondeeyaan waqtiga iyo shaqooyinka looga baahan yahay si ay u go'aamiyaan inta jeer ee hantidhawrka la sameynayo, u doortaan mawduucyada la hubinayo, u qeexaan baaxadda shaqada, una adeegsadaan farsamooyinka lagama maarmaanka ah si loo gaaro ujeeddooyinka hantidhawrka gudaha ee Hay'addooda Dowladdeed.

(x) Ka helaan shaqaalaha Hay'addooda iyo sidoo kale khubaro ka madax bannaan hay'addooda taageerada iyo wada-shaqaynta lagama maarmaanka ah, iyadoo si buuxda loogu hoggaansamayo miisaaniyadda la ansixiyay.

2. Qorshaha Hantidhawrka Sannadlaha ah ee faahfaahsan ee Hay'ad kasta ee Dowladdeed waa in uu ansixiyo Sarkaalka Idman ee Hay'addas (iyo Guddiga Hantidhawrka, haddii uu jiro). Qorshuhu waa in uu ka koobnaadaa waqtiga iyo miisaaniyadda loo qoondeeyey hawlaha hantidhawrista gudaha iyo dib-u-eegisyada hantidhawreed ee uu codsan karo Sarkaalka Idman ama Guddiga Hantidhawrka.

3. Madaxa Hantidhawrka Gudaha waa inuu si joogto ah ugu soo gudbiyaa Sarkaalka Idman (iyo Guddiga Hantidhawrka, haddii uu jiro) warbixinnada hantidhawrka gudaha.

4. Sarkaalka Idman waa in uu si joogto ah dib-u-eegis ugu sameeya awoodaha, baaxadda shaqada, shaqaalaha ka hawl-gala iyo dhaqaalaha loo qoondeeyay unugga hantidhawrka gudaha ee hay'addiisa, si uu u xaqiijiyo in si buuxda loogu hoggaansanyahay Hagahan iyo xeerarka iyo tilmaamaha kale ee loo soo saaray si waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019.

5. Shaqaalaha unugga hantidhawrka gudaha looma oggola inay:

(b) Fuliyaan wax shaqo ah ee hawlgal ama maamul oo ay leedahay Hay'addooda (tusaale ahaan, diyaarinta lacag-bixinnada, ansixinta macaamilaadka, ama diyaarinta warbixinnada maaliyadeed).

(t) Bilaabaan ama ansixiyaan wax macaamilaad xisaabeed ah oo ka baxsan shaqada hantidhawrka gudaha.

(j) Hagaan ama maamulaan shaqaale ka tirsan Hay'addooda kuwaas oo aan ka shaqayn unugga hantidhawrka gudaha, marka laga reebo shaqaalaha si rasmi ah loogu xilsaaray inay caawiyaan hawlaha hantidhawrka gudaha.

### Qodobka 7: Nidaamka La Xisaabtanka Hantidhawrka Gudaha

1. Madaxa Hantidhawrka Gudaha, marka uu gudanayo waajibaadkiisa, waxa la xisaabtamaya Sarkaalka Idman ee Hay'adda Dowladdeed (iyo Guddiga Hantidhawrka, haddii uu jiro), waxaana looga baahan yahay in uu:

(b) Sanad kasta soo gudbiyo qiimeyn ku saabsan waxtarka iyo wax-ku-oolnimaada nidaamyada iyo habraacyada ay Hay'adda Dowladdeed u adeegsato xakamaynta hawlaheeda iyo maareynta khataraha, iyadoo lagu salaynayo ujeeddada iyo baaxadda shaqo ee loo igmaday.

(t) Ka warbixiyo arrimaha muhiimka ah ee la xiriira nidaamyada xakamaynta hawlaha Hay'adda Dowladda, oo ay ku jiraan talooyinka iyo horumarinnada suurtagal ah oo lagu hagaajin karo nidaamyadaas, isla markaana sii wado ka warbixinta arrimahaas ilaa si buuxda looga xallinaayo ama looga soo afjaraayo.

(j) Si joogto ah (ama xilliyeeysan) u bixiyo warbixin ku saabsan heerka fulinta iyo natiijooyinka Qorshaha Hantidhawrka Sanadlaha ee Hay'adda Dowladda, iyo sidoo kale in unugga hantidhawrka gudaha ay ku filanyihiin shaqaalaha, miisaaniyadda iyo agabka uu ku hawlgalo.

(x) La shaqeeyo, isla markaana kormeer guud ku sameeyo waaxyaha iyo unugyada kale ee hay'addiisa ee masuulka ka ah xakamaynta iyo dabagalka, oo ay ka mid yihiin kuwa u xilsaaran maareynta khataraha, u hoggaansanaanta sharciyada, amniga, latalinta sharciga, iyo anshaxa.

### Qodobka 8: Madaxbannaanida

1. Si loo xaqiijiyo madaxbannaanida hawlaha hantidhawrka gudaha ee Hay'addaha Dowladda, shaqaalaha hantidhawrka gudaha waxa ay si toos ah u hoos tagayaan Sarkaalka Idman ee hay'addooda (iyadoo ay farsamo ahaanna u hoos tagayaan Guddiga Hantidhawrka, haddii uu jiro), sida ku xusan Qodobka 7 ee Hagahan.

2. Madaxa Hantidhawrka Gudaha waxa maamul ahaan hoos tagaya Sarkaalka Idman, halka uu farsamo ahaanna hoos tagaayo Guddiga Hantidhawrka, haddii guddigaasi la dhisay.

3. Wasaaradda Maaliyaddu waa inay, iyadoon si toos ah u faragelinayn, ku taageertaa madaxbannaanida unugyada hantidhawrka gudaha ee Hay'adaha Dowladda saarista heerarka (standards) iyo habraacyada hantidhawrka gudaha.

4. Sidoo kale, Wasaaradda Maaliyaddu waa inay gacan ka geysataa xoojinta hannaanka iyo wax-ku-oolnimada hantidhawrka gudaha ee Hay'addaha Dowladda Federaalka iyadoo:

(b) soo saaraysa heerar qasab ah oo hantidhawr gudaha ah, hab-raac mideysan oo ku salaysan qiimaynta khataraha (risk-based methodology), qaabab warbixin oo halbeeg ah, tilmaamayaal waxqabad (KPIs), iyo xeerar anshaxeed ee hagaya saraakiisha maamulka maaliyadda guud;

(t) bixisa tababarro, talo-bixin iyo taageero farsamo marka ay codsadaan unugyada hantidhawrka gudaha;

(j) fulisa dib-u-eegisyo tayo-hubin (quality reviews) iyo qiimeyn is-barbardhig (peer assessments) oo ay iskeed u sameeynayso, kadib marka ay la tashato Sarkaalka Idman ee Hay'adda Dowladda oo ay khusayso.

5. Madaxa Hantidhawrka Gudaha iyo dhammaan shaqaalaha hantidhawrka gudaha waa in ay si sannadle ah, iyo mar kasta oo xaalad timaaddo, la wadaagan Sarkaalka Idman xogta danaha is-diidan (conflict of interest) ee jira ama suurtagal ah. Haddii ay jiraan dano is-diidan, saraakiisha hantidhawrka gudaha ee ku lugta leh danahaas kama qayb qaadan karaan wax hawl hantidhawr ah oo danahaas is-diidan ay saamayn karaan.

6. Dhammaan shaqaalaha hantidhawrka gudaha waa in ay ilaaliyaan sirta dhammaan xogta ay helaan inta ay gudanayaan waajibaadkooda. Ma faafin karaan wax xog sir ah oo aan fasax loo haysan, marka laga reebo xaaladaha uu sharcigu waajibinayo ama marka ay lagama maarmaan u tahay gudashada hawlahooda hantidhawrka.

7. Wasiirka Maaliyaddu waxa uu sannad kasta dib u eegis ku sameyn karaa Hagahan (Charter), si uu u xaqiijiyo inuu ku habboonyahay hawlaha loogu talagalay. Wax ka beddel kasta ee Hagahan oo la soo jeediyo waxa loo marayaa habraaca ku xusan farqadda 10-aad ee Qodobka 3-aad.

### Qodobka 9: Mas'uuliyadda Unugga Hantidhawrka Gudaha

1. Madaxa Hantidhawrka Gudaha waxa uu mas'uul ka yahay xaqiijinta in unugga hantidhawrka gudaha uu fuliyo hawlahan soo socda:

(b) In uu diyaariyo Qorshe Hantidhawr Sannadle ah oo la socon kara baahiyaha Hay'adda Dowladda, loona dejiyo hab ku salaysan qiimaynta khataraha (risk-based methodology) iyadoo la raacaayo tilmaamaha Wasiirka Maaliyadda. Qorshuhu waa in uu xisaabta ku darsadaa khataraha iyo arrimaha la xiriira koontoroolka gudaha ee usoo if-baxay Sarkaalka Idman ama ay u soo gudbiyeen saraakiisha kale ee hay'adda. Marka la dhameeyo diyaarinta Qorshaha Hantidhawrka Sannadle ah (iyo wax ka beddelkiisa rubac laha ah), waa in loo gudbiyaa Sarkaalka Idman ee Hay'adda Dowladda, si loo ansixiyo.

(t) In uu fuliyo Qorshaha Hantidhawrka Sannadlaha ah ee la ansixiyey, isla markaana uu qabto hawl kasta oo kale oo hantidhawr ama talo-bixin ah oo uu codsado Sarkaalka Idman ama Guddiga Hantidhawrka, waase haddii hawlahaasi aanay wax u dhimayn madaxbannaanida unugga hantidhawrka gudaha.

(j) In uu hubiyo in unugga hantidhawrka gudaha uu leeyahay shaqaale leh xirfad, aqoon, iyo khibrad ku filan, si loo fuliyo waajibaadka ku xusan Hagahan.

(x) Iyadoo la raacayo Qodobka 46(1) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, in uu qabto hawlaha soo socda:

(i) In uu si joogto ah u eego habsami u socodka shaqo ee Hay'adda Dowladda, gaar ahaan nidaamyada maareynta maaliyadda.

(ii) In uu qiimeeyo in Hay'adda Dowladdu ay u hoggaansanto dhammaan habraacyada maareynta maaliyadda ee ku xusan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, iyo tilmaamaha iyo xeer-nidaamiyaasha Sharcigaas ee uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda.

(iii) In uu qiimeeyo ku filnaanta iyo waxtarka nidaamyada xakamaynta, hubinta iyo dheellitirka (checks and balances), iyo guud ahaan hababka maareynta maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyadeeda.

(iv) In uu soo jeediyo Sarkaalka Idman ee Hay'adda Dowladda tallaabooyinka sixitaanka ah, marka loo baahdo.

(kh) In uu qiimeeyo dib-u-habeynnada waaweyn, isku-darka ama mideynta shaqooyinka, iyo hirgelinta ama wax ka beddelka adeegyada, habraacyada, hawlaha iyo nidaamyada koontoroolka gudaha, inta lagu jiro marxaladaha diyaarintood, hirgelintooda ama ballaarintood.

(d) In uu soo saaro Warbixinnada Hantidhawrka Gudaha, kuwaas oo si toos ah loogu gudbinaayo Sarkaalka Idman. Sarkaalka Idman waxa uu la wadaagi karaa warbixinta madaxa waaxda la baaray si loo qaado tallaabooyinka ku habboon. Warbixin kasta waa in ay ka koobnaataa:

(i) baaxadda iyo ujeeddada hantidhawrka;

(ii) sharaxaadda habka hantidhawrka ee loo adeegsaday;

(iii) natiijooyinka oo lasoo koobay;

(iv) qiimeynta khatar kasta iyo koontoroolka loogu talagalay;

(v) faallooyin faahfaahsan iyo talooyinka sixitaanka;

(vi) tallaabooyinka sixitaanka ee maamulka hay'adda qorsheeyay iyo waqtiyada fulintooda;

(vii) sharaxaad heerarka khatarta iyo koontoroolada ee lagu isticmaalay warbixinta hantidhawrka.

(r) In uu soo saaro Warbixinno Dabagal Hantidhawr ah, kuwaas oo si toos ah loogu gudbinayo Sarkaalka Idman (iyo Guddiga Hantidhawrka haddii uu jiro) lixdii biloodba mar, kuwaas oo ka warbixinaya heerka fulinta tallaabooyinka sixitaanka ee maamulka hay'addu qorsheeyay.

(s) In uu diyaariyo Halbeegyada Muhiimka ah ee Waxqabadka (KPIs) ee lagu cabbiraayo hawlaha hantidhawrka gudaha, isla markaana uu saddexdii biloodba mar u gudbiyo Sarkaalka Idman (iyo Guddiga Hantidhawrka) warbixinno ku saabsan waxqabadka hantidhawrka gudaha.

(sh) In uu si joogto ah ugu wargeliyo Sarkaalka Idman habraacyada cusub iyo hababka ugu wanaagsan ee hantidhawrka gudaha, oo ay ku jiraan kuwa ay soo gudbiso Wasaaradda Maaliyadda.

(dh) In uu ka caawiyo Sarkaalka Idman baaritaanka iyo hubinta tuhunnada culus ee musuqmaasuq ama khiyaamo, isla markaana uu natiijooyinka si toos ah ugu gudbiya Sarkaalka Idman, Hantidhawraha Guud iyo Wasiirka Maaliyadda.

(c) In uu tixgeliyo, isla markaana xisaabta ku darsado baarista hantidhawrka dibadda iyo hay'adaha sharci ilaalinta, si loo xaqiijiyo hantidhawris dhammaystiran iyadoo kharashka ku baxa hantidhawrista la beeqaaminaayo.

(g) In uu si rasmi ah ula shaqeeyo Hantidhawraha Guud ugu yaraan hal mar sanadkii, isaga oo la wadaagaya Qorshaha Hantidhawrka gudaha isla markaana kala tashanaaya mowduucyada baarista, si'aysan u dhicin baaris isku nuuc ah. Sidoo kale, unugga hantidhawrka gudaha waa inuu siiyaa Hantidhawraha Guud nuqullo ka mid ah warbixinnada hantidhawrka gudaha marka uu codsado.

(f) In uu ilaaliyo magaca iyo xogta ee qof kasta oo si niyad-sami leh u soo sheega musuq, khiyaamo, khalad ama wax is-dabamarin, isla markaana uu xaqiijiyo in aan qofkaas lagu sameyn wax aargoosi ama dhibaato ah.

**Qodobka 10: Dhaqan-galka**

1. Hagahan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Golaha Wasiirrada.
2. Marka la ansixiyo, Hagahan waxa lagu daabacayaa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda Maaliyadda, iyo Faafinta Rasmiga ah.

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.204** **Taariikh: 09/05/2026**

**XEERKA: XEERNIDAAMIYAHA ADEEGYADA AMNIGA GAARKA AH.**

XRW - BIXIT
1 2 MAY 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu arkay:** Qodobka 6aad & Qodobka 77aad ee Xeerka Nabadgelyada Guud, ee (sharci 1963).

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **WAG/XW/222/2026** ee ku taariikheysan **12/04/2026** ee Wasaaradda Amniga kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeernidaamiyaha Adeegyada Amniga Gaarka ah;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.12.152.05.26** ee **07/05/2026,** kuna saabsan Ansixinta**"Xeernidaamiyaha Adeegyada Amniga Gaarka ah"**oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeekani uu leeyahay Ilaalinta Amniga guud iyo Badqabka Dadweynaha.

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.12.152.05.26** ee **07/05/2026,** kuna saabsan Ansixinta**"Xeernidaamiyaha Adeegyada Amniga Gaarka ah"**oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiy.

**Qodobka 2aad**
**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Amniga loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeernidaamiyaha Adeegyada Amniga Gaarka ah.

**Qodobka 3aad**
**Dhaqangal**

Xeerkan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO
TAARIIKH
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**SUMMAD: XGG/154/2026** **07/04/2026**

**Ku: Agaasimaha Golaha wasiiradda** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Amniga Gudaha** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Raiisul Wasaaraha JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo sharci**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, isaga oo tixraacaya warqadda summaddeedu tahay: **WCAD/XAWSHH/3085/2026,** ee ku taariikhaysan 04/03/2026, ujeeddadeeduna ahayd **Soo-Gudbin "Xeer-Nidaamiyaha Adeegyada Amniga Gaarka ah"."** kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, isaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo ee ku xusan Xeer Lr. 18 ee soo baxay 29-kii Jannaayo 1976, si uu uga bixiyo talo sharci oo ku saabsan Xeer-nidaamiyahan waafaqsanaantiisa nidaamka sharci ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ayaa waxa uu si qoto dheer u dersay "Xeer-nidaamiyaha Adeegyada Amniga Gaarka ah", kaas oo loogu talagalay dejinta hannaan sharci oo nidaaminaya adeegyada amniga gaarka ah, si loo hubiyo ilaalinta amniga guud, bad-qabka dadweynaha, iyo xakamaynta isticmaalka hubka.

Haddaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, iyada oo lagu salaynayo natiijada daraasadda uu sameeyay, waxa uu ku talinayaa in Wasaaradda Amniga Gudaha ay soo saarto hageyaal iyo habraacyo faahfaahsan oo lagu:

- Dhammaystirayo habraaca rukhsad-bixinta, iyadoo si cad loo qeexayo muddada go'aan-qaadashada, sababaha diidmada, iyo waajibaadka maamulka ee ku saabsan bixinta go'aan qoraal ah oo sababaysan, laguna caddeeynayo nidaamka ganaaxyada maamul, si loo hubiyo in ay jiraan halbeegyo cad oo lagu saleeyo xadgudubyada iyo ciqaabtooda, loogana hortago ku takri-fal awood maamul oo keeni karta Dacwad Maamul.
- Maareeynayo hubka iyo rasaasta, oo ay ku jiraan diiwaangelin, kormeer joogto ah, iyo habraaca la-wareegidda hubka marka rukhsaddu dhammaato ama la laalo.

- Taageerayo dhaqan-gelinta xeer-nidaamiyahan, si loo xaqiijiyo isku mid ahaanshaha fulinta iyo fahamka xeerka, laguna hubinayo ilaalinta xuquuqaha habraaca ee adeeg-bixiyeyaasha, gaar ahaan xaqa ay u leeyihiin in la dhageysto ka hor inta aan laga qaadin tallaabooyin maamul oo culus sida hakin ama laalid rukhsad.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, waxa uu ku talinayaa si loo gaaro ujeedooyinka "Xeer-nidaamiyaha Adeegyada Amniga Gaarka ah", in Golaha Wasiirrada loo gudbiyo, maadaama uu si weyn uga qayb qaadanayo xakameynta hubka iyo shirkadaha amniga gaarka ah, ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta, iyo sugidda amniga qaranka, uuna sharci ahaan waafaqsan yahay Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, (ilaalinta amniga iyo xuquuqda aadanaha), Mabaadi'da guud ee maamulka iyo kala-soocidda awoodaha dowladeed, Xeerka Nabadgelyada Guud nidaamka sharci ee dalka, isla markaana ay muhiim u tahay xoojinta ilaalinta rayidka, sharciyadda amniga, isla-xisaabtanka, iyo xoojinta kalsoonida bulshada ee dowladnimada.

Salaan qadarin leh

FG. Waxaa halkan ku lifaaqan: Nuqulka Xeer-Nidaamiyaha sare ku xusan.

**Dr. Saalax Siidii Sh. C/raxmaan**
**Ku-simaha Garyaqaanka Guud ee Dawladda**
**Ahna Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA / OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL / مكتب المحامي العام للدولة

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشئون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والا تقاقيات

Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/3085/2026** **Tr. 04/03/2026**

Mudane Garyaqaan Guud,

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA ADEEGYADA AMNIGA GAARKA AH"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Xukuumadda JFS waxay halkan ku soo gudbinaysaa **"Xeer-nidaamiyaha Adeegyada Amniga Gaarka ah"** oo ay soo gudbisay **Wasaaradda Amniga Gudaha, Xukuumadda JFS** (Arag lifaaqa).

Xeer-nidaamiyahani wuxuu qeyb weyn ka qaadanayaan in la nidaamiyo qaababka ay u hawl-galaan hay'adaha gaarka loo leeyahay ee ku hawlan adeegyada amniga iyo ilaalinta bed-qabka hubka iyo agabyada ay isticmaalaan.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsaneynaa in uu waajibaadkiisa sharci ee ku aaddan Xeer-nidaamiyahan ka guto, si hab-raaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA WASAARADDA CADAALADDA IYO DASTUURKA MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTION FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Mudane Xasan Axmed Cali
**AGAASIMAHA WAAXDA SHARCIYADA IYO HESHIISYADA,**
**WASAARADDA CADAALADDA IYO ARR. DASTUURKA**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Arrimaha Dastuurka, Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia. | Tell: 0615847146

**Tixraac:XRW/XJ0112/03/2026** **Taariikh: 30/03/2026**

**Ku: Wasaaradda Cadaaladda iyo Dastuurka**
**Og: Agaasimaha Golaha Wasiirrada**
**Og Garyaqaanka Guud ee Dowladda**
**Og: Wasaaradda Amniga Gudaha**

**UJeeddo: Soo Gudbin Hindise-Sharciyeedyadka Xeer-nidaamiyaha Adeegyada amniga Gaarka ah.**

**Xoghayaha Joogtada Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.**

Markuu arkay: Xeer Ra'iisul Wasaare **Lr. 125** soona baxay **06/04/2023** iyo Habraaca Diyaarinta Hidise-sharciyeedyada Qodobkiisa **2aad** farqadaha (ii) iyo (iii) ee Siyaasadda Diyaarinta Hindise sharciyeedyada, Xeernidaamiyeyaasha iyo Gelidda Heshiisyada Xukuumadda JFS.

Markuu Arkay: Kulamo heer farsamo iyo heer Wasiir ah oo ay qabteen Tiirka Dib-u-xoreynta iyo sugidda amniga ee laguna falanqeeyay Xeer nidaamiyaha kor ku xusan, ee ay soo gudbisay Wasaaradda **Amniga Gudaha,** si loo hubiyo talo-galinta dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale **(Stakeholders)** ee saamaynta ku-leh Xeer nidaamiyahan.

Markuu hubiyey: In Hindise-sharciyeedyadaan qayb ka yihiin taaba-galinta barnaamijka Siyaasadeedee Xukuumadda si waafaqsan Dastuurka KMG ah ee Dalka.

Ayaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, wuxuu usoo gudbinayaa Wasaaradda Cadaaladda iyo Dastuurka Xeer nidaamiyahan si ay uga gudato waajibaadkeeda.

**Wadashaqeyn Wacan.**

Kamal

**Mudane: kamal Gutale**
**Xoghayaha Joogtada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
# WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

## XEER-NIDAAMIYAHA ADEEGYADA AMNIGA GAARKA AH

**Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Amniga Gudaha, Xukuumadda JFS 2026**

# TUSMO:


**CUTUBKA KOWAAD** ---------- 3

**QODOBBO GUUD** ---------- 3

Qodobka 1aad Magaca Xeer-nidaamiyaha ---------- 3

Saldhigga Sharci iyo ---------- 3

Qodobka 4aad Qeexid ---------- 4

Qodobka 5aad Baaxadda Xeer-nidaamiyaha ---------- 5

**CUTUBKA LABAAD** ---------- 6

**AWOODAHA WASAARADDA AMNIGA GUDAHA** ---------- 6

Waaxda Amniga iyo La-dagaallanka Argagixisada ---------- 6

Xilka iyo Waajibaadka Waaxda ---------- 7

**CUTUBKA SADDEXAAD RUKHSADAHA IYO KORMEERKA HUBKA** ---------- 8

Waajib-ahaanshaha Rukhsadda ---------- 8

Hab-raaca Bixinta Rukhsadda ---------- 8

Kormeerka Hubka iyo Agabka ---------- 9

**CUTUBKA AFARAAD** ---------- 9

**ARRIMAHA LA OGGOLYAHAYIYOKUWA REEBBAN** ---------- 9

Aqoonsiga Adeeg-bixiyaha ---------- 9

Qodobka 13aad HawlahaReebban ---------- 10

Qodobka 14aad Adeegyada La Oggol Yahay ---------- 10

**CUTUBKA SHANAAD** ---------- 11

**HAL-BEEGYADA SHAQAALAHA IYO TABABARKA** ---------- 11

Qodobka 15aad ---------- 11

Hubinta Shaqaalaha ---------- 11

Manhajka Tababarka Shaqaalaha ---------- 11

**CUTUBKA LIXAAD HUBINTA IYO ISLA-XISAABTANKA** ---------- 12

La-socodka iyo Kormeerka ---------- 12

HannaankaCabashadaDadweynaha ---------- 12

Tillaabooyin Maamul ---------------------------------------------------------------------------------------------------- 13

Dacwadaha Ciqaabta----------------------------------------------------------------------------------------------------- 13

CUTUBKA 7AAD QODOBBO GUNNAANAD AH ------------------------------------------------------13

Qodobka 21aad Xilliga Kala-guurka ------------------------------------------------------------------------------------ 13

Qodobka 22aad Xaqa Cabashada----------------------------------------------------------------------------------------- 14

Ilaalinta Xogaha iyo Warbixinnada ---------------------------------------------------------------------------------------- 14

Awoodda Soo-saarista Hageyaal iyo Hab-raacyo -------------------------------------------------------------------- 14

Baabi'in ---------------------------------------------------------------------------------------------------------------- 14

Qodobka 26aad Dhaqan-gal ----------------------------------------------------------------------------------------------- 14

# CUTUBKA KOWAAD
# QODOBBO GUUD

## Qodobka 1aad

### Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "**Xeer-nidaamiyaha Adeegyada Amniga Gaarka ah"**.

## Qodobka 2aad

### Saldhigga Sharci

Xeer-nidaamiyahan waxaa loo soo saaray si waafaqsan Qeybta 6aad iyo Qodobka 77aad ee Xeerka Nabadgelyada Guud ee soo baxay 26 Agoosto 1963 kaasoo awood u siinaya Xukuumadda in ay soo saari karto xeer-nidaamiyeyaal lagu faahfaahinayo laguna dhaqan-gelinayo qodobbada Sharcigaas.

## Qodobka 3aad

### Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyaha

Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyahan waa:

a) In la helo hannaan sharci oo faahfaahsan kaasoo nidaaminaya, xakameeynaya adeegyada amniga gaarka ah iyo cidda loo oggol yahay in ay bixiso,

b) In loo bixiyo si waafaqsan xeerarka dalka iyo xeerarka caalamiga ah ee ku saabsan xuquuqda aadanaha iyo nidaaminta amniga gaarka ah;

c) In la ilaaliyo amniga guud iyo bed-qabka dadweynaha;

d) In la hubiyo xirfadda, anshaxa, iyo tababarka ilaalada iyo shaqaalaha amniga gaarka ah;

e) In laga hortago ku-takri-falka awoodda iyo isticmaalka xoog xad-dhaaf ah; iyo

f) In la maareeyo isticmaalka hubka, qalabka iyo astaamaha shaqada.

## Qodobka 4aad
## Qeexid

Haddii aan si kale loogu tilmaamin Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, erayada soo socda waxay lahaanayaan micnaha ku hor qoran:

1. **Xeerka Nabadgelyada Guud:** waxaa loola jeedaa Sharci Lr. 21 ee soo baxay 26 Agoosto 1963.

2. **Xaaladaha Isticmaalka Hubka** waxaa loola jeedaa marka ay jiraan xaalado aan la abuurin oo waafaqsan xeerarka dalka kuwaasoo oggolaanaya isticmaal xaddidan ee hubka si u dhiganta khatarta markaas jirta, iyadoo ay khasab tahay in la joojiyo isticmaalka hubkaas isla marka ay khatartu dhammaato:

    a) Iska-difaacidda halis keenaysa dhimasho ama dhaawac culus;
    b) Ka-difaacidda cidda la ilaalinayo halis keenaysa dhimasho ama dhaawac culus; iyo
    c) Ka-difaacidda hanti muhiim ah oo gaar ah burburin ama dhibaatayn ku wajahan.

3. **Waaxda:** waxaa loola jeedaa Waaxda Amniga iyo La-dagaallanka Argagixisada ee lagu sheegay Qodobka 6aad ee Xeer-nidaamiyahan.

4. **Ka-qeyb-galka Colaadaha:** waxaa loola jeedaa fal kasta oo loogu tala-galay in looga qeyb-galo colaado ama isku dhacyo hubaysan oo socda oo ay ku jiraan hawl-gallo weerar ah, difaacidda bar-tilmaameedyo ciidan, iyo ururinta xogo looga faa'iidaysanayo codaaladaas ama si kale.

5. **Rukhsad:** waxaa loola jeedaa oggolaanshaha rasmiga ah ee ay soo saarto Wasaaradda Amniga Gudaha, Xukuumadda JFS lana siiyo shirkad ku dhisan sharci oo bixinaysa adeegyo amni gaar ah.

6. **Wasaaradda:** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Amniga Gudaha, Xukuumadda JFS.

7. **Adeeg-bixiyaha:** waxaa loola jeedaa shirkad kasta oo sharci ku dhisan taasoo bixinaysa adeegyo amni gaar ah, sida ilaalinta dad gaar ah, waxyaabo gaar ah, ama goobo gaar ah, waxaana ku jira adeegyada amni ee shirkaduhu sameysanayaan. Adeeg-bixiyeyaal ma noqon karaan kooxaha/dadka u abaabulan

sida maleeshiyaadka ama aan ahayn shirkado u dhisan si waafaqsan Sharciga Shirkadaha Soomaaliya.

8. **Shaqaale:** waxaa loola jeedaa dhammaan dadka ka shaqeeya ama heshiis kula jira adeeg-bixiyaha kuna hawlan bixin adeegyo amni gaar ah kuwaasoo dhammeystay tababarka looga baahan yahay.

9. **Hawlaha Reebban:** waxaa loola jeedaa arrimaha lagu tilmaamay Qodobbada 11aad iyo 12aad ee Xeer-nidaamiyahan.

10. **Wasiir:** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha, Xukuumadda JFS.

11. **JFS:** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 5aad
## Baaxadda Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahani wuxuu nidaaminayaa dhammaan:
   a) Shirkadaha bixinaya adeegyada amniga gaarka ah;
   b) Shirkadaha sameysanaya ilaalada gaarka ah;
   c) Rukhsad-bixinta/Shati-bixinta, cusboonaysiinta, hakinta iyo kala-laabashada shatiga/rukhsadda;
   d) Haysashada hubka iyo adeegisigiisa;
   e) Hab-raacyada hawl-galka iyo anshaxa shaqada;
   f) Kormeerka iyo u-hoggaansanaanta xeerarka dalka;
   g) Isticmaalka xoogga, hubka iyo qalabka;
   h) Ilaalinta xogta iyo keydinta dokumentiyada; iyo
   i) Iskuduwidda iyo ka-warbixinta adeegyada amniga gaarka ah.
2. Xeer-nidaamiyahani wuxuu nidaaminayaa hawl-gallada amni ee lagu ilaalinayo:
   a) Hantida, dadka, dhismayaasha ama gaadiidka;
   b) Xafiisyada hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga;
   c) Goobaha ganacsi, adeeg ama warshado; iyo
   d) Hawl-gallada amni ee kale ee uu tilmaamo Wasiirka, waqti-ka-waqti.

## CUTUBKA LABAAD
## AWOODAHA WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

### Qodobka 6aad
### Mudnaanta Awoodaha Dawladeed

1. Iyadoo laga duulaayo ujeeddooyinka Xeerka Nabadgelyada Guud, oggolaanshaha iyo rukhsadsiinta adeeg-bixiyaha qabanaya adeegyo amni gaar ah marnaba looma qaadan karo in ay ku jiraan awoodaha nabadgelyada guud iyo awoodaha uu sharcigu siiyey hay'adaha amniga ee labada heer Dawladeed. Shaqaalaha bixinaya adeegyo amni oo gaar ah marnaba looma qaadan karo in ay yihiin ama la maqaam yihiin ciidan Dawladeed, waxaana loo oggol yahay oo keliya arrimaha uu jideeyey Xeer-nidaamiyahan.
2. Wasaaradda Amniga Gudaha, iyadoo kaashanaysa Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, ayaa hubinaysa in aan rukhsadaha adeegyada amniga gaar ah loo isticmaalin hawlo ka baxsan hawlaha lagu oggolaaday si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

### Qodobka 7aad
### Waaxda Amniga iyo La-dagaallanka Argagixisada

1. Waaxda Amniga iyo La-dagaallanka Argagixisada ee Wasaaradda Amniga Gudaha ayaa u xilsaaran awoodaha lagu sheegay Qodobka 7aad ee Xeer-nidaamiyahan.
2. Waaxda waxaa hoggaaminaya agaasime uu soo magacaabo Wasiirka Amniga Gudaha, Xukuumadda JFS isagoo tixgelinaya aqoonta, kartida iyo khibradda uu u leeyahay arrimaha mniga gaarka ah, xeerarka dalka, iyo nidaaminta shirkadaha gaarka ah.
3. Si waafaqsan Qaab-dhismeedka Maamul ee Wasaaradda, Waaxdu waxay hoostagaysaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda waxayna yeelanaysa shaqaale iyo miisaaniyad hawleed ee ay ku fulin karto hawlaha loo idmaday si ku saleysan hab-raacyada shaqaalaha iyo isticmaalka qoondooyinka miisaaniyadeed ee Wasaaradda.

## Qodobka 8aad
## Xilka iyo Waajibaadka Waaxda

1. Waaxdu waxay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:
    a) In ay qabato, hubiso, kana talo-bixiso codsiyada la xiriira rukhsadaha la siinayo adeeg-bixiyeyaasha;
    b) In ay abuurto, isla markaana gacanta ku hayso keyd elekteroonig ah oo lagu keydinayo macluumaadka adeeg-bixiyeyaasha loo oggolaaday in ay Soomaaliya ka fuliyaan adeegyo amni oo gaar ah, iyadoo macluumaadkaas ay ku jiraan xogo dhammeystiran oo laga tixraaci karo shirkadaha la siiyey rukhsadaha, isla markaasna ku soo bandhigaysa macluumaadkaas mareeg ay dadweynuhu ka heli karaan;
    c) In ay dejiso ayna soo saarto tilmaamo faahfaahsan oo khuseeya hal-beegyada tababarka, isticmaalka hubka, maareynta hubka iyo rasaasta, iyo anshaxa guud ee hawlaha amni ee adeeg-bixiyeyaasha;
    d) In ay ka codsato una raacdo Ciidanka Boliiska booqashooyin la shaaciyey ama kediska ah oo lagu fatashayo xafiisyada, bakhaarrada, iyo goobaha ay ku sugan yihiin shaqaalaha ku hawlan adeegyada amni ee gaarka ah;
    e) In ay qabato ayna baarto cabashooyinka ka imaanaya dadweynaha ee la xiriira adeeg-bixiyeyaasha haysta rukhsadaha Wasaaradda Amniga Gudaha;
    f) In ay u soo jeediso Agaasimaha Guud ee Wasaaradda tallaabooyinka maamul ee Wasiirku ka qaadayo adeeg-bixiyeyaasha oo ay ku jiraan ganaaxyo lacageed, hakin rukhsadaha, iyo burintoodaba; iyo
    g) In ay la socoto u-hoggaansanaanta adeeg-bixiyeyaasha ee Xeer-nidaamiyahan, tilmaamaha lagu soo saaray, iyo xeerarka kale ee dalka, iyadoo wixii fal-dembiyeed ah u gudbinaysa Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed iyo Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud.
2. Dhammaan codsiyada Waaxda, hageyaasheeda, soo-jeedinnadeeda, iyo talooyinkeeda waxaa soo saaraya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda si waafaqsan tilmaamaha Wasiirka.

## CUTUBKA SADDEXAAD
## RUKHSADAHA IYO KORMEERKA HUBKA

### Qodobka 9aad
### Waajib-ahaanshaha Rukhsadda

1. Waxaa ka reebban adeeg-bixiye kasta oo qabanaya adeegyo amni gaar ah in uu fuliyo hawlaha lagu oggolaaday Xeer-nidaamiyahan isagoo aan haysan rukhsad dhaqan-gal ah oo ka soo baxday Wasaaradda Amniga Gudaha.
2. Ciddii fulisa adeegyo amni gaar ah iyadoo aan rukhsad u haysan waxay ku xad-gudubtay Xeer-nidaamiyahan iyo xeerarka kale ee dalka waxaana laga qaadayaa tallaabooyin ay ku jiraan awaamiir lagu joojinayo hawlahooda, la-wareegista aqabka la isticmaalayey, iyo ku-oogista dacwad ciqaabeed si waafaqsan xeerarka dalka.

### Qodobka 10aad
### Hab-raaca Bixinta Rukhsadda

1. Wasiirku wuxuu bixinayaa rukhsadda la siinayo adeeg-bixiye markuu helo soo-jeedinta Agaasimaha Guud oo tixgeliyey talada Waaxda, iyadoo adeeg-bixiyaha looga baahan yahay in uu soo dhammeystiro arrimaha soo socda:
   a) In uu haysto rukhsadda ama shatiga ganacsiga oo aan dhacsanayn si waafaqan xeerarka dalka iyo ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyahan;
   b) In uu haysto dhaqaale ku filan iyo keyd hantiyeed oo lagu dabooli karo mag-dhawga iyo mas'uuliyadda waxyeellada uu geysto, hadba sida ay dhigayaan tilaamaha ay soo saarto Wasaaraddu;
   c) In uu soo gudbiyo siyaasadda iyo hab-raacyada uu ku xakamaynayo isticmaalka hubka oo waafaqsan xeerarka dalka iyo xeerka anshaxa shaqaalihiisa si waafaqsan tilmaamaha ay soo saarto Wasaaraddu.
   d) In uu soo gudbiyo manhajka tababarka shaqaalaha qabanaya hawlaha amniga gaarka ah si waafaqsan Qodobka 17aad ee Xeer-nidaamiyahan;
   e) In uu keeno caddeymo amni oo ka soo baxay Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, waana in caddeymahaas laga keeno milkileyaasha, maamuleyaasha, iyo hawl-wadeennada kaleba;

f) In uu leeyahay bakhaar ama wax u dhigma oo si bed-qab leh loogu keydin karo hubka iyo rasaasta loo oggol yahay, waxaana hubinaya Waaxda; iyo
g) In uu bixiyo khidmadda diiwaan-gelinta si waafaqsan qiimaha lagu sheegay lifaaqa Xeer-nidaamiyahan.

2. Cusboonaysiinta rukhsadda waxaa loo marayaa isla hab-raaca lagu bixiyey rukhsadda.

### Qodobka 11aad
### Kormeerka Hubka iyo Agabka

1. Waaxdu waxay soo saaraysaa ayna keydinaysaa liiska hubka iyo agabka loo oggol yahay adeeg-bixiyaha, waxaana ka reebban in uu isticmaalo hub ama agab aan ku jirin liiska loo awood-siiyey.
2. Haysashada hubka iyo rasaasta loo oggol yahay adeeg-bixiye kasta waxay u baahan yihiin rukhsad gaar ah oo lagu caddeynayo arrimaha soo socda:
   a) Baahida loo qabo hubka iyo rasaasta la codsanayo;
   b) Dhammeystirnaanta tababarrada shaqaalaha ku shaqeynaya hubka; iyo
   c) Hubinta bakhaarka lagu keydinayo hubka si waafaqsan hab-raacyada ay soo saarto Wasaaraddu.
3. Waxaa gebi ahaanba reebban oggolaanshaha iyo isticmaalka wax kasta oo aan ahayn hub fudud (AK47 iyo Bastoolad), sida qoryaha waaweyn iyo waxyaabaha qarxa.

## CUTUBKA AFARAAD
## ARRIMAHA LA OGGOLYAHAYIYOKUWA REEBBAN

### Qodobka 12aad
### Aqoonsiga Adeeg-bixiyaha

Labiska, summadaha, astaamaha, gaadiidka, iyo xarumaha adeeg-bixiyaha waxaa khasab ah in ay si aan shaki ku jirin uga duwanaadaan kuwa ay isticmaalayaan Ciidanka Xoogga Dalka, Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka, Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed, iyo cid kasta oo qabanaysa hawlo ciidan oo rasmi ah.

## Qodobka 13aad
## HawlahaReebban

Adeeg-bixiyaha waxaa gebi ahaanba ka reebban in uu fuliyo hawlaha soo socda:

1. In uu si toos ah ama si dadban uga qeyb-galo colaado ama isku dhacyo hubaysan oo socda.
2. In uu fuliyo hawlaha u gaarka Dawladda sida xarig, xannibaad, baaris dembi, iyo hawl-gallo lagu ilaalinayo amni iyo kala-dambaynta.
3. In uu geysto falal ka dhan ah xeerarka dalka iyo kuwa caalamiga ah isagoo ku xad-gudbaya xuquuqda aadanaha.
4. In uu fatashaad xad-dhaaf ah ku sameeyo dadka haddii aan qofku oggolaan ama aysan jirin khatar keenaysa waxyeello soo gaarta dad ama hanti (person or property).
5. In uu fuliyo hawlo caqabad ku ah hannaanka dimoqraadiyadda ee dalka ama ka hawl-galo sugidda amniga dano siyaasadeed ku qotoma.

## Qodobka 14aad
## Adeegyada La Oggol Yahay

Adeeg-bixiyaha haysta rukhsadda waxaa loo oggol yahay in uu fuliyo hawlaha soo socda oo keliya:

1. Ilaalinta walxaha iyo goobaha rayidka ah sida hoteellada, xarumaha ganacsiga, guryaha gaarka ah, xafiisyada, iyo bakhaarrada.
2. Gelbinta kolonyo socota ama dad socda waana in uu ku wargeliyaa hay'adaha amniga ee ay khusayso.
3. Bixinta adeegyada lagu qiimeynayo xaaladaha amni iyo talo-bixinta la xiriirta hawlaha ku xusan faqradaha 1aad iyo 2aad ee Qodobkan.
4. Adeegyada kale ee sida gaarka ah ay ugu oggolaatay Wasaaradda Amniga Gudaha si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

## CUTUBKA SHANAAD
## HAL-BEEGYADA SHAQAALAHA IYO TABABARKA

### Qodobka 15aad
### Hubinta Shaqaalaha

1. Adeeg-bixiyaha waxaa laga rabaa in uu hubiyo taariikh-nololeedka shaqaalihiisa oo ay ku jiraan caddeymaha ay soo saarto Qeybta Baarista Dembiyada (CID), iyadoo natiijada hubintaas lala wadaagayo Waaxda.
2. Dhammaan shaqaalaha ajnabiga ah waa in ay haystaan rukhsadda shaqada si waafaqsan xeerarka shaqada ee dalka.

### Qodobka 16aad
### Manhajka Tababarka Shaqaalaha

1. Dhammaan shaqaalaha bixinaya adeegyada amni waa in ay soo dhammeysteen tababar ugu yaraan 120 (boqol iyo labaatan) saacadood oo ay ku qanacday Waaxdu, waana in ay ku jiraan duruusta/casharrada soo socda:
   a) Xeer-nidaamiyahan iyo xeerarka hay'adaha amniga;
   b) Mabaadi'da guud ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xuquuqda Aadanaha;
   c) Mabaadi'da salka u ah xakamaynta iyo isticmaalka hubka; iyo
   d) Gargaarka degdegga iyo ka-warbixinta dhacdooyinka amni.
2. Shaqaalaha soo maray mihnad ciidannimo waxaa laga rabaa in ay qaataan tababar la xiriira u-hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyahan iyo xuquuqda aadanaha.
3. Dhammaan shaqaalaha waxay qaadanayaan tababar ugu yaraan 24 (afar iyo labaatan) saacadood oo sannadle ah si kor loogu qaado aqoontooda iyo xirfadooda si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

## CUTUBKA LIXAAD
## HUBINTA IYO ISLA-XISAABTANKA

### Qodobka 17aad
### La-socodka iyo Kormeerka

1. Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, isagoo tixraacaya codsiga Waaxda, wuxuu hubinayaa/kormeerayaa xarumaha, dokumentiyada, hubka, cabashooyinka dadweyne, iyo agabka adeeg-bixiyaha xilli kasta oo sidaasi habboon tahay ama uu jiro tuhun lagu rumaysan karo in lagu xad-gudbay Xeer-nidaamiyahan ama xeerarka kale ee dalka.
2. Adeeg-bixiye kasta waxaa laga rabaa in uu hayo qoraallo iyo warbixinno faahfaahsan oo ku saabsan hawlaha la fuliyey, dhacdooyinka amni ee gaar ahaan isticmaalka hubka, keydka hubka, iyo shaqaalaha, waana in xogahaas la keydiyo ugu yaraan muddo dhan 7 (toddobo) sano.

### Qodobka 18aad
### Hannaanka Cabashada Dadweynaha

1. Adeeg-bixiye kasta wuxuu sameynayaa xafiis gaar ah oo guddoomaya, isla markaasna baaraya cabashada dadweynaha ee la xiriirta hawlihiisa amni ama shaqaalihiisa, waana in uu dadweynaha u soo bandhigo sida loola xiriiri karo.
2. Dadweynaha waxay si toos ah ugu soo caban karaan Waaxda ama xarunta boolis ee ugu dhow, waxaana la sameynayaa baaris la xiriirta cabashada iyadoo natiijada baarista loo soo gudbinayo Wasiirka. Wasiirku wuxuuna qaadi karaa tallaabooyin ay ka mid yihiin amar mag-dhaw, tababar khasab ah, ama ganaax lacageed oo ku saleysan anshax-marin.
3. Hannaanka cabashada ee lagu qeexay qodobkan ma reebayo in dadweynuhu ay u caban karaan hay'adaha uu sharcigu awood u siiyey in ay guddoomaan cabashooyinka ka dhanka ah adeeg-bixiyaha.

## Qodobka 19aad

### Tillaabooyin Maamul

Marka ay jiraan xad-gudubyo ka dhan ah Xeer-nidaamiyahan uuna sidaas ku talo-bixiyo Agaasimaha Guud oo cuskanaya talada Waaxda, Wasiirku wuxuu awoodaa in uu qaado tallaabooyinka soo socda:

1. Digniin qoraal ah.
2. Amar lagu khasbayo tallaabooyin sixitaan.
3. Ganaax lacageed oo aan ka badnayn 10% dakhligooda sannadlaha.
4. Hakinta rukhsadda muddo aan ka badnayn 1 (hal) sano.
5. Laalidda rukhsadda.

## Qodobka 20aad

### Dacwadaha Ciqaabta

Dhammaan caddeymaha fal-dembiyeed ee ay Waaxdu ogaato waxaa si degdeg ah loogu gudbinayaa Ciidanka Booliska Soomaaliyeed iyo Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud, kuwaasoo baaraya, isla markaasna u oogaya dacwadaha ciqaabeed si waafaqsan xeerarka dhaqan-galka ah ee JFS.

# CUTUBKA 7AAD
# QODOBBO GUNNAANAD AH

## Qodobka 21aad

### Xilliga Kala-guurka

1. Adeeg-bixiyeyaasha hadda jira waa in ay isku soo diiwaan-geliyaan muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah laga billaabo markuu Xeer-nidaamiyahani dhaqan-galo, waxaana la siinayaa diiwaan-gelin ku-meel-gaar ah inta ay soo dhammeystirayaan hab-raacyada iyo shuruudaha uu jideeyey Xeer-nidaamiyahan.
2. Adeeg-bixiyeyaasha waxaa laga rabaa in ay si degdeg ah ugu soo wargeliyaan Waaxda qorshohooda iska diiwaan-gelinta ka hor inta aysan dhammaan muddada 30ka (soddonka) maalmood ah.
3. Wasaaraddu waxay soo saaraysaa hageyaal faahfaahsan oo lagu maareynayo xaaladda kala-guurka iyadoo la tixgelinayo nabadgelyada guud, xuquuqda shirkadaha, iyo u-hoggaansanaanta hal-beegyada cusub.

## Qodobka 22aad
## Xaqa Cabashada

1. Adeeg-bixiyuhu wuxuu Wasiirka ka codsan karaa dib-u-eegis maamul ee cabashada ka hor inta aanu maxkamad u gudbin.
2. Haddii lagu qanci-waayo dib-u-eegista Wasiirka, adeeg-bixiyaha wuxuu go'aannada Wasiirka uga caban karaa maxkamadda awoodda u leh dhegaysiga dacwadaha maamul ama idaariga ah.
3. Dacwadda cabashada ah waxaa go'aan looga gaarayaa sida ugu dhaqsaha badan iyadoo la tixgelinayo danta guud iyo xuquuqda adeeg-bixiyaha.

## Qodobka 23aad
## Ilaalinta Xogaha iyo Warbixinnada

1. Waaxdu iyo cidda la shaqaynaysa waxay ilaalinayaan xogaha ganacsi iyo kuwa amni ee ay ku ogaadaan xil-gudashadooda waxaana ka reebban in ay xogahaasi u isticmaalaan si aan waafaqsanayn xeerarka dalka.
2. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda wuxuu Wasiirka u soo gudbinayaa warbixinno seddex biloodle iyo sannadleba ah kuwaas oo soo koobaya xaaladda guud ee adeeg-bixiyeyaasha iyo hawlaha ay Waaxdku ka qabatay.

## Qodobka 24aad
## Awoodda Soo-saarista Hageyaal iyo Hab-raacyo

Wasiirka Amniga Gudaha wuxuu soo saari karaa hageyaal iyo hab-raacyo faahfaahsan oo habsami loogu dhaqan-gelinayo qodobbada iyo axkaamta Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 25aad
## Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey dhammaan Xeer-nidaamiyeyaasha, Hab-raacyada, Hageyaasha, siyaasadaha iyo awaamiirta ka hor-imaanaya ama aan la socon karin Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 26aad
## Dhaqan-gal

Xeer-nidaamiyahani wuxuu dhaqan-gelayaa markuu meel-mariyo Golaha Wasiirrada, isla markaana uu Dekreeto ku soo saaro Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda,

**Tixraac: XRW/ 550 /01/2026** **Taariikh: 25/01/2026**

**Ku: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyadda** **Muqdisho**
**Og: Dhamman Xubnaha Golaha Wasiirrada** **Muqdisho**
**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed** **Muqdisho**

**UJEEDO: <u>GO'AAN GOLE EE "ANSIXINTA SIYAASADDA BOOSTADA SOOMAALIYEED 2025 2030"</u>**

XRW - BIXIT
27 JAN 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

**Markuu arkay:** Warqada Summadeedu tahay **XW/WI&T/123/2025**, ku taariikhaysan 30/12/2025, kuna saabsan codsi soojeedinta Wasaaradda Isgaarsiinta & Tiknolojiyadda Siyaasadda Boostada Soomaaliyeed;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.03.143.01.26** ee **22/01/2026**, kuna saabsan Ansixinta **"Siyaasadda Boostada Soomaaliyeed 2025 2030"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Muhiimadda ay u leedahay in dib-u-habeyn iyo dib-u-qiimayn lagu sameeyo adeegga Boostada Soomaaliyeed.

**Waxaa uu meelmariyay:**

**<u>Qodobka 1aad:</u>**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.03.143.01.26** ee **22/01/2026**, kuna saabsan Ansixinta **"Siyaasadda Boostada Soomaaliyeed 2025 2030"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

## Qodobka 2aad

## Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Isgaarsiinta & Tiknolojiyadda loo igmaday inay hirgaliso, meelmarisana Siyaasaddan kor ku xusan.

## Qodobka 3aad

## Dhaqangal

Siyaasaddan waxaa ay dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO
TAARIIKH
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Summad: XGG/446/2025** **28/12/2024**

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyada** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo:** Talo Sharci

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **WC&AD/XAWSH&H/2769/2025** ee ku taarikheysan **24/12/2025** kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "SIYAASADDA BOOSTADA SOOMAALIYEED"**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci **Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idinkugu soo gudbinayaa "Siyaasadda Boostada Soomaaliyeed" oo ay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Haddaba Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka diib markii uu darsay Nuqulka Siyaasaddani oo dhib-u-habeynaayo nidaammka Boostada Soomaaliyeed, uuna ku sameeyay toosin Qoraaleed oo aan looga maarmin, ayaa waxa uu Xafiisku ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirada, maadaama aanay ka hor imaanayn dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

**FG:** Waxa halkan ku lifaaqan Siyaasadda Sare ku xusan.

**Wabillahi Towfiiq**

**Adv. Xasan Axmed Caamir**
**Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA · OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL · مكتب المحامي العام للدولة

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
**Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada**

جمهــورية الصــومــال الفيدراليـــة
وزارة العـدل والشــؤون الدسـتورية
مكــتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

**Federal Republic of Somalia**
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
**Office of Director Legislations and Agreements Department**

**SUMMAD: WC&AD/XAWSH&H/[illegible]/2025** **TR. 24/12/2024**

Mudane Garyaqaan,

**UJEEDDO: <u>SOO-GUDBIN: SIYAASADDA BOOSTADA SOOMAALIYA</u>**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa "Siyaasadda Boostadda Soomaaliya" oo dib-u-habeyn iyo dib-u-qiimayn ku sameyneyso Adeegga Boostada Soomaaliyeed, iyadoo mudnaanta siineyso adeegga shirkadaha Ganacsiga Gaarka loo leeyahay.

Siyaasaddan oo ay diyaarisay Wasaaradda Boostadda iyo Isgaarsiinta, waxay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurku ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan siyaasadaha sharci.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu waajibkiiska sharci ee ku aaddan siyaasadaha sharci ka guto, si hab-raaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan,

JAMHUURIYADDA FEDERAAL KA SOOMAALIYA
WASAARADDA CADAALADDA IYO DASTUURKA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTION
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =<u>Muqdisho</u>=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =<u>Muqdisho</u>=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =<u>Muqdisho</u>=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =<u>Muqdisho</u>=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =<u>Muqdisho</u>=
=<u>Muqdisho</u>=

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so
Tell: 0615847146

XAFIISKA GARYAQAANKA
GUUD EE DOWLADDA
GALID

٨

# SIYAASADDA BOOSTADA SOOMAALIYA

## Iskuxirka Bulshada iyo Xoojinta Horumarka



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

WASAARADDA ISGAARSIINTA IYO TIKNOOLAJIYADA

# SIYAASADDA BOOSTADA SOOMAALIYEED 2025- 2030

***Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyada, 2025***

# TUSMADA


........................................................................ 2

**ARARTA WASIIRKA** ........................................................ 5

**HORDHAC** ........................................................ 7

**1. XAALADDA BOOSTADA EE IMINKA** ........................................................ 8

1.1. Waa maxay Boosto? ........................................................ 8
Aagagga Ganacsiga Boostada ........................................................ 8
1.2. Taariikhda Boostada Soomaaliya ........................................................ 9
1.2.1 Adeegyada Boostada Qaranka ........................................................ 9
1.2.2 Adeegyada Boostada Gaarka loo Leeyahay ........................................................ 10
1.2.3 Xeerka iyo Nidaamka Boostada ........................................................ 11
1.3. Isbeddellada Caalamiga ah ee Boostada ........................................................ 11
1.4 Isbeddellada Dib-u-habaynta Boostada ........................................................ 11
Goobaha Ganacsiga Danabysan ........................................................ 12

**2. QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA** ........................................................ 13

2.1. Ujeeddooyinka iyo Himilooyinka Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) ........................................................ 13
2.2. Iskuxirka Siyaasadda Boostada iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) ........................................................ 14

**3. MABAADI'DA, HIMILADA IYO HIIGSIGA SIYAASADDA** ........................................................ 15

3.1. Mabaadi'da Aasaasiga ah ........................................................ 15
3.2. Himilada Siyaasadda Boostada ........................................................ 16
3.3. Hiigsiga Siyaasada Boosatada ........................................................ 16

**4. TIIRARKA SIYAASADDA** ........................................................ 17

**SIYAASADDA BOOSTADU WAXAY KA KOOBAN TAHAY SHAN TIIR OO WAAWEYN MID KASTANA WUXUU LEEYAHAY BAYAANKIISA SIYAASADEED, WAXAYNA KALA YIHIIN:** ........................................................ 17

4.1. Shuruucda iyo nidaaminta boostada ........................................................ 17
4.2. Doorka Adeegyada Boostada Qaranka Soomaaliya ........................................................ 17
4.3. Helitaanka Adeegyada Boostada ........................................................ 17
4.4. Doorka Ganacsiga Gaarka loo Leeyahay ........................................................ 18
4.5. Dookha Macmiilka ........................................................ 18

**5. UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA** ........................................................ 18

5.1. Qaab-dhismeedka sharci iyo nidaam ........................................................ 18
*5.1.1. Yagleelida sharci-boosto oo cusub* ........................................................ *18*
*5.1.2.* ***Horumarinta Qaab-dhismeedka Nidaaminta Boostada iyo Gaarsiinta Adeegga Masaafada ugu Dambeysa*** ........................................................ *18*
*5.1.3.* ***Dhisida Nidaamka Ruqsad-siinta iyo Gudbinta Alaabada*** ........................................................ *18*
5.2. Doorka Adeegyada Boostada Qaranka Soomaaliyeed (SNPS) ........................................................ 19
*5.2.1. Bixinta Adeeggyada Caalamiga a* ........................................................ *19*
*5.2.2. Isukiduwidda xarumaha Goob-adeeg* ........................................................ *19*
*5.2.3. Lahaanshaha Cinwaanka (VO Box)* ........................................................ *19*
*5.2.4. Diiwaanka Cinwaanka 6D* ........................................................ *19*
*5.2.5. Maamulka Boostada iyo Adeeg-Gaarsiinta ugu Dambeey* ........................................................ *20*
5.3. Helitaanka Adeegyada ........................................................ 20
*5.3.1. Shabakadda Xarumaha Goob-Adeeg* ........................................................ *20*
***5.3.2.*** *Nidaamka Keenista VO Box* ........................................................ *20*
*5.3.3. Nidaamka Cinwaanka (6D)* ........................................................ *20*

*Nidaamka cinwaanka 6D wuxuu leeyahay adeegsiyo ka ballaaran kuwa Boostada. Waxaa sidoo kale loo adeegsanayaa qeyb ka mid ah nidaamka aqoonsiga (ID), shirkadaha adeegyada biyaha iyo korontada iyo diiwaan-gelinta dhulka.* ........ *21*
5.4. DOORKA GANACSIGA GAARKA LOO LEEYAHAY ........ 21
*5.4.1. Bixiyeyaasha Adeegga Boostada Caalamiga ah* ........ *21*
*5.4.2. Bixiyeyaasha Adeegga Boostada Gudaha* ........ *21*
*5.4.3. Adeeg-Bixiyeyaasha Xarumaha Goob-Adeeg* ........ *21*
*5.4.4. Shabakadda Qaran* ........ *22*
5.5. DOORASHADA MACAAMIISHA ........ 22
*5.5.1. Helitaanka Adeegyada ee Macaamiisha* ........ *22*
*5.5.2. Hal-abuurka Adeegyada* ........ *22*
*5.5.3. Tayada Adeegga* ........ *22*
*5.5.4. Ilaalinta Macaamiisha* ........ *22*

**6. HIRGELINTA SIYAASADDA, KORMEERKA IYO DIB-U-EEGIST ........ 23**

# Ararta Wasiirka

Soomaaliya waxay leedahay taariikh qoto-dheer oo ku saabsan bixinta adeegyada boostada, taasoo ka soo bilaabanaysa sanadkii (1903[dii]) waxayna soomaaliya ku biirtay Ururka Boostada Adduunka (UPU) sanadkii 1959[kii]. Xilligii ugu sarreeyay dalku wuxuu lahaa (100) xafiis oo boosto kuwaasoo bixiya adeegyo kala duwan oo boosto iyo adeegyo Dawladeed. Si kastaba ha ahaatee, tan iyo sanadkii 1991[kii], ma jirin adeeg boosto oo rasmi ah, dhammaan xafiisyadii boostada waa ay joojiyeen shaqadoodii waxaana gebi ahaanba meesha ka baxay adeegii ay xafiisyadaasu bixin jireen.

Mudadii 34 ka sano ahyd ee ay boostada dalku ka maqnayd saaxada waxaa aad isu beddeley nidaamkii boostada caalamka waxaana saamayn weyn ku yeeshay tiknoolajiyada, tartanka iyo horumarka suuqgeynta. Gudaha dalka waxaa kaalintaa bixinta adeegyada boosatada qaatay shirkadaha ganacsiga ee gaarka loo leeyahay oo buuxiyey booskii ay Boostada qaranku banaysay. Xilligan hada la joogo dalku wuxuu marayaa marxalad dib loo soo noolaynayo adeegyada Boostada rasmiga ah, si yoolkaas loo gaarana waxaa dib loo soo noolooyey xiriirkii Ururka Boostada Adduunka (UPU) si dalka loogu xiro caalamka intiisa kale.

Maadaama aan ahay Wasiirka masuulka ka ah mashruucan muhiimka ah waxaan dareensanahay muhiimadda ay leedahay in la hubiyo lana helo dhaxal waara oo jiilalka mustaqbalku ay ka faa'iidaystaan. Sidaa daraadeed waxaan diyaarinay siyaasaddan oo awood siinaysa shirkadaha Boosatda ee gaarka loo leeyahay sidoo Kalena abuuraysa nidaam boosto oo casri ah. Kasoo adeegsanaya shaqaale kooban iyo xarumo kooban waxaana la abuurayaa shabakad boosto goob-adeeg oo isku xirta dhammaan dalka oo dhan, iyadoo la adeegsanayo xarumaha ganacsiga ee gaarka loo leeyahay ee buuxiya shuruudaha ka mid noqoshada shabakadda. Sidoo kalena waxaa fursad loo siinayaa in ay shabakadaan adeegsan karaan dhammaan shirkadaha boostada gaarka loo leeyahay kuwaasoo si dhaqso ah u balaarin kara adeegooda si ay u gaaraan dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed, iyadoo lagu saleynayo baahida adeegga. Hadaba waxaa lagama- maarmaan ah in boostadu noqoto mid casriya oo waarta isla markaana aan dib loo soo celin qaab-dhismeedyadii hore si aan ula jaan-qaadno Tiknolojiyadda cusub.

Waxaan kaloo hiigsanaynaa inaan abuurno nidaam agab-gudbin oo u oggolaanaya dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed inay lambarkooda taleefanka ku diiwaan-geliyaan ciwaanna uga dhigtaan xarunta ugu dhow ee goob-adeeg ee katirsan shabakadda Boostada. Sidoo kale, waxaan hiigsanaynaa horumarinta nidaam cinwaan-qaran oo suurto-gelinaya in alaabooyinka la sii gudbin karo iyadoo la bixinayo khidmad dheeraad ah.

Si'aan u xaqiijino ujeeddooyinkan hadafkeennu waa inaan xoojino Adeegga Boostada Qaranka (SNPS) oo si rasmi ah ugu sidkan Ururka Boostada Caalamiga ah (UPU) si ay u maamusho dhammaan boostada caalamiga ah ee soo gasha dalka iyo tan ka baxaysaba.

Adeegan ayaa sidoo kale hagaya suuqa boostada gudaha si ganacsiga gaarka loo leeyahay uu meel fiican u gaaro.

Adeegga Boostada Qaranku waxay noqon doontaa irida caalamiga ah ee loo maro gudbinta boostada, iyadoo la adeegsanayo nidaamka Ururka Boostada Caalamiga ah (UPU), waxayna kaloo fududaynaysaa adeegyada gudaha iyadoo ruqsad siineysa shirkadaha gaarka loo leeyahay.

Siyaasadda Boostadu waxay diiradda saareysaa shan tiir oo muhiim ah ku-waas oo kala ah:

- Qaab-dhismeed sharci iyo xeer-nidaamineed
- Doorka Adeegyada Boostada Qaranka
- Gaarsiinta Adeegyada Dhammaan Muwaadiniinta
- Doorka Ganacsiga Gaarka loo Leeyahay
- Doonista ama Xulashada Macaamiilka

**Mudane Maxamed Adam Cali (Soomaali)**

Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyada

# Hordhac

Guud ahaan dunida oo dhan boostada waxaa ka socda isbeddel baaxad leh waxaana hoos u dhac weyn ku yimid hab-dhaqankii hore ee isweydaarsiga waraaqaha halka adeegyada gudbinta baakadaha iyo boostada deg-dega ahna ay si xawli ah u korayaan sababo la xiriira kobaca ganacsiga danabysan (eCommerce). Labadan saamaynood ee is barbar socda waxay waajibinayaan in dib loo eego nidaamka boostada dalka waxna laga bedelo qaabkii boostadu u shaqayn jirtey, siyaasadaheeda iyo lahaanshaheedaba. Sidii ay u burburtay Dawladii dhexe, Dalku ma lahayn adeeg Boosto Qaran sababtuna waa dagaalladii sokeeye oo burburiyey nidaamkii boostada waxaana booskii buuxiyey shirkado gaar loo leeyahay oo bixiya adeegyo rasmi ah iyo kuwo dadban.

Sidaa daraadeed Dawladda Soomaaliya waxay doonaysaa inay dib-u-dhisto nidaamkii boostada Qaranka iyadoo laga faa'iidaysanayo waaya-aragnimada shirkadaha gaarka loo leeyahay, isla markaana la hubiyo in adeegyada la gaarsiiyo dhammaan shacabka iyadoo la tixgelinayo tayada, iyo helitaanka Boosto oo dhammaystiran.

**Ujeeddada Siyaasadda Boostada Qaranka**

Siyaasaddan cusub ee boostada waxay ujeeddadeedu tahay in dib-u-habeyn iyo dib-u-qiimayn lagu sameeyo boostada Soomaaliyeed, iyadoo la tixgelinayo arrimaha soo socda:

- In la dhiso nidaam boosto oo waara, iyadoo mudnaanta la siinayo ka qeybgalka shirkadaha ganacsiga ee gaarka loo leeyahay.
- In la xoojiyo ku xirnaanta caalamka, iyadoo loo marayo xubinnimada Ururka Boostada Adduunka (UPU).
- In dhammaan muwaadiniintu helaan adeeg boosto oo haqabtira baahiyahooda.
- In la horumariyo adeegyo hal-abuur leh oo la jaan-qaadaya baahiyaha mustaqbalka ee macaamiisha.
- In la sameeyo qaab sharci iyo nidaam maamul oo ku habboon shaqada boostada.
- In boostadu door muuqda ka qaadato hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP).
- In boostadu noqoto mid horseeda kobaca ganacsiga danabysan ah ee dalka oo dhan.
- In la abuuro nidaam boosto oo dhiirri-geliya daryeelka macaamiisha, iskaashiga, qiimaha iyo tayada.

Sidaa daraadeed maadaama ay dunidu si degdeg ah ugu sii gudbayso nidaamyo cusub oo boosto, Dawladda Soomaaliya waxaa ka go'an ay ka faa'iideysato waayo-aragnimada iyo habraacyada ugu fiican ee caalamka si loo haqab-tiro baahiyaha ganacsatada iyo shacabkaba.

## 1. XAALADDA BOOSTADA EE IMINKA

Qodobkan waxaan ku dulmaraynaa xaalada boostada ee Dalkeenu maanta ku sugun tahay. Haseyeeshe waxaan marka hore qeexeynaa waxa loola jeedo boosto.

### 1.1. Waa maxay Boosto?

Marka la qeexayo boostada waxaa muhiim ah in la kala saaro waxa loola jeedo "boosto" iyo kaalinta suurtogalka ah ee Adeegga boostada Qaranka. Boostadu guud ahaan waxay diiradda saartaa dirista iyo gudbinta alaabada, halka Adeega boostada Qaranku ay yeelan karto adeegyo ballaaran oo ka baxsan boosto keliya.

### Aagagga Ganacsiga Boostada




Shirkadaha boostada caalamka ee heer Qaran badankoodu waxay ku lug leeyihiin hawlo ka baxsan adeegyada boostada oo qura. Qaar badan ayaa bixiya adeegyo Maaliyadeed, qaar kalena waxay macaamiishooda u qabtaan adeegyo kale sida iibka boqshadaha, waraaqaha, bixinta gunooyinka iwm gaar ahaan kuwa Dawladaha, halka kuwa kale ay bixiyaan adeegyada saadka. Si kastaba ha ahaatee, isbeddelka dhijitaalka ah ee dunida ayaa sababay in qaabka adeegyadaas loo bixiyo uu si weyn isu beddelo. Maaddaama aysan Soomaaliya

hadda ka jirin shabakad boosto Qaran oo rasmi ah, siyaasaddan waxay hiigsanaysaa yagleelida shabakad boosto Qaran.

Marka laga eego aragtida caalamiga ah iyo tan sharciba ee habraaca (UPU) qeybta ku kooban boostada qura waxay leedahay xadi kooban oo ku eg dirista warqadaha ilaa (2kg) iyo tan baakadaha ilaa (20kg). Adeegga Waajibaadka Guud (USO) ee heer Qaran Wuxuu tilmaamaa shuruucda qasbaysa in cid kasta oo ku hawlan adeeg boosto ay bixiyso heerka aasaasiga ah ee adeegyada boostada kaasoo adeeg u fidinaya dhammaan dadka iyo ganacsiyadaba meel kasta oo ay Dalka ka joogaan. Sharciyeynta hawlaha boostada ee adeeg-bixinta caadiga ah iyo tan deg-dega ahba waxay ku xiran tahay go'aankaa Boostada Qaranka ee maamusha boostada.

Si ay u xoojiyaan adeegyada boostada isla markaana looga faaiidaysto xarumaha boostada, hawl-wadeennada boostada ee Dawladduhu waxay horumariyeen adeegyo kale oo dheeri ah sida:

**Adeegyada maaliyadeed ee boostada** – bangiyada iyo lacag-dirista.

**Adeegyada Dawladda** –helitaanka adeegyada laamaha Dawladda.

**Adeegyada bulshada** – bixinta gunnooyinka iyo gaarsiinta adeegyada meelaha fog.

Adeegyadan dheeraadka ah badanaa waxaa lagu bixiyaa danta bulshada iyo kor-u-qaadista ka-qeybgalka muwaadiniinta. Mararka qaar waxaa sidoo kale la bixiyaa kharashaad lagu kabayo si loo hubiyo in adeegyadaasi gaaraan bulshada oo dhan.

## 1.2.Taariikhda Boostada Soomaaliya

Nidaamka boostada ee Dalka waxaa la asaasay sandkii (1903[dii]) waxayna boostadeenu xubin buuxda ka noqotay ururka boostada aduunka sandkii (1959) kii. Hase yeeshee waxaa nidaamkii boostada Qaranku uu meesha ka baxay sanadkii (1991) kii, kadib markii jamhadihii hubaysnaa ay xukunka ka tureen Dawladii dhexe ee Dalka taasoo keentay Qaran-jab iyo burbur ku yimi dhammaan adeegyadii Dawlada. Halkaasna waxaa ku istaagey adeegii ay bixin jirtey Wasaaradda boostada. Tan iyo xiligii adeegga boostada Qaranku hakad ku yimi hawlihii ay qaban jirtey sannadkii 1991[kii], adeegyada boostada waxaa si aan rasmi ahayn u bixinayay shirkadaha ganacsiga ee gaarka loo leeyahay. Ma jiro qeexitaan ku saabsan nooca iyo baaxadda adeegyada la bixiyo, mana jiraan fikrado rasmi ah oo la xiriira adeeg guud ama helitaan guud oo muwaadiniintu wada haystan.

### 1.2.1 Adeegyada Boostada Qaranka

Xilligii ugu sarreeyay shirkaddii boostada Qaranku waxay lahayd (100) xarumo boosto oo bixiya adeegyo kala duwan oo boosto kuwaasoo dhammaantood aan hadda jirin. Sannadkii (1991[kii]) ayaa guud ahaan hawlihii boostada Dalka si rasmi ah u istaageen

mana jirin wax adeeg boosto ah ilaa sannadkii (2013) oo markaas heshiis lala galay Dawladda Imaaraadka Carabta si ay u maamusho boostada dalka. Heshiiskaas ayaa si rasmi ah u dhammaaday sannadkii (2017[kii]), kadib markii heshiis la mid ah lala saxeexday Jamhuuriyadda Jabuuti. Labadaas heshiis-xiliyeedba waxaa Soomaaliya boostada loo soo marsiin jiray shirkadaha boostada Qaranka ee labadaas Dal. Sannadihii ugu dambeeyay, mugga ama xaddiga boostada la soo diro iyo tan la diroba aad bay u yaraayeen, iyadoo celcelis ahaan lagu qiyaasay inta u dhaxaysa 15–50 kiiloogaraam bishiiba.

Adeegga Boostada Qaranku (SNPS) wuxuu xaqiijinaya dib-u-soo-celinta isku xirka tooska ah ee boostada caalamiga ah oo ay saameyn togan ku yeelan doonto mugga boostada soo gasha Dalka, isla markaana ay suurtogal ka dhigi doonto in dib loo bilaabo adeegyada boostada dibadda loo diro markii ugu horreysay muddo 34 sano ah ka dib.

Wasaaradu waxay dib-u-soo-celisay tixraaca habraaca Xarunta Caalamiga ah ee la socodka Boostada (IMPC) taas oo ah tallaabadii ugu horreysay ee fududeyneysa ka mid noqoshada shabakadda Ururka Boostada Adduunka (UPU). Waxaa la filayaa in hawlaha boostada soo gasha Dalka si rasmi ah loo bilaabo bisha Juun 2025.

Siyaasaddani waxay qeexi doontaa baaxadda iyo noocyada hawlaha ay fulin doonto Adeegga Boostadu.

### 1.2.2 Adeegyada Boostada Gaarka loo Leeyahay

Waxaa jira tiro shirkado caalami ah oo boosto oo ka hawlgala gudaha Soomaaliya iyadoo DHL ay tahay midda aadka u muuqata ee ka mid ah shirkadahaas. Shirkado kale ayaa bixiya adeegyo goboleed oo u socda Dalalka deriska ah sida Kenya, Itoobiya iyo Jabuuti. Sidoo kale waxaa jira shirkado bixiya adeegyo gudaha ah oo aan rasmi ahayn kuwaas oo ka hawlgala heer Qaran, heer gobol iyo magaalooyinka waaweyn. Waxaa kaloo iyana jira shabakado ka kooban mootooley kuwaas oo alaabooyinka gaarsiiya macaamiisha iyagoo u shaqeynaya dukaamada waaweyn, maqaayadaha cuntada degdega ah iyo xarumaha tafaariiqda.

### 1.2.3 Xeerka iyo Nidaamka Boostada

Dalku malaha sharci boosto oo rasmi ah waqtigan, sidoo kale ma jiro nidaam ruqsad-siineed oo loogu talagalay bixiyayaasha adeegyada boostada heerarkeeda kala duwan.

## 1.3.Isbeddellada Caalamiga ah ee Boostada




Waxaa jira isbeddel caalami ah oo lagu sameeyey shirkadaha boostada ee heer Qaran oo ahaa waax-hay'ad Dawladeed laakiin loogu beddelayo shirkado dawli ah ama kuwa gaar loo leeyahay.



Isbedelka ku yimi tartanka ganacsiga boostadu wuxuu horseeday korna u qaaday tayada adeeg-wanaagsan, hal-abuur, iyo qiimo jaban.



Wax-ka-beddelka adeegga boostada Qaran iyo suuqa xorta ah ayaa sababay baahida loo qabo sharciyo boosto oo cusub iyo Xeerer madax-bannaan oo lagu sameeyo Adeegga boostada.




Baahiyaha macaamiisha ayaa noqday kuwo muhiim ah marka la qeexayo qaabka boostada, si loo hubiyo in la helo doorasho, helitaan, iyo magdhaw ku habboon.



Isbeddelada ku yimid qaab-dhismeedka boostada ayaa keenay dib-u-eegis weyn oo lagu sameeyay qeexidda adeegga guud oo ay ku jirto burinta waajibka adeegga guud ee Qaranka.

## 1.4 Isbeddellada Dib-u-habaynta Boostada

Intii lagu jiray 25-kii sano ee la soo dhaafay, qaab-dhismeedka iyo dhaqdhaqaaqa boostada ayaa si weyn isu beddelay, laga soo bilaabo hab-dhaqankii disrista waraaqaha ilaa ganacsiga danabysan kuwaas oo leh baahiyo aad u kala duwan.

| Waraaqaha Laysweydaarsado | Waraaqaha danabysan |
|---|---|
| Waxaa la marsiiyaa boostada (waxaa xakameeya qofka diraya) | Waxaa lagu helaa habka boostada danabaysan (waxaa xakameeya qaataha) |
| In la soo celiyo wey adag tahay | Aad bey u sahlan tahay in la soo celiyo |

| | |
|---|---|
| In la raad-raaco iyo in la dabagalo wey adag tahay | Raad-raaca iyo dabagalku aad buu u sareeyaa |
| Kalsoonida ayaa ah arrinta ugu muhiimsan | Xawaaraha Alaabta ayaa ah arrinta ugu muhiimsan |

Halka waraaqaha laysweydaarsado ay xakameyn jireen Dadka diraya, ganacsiga danabysan waxaa xakameeya qofka qaata ah. Waxaana bud-dhig u shuruudo muhiim ah oo macaamiishu ka filayaan shirkada sida xawaaraha, tayada, dabagalka iyo ahmiyad siinta macmiilka. Shirkadaha boostada ee heer Qaran ee caalamka ayaa la daalaa dhacaya sidii ay ula qabsan lahaayeen baahiyahan cusub ee macaamiisha marka loo eego shirkadaha gaarka loo leeyahay.

## Goobaha Ganacsiga Danabysan

Waxaa jira guuritaan laga guurayo xarumihii iyo xafiisyadii dhismayaasha waaweyn ahaa loona guurayo xarumo yaryar oo loo yaqaan (Pick-Up and Drop-Off) loona soo gaabiyo (GOOB-ADEEG). Nidaamka (GOOB-ADEEG) waa Goob-adeeg oo ruuxa loogu soo dirayo alaabta cinwaankiisa rasmiga ah laakiin uu si dhijitaal ah ula soconayo kana maamulay, bog internet ama app uu ka isticmaalayo telefoonkiisa gacanta. Goobahaasi waa meelo loo qoondeeyay in macaamiishu ka qaadan karaan alaabtooda ay internetka ka dalbadeen ama ay geyn karaan alaab ay doonayaan inay dirsadaan. Nidaamkani waa xal fudud oo beddel u ah agabkii sida tooska ah loo geynayey guryaha ama xafiisyadda. Abuurista shabakadaan waxaa loo maridoonaa adeegsiga xurmaha ganacsi ee gaarka loo leeyahay ee buuxiya shuruudaha ka mid noqosha shabakada boostada, sida dukaamada waaweyn, makhaayadaha, baararka kafeega ama goobaha kale ee u adeegaya bulshad deegaanka. Hab kaan waxa isticmaala shirkadda (Deutsche Post) ee Jarmalka iyo sidoo kale shirkado badan oo qaada alaabada iyo boostada degdega ah sida (DPD, Hermes, iyo Aramex).

## 2. QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA




Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) wuxuu ka kooban yahay afar tiir oo waaweyn:

**Tiirka 1aad: Maamul Isbeddel Horseeda**

**Tiirka 2: Isbeddel Dhaqaale oo Waara**

**Tiirka 3: Horumarinta Bulshada iyo kor-u-qaadida xirfadda aadanaha.**

**Tiirka 4: Ilaalinta Deegaanka iyo U adkaysiga Cimilada**

### 2.1. Ujeeddooyinka iyo Himilooyinka Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP)

Maadaama uu yahay qorshe mustaqbal oo loogu talagalay in lagu dhiso Soomaaliya xasiloon, dhaqaale ahaan kobocsan, bulsho ahaan firfircoon, adkaysi u leh cimilada iyo horumarinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP), waxaa hagaya himilada guud ee shacabka Soomaaliyeed ee ah in la gaaro horumar waara iyo nolol barwaaqo ah. Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) wuxuu si buuxda ula jaanqaadayaa Aragtida Qaranka ee (2060) ka, taasoo ah in la dhiso dal barwaaqo ah, ammaan ah, dimuqraadi ah, isbeddel furan leh, tartan caalami ah ku jira isla markaasna dadkiisu ku nool yihiin nolol tayo sare leh.

Iyadoo la raacayo aragtidaas, ujeeddada guud ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) waa in la xoojiyo yoolalka aasaasiga ah ee soo socda:

- In la dhiso lana xoojiyo hay'adaha Dawliga ah si ay u noqdaan kuwo daahfuran, isla xisaabtan leh iyo maamul Dawldanimo oo loo dhan yahay.
- In la xoojiyo xasilloonida dhaqaale ee Dalaka salkana loo dhigo siyaasad dhaqaale oo lagu hago qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha dalka.

- In la dhiso kaabeyaasha muhiimka ah ee horumarka waara, sida waddooyinka, dekedaha, garoomada diyaaradaha, tamarta, dhismayaasha dawladda iyo tiknolojiyada casriga ah.
- In la kordhiyo maalgelinta iyo taageerada lagu bixiyo arimaha bulshada ee horumarinta tayeynta aadanaha iyo ilaalinta bulshada nugul gaar ahaan Dadka baahiyaha gaarka ah qaba.
- In la xoojiyo u adkaysiga iyo la-qabsiga isbeddelka cimilada.
- In la xoojiyo sinaanta iyo xuquuqda aadanaha laguna saleeyo dhammaan siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarinta cadaalad, iyadoo la awoodsiinayo haweenka, dhalinyarada iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba si ay u noqdaan hormuudka koboca iyo dhismaha Qaranka.

## 2.2.Iskuxirka Siyaasadda Boostada iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP)

Siyaasadda Boostada waxaa loo diyaariyey in ay si buuxda ula jaanqaaddo afarta tiir ee muhiimka ah ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) iyo ujeeddooyinka la xiriira. Gaar ahaan siyaasadda boostadu waxay u la jaanqaadaysaa afarta tiir sida soo socda:

| | |
|---|---|
| **Tiirka 1aad:**<br>Isbeddel Maamul oo Horumar horseeda | Waxaan higsanaynaa nidaam boosto oo leh maamul hufan, kaas oo hawlwadeenada **Q**aranku ay door muhiim ah ka qaadanayaan sidii uu u noqon lahaa marin lagu hago is-weydaarsiga boostada caalamiga ah ee hoos timaada Shabakadda Ururka Caalamiga ah ee Boostada (UPU)**,** iyo xeer-nidaamiye haga dhammaan hawlaha boostada ee gudaha Dalaka. |
| **Tiirka 2aad**<br>Isbeddel Dhaqaale oo Waara | Waxaan hiigsanaynaa nidaam boosto oo dhaqaale ahaan waara, kaas oo ku tiirsan awoodda ganacsiga gaarka loo leeyahay, si loo helo xalal hal-abuur oo lagu hirgelinayo nidaamyo sharci iyo ruqsadsiin cusub, halka hawlwadeenka boostada qaranka uu yeelanayo kaalin hawlgal xaddidan oo diiradda saaraysa fududeynta iyo hagidda. |
| **Tiirka 3aad** | Waxaan hiigsanaynaa nidaam boosto oo fursado u abuuraya shacabka Soomaaliyeed**,** si ay uga qeybqaataan adeegyada |

| | |
|---|---|
| Isbeddelka Bulshada iyo tayeynta Aadanaha | boostada, iyagoo isticmaalaya xalal-hal-abuur leh sida in loo adeegsado taleefanka gacanta cinwaan ahaan iyo inay sidoo kale noqdaan bixiyeyaasha adeegyada, iyagoo ka shaqeynaya goobaha (GOOB-ADEEG). |
| **Tiirka 4**<br>Ilaalinta Deegaanka iyo U adkaysiga Cimilada | Waxaan hiigsanaynaa nidaam boosto oo u hogaansan bedqabka-deegaanka kaas oo loo habeeyay shabakado **GOOB-ADEEG** oo dhiirrigelinaya wadaagga adeegyada iyo kaabeyaasha, isla markaana xaqiijinaya isticmaal hufan oo gaadiid si loo yareeyo saameynta taban ee isu-socdku ku yeelan karo deegaanka. |

## 3. MABAADI'DA, HIMILADA IYO HIIGSIGA SIYAASADDA

### 3.1. Mabaadi'da Aasaasiga ah

Siyaasadda boostada ee Soomaaliya waxay ku dhisan tahay mabaadi'da aasaasiga ah ee soo socda:

- Siyaasadda boostada ee Soomaaliya waa in ay la jaanqaaddaa Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP).
- Qaab-dhismeedka sharci iyo nidaam ee hagaya boostadu waa in la cusboonaysiiyaa, iyadoo la tixgelinayo waayo-aragnimada caalamiga ah iyo baahiyaha gaarka ah ee Soomaaliya.
- Adeegga Boostada Qaranka Soomaaliya (SNPS) wuxuu noqonayaa hagaha, fududeeyaha iyo kormeeraha adeegga ay bixiyaan ganacsiyada gaarka loo leeyahay.
- Boostada waa in lagu dhisaa hal-abuur xalinaya caqabadaha jira oo ay ka mid yihiin nidaamka sanduuqyada Boostada dhijitaalka ah (VO Boxes), nidaamyo cinwaan-bixineed oo kharash ahaan la awoodo, iyo shabakadda (GOOB-ADEEG) oo ay maamulaan shirkadaha ganacsiga ee gaarka loo leeyahay isla markaana u furan dhammaan shirkadaha boostada gaarka loo leeyahay ee ruqsadda haysta. *Nidaamka (GOOB-ADEEG) waa adeeg ruuxa loogu soo dirayo waraaqaha cinwaankiisa rasmiga ah laakiin uu si dhijitaal ah ka maamulayo, bog internet ama app uu ka isticmaalayo telefoonkiisa gacanta.*
  - Suuqa boostada waa in si caddaaladi ku dhisan tahay loo nidaamiyaa, si loo hubiyo in macmiisha iyo shirkaduhaba si siman loola dhaqmo, waana in la dhiirrigeliyaa koritaanka suuqa boostada, iyada oo la adeegsanayo hal-abuur iyo tignoolajiyad casri ah.

- Danaha macmiisha waa in ay noqdaan tiirka ugu muhiimsan ee horumarinta boostada.

Waxaa xaqiiq ah in boostada Soomaaliya ay u kobocday si madaxbannaan 25sano ee u dameeyey iyadoo aysan jirin faragelin toos ah oo Dawwladeed. Sidaas darteed waxaa muhiim ah in siyaasaddan si dabacsan loo hirgeliyo si aragtida guud ee siyaasadda si buuxda loogu xaqiijiyo.

### **3.2.**Himilada Siyaasadda Boostada

Inkastoo ay burburtay shirkadii boostada Qaranku 35 sano ka hor hadana booskaas waxaa buuxiyay shabakado aan rasmi ahayn iyo shirkado ganacsi oo gaarka loo leeyahay ku waas oo keenay xalal ku-meel-gaar ah. Sidaadaraadeed himilada siyaasadda boostadu waxay hiigsanaysaa in adeeg bixiyayaasha shabakadahaas aan rasmiga ahayn la nidaamiyo si loo dhiso nidaam boosto oo heer caalami ah, kaasoo noqon kara tusaale ay Dalalka kale raacaan**.**

### 3.3.Hiigsiga Siyaasada Boosatada

Hiigsiga siyaasadu waa in la dhiso nidaam boosto casri ah oo mustaqbal adkaysi leh, oo ku ku tiirsan awoodda ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyadoo adeegga-qaran ee boostadu ay noqoneyso iskuxiraha shirkadaha gaarka loo leeyahay ee dunida iyo kuwa Dalka, iyadoo loo marayo:

- In la dhiso nidaam boosto oo mustaqbalka la jaanqaadi kara, iyadoo laga faa’iideysanayo awoodda ganacsiga gaarka loo leeyahay.
- In hawlwadeenada Qaranku uu u fududeeyaan shirkadaha gaarka loo leeyahay sidii ay ugu xirmi lahaayeen caalamka.
- In shabakada (GOOB-ADEEG) ay u furnaato dhammaan cidii ruqsad u haysta adeegga boostada.
- In nidaamka adeegga (VO Box) ka loo isticmaali karo lambarka taleefanka gacanta oo loo asteeyey goob-adeeg xadidan taasoo u furan dhammaan adeeg-bixiyaasha boostada ee ruqsadda haysta**.**
- In nidaam cinwaan bixintu uu yahay mid kharash jaban oo keydinkara xog cinwaanno badan.
- In la helo shuruuc iyo xeerar lagu maamulo boostada

- In la helo nidaam ruqsad-siineed oo lagu maamulo dhammaan hawl-adeeg-bixiyeyaasha boostada
- Ganacsiga gaarka loo leeyahay oo xooggan oo bixiya adeegyo boosto oo hal-abuur leh oo hufan.

## 4. TIIRARKA SIYAASADDA

Siyaasadda boostadu waxay ka kooban tahay shan tiir oo waaweyn mid kastana wuxuu leeyahay bayaankiisa siyaasadeed, waxayna kala yihiin:

- Qaab-dhismeedka sharci iyo xeer-nidaamineed
- Doorka Qaranka ee Adeegyada Boostada Soomaaliya
- Helitaanka adeegyada ee guud ahaan bulshada
- Doorka ganacsiga gaarka loo leeyahay
- Doonista ama Xulashada macmiilka

### 4.1.Shuruucda iyo nidaaminta boostada

In la abuuro shuruuc iyo xeerar taageera horumarinta adeegyada boostada oo ay ku jiraan sharciga boostada, nidaam-maamul oo cad iyo nidaamka ruqsad siinta si boostadu u korto una kobocdo.

### 4.2.Doorka Adeegyada Boostada Qaranka Soomaaliya

Adeegga Boostada Qaranku (SNPS) wuxuu noqon doonaa iskuxiraha ugu weyn ee boostada dalka iyo shabakada ururka boostada aduunka (UPU), waxay ka loo fududeynayaa helitaanka adeegyada boostada gudaha waxayna noqonayaa mid nidaamisa dhammaan hawlaha boostada ee Dalka.

### 4.3.Helitaanka Adeegyada Boostada

Helitaanka adeegyada boostada waxaa lagu heli karaa saddex wadiiqo: Diiwaanka cinwaannada Qaranka, nidaamka (VO Box) oo lagu isticmaalo lambarrada taleefanka gacanta, iyo shabakada, GOOB-ADEEG oo Dalka oo dhan ah sadexduna waa u furan yihiin dhammaan ganacsatada ruqsadda haysta.

## 4.4. Doorka Ganacsiga Gaarka loo Leeyahay

Boostadu waa u furan tahay dhammaan shirkadaha gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegga goobaha (GOOB-ADEEG) iyo adeegyada alaab-qaadista waxaana lagu hagayaa nidaam ruqsadeed fudud oo ay maamusho Adeegga Boostada Qaranku.

## 4.5. Dookha Macmiilka

Waxaa la xaqiijinayaa bixinta adeegyada boostada, iyadoo macaamiisha la siinayo doorashooyin badan, adeeg tayo sare leh iyo hal-abuur cusub. Waxaa kor loo qaadayaa bixinta adeegyada boostada oo laga helayo guud ahaan Dalka oo dhan iyadoo loo marayo shabakadda (GOOB-ADEEG) oo ay maamulayaan shirkadaha gaarka loo leeyahay. Adeegaasi wuxuu noqonayaa mid furan maalmaha iyo saacadaha shaqada ee goobtaasi shaqayso.

# 5. UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

## 5.1. Qaab-dhismeedka sharci iyo nidaam

### 5.1.1. Yagleelida sharci-boosto oo cusub

In la diyaariyo sharci boosto oo cusub si uu uga turjumo baahiyaha adeegyada boostada ee gudbinta alaabada mustaqbalka dhow, iyadoo lagu saleynayo dhaqdhaqaaqa alaabada, tartan furan, ruqsad-siinta shirkadaha iyo baahida macaamiisha.

### 5.1.2. Horumarinta Qaab-dhismeedka Nidaaminta Boostada iyo Gaarsiinta Adeegga Masaafada ugu Dambeysa

In la sameeyo qaab-dhismeed iyo nidaam ku habboon boostada ee gudbinta alaabada si loo dhiirrigeliyo tartan furan, iskuxirka shabakadaha, adeegsiga nidaamka (VO Box), habraaca guud ee cinwaannada, iyo shabakadda Qaran ee (GOOB-ADEEG), isla markaana la xaqiijiyo dhawrista xuquuqda macaamiisha iyo in la abuuro fursado ay u siman yihiin dhammaan shirkaduhu una wada tartami karaan.

### 5.1.3. Dhisida Nidaamka Ruqsad-siinta iyo Gudbinta Alaabada

In la yagleelo nidaam ruqsad-siineed daboolaya noocyada kala duwan ee boostada iyo gudbinta alaabada oo ay ku jiraan shirkadaha caalamiga ah, shirkadaha gudaha,

shirkadaha bixiya adeegga GOOB-ADEEG, kuwa qaada cuntada degdega ah iyo iwm.

## 5.2. Doorka Adeegyada Boostada Qaranka Soomaaliyeed (SNPS)

### 5.2.1. Bixinta Adeeggyada Caalamiga a

Adeegga Boostada Qaranku (SNPS) waxay maamulayaan dhammaan boostada soo gasha Dalka iyo tan baxaysaba, iyadoo adeegsanaysa shabakadda (UPU). Waxay shirkadaha ka hawlgala gudaha Dalka u sahlayaan in ay ka diri karaan boosto ku socota caalamka daafihiisa meel kasta oo Soomaaliya ka mid ah.

### 5.2.2. Isukiduwidda xarumaha Goob-adeeg

Adeegga Boostada Qaranku (SNPS) waxay noqonaysaa fududeeyaha horumarinta shabakadda xarumaha Goob-adeeg. SNPS waxay diyaarinaysaa heshiisyada qandaraasyada ee xarumaha Goob-Adeeg waxayna fududeynaysaa tilmaamaha hawlgalka ee ay tahay in adeeg-bixiyeyaasha Goob-Adeeg ay raacaan.

### 5.2.3. Lahaanshaha Cinwaanka (VO Box)

Adeegga Boostada Qaranku (SNPS) ayaa yeelanaya lahaanshaha adeegga (VO Box) ka, kaas oo u oggolaanaya macaamiisha inay diiwaan-geliyaan lambarkooda taleefanka gacanta si uu ugu noqdo cinwaan rasmi ah oo loo qoondeeyay xarun (GOOB-ADEEG) ah. Cinwaanka (VO Box) waxaa isticmaali kara dhammaan adeeg-bixiyeyaasha boostada.

### 5.2.4. Diiwaanka Cinwaanka 6D

Adeegga Boostada Qaranku (SNPS) ayaa lahaanaya diiwaanka cinwaanka (6D) ga oo ah cinwaan dhijittala oo ka kooban lkix number kaas oo noqonaya faylka cinwaanada Qaranka ee Soomaaliya. Diiwaanka (6D) waxaa lagu xiriirinayaa cinwaanka (VO Box) si loogu dhiirrigeliyo macaamiisha inay iskumar isu diiwaan-geliyaan labada adeeg. Diiwaanka cinwaanka (6D) waxaa isticmaali kara dhammaan bixiyeyaasha adeegyada boostada.

### 5.2.5. Maamulka Boostada iyo Adeeg-Gaarsiinta ugu Dambeey

Adeegga Boostada Qaranku (SNPS) waxay noqonayaa mida maamusha boostada iyo adeegga gaarsiinta dhammaan shirkadaha boostada, iyadoo adeegsanaysa nidaam ruqsad-bixineed fudud.

## 5.3. Helitaanka Adeegyada

### 5.3.1. Shabakadda Xarumaha Goob-Adeeg

Waxaa la dhisayaa shabakad Qaran oo xarumaha GOOB-ADEEG ay wada isticmaali karaan dhammaan bixiyeyaasha adeegyada Boostada si loo dhiirrigeliyo iskaashi ku saabsan bixinta shabakadda loona ballaariyo helitaanka adeegyadda. Heshiisyada iskuxirka ee heer Qaran ayaa siinayaa dhammaan shirkadaha fursad ay ugu xirmaan shabakadda Qaranka taasoo kordhinaya in adeegyada laga heli karo Dalka oo dhan.

### **5.3.2.** Nidaamka Keenista VO Box

Horumarinta nidaamka VO Box ee isticmaala lambarrada taleefannada gacanta sidii cinwaan keenis ayaa suurtagelin doonta in alaabta lagu keeno xarunta GOOB-ADEEG ee uu doorto qofka qaata. Qof kasta oo leh telefoon gacanta ah wuxuu isku diiwaan-gelin karaa lambarkiisa si uu ugu noqdo cinwaan VO Box, waxaana hubin kara hawl-wadeen kasta si uu u fududeeyo keenista adeegyada.

### 5.3.3. Nidaamka Cinwaanka (6D)

Waxaa sii kordhaya baahida loo qabo in adeegyada sida cuntada degdegga ah iyo adeegyo kale la keeno guryaha, balse waxaa caqabad ku ah maqnaanshaha nidaam cinwaanno rasmi ah. Nidaamka Cinwaanka 6D wuxuu suurta-gelinaya in cinwaan gaar ah oo 6D ah loo sameeyo meel kasta oo goob-adeeg ahaan u taagan gudaha Soomaaliya, taas oo fududeyn doonta keenista adeegyada. Dadka oo dhan waxay diiwaan-gelin karaan guryahooda si loogu daro diiwaanka cinwaanka 6D iyadoo qe3yb ka ah diiwaan-gelinta VO Box. Marka la diiwaan-geliyo, cinwaanka 6D waxaa adeegsan kara dhammaan shirkadaha alaabta qaada si ay u fududeeyaan keenista guriga.

Nidaamka cinwaanka 6D wuxuu leeyahay adeegsiyo ka ballaaran kuwa Boostada. Waxaa sidoo kale loo adeegsanayaa qeyb ka mid ah nidaamka aqoonsiga (ID), shirkadaha adeegyada biyaha iyo korontada iyo diiwaan-gelinta dhulka.

## 5.4. Doorka Ganacsiga Gaarka Loo leeyahay

### 5.4.1. Bixiyeyaasha Adeegga Boostada Caalamiga ah

Soomaaliya waxay soo dhaweynaysaa joogitaanka adeegyada Boostada caalamiga ah si ay muwaadiniinta u siiyaan adeegyo diris iyo keenis ah oo heer calami ah. Adeeg-bixiyeyaasha boostada caalamiga ah waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay isticmaalaan shabakadda Qaran ee xarumaha (GOOB-ADEEG) si ay u ballaariyaan bixinta adeegyada. Waxaana lagu dabaqayaa nidaam ruqsad-bixin fudud si Dawladda ay u la socoto shaqadooda.

### 5.4.2. Bixiyeyaasha Adeegga Boostada Gudaha

Soomaaliya waxay aqoonsan tahay in horey u jireen bixiyeyaasha boostada gudaha ee aan rasmiga ahayn oo xooggan. Waxaa la doonayaa in shabakaddahaas laga dhigo rasmi isla markaana la dhiirrigeliyo iskaashi u dhexeya iyo iskuxirnaan ballaaran si loo horumariyo bixinta adeegyada guud ahaan Dalka. Adeeg-bixiyayaasha gudaha waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay isticmaalaan cinwaanka VO Box, xarumaha (GOOB-ADEEG), iyo nidaamka 6D Address si loo abuuro nidaam boosto oo iskudhafan Dalka oo dhan. Adeeg-bixiyeyaasha boostada gudaha waxaa lagu dabaqayaa nidaam ruqsad-bixin fudud si Dawladda ay u la socoto una qaabayso shaqadooda.

### 5.4.3. Adeeg-Bixiyeyaasha Xarumaha Goob-Adeeg

Waxaa la qorsheynayaa in shabakaddaha Qaran ee xarumaha Goob-adeeg ay bixiyaan adeegyada tafaariiqda ee hadda jira ee ganacsiga gaarka ah. Shabakadda ayaa lagu furayaa, iyadoo lagu salaynayo baahida loo qabo. Marka hore waxaa la furayaa hal xarun gobol kasta, kadib hal xarun degmo kasta ka dibna waa la sii balaarinaya, iyadoo loo eegayo baahida. Tafaariiqleyda waxaa lagu casumayaa inay

noqdaan xarun Goob-adeeg iyagoo raacaya shuruudo lagu heshiiyey oo ku saleysan khidmadaha macaamilka.

### 5.4.4. Shabakadda Qaran

Shirkadaha iyo ganacsatada gaarka ah waxaa lagu casumayaa inay iskuxiraan goobaha shabakadda qaybahooda kala duwan. Waxaa kaloo jiri doona fursado laysugo xirayo adeegyada u dhexeeya gobollada, sidoo kale gobollada iyo degmooyinka iyo xarumaha agabka la dhigo ee macmiilku ka qaadanayo dalabkiisa.

## 5.5. Doorashada Macaamiisha

### 5.5.1. Helitaanka Adeegyada ee Macaamiisha

Himilada shabakaddaha xarumaha Goob-adeeg waa in ay bixiyaan adeegga maalmaha iyo saacaadaha shaqada ee goobta-adeegga. Intaa waxaa dheer, shabakaddaha ayaa adeegyo siinaya dhammaan macaamiisha Boostada si loo kordhiyo helitaanka adeegyo wax tar leh.

### 5.5.2. Hal-abuurka Adeegyada

Himilada siyaasaddani waa in rasmi laga dhigo adeegga dirista iyo helitaanka boostada, iyadoo loo marayo ruqsad-bixin, bixinta cinwaanada iyo wadaagista shabakaddaha. Arinkaasi wuxuu ka caawinayaa adeeg-bixiyaasha boostada in ay helaan fursad ay diiradda ku saaraan adeegyo hal abuurnimo cusub leh sida qiimeynta, ogeysiisyada iyo raadraaca adeegyada.

### 5.5.3. Tayada Adeegga

Dhammaan adeeg-bixiyayaasha boostada ee haysta ruqsada waxaa waajib ku ah inay horumariyaan heerarka tayada adeegga gudaha ee shirkadahooda sidoo kalena waxaa laga rabaa inay faahfaahiyaan waxqabadkooda taasoo qayb ka ah heshiiska ruqsadda.

### 5.5.4. Ilaalinta Macaamiisha

Dhammaan shirkadaha haysta ruqsada adeeg-bixinta boostada waa inay si cad u soo bandhigaan shuruudaha adeegyada ay bixiyaan oo ay ku jiraan magdhawga la siinayo macmiilka haddii adeeggu xumaado ama khasaare yimaado. Adeegyada Hay'aada Boostada Qaranka (SNPS) ee dirista iyo keenista boostada waa in macaamiisha si cad loogu sheegaa heerarka magdhawga ee ururka boostada caalamiga ah (UPU).

## 6. HIRGELINTA SIYAASADDA, KORMEERKA IYO DIB-U-EEGIST

Soomaaliya waxay gaari kartaa ujeeddooyinka siyaasaddan haddii shirkadaha ganacsiga ee gaarka loo leeyahay ay si xoog leh uga qayb qaataan. Adeegga Boosatada Qaranka (SNPS) oo ka wakiila Dawlada ayaa hagaysa horumarinta boostada waxayna la iman doontaa agabkii loo baahnaa si loo dhiso nidaam boosto oo casri ah oo la jaanqaada nidamka boostada qaarada Afrika iyo kan caalamkaba. Siyaasaddan waxaa loo fulinayaa si macquul ah, iyadoo lagu saleynayo awoodda kaabeyaasha Dalka iyo xirfadleyaasha.

Qorshe faahfaahsan ayaa loo diyaarinayaa shanta tiir ee siyaasadda. Horumarka laga sameeyey ujeeddo kasta ayaa si dhow loola soconayo, iyadoo lagu cabbirayo yoolal cad cad. Ujeeddooyinkana waxaa lagu samayn doonaa dib-u-eegis si loo hubiyo inay weli yihiin kuwo ku haboon marxalada markaas taagan loona beddelo haddii aysan waafaqsanayn baahida Dalka ama horumarinta dhaqaalaha xiliga qiimaynta.


Somail Past servics

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac: XRW/605/05/2026 Taariikh: 18/05/2026

Ku: Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha Muqdisho
Og: Dhamman Xubnaha Golaha Wasiirrada Muqdisho
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed Muqdisho

**UJEEDO:** **GO'AAN GOLE EE ANSIXINTA "SIYAASADDA QARAN EE HORMARINTA ISBOORTISKA SOOMAALIYA"**

XRW - BIYO
24 MAY 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**Markuu arkay:** Warqadda soojeedinta ee Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha ee Summaddeedu tahay **WDHI//XW/658/2026** kuna taariikhaysan **03/05/2026;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.13.153.05.26** ee **17/05/2026**, kuna saabsan ansixinta **"Siyaasadda Qaran ee Hormarinta Isboortiska Soomaaliya"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Muhiimadda ay leedahay in la hormariyo Isboortiska Soomaaliya, mudnaantana la siiyo Dhallinyarada Soomaaliyeed.

**Waxaa uu meelmariyay:**

**Qodobka 1aad:**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.13.153.05.26** ee **17/05/2026**, kuna saabsan ansixinta **"Siyaasadda Qaran ee Hormarinta Isboortiska Soomaaliya"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

## Qodobka 2aad

## Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha loo igmaday inay hirgaliso, meelmarisana Siyaasadda kor ku xusan.

## Qodobka 3aad

## Dhaqangal

Go'aanka Golaha waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Siyaasaddaana waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO
TAARIIKH
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA

جمهـــــورية الصـــومـــال الفيـــدرالية
مكـــتب محامى العام للـــدولة

THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF STATE ATTORNEY GENERAL

**SUMMAD: XGG/184/2026** **05/05/2026**

**Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Bixin Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliya**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda asaga oo tixraacaya Warqadda **SUMMAD: WCAD/XAWSHH/3156/2026** ee ku taariikheysan **03/05/2026**, Ujeeddadeeduna ahayd: Soo-gudbin **"Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliya"**, kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Xeer Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976, waxa uu halkaan idinkugu soo gudbinayaa **"Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliya"**, oo ay Wasaaraddu horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa Shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiisku markuu darsay Siyaasadan oo ah mid mudnaan gaar ah u leh horumarinta Isboortiga Soomaaliya, waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirrada si ay u ansixiyaan, maadaama aysan ka hor-imaanayn Dastuurka, Shuruucda Dalka, Danta-guud, kadib marka la dhammeystiro habraaca uu tilmaamayo Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 125 ee soo baxay 06/04/2023.

Ugu dambeyn, Xafiiska Garyaqaanku waxa uu ka codsanayaa Agaasimaha Golaha Wasiirrada marka ay Golaha Wasiirraddu ansixiyaan Siyaasaddan in Nuqulka Asalka ah loo soo gudbiyo Xafiiska Garyaqaanka Guud, sida ku cad Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 125 ee soo baxay 06/04/2023, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**FG**: Halkaan waxaa ku lifaaqan Nuqul Siyaasadda Sare ku xusan.

**Qareen: Axmed Faarax Axmed**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA • OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL • مكتب المحامي العام للدولة

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/3156/2026** **Tr. 03/05/2026**

Mudane Garyaqaane,

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "SIYAASADDA QARAN EE HORUMARINTA ISBOORTIGA SOOMAALIYA"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxa ay halkan ku soo gudbinaysaa "Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliya" oo tilmaamaysa hannaan sharci iyo mid maamul oo lagu horumarinayo isboortiga Soomaaliyeed.

Siyaasaddan oo ay diyaarisay Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga ee Xukuumadda JFS, waxay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurku ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan siyaasadaha sharci.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa in uu ka guto waajibkiisa sharci ee ku aaddan siyaasadaha sharci si habraaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so
Tell: 0615847146

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID

Dr. Axmed iyo Axmed Nuur

**Tixraac:XRW/XJ 0156 /04/2026** **Taariikh: 29/04/2026**

**Ku: Wasaaradda Cadaaladda iyo Dastuurka**
**Og: Agaasimaha Golaha Wasiirrada**
**Og Garyaqaanka Guud ee Dowladda**
**Og: Wasaaradda Dhalinyaradda iyo Ciyaaraha**

**UJeeddo: Soo Gudbin Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Ciyaaraha Soomaaliya.**

**Xoghayaha Joogtada Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS,**

Markuu arkay: Xeer Ra'iisal Wasaare **Lr.125** Soona Baxay **06/04/2023** iyo Habraaca Diyaarinta Hindise-Sharciyeedyada qodobkiisa **2aad** farqadaha (ii) iyo (iii) ee Siyaasadda Diyaarinta Hindise Sharciyeedyada, Xeernidaamiyeyaasha iyo Gelidda Heshiisyada Xukuumadda JFS.

Markuu Arkay: Kulamo heer farsamo ah oo ay qabteen Tiirka Horumarinta Arimaha Bulshadda ee Xafiiska Raysal wasaaraha laguna falanqeeyey Siyaasadda kor ku xusan ee ay soo gudbisay wasaaradda dhalinyaradda iyo Ciyaaraha.

Markuu hubiyey: In Hindise-sharciyeedyadaan qayb ka yihiin taaba-galinta barnaamijka Siyaasadeedee Xukuumadda si waafaqsan Dastuurka KMG ah ee Dalka.

Ayaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, wuxuu usoo gudbinayaa Wasaaradda Cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Ciyaaraha, si ay uga gudato Waajibaadkeeda.

**Wadashaqeyn Wacan.**

**Mudane: kamal Gutale**
**Xoghayaha Joogtada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga

# SIYAASADDA QARAN EE HORUMARINTA ISBOORTIGA SOOMAALIYA

**MOGADISHU-SOMALIA**

**MAY 2026**

**TUSMADA BUUGGA**


1. FARIINTA WASIIRKA ............ 4
2. MAHADNAQ ............ 5
3. DULMAR GUUD ............ 6
4. HORDHAC ............ 8
5. TAARIIKHDA ISBOORTIGA SOOMAALIYA ............ 10
6. HIMILADA ............ 11
7. HIIGSIGA ............ 11
8. CAQABADAHA UU WAJAHAYO ISBOORTIGA SOOMAALIYA ............ 11
9. FURSADAHA ............ 14
   9.1. Dhallinyaro fara badan oo leh hibo isboorti ............ 14
   9.2. Jiritaanka kaabayaal isboorti sida garoomada oo dalka hore looga sameeyey ............ 15
   9.3. Helitaanka maalgashi ka yimaada dhinaca ganacsiyada gaarka loo leeyahay ............ 15
10. BARTILMAAMEEDKA LA HIIGSANAYO ............ 17
11. MABAADII'DA IYO QIYAMKA HAGAYA SIYAASADA ............ 19
   11.1. Mabaadii'da Hagaya Siyaasadda ............ 19
   11.2. Qiyamka Hagaya Siyaasadda ............ 20
12. UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA ............ 21
   12.1. Ujeeddada Guud ee Siyaasadda ............ 21
   12.2. Tiirarka Istiraatiijiga ah ee Hirgelinta Siyaasadda ............ 21
   12.2.1. Tiirka Koowaad: Dib u Habaynta Hannaanka Maamulka Guud ee Hay'adaha iyo Xiriirrada Isboortiga ............ 21
   12.2.2. Tiirka Labaad: Horumarinta Kaabayaasha Isboortiga ............ 22
   12.2.3. Tiirka Saddexaad: Horumarinta Aqoonta iyo Xirfadda Xirfadlayaasha Isboortiga ............ 22
   12.2.4. Tiirka Afraad: Barbaarinta aqooneed & jireed ee da'yarta iyo aqoonsiga hibada isboortiga ............ 22
   12.2.5. Tiirka Shanaad: Sare u Qaadidda Anshaxa Isboortiga, Ilaalinta Xirfadlayaasha iyo Isboortiga ............ 23

**12.2.6. Tiirka Lixaad: Ka Qaybqaadashada Isboorti ee Loo dhanyahay** .................. 23
**12.2.7. Tiirka Toddobaad: Tartanada, Munaasabadaha Isboortiga iyo Abaalmarinada Guulaha**.............................................................................................. 23
**12.2.8. Tiirka Sideedaad: Abaabulka Khayraadka iyo Maalgelinta Isboortiga** .......... 24
**12.2.9.Tiirka Sagaalaad: Iskaashi, muuq-bilid iyo diblomaasiyada isboortiga**........... 24
**13. XIRIIRKA WARBAHINTA IYO MUUQ-BILIDDA**............................................... 25
**14. ISKU DUBBARIDKA IYO HANNAANKA HIRGELINTA SIYAASADDA** ........... 27
**15. HANNAANKA DABAGALKA IYO QIIMAYNTA SIYAASADDA**........................ 30
**16. GUNNAANAD**......................................................................................... 32

## 1. FARIINTA WASIIRKA



Waxaa sharaf iyo milgo weyn ii ah inaan soo bandhigo Siyaasadda Qaran ee Isboortiga Soomaaliyeed (SQIS), oo ah dukumeenti salka u dhigaya istiraatiijiyad sal adag leh oo looga golleeyahay in lagu horumariyo qaybaha kala duwan isboortiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Diyaarinta qabyo-qoraalka siyaasaddan waxay soo bilaabatay xili hore, iyada oo ka dhalatay wadatashi iyo iskaashi ballaaran oo u dhexeeyay hay'adaha dowladda, hay'adaha/xiriirrada isboortiga dalka, xirfadlayaasha isboortiga, bulshada rayidka oo ay ugu horeeyaan dhallinyarada iyo bah-wadaagta caalamiga ah. Waxaan si gaar ah ugu faraxsanahay inaan goobjoog u noqdo dhammeystirka, soo bandhigista iyo fullinta siyaasadan muhiimka ah oo ku soo hagaagtay xili baahi weyn loo qabo.

Isboortigu wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa mideynta bulshada, kobcinta dareenka waddaninimo, iyo xoojinta wadajirka bulshada Soomaaliyeed. Waxaa intii muddo ah socday dadaallo heerar kala duwan leh oo lagu horumarinayo isboortiga dalka. Hase yeeshee, maqnaanshaha siyaasad dhexe oo mideysan ayaa saamayn taban ku yeelatay xaqiijinta dib u habaynta hay`adaha Isboortiga Dalka. Iyada oo arrinkaas laga duulayo, Siyaasadda Qaran ee Isboortiga Soomaaliyeed waxay soo bandhigaysaa hannaan mideysan oo lagu hago horumarinta, maamulka, iyo maaraynta isboortiga heer kasta, laga billaabo heerka bulshada ilaa heer qaran.

Siyaasaddani waxay mudnaan gooni ah siinaysaa xoojinta iyo dhismaha hay'adaha iyo xirriirada isboortiga, hagaajinta kaabeyaasha, dhiirrigelinta ka-qaybgalka loo dhan yahay, kor u qaadidda awoodda farsamo, iyo ballaarinta fursadaha dhalinyarada iyo bulshada qeybaha kala dugan duwan.

Hirgelinta siyaasaddan waxay u baahan tahay dadaal iyo iskaashi dhab ah oo ay yeeshaan dhammaan daneeyayaasha isboortiga kala duwan ee gudaha dalka iyo dibaddiisa. Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga XFS waxay si buuxda diyaar ugu tahay inay hoggaamiso dadaallada arrintaas ku wajahan si loo xaqiijiyo ka miradhalinta ujeeddooyinka iyo yoolasha ku xusan siyaasaddan.

Waxaan ku kalsoonahay in siyaasaddani ay horseedi doonto sare u qaadista heerka tayo iyo wax-ku-oolnimo ee isboortiga dalka, kobcinta karaanka bahda dhalinyaradda Isboortiga, iyo dib u soocelinta maqaamka isboortiga ee dalku uu ku lahaa fagaarayaasha caalamka.

Md. Maxamed Cabdulqaadir Cali
Wasiirka Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga XJFS

## 2. MAHADNAQ

Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay si wayn ugu mahadnaqaysaa dhammaan hay'adaha, khubarada, iyo daneeyayaasha kala duwan ee ka qayb qaatay diyaarinta, dib u eegista, iyo dhammaystirka Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliyeed.

Mahadnaq gaar ah waxaa mudan shaqaalaha iyo masuuliyiinta Wasaaradda oo uu ugu horeeyo Wasiirka Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga Mudane Mohamed Cabdulqaadir Cali oo lahaa dardargalinta dhammaystirka siyaasadan, khubarada isboortiga ee gudaha dalka iyo dibadda, Guddiga Olombikada Qaranka Soomaaliyeed, xiriirrada iyo ururada isboortiga, haweenka, dhallinyarada, xirfadlayaasha isboortiga iyo dhammaan dhinacyadii kale ee fikradahooda, talooyinkooda, iyo khibradahooda ku biiriyay geeddi socodkii diyaarinta siyaasaddan.

Sidoo kale, Wasaaraddu waxay u mahadcelinaysaa hay'adaha kala duwan ee Xukuumadda Dan Qaran taageeradooda iyo doorkooda ku aaddan dhiirrigelinta dhammaystirka siyaasaddan muhiimka u ah bahda isboortiga Soomaaliyeed.

Ugu dambayn, Wasaaraddu waxay qiraysaa in ay siyaasaddan tahay natiijo ka dhalatay iskaashi, wadatashi, iyo dadaal wadareed ay si wada jir ah u bixiyeen bahda isboortiga. Sidaas darteed, waxaan rajaynayaa in isla ruuxdaaas wadajirka ahi ay saldhig u noqoto hirgelinta iyo mirodhalinta Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliyeed.

## 3. DULMAR GUUD

Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliya waa siyaasad looga golleeyahay in lagu maamulo laguna horumariyo guud ahaan isboortiga dalka heer federaal iyo heer Dowlad Goboleed si isboortiga dalka uu u noqdo mid horumarsan oo la jaanqaada heer gobol iyo caalamka.

Siyaasaddan ayaa ah middii ugu horeeysay uu dalku yeelanayo tan iyo kolkii dalka laga aasaasay Jamhuuriyadda Seddexaad. Maqnaashaha siyaasadan ayaa ahayd caqabad ballaaran oo uu wajahayay isboortiga dalka maadaama aysan jirin siyaasad Qaran oo hagta horumarka isboortiga dalka.

Siyaasaddan ayaa waxaa diyaariyay Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga si waafaqsan waajibaadka Wasaaradda iyo xeerarka dhaqan-galka ah ee u degsan Dalka. Siyaasadan oo loogu talagalay in la fuliyo muddada u dhaxaysa 2026-2030 ayaa waxay lafdhabar u tahay dib u habaynta, casriyaynta iyo horumarinta isboortiga dalka noocyadiisa kala duwan.

Waxay sidoo kale bar-billow wanaagsan u ah hawlaha horumarinta isboortiga iyada oo qeexaysa himilo, hiigsi, qayim iyo ujeedooyin cad cad oo loogu talagalay in ay wax wayn ku soo kordhiyaan isboortiga dalka.

### Himilada:

Dal isku duuban oo gaara isla markaana joogteeya guulo isboorti oo heer sare ah, heer shakhsi iyo heer qaranba.

### Hiigsiga:

Hagidda iyo xoojinta dadaallada lagu kobcinayo isboortiga si uu u noqdo dhaqan bulsho oo kor u qaada caafimaadka, fayoobida, iyo firfircoonida bulshada, isla markaana horumariya xirfadda iyo tayada bahda isboortiga.

### Mabaadii'da iyo Qiyamka Hagaya Siyaasadda:

Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliya waxay ku salaysan tahay mabaadii' hagaya iyo qiyam aasaasi ah oo dejinaya saldhigga jihaynta, maamulka, hirgelinta, iyo horumarinta isboortiga dalka. Mabaadii'dan iyo qiyamkan waxay hubinayaan in isboortigu noqdo aalad wax ku ool ah oo ka qayb qaadata horumarinta qofka, kobcinta bulshada, xoojinta wadajirka qaranka, iyo dhismaha hannaan isboorti loo dhan yahay, hufan, oo waara.

### Mabaadii'da:

- **Isla xisaabtan iyo ka mid ahaansho**
- **Sinnaan iyo caddaalad**
- **Ka qayb qaadashada loo siman yahay**
- **Aqoonsiga kartida iyo horumarinta hibada**
- **Waxqabad heer sare ah**
- **Joogtaynta**

### Qayimka:

- **Daacadnimo**
- **Ixtiraam**
- **Ciyaar caddaalad ah**

**Ujeedooyinka Siyaasadda:**

Siyaasadan ayaa waxaa ku jira ujeedooyin cad cad oo looga gol-leeyahay in lagu hormariyo isboortiga dalka.

**Tiirarka Istiraatiijiga ah ee Hirgelinta Siyaasadda:**

Si loo xaqiijiyo ujeeddada guud ee siyaasaddan, waxaa mudnaan gaar ah la siinayaa tiirarkan istiraatiijiga ah ee soo socda:

1) Dib u habaynta hannaanka maamulka guud ee hay'adaha iyo xiriirrada isboortiga dalka.
2) Horumarinta kaabayaasha isboortiga.
3) Horumarinta aqoonta iyo xirfadda xirfadlayaasha isboortiga.
4) Barbaarinta aqooneed iyo jireed ee da'yarta iyo aqoonsiga hibada isboortiga.
5) Sare u qaadidda anshaxa isboortiga iyo ilaalinta xirfadlayaasha isboortiga.
6) Ka qayb qaadashada isboorti loo dhanyahay.
7) Tartanada, munaasabadaha isboortiga abaalmarinnada.
8) Abaabulka khayraadka iyo maalgelinta isboortiga.
9) Iskaashi, muuq-bilid iyo diblomaasiyadda isboortiga.

Dukumeentigani wuxuu sidoo kale tilmaamayaa caqabadaha waaweyn ee haysta isboortiga dalka, sida maqnaanshaha sharciyo iyo siyaasado dhameystiran, tabar yarida ama nuglaanta hay'adaha, burburka kaabeyaasha isboortiga, miisaaniyad la'aanta hay'adaha/xiriirada isboortiga, iyo tayada hooseeysa ee aqoonta xirfadlayaasha isboortiga. Sidoo kale, siyaasadan waxay muujinaysaa in ay jiraan fursado waaweyn oo ay ka mid yihiin dhallinyaro badan oo leh hibo isboorti, kaabayaal dib loo soo nooleyn karo, iyo taageerto laga heli karo dowladda, ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyo bahwadaagta kale ee isboortiga taageerta.

Siyaasaddan waxay suurtagalin doonta in helo isboorti bulshada iyo dalkaba u leh waxtar la taaban ee dhinacyada horumarinta bulshada sida; ka qayb-qaadashada nabadaynta dalka, ka hortaga fikirka xagjirka, soo saarista xirfadlayaal heer sare ah, shaqa abuurka dhallinyarada iyo sare u qaadista ka faa'iidaysiga hibada isboorti ee ku jirta dhallinyaradeena.

Siyaasaddan ayaa waxaa ay dhabaha u xaaraysaa diyaarinta sharciga isboortiga dalka oo Wasaaradda ay ku hawlan tahay iyo diyaarinta Qorshaha Istaraatiijiyadda ee Horumarinta Isboortiga dalka kuwaas oo iyaguna wax badan oo wanaagsan ku soo kordhin doona tayanta iyo horumarinta isboortiga dalka.

Ugu danbayn, bahda Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo uu ugu horreeyo Wasiirka Wasaaradda, waxay si buuxda ugu mahad celinayaan dhammaan dadkii iyo hay'adihii kala duwanaa ee gacanta ka gaystay hirgalinta iyo dhammaystirka siyaasadan muhiimka u ah hawlaha isboortiga dalka.

## 4. HORDHAC

Isboortiga waxaa lagu qeexaa dhammaan noocyada kala duwan ee dhaqdhaqaaqa jireed, ha ahaadeen kuwo rasmi ah ama kuwo aan rasmi ahayn, kuwaas oo loo maro ka qaybgal furan ama tartan, ujeeddadooduna tahay horumarinta caafimaadka jirka, fayoobida maskaxda, kobcinta xirfadaha, iyo xoojinta isku xirnaanta bulshada, iyadoo lagu hagayo xeerar ama hannaan la isla oggolyahay.

Colaaddii sokeeye ee dalka waxay sababtay burbur guud oo ku yimid hay'adihii dowliga ahaa, waxaana ay si gaar ah u saameysay qaybaha kala duwan ee kaabeyaasha isboortiga. Waxaa si weyn hoos ugu dhacay awooddii qaybaha muhiimka u ahaa horumarka isboortiga, sida xirfadlayaasha, tababarayaasha, garsoorayaasha, maamulayaasha, iyo khubarada farsamo ee loo baahnaa. Arrintaasi waxay keentay in nidaamyadii, qaab dhismeedkii, iyo hab-maamulkii isboortigu ay si weyn u tabar darreeyaan.

Burburkaasi wuxuu saameeyay qaab dhismeedkii isboortiga ee heer kasta, laga bilaabo heerka bulshada hoose, dugsiyada, iyo jaamacadaha, ilaa heer gobol iyo horyaallada qaran. Taasi waxay caqabad ku noqotay koboca ciyaartooyda iyo xirfadlayaasha isboortiga, waxayna si toos ah u xaddiday fursadaha lagu ogaan karo, lagu kobcin karo, laguna horumarin karo hibada dhallinyarada Soomaaliyeed.

Inkasta oo la sameeyay dadaallo dib u soo nooleyn ah oo xooggan, isla markaana lagu tallaabsaday guulo muhiim ah oo ay ka mid yihiin dib u billaabidda tartamada gudaha ee qaranka iyo matalaadda dibadda, dib u dhiska garoomada kala duwan, iyo soo saarista ciyaartooy qaran oo dhinacyo kala duwan leh, haddana horumarka waxaa weli caqabad ku ah jiritaan la'aanta ilo dhaqaale iyo kuwo farsamo oo la isku hallayn karo, iyo maqnaanshaha siyaasad qaran oo mideysan oo hagi karta hawlahaas. Arrimahani waxay si cad u muujiyeen baahida degdegga ah ee loo qabo siyaasad dhammaystiran, loo dhan yahay, oo lagu hago yoolasha la hiigsanayo mustaqbalka dhow iyo kan fog.

Haddaba, iyadoo laga jawaabayo baahidaas, Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga waxay diyaarisay Siyaasadda Qaran ee Isboortiga Soomaaliyeed (SQIS). Siyaasaddani waxay soo bandhigaysaa jihayn istiraatiiji ah oo mideysan, taas oo lagu hagayo horumarinta, maamulka, iyo kobcinta hawlaha isboortiga dalka ee heer kasta.

Siyaasaddu waxay sidoo kale mudnaan gaar ah siinaysaa dib u dhiska, xoojinta iskaashiga, iyo horumarinta xiriirrada lala yeesho hay'adaha isboortiga ee heer gobol, heer qaaradeed, iyo heer caalami ba, gaar ahaan Afrika, Carabta, iyo caalamka intiisa kale. Arrintani waxay fududeyn doontaa aqoon isweydaarsiga, kobcinta xirfadaha, iyo kordhinta ka qaybgalka tartammada caalamiga ah.

Siyaasaddan waxaa udub dhexaad u ah garawshiyaha in isboortigu yahay aalad muhiim ah oo tiir u ah caafimaadka qofka, firfircoonida bulshada, awood siinta dhallinyarada, horumarinta nabadda iyo midnimada qaranka. Waxay ku dhisan tahay mabaadi'da sinnaanta, daah furnaanta, isla xisaabtanka, iyo hufnaanta. Siyaasaddani waxay sidoo kale qeexaysaa aragtida guud, yoolasha, iyo arrimaha hortabinta u leh qaab dhismeedka hay'adaha lagama maarmaanka u ah dib u dhiska iyo horumarinta isboortiga Soomaaliya.

Ugu dambayn, hirgelinta siyaasaddan waxay horseedi doontaa dib u soo celinta sumcaddii isboorti ee Soomaaliya, ka miro dhalinta karaanka iyo xirfadda dhallinyarada, iyo sare u qaadista awoodda tartan iyo xirfadeed ee ciyaartooyda Soomaaliyeed, si dalku uga qaato kaalin muuqata isboortiga heer gobol iyo heer caalami.

## 5. TAARIIKHDA ISBOORTIGA SOOMAALIYA

Isboortiga casriga ah ee Soomaaliya wuxuu leeyahay taariikh dib ugu laabanaysa xilligii gumeysiga, gaar ahaan billowgii qarnigii 20-aad. Xogaha la heli karo waxay muujinayaan in ciyaaraha, gaar ahaan kubadda cagta, ay dalka ka jireen tan iyo 1920-dii, halka kooxo isboorti iyo tartammo maxalli ah ay si tartiib tartiib ah uga hanaqaadeen magaalooyinka waaweyn sida Muqdisho. Marxaladdan hore, kooxo caan noqday sida Comando Marina, Gaadiidka FC (Auto Parco), AC Bondhere, iyo LLPP Jeenyo ayaa saldhig u noqday koboca isboortiga, iyaga oo horseeday xiise bulsho iyo tartan abaabulan oo si tartiib ah u sii ballaartay.

Dhinaca maamulka, isboortigu wuxuu yeeshay qaab-dhismeed qaran oo sii xoogaystay markii Xiriirka Kubadda Cagta Soomaaliyeed si rasmi ah loo aasaasay sannadkii 1951. Tani waxay caddeyn u tahay in maamulka isboortiga Soomaaliyeed uu leeyahay xididdo taariikheed oo ka horreeya xornimada dalka, isla markaana isboortigu horey ugu jiray geeddi socodka samaysanka hay'adaha qaran. Xorriyaddii ka dib, dowladdii Soomaaliyeed waxay xoogga saartay horumarinta isboortiga si loo xoojiyo midnimada qaranka, loo kobciyo karaanka dhallinyarada, loona dhiso nidaamyo iyo xiriirro rasmi ah oo maamula noocyada kala duwan ee ciyaaraha.

Sannadihii 1960-dii iyo 1970-dii, isboortiga Soomaaliya wuxuu galay marxalad hormar iyo koboc aad uu nidaamsan oo tayo leh. Tartammo gudaha ah ayaa sii xoogaystay, kooxo heer qaran ahna waxay noqdeen kuwo si weyn loo yaqaan. Isla muddadaas, Soomaaliya waxay xoojisay joogitaankeeda caalamiga ah, waxaana Guddiga Qaranka Olombikada Soomaaliyeed si rasmi ah u aqoonsaday Guddiga Olombikada Adduunka sannadkii 1972. Aqoonsigaasi wuxuu ahaa tallaabo muhiim ah oo dalka u sahashay inuu si rasmi ah uga mid noqdo dhaqdhaqaaqa Olombikada caalamka

Xilligaas, Soomaaliya waxay gaartay guulo isboorti oo muuqda oo sare u qaaday sumcadda qaranka. Dhinaca kubbadda kolayga dumarka, Soomaaliya waxay martigelisay tartankii Women's AfroBasket ee 1979, halkaas oo ay ku gashay kaalinta labaad, kana noqotay dalkii ugu horreeyey ee Zone 5 ka tirsan ee bilad ka hela tartankaas. Guushaasi waxay muujinaysay in Soomaaliya xilligaas aanay ku koobnayn ka qaybgal oo keliya, balse ay lahayd awood tartan oo qaaradeed isla markaana soo hoyay guulo waawayn.

Ciyaaraha fudud ayaa iyaguna ahaa qeyb kale oo Soomaaliya si weyn uga dhex muuqatay. Guushii ugu caansanayd ee shaqsiyeed waxaa gaadhay Cabdi Bile Cabdi, oo ku guuleystay orodka 1500 mitir ee Horyaalkii Adduunka sannadkii 1987. Guushan waxaa loo tixgeliyaa mid ka mid ah guulaha ugu waaweyn ee abid ay Soomaaliya ka gaarto isboortiga heer caalami, waxayna caddeyn u noqotay in dalka uu leeyahay karti iyo hibo isboorti oo gaari karta heerka ugu sarreeya. Intaa waxaa dheer, halyeey Cabdullaahi Nuur Waasuge ayaa sanadkii 1973 ku guuleystay billadda dahabka ee boodada sare ee Ciyaarihii Afrika, taas oo caddeyn u ahayd heerka ay Soomaaliya ka gaartay ciyaaraha fudud xilligaas.

Markii dowladdii dhexe burburtay sannadkii 1991, isboortiga Soomaaliya wuxuu galay marxalad aad u adag. Burburkaasi wuxuu saameeyey hay'adihii, xiriirradii, tartamadii, iyo kaabeyaashii isboortiga. Garoomo badan ayaa burburay, nidaamyadii tartamada qarankuna way istaageen ama si weyn ayay u daciifeen. Xaaladdaasi waxay si toos ah u dhaawacday koboca ciyaartooyda, tayeynta xirfadlayaasha, iyo awooddii dalka ee ka qaybgalka joogtada ah ee fagaarayaasha gobolka iyo caalamka.

Si kastaba ha ahaatee, inkastoo ay jireen dhibaatooyin amni, dhaqaale, iyo kala daadsanaan hay’adeed, isboortigu gebi ahaanba kama bixin nolosha bulshada Soomaaliyeed. Meelo badan oo dalka ah waxaa si iskaa wax u qabso ah uga sii socday ciyaaro iyo kulammo bulsho, taas oo muujinaysay in isboortigu weli ahaa meel firfircooni, kulmid, iyo rajayn bulsho lagu ilaashado. Xilliyadii colaadaha, waxaa sidoo kale jiray shakhsiyaad iyo dadaallo bulsho oo u arkayay isboortiga aalad lagu yareeyo kala fogaanshaha bulshada, looguna abuuro dhallinyarada dariiq ka duwan rabshadda. Sidaas darteed, isboortigu wuxuu si toos ah iyo si dadbanba uga qayb qaatay ilaalinta isku xirnaanta bulshada iyo horumarinta nabadda.

Laga bilaabo sannadihii 2000, waxaa dib u soo xoogaystay dadaallo lagu soo nooleynayo isboortiga Soomaaliya. Xiriirro isboorti ayaa dib loo dhisay, tartammo gudaha ah iyo kuwo heer gobol ah ayaa dib loo bilaabay, waxaana si tartiib tartiib ah u soo laabtay ka qaybgalka Soomaaliya ee tartamada gobolka sida CECAFA. Dadaalladan soo kabasho, inkastoo ay la socdaan caqabado waaweyn oo dhinaca kaabeyaasha, maamulka, iyo maalgelinta ah, waxay muujinayaan in isboortiga Soomaaliya weli leeyahay awood dib loogu dhisi karo laguna sii horumarin karo.

Marka la eego guud ahaan taariikhda isboortiga Soomaaliya, waxaa muuqata saddex arrimood oo muhiim ah:

- Midda koowaad waa in isboortigu leeyahay xididdo taariikheed oo qoto dheer oo ka horreeya xornimada.
- Midda labaad waa in Soomaaliya ay horey u lahayd waqtiyo guul iyo sharaf isboorti oo heer qaran, heer qaaradeed, iyo heer caalami ah.
- Midda saddexaadna waa in xilliyadii burburka iyo colaadaha, isboortigu sii ahaa aalad bulsho oo gacan ka geysan karta firfircoonida dhallinyarada, isku xirnaanta bulshada, iyo rajada dib u soo kabashada. Sidaa darteed, dib u dhiska iyo horumarinta isboortiga Soomaaliya maanta ma aha hawl meel eber ah laga bilaabayo, balse waa soo nooleyn iyo sii ambaqaadid ku dhisan taariikh, hibo, iyo waayo-aragnimo qaran oo hore u jirtay.

## 6. HIMILADA

Dal isku duuban oo gaara isla markaana joogteeya guulo isboorti oo heer sare ah, heer shakhsi iyo heer qaranba.

## 7. HIIGSIGA

Hagidda iyo xoojinta dadaallada lagu kobcinayo isboortiga si uu u noqdo dhaqan bulsho oo kor u qaada caafimaadka, fayoobida, iyo firfircoonida bulshada, isla markaana horumariya xirfadda iyo tayada bahda isboortiga.

## 8. CAQABADAHA UU WAJAHAYO ISBOORTIGA SOOMAALIYA

Caqabadaha haysta ama uu wajahayo isboortiga Soomaaliya waa kuwo aad u ballaaran, isbiirsaday, oo muddo dheer soo jiitamayay, kuwaas oo salka ku haya burburkii ku yimid dowladnimada dalka, dagaalladii sokeeye, iyo daciifnimadii hay’adaha dowladeed ee mas’uulka ka ahaa horumarinta adeegyada bulshada, oo ay ku jirto qaybta isboortigu. Burburkaasi wuxuu saameyn toos ah ku yeeshay qaab dhismeedkii, nidaamkii, iyo kaabayaashii laf-dhabarta u ahaa horumarinta isboortiga, taas oo keentay in qeybta isboortigu ay muddo dheer ka baxdo mudnaantii ay ku lahayd qorsheynta iyo maalgelinta qaranka.

Inkasta oo dalka uu sannadihii u dambeeyay muujiyay soo kabasho la taaban karo oo dhinacyada amniga, dhaqaalaha, iyo dib u dhiska hay'adaha dowladda, haddana isboortigu wuxuu weli ka mid yahay qaybaha aan helin mudnaantii ku habboonayd. Tani waxay ka dhalatay isku biiridda duruufo badan oo ay ka mid yihiin baahiyaha amni, culaysyada dhaqaale, baahida adeegyada aasaasiga ah, iyo aragti aan wali si buuxda u aqoonsanayn kaalinta istiraatiijiga ah ee isboortigu ku leeyahay dhismaha bulshada iyo horumarinta dhalinyarada. Sidaas darteed, isboortigu wuxuu noqday qayb ka mid ah meelaha la dayacay ama aan si ku filan loogu darin qorshayaasha dib u soo kabashada iyo horumarinta dalka.

Marka si qoto dheer loo eego xaaladda guud ee Soomaaliya, waxaa muuqata in caqabadaha weli ka jira dalka, sida amni darrada, saameynta kooxaha argagixisada, shaqa la'aanta baahsan ee dhallinyarada, tahriibka, mukhaadaraadka, iyo nuglaanta bulsho ee ka dhalata firaaqada iyo rajo xumada, ay dhammaantood yihiin arrimo si toos ah uga dhigaya isboortiga aalad qaran oo lagama maarmaan ah. Haddaba isboortigu waa dariiqa ugu fiican ee loo maro xoojinta nabadaynta, dib u heshiisiinta, ka hortagga halista sida mukhaadaraadka iyo caafimaad darrada jirka, iyo shaqo abuurka dhallinyarada.

Sidoo kale, caqabadaha isboortiga Soomaaliya kuma koobna oo kaliya dhinaca kaabayaal li'ida ama dhaqaale yarida, balse waxay taabanayaan qaab dhismeedka guud ee maamulka, qorsheynta, tayeynta xirfadlayaasha, iyo kobcinta hibada ciyaartooyda. Waxaa jira farqi weyn oo u dhexeeya hibada dabiiciga ah ee dhallinyarada Soomaaliyeed ay leeyihiin iyo nidaamka qaran ee la doonayo inuu hibadaas aqoonsado, kobciyo, ilaaliyo, kuna hogaamiyo heer tartan qaran iyo mid caalami ah. Sidaas awgeed, fahamka caqabadaha jira waa tallaabo muhiim u ah dejinta xalal waara oo sal adag leh.

**Caqabadaha ugu waaweyn ee haysta isboortiga Soomaaliya waxaa ka mid ah:**

I. Maqnaanshaha sharciyada, xeerarka, iyo siyaasadaha lagu horumariyo isboortiga: Waxaa weli muuqata baahi weyn oo loo qabo sharciyo, xeerar, iyo siyaasado dhammaystiran oo si cad u hagaya maamulka, horumarinta, maalgelinta, iyo isla xisaabtanka isboortiga dalka. Maqnaanshahan wuxuu horseeday jahawareer dhinaca qaab dhismeedka, doorarka hay'adaha, iyo habraacyada lagu hago xiriirrada, tartamada, iyo horumarinta bahda isboortiga.

II. Maqnaanshaha hay'ado muhiim u ah horumarka isboortiga dalka: Isboortigu wuxuu u baahan yahay hay'ado qaran iyo kuwo heer deegaan ah oo leh awood, waajibaad cad, iyo shaqaale xirfad leh si ay u qaadaan hawlaha qorsheynta, isku dubbaridka, fulinta, iyo dabagalka. Maqnaanshaha ama daciifnimada hay'adahaas waxay caqabad ku tahay inla helo hannaan mideysan oo horseeda horumar joogto ah.

III. Garoomada iyo xarumaha isboortiga dalka oo burbursan ama ku sugan xaalad liidata: Soomaaliya waxaa ay lahayd garoomo heer caalami ah oo lagu qaban jiray dhammaan ciyaaraha heerka caalami si waafaqsan xeerarka hay'adaha isboortiska caalamka. Inta badan garoomadii iyo xarumihii isboortiga ee dalka way burbureen ama waxay ku sugan yihiin xaalad liidata oo aan ku habboonayn tababar, tartan, iyo horumarinta ciyaartooyda iyo xirfadlayaasha. Tani waa caqabadda ugu weyn ee hortaagan dhalinyarada in ay helaan meel ammaan ah oo ay ku ciyaaraan, ku tababartaan, kuna kobciyaan hibadooda. Sidoo kale, waxay caqabad ku tahay qabashada tartamo joogto ah iyo dib u soo nooleynta bulshada dhaqankeeda dhanka isboortiga.

IV. Miisaaniyad la’aan baahsan oo haysata isboortiga dalka:
Isboortiga Soomaaliya waxaa si weyn u saameeyay maalgelin yari joogto ah iyo qoondayn miisaaniyadeed oo aan la jaanqaadi karin baahiyaha dhabta ah ee jira. Maqnaanshaha maalgelin ku filan wuxuu saameeyay dib u dhiska kaabeyaasha, taageerada tartamada, tababarka xirfadlayaasha, qalabaynta, iyo guud ahaan hirgelinta barnaamijyada horumarineed ee isboortiga.

V. Xirfadda iyo aqoonta xirfadlayaasha isboortiga oo hooseysa ama liidata:
Bahda isboortiga dalka, oo ay ku jiraan tababarayaal, garsoorayaal, maamuleyaal, iyo farsamayaqaanno kale, waxay u baahan yihiin tayeyn joogto ah, tababbarro casri ah, iyo fursado aqoon kororsi. Haddaba, hoos u dhaca aqoonta iyo xirfadaha farsamo wuxuu si toos ah u saameeyay tayada tababarka, habsami u socodka tartamada, iyo horumarinta guud ee isboortiga dalka.

VI. Mudnaanta dowladda ee dhinaca isboortiga oo aad u hoosaysa:
Inkasta oo isboortigu leeyahay qiime qaran, bulsho, caafimaad, iyo dhaqaale, haddana weli mudnaanta uu ka helo qorsheynta, siyaasadda, iyo maalgelinta dowladda waa mid aad u hooseysa. Arrintani waxay keentay in isboortigu uusan helin taageeradii siyaasadeed, hay’adeed, iyo dhaqaale ee uu u baahnaa si uu ugu noqdo Soomaaliya aalad wax ku ool u ah horumarinta bulshada iyo dhalinyarada, nabadaynta, iyo yaraynta xagjirnimada.

Marka la isku geeyo caqabadahan, waxaa cad in horumarinta isboortiga Soomaaliya uu ubaahan yahay xal waara oo qorsheysan, mideysan, isla markaana waafaqsan habka federaalka dalka iyo daadajinta isboortiga si dib loogu soo celiyo sumcadda Soomaaliya ay ku lahayd fagaarayaasha caalamka.

## 9. FURSADAHA

In kasta oo ay jiraan caqabado waaweyn oo hortaagan horumarinta isboortiga Soomaaliya, haddana waxaa jira fursado muhiim ah oo horseedi kara dib u soo nooleynta, kobcinta, iyo casriyeynta isboortiga dalka. Fursadahani waa kuwo dhab ah oo la taaban karo, isla markaana noqon kara saldhigga dib looga amba qaado horumarinta isboortiga haddii si qorshaysan oo istiraatiiji ah loo wajaho caqabadaha jira. Sidaas darteed, aqoonsiga iyo ka faa'iidaysiga fursadahani waxay muhiim u yihiin dhismaha hannaan qaran oo isboorti oo waara, loo dhan yahay, oo ku dhisan ka miro dhalinta khayraadka iyo awoodaha dalka u gaarka ah.

Marka la eego xaaladda Soomaaliya, fursadaha jira kuma koobna oo kaliya jiritaanka ciyaartooy hibeysan ama kaabayaal hore u jiray, balse waxay si qoto dheer ula xiriiraan qaab dhismeedka bulsho, awoodda dhallinyarada, firfircoonida ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyo suuragalnimada in isboortiga loo beddelo aalad qaran oo taageerta horumarinta bulshada, caafimaadka, wadajirka, iyo sumcadda dalka. Haddii si habboon loo hago, fursadahani waxay Soomaaliya u abuuri karaan waddo cusub oo ay dib ugu soo ceshato maqaamkeedii isboorti, isla markaana ay uga faa'iidaysato isboortiga dhinacyada bulshada, dhaqaalaha, iyo horumarinta dhallinyarada.

**Fursadaha ugu waaweyn ee ka jira dhinaca isboortiga Soomaaliya waxaa ka mid ah:**

### 9.1. Dhallinyaro fara badan oo leh hibo isboorti

In dhallinyaradu guud ahaan ay tahay tirada ugu badan  bulshada Soomaaliyeed waa caqabad iyo fursad is barbar socota. Haddii dhallinyarada la abaabulo, la hago, la xirfadeeyo, isla markaana loo abuuro barnaamijyo waaweyn iyo fursado ku habboon, tiradaas badan waxaa loo adeegsan karaa qaab wanaagsan oo wax tar u leh naftooda, bulshada, iyo dalkaba. Tani waxay muujinaysaa in dhallinyarada Soomaaliyeed aan loo arki karin oo keliya culays bulsho ama baahi u baahan adeeg, balse sidoo kale loo arki karo awood qaran oo wax soo saar leh, haddii si sax ah loo maareeyo.

Bulshada Soomaaliyeed waxaa lagu yaqaannaa hal-abuur, karti, geesinimo, iyo adkaysi. Xirmada ugu badan bulshada waa dhallinyaro iyada oo lagu tiryo in ay ka yahiin bulsha waynta boqolkiiba todobaatan (70%). Tani waxay ka dhigan tahay in dalka uu leeyahay kayd bulsho oo aad u ballaaran, kana kooban jiil da'yar oo haddii la hago awood u leh inuu kaalin muuqata ka qaato horumarinta isboortiga qaranka. Dhallinyaradaas waxaa ku jira tiro badan oo leh hibo dabiici ah oo dhinaca isboortiga ah, kuwaas oo Alle ku mannaystay karti muuqata, balse aan helin fursadihii, hagiddii, iyo taageeradii lagama maarmaanka u ahayd si hibadooda loo aqoonsado, loo kobciyo, loogana faa'iidaysto.

Dalalka dunida ee horumarka ka gaaray dhinaca isboortiga waxay inta badan ku guulaysteen in ay si xeeladaysan isugu xiraan laba arrimood oo aad muhiim u ah, kuwaas oo kala ah jiritaanka dhallinyaro leh hibo isboorti iyo maalgelinta nidaamsan ee dadaallada lagu horumarinayo hibadaas. Soomaaliya, burburkii dowladnimada ka dib, si ku filan mudnaanta looma siin isku xirnaanta labadaas arrimood, taas oo sababtay in hibooyin badan oo jiri lahaa ay lumiyaan jihadii iyo fursaddii ay ku horumari lahaayeen. Sidaas awgeed, tirada badan ee dhallinyarada Soomaaliyeed iyo hibada dabiiciga ah ee ka dhex jirta bulshada waa fursad qaran oo aad u weyn, haddii si sax ah loo aqoonsado, loo maalgaliyo, loona xiro nidaamyo taageera tayeyntooda iyo tartankooda.

Intaa waxaa dheer, dhallinyaradaan aad ka u badani waxay ka dhigan tahay in Soomaaliya ay leedahay awood ay ku dhisi karto saldhigyo ballaaran oo isboorti laga bilaabo heerka bulshada ilaa heer qaran. Tani waxay suurtagelin kartaa samaynta horyaallo, akadeemiyo, barnaamijyo tayeyn, iyo hannaan lagu helo ciyaartooy cusub oo si joogto ah ugu soo baxa nidaamka isboortiga dalka. Haddii fursaddan si istiraatiiji ah loo maareeyo, waxay dalka u horseedi kartaa in uu yeesho jiilal isboorti oo is daba jooga, taas oo udub dhexaad u noqon karta guulaha mustaqbalka fog.

### 9.2. Jiritaanka kaabayaal isboorti sida garoomada oo dalka hore looga sameeyey

Sida la wada og yahay, dalka waxaa hore uga jiray garoomo iyo xarumo loogu talagalay horumarinta isboortiga, kuwaas oo ay dowladdii dhexe ka hirgelisay magaalooyin kala duwan oo dalka ah. In kasta oo inta badan kaabayaashaas ay maanta ku sugan yihiin xaalad aan wanaagsanayn, haddana jiritaankoodu laftiisu wuxuu yahay fursad muhiim ah oo dib looga amba qaadi karo horumarinta isboortiga dalka. Tani waxay ka dhigan tahay in Soomaaliya aysan gabi ahaanba ka soo bilaabayn meel eber ah, balse ay weli leedahay hanti qaran oo hore loo dhisay, taas oo dib loo soo noolayn karo.

Garoomada iyo xarumahaas waxay u baahan yihiin dayactir, dib u habayn, iyo dib u dhis xooggan si mar kale ay u noqdaan goobo diyaar u ah ciyaar, tababar, tartan, iyo horumarinta hibada isboortiga dalka. Marka si istiraatiiji ah loo eego, jiritaanka kaabayaal hore loo sameeyey wuxuu yareyn karaa culayska dhaqaale iyo wakhtiga ku baxaya in dhammaan baahiyaha laga bilaabo meel bilow ah. Sidaas darteed, haddii la helo qorshe qaran, mudnaan siyaasadeed, iyo maalgelin ku filan, dib u soo nooleynta kaabayaashaas waxay noqon kartaa tallaabo wax ku ool ah oo si degdeg ah dib loogu dhisayo saldhigga isboortiga Soomaaliya.

Sidoo kale, kaabayaashaas hore u jiray waxay dalka siin karaan fursad uu dib ugu bilaabo hawlo isboorti oo abaabulan, sida tababarrada joogtada ah, horyaallada, tartamada heer deegaan iyo heer qaran, iyo ururinta bulshada ku xeeran dhaqanka isboortiga. Jiritaanka kaabayaal hore u jiray wuxuu sidoo kale kor u qaadi karaa kalsoonida maalgashadayaasha iyo daneeyayaasha kale, maadaama ay arkayaan in ay jiraan meelo la taaban karo oo dib loo horumarin karo. Sidaa awgeed, kaabeyaasha isboortiga ee hore u jiray waa fursad muuqata oo u baahan oo kaliya in lagu xiro qorsheyn, maalgashi, iyo maamul hufan.

### 9.3. Helitaanka maalgashi ka yimaada dhinaca ganacsiyada gaarka loo leeyahay

Dalka waxaa ka jira ganacsiyo gaar loo leeyahay oo waaweyn, kuwaas oo leh awood dhaqaale, saamayn bulsho, iyo joogitaan suuqeed oo u saamaxaya in ay door muuqata ka qaataan maalgelinta horumarinta isboortiga dalka. Haddii si habboon loo jiheeyo, ganacsiyada gaarka loo leeyahay waxay ka qayb qaadan karaan maalgelinta kaabeyaasha, taageeridda horyaallada iyo tartamada, qalabaynta xarumaha isboortiga, iyo kobcinta barnaamijyada tayeynta dhallinyarada.

Ka qaybgalka ganacsiga gaarka loo leeyahay wuxuu fursad u yahay dhinacyo badan. Dhinaca koowaad, wuxuu xoojin karaa dhaqaalaha loo baahan yahay si loo horumariyo isboortiga, gaar ahaan marka miisaaniyadda dowladda ay xaddidan tahay. Dhinaca labaad, wuxuu ganacsiyada siin karaa fursado ay kaga faa’iidaystaan sumcad, xayeysiin, ballaarinta suuqooda, iyo iskaashi bulsho oo kobciya xiriirkooda bulshada. Sidaas darteed, xiriirka u dhexeeya isboortiga iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay wuxuu noqon karaa iskaashi faa’iido wadaag ah oo dhinac walba anfaca, haddii loo sameeyo hannaan sharci, maamul, iyo isla xisaabtan ku dhisan.

Waxaa kale oo xusid mudan in maalgashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay aanu ku koobnayn oo kaliya kaabeyaasha, balse uu gaari karo dhinacyada kale ee isboortiga sida suuqgeynta, warbaahinta isboortiga, xayeysiinta, qalabka, maamulka dhacdooyinka, iyo samaynta fursado shaqo iyo dhaqaale oo ku xeeran isboortiga. Sidaas darteed, haddii si xeeladaysan loo wajaho, ganacsiga gaarka loo leeyahay wuxuu noqon karaa lammaane istiraatiiji ah oo door weyn ka qaata beddelidda isboortiga Soomaaliya qayb dhaqaale, bulsho, iyo helista qaran ku firfircoon isboortiga.

Haddaba, marka la isku geeyo fursadahan, waxaa muuqata in Soomaaliya ay leedahay awood iyo aasaas muhiim ah oo dib looga dhisi karo isboortiga qaranka. Tirada badan ee dhallinyarada hibada leh, jiritaanka qaar ka mid ah kaabayaashii hore ee isboortiga, iyo suurtagalnimada helitaanka maalgashi ka yimaada ganacsiga gaarka loo leeyahay, dhammaantood waxay muujinayaan in mustaqbalka isboortiga Soomaaliya uu noqon karo mid ifaya haddii la helo hoggaan, qorsheyn, iyo maalgelin ku habboon.

## 10. BARTILMAAMEEDKA LA HIIGSANAYO

Inta lagu jiro muddada fulinta Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliya, waxaa muhiim ah in la dejiyo bartilmaameedyo cad cad oo lagu hago jihada fulinta, qorsheynta istiraatiijiga ah, iyo abaabulka maalgelinta. In sidaasi la sameeyo waxay lagama maarmaan u tahay in hirgelinta siyaasaddan lagu saleeyo natiijooyin la qiyaasi karo, si hannaanka dabagalka iyo qiimeyntu u noqdaan kuwo ku dhisan cabbir, isla xisaabtan, iyo gaarista yoolal wax ku ool ah oo muhiim u ah horumarinta isboortiga dalka.

Haddii la helo mudnaanta siyaasadeed ee dowladda, ka go'naanshaha hay'adaha ku shaqada leh horumarinta isboortiga, iyo maalgelin dhammaystiran oo ay wada bixiyaan dowladda iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay, waxaa la filan karaa in muddada shanta sano ee u dhexeysa 2026 ilaa 2030 la gaaro natiijooyin istiraatiiji ah oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

I. In la helo xirfadlayaal isboorti oo leh aqoon, tababar, iyo karti heer sare ah, kuwaas oo laf-dhabarta u noqda horumarinta isboortiga dalka.

II. In la dhiso lana dayactiro kaabayaal isboorti oo horumarsan, iyadoo ugu yaraan laba garoon loo sameynayo qaybaha kala duwan ee isboortiga sida kubadda cagta, kubadda kolayga, ciyaaraha fudud, baaskiilka, dabaasha, shiishka, feerka, iyo noocyada kale ee isboortiga.

III. In guud ahaan dalka laga hirgeliyo ugu yaraan saddex ilaa shan akadeemiyadood oo isboorti, kuwaas oo soo saara jiil da'yar oo leh xirfad, hibo, iyo diyaargarow tartan.

IV. In la hirgeliyo horyaallo qaran iyo heer gobol ah oo ay si joogto ah uga qayb qaataan kooxaha ka dhisan gobollada dalka.

V. In si qorshaysan oo xooggan loo dhiso kooxaha Xulka Qaranka, da'yarta iyo waaweynkaba, ee kubadda cagta iyo kubadda kolayga si ay uga qayb qaataan tartamada heer qaaradeed iyo heer caalami.

VI. In kooxaha Xulka Qaranka ee kubadda cagta iyo kubadda kolayga ay si rasmi ah uga qayb qaataan tartamada qaaradda Afrika sida "African Cup of Nations" iyo tartamada dalalka Carabta sida "Arab Cup".

VII. In Soomaaliya ay ka mid noqoto shanta dal ee ugu sarreeya qaaradda Afrika dhinaca ciyaaraha fudud, gaar ahaan orodka oo ay dadka Soomaaliyeed taariikh ahaan iyo hibo ahaanba caan ku yihiin.

VIII. In xirfadlayaasha isboortiga Soomaaliyeed ay dalka u soo hooyaan guulo muuqda oo heer shaqsi, heer kooxeed, iyo heer qaranba leh.

IX. In la joogteeyo qabashada tartamada sannadlaha ah ee kubadda cagta iyo kubadda kolayga ee da'yarta ka yar 20 jirka iyo 16 jirka.

X. In la joogteeyo qabashada tartamada sannadlaha ah ee kubadda cagta iyo kubadda kolayga ee Dowlad Goboleedyada.

XI. In la joogteeyo qabashada tartamada sannadlaha ah ee kubadda cagta ee degmooyinka Gobolka Banaadir iyo degmooyinka Dowlad Goboleedyada, si loo xoojiyo ka qaybgalka heer hoose, kobcinta hibada, iyo joogtaynta dhaqanka tartanka isboortiga dalka.

## 11. MABAADII'DA IYO QIYAMKA HAGAYA SIYAASADDA

Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliya waxay ku salaysan tahay mabaadii' hagaya iyo qiyam aasaasi ah oo dejinaya saldhigga jihaynta, maamulka, hirgelinta, iyo horumarinta isboortiga dalka. Mabaadii'dan iyo qiyamkan waxay hubinayaan in isboortigu noqdo aalad wax ku ool ah oo ka qayb qaadata horumarinta qofka, kobcinta bulshada, xoojinta wadajirka qaranka, iyo dhismaha hannaan isboorti loo dhan yahay, hufan, oo waara. Waxa kale oo ay hagayaan sida dowladda, hay'adaha isboortiga, bahwadaagta, iyo bulshada inteeda kale u dejinayaan una hirgelinayaan siyaasadaha, barnaamijyada, iyo maalgashiga la xiriira isboortiga dalka.

Sidaas darteed, dhammaan heerarka hirgelinta siyaasaddan waa in lagu saleeyaa mabaadii'dan iyo qiyamkan si loo xaqiijiyo in horumarinta isboortigu ku socoto jihada saxda ah, isla markaana ay ka dhalato natiijooyin waara oo waxtar qaran leh.

### 11.1. Mabaadii'da Hagaya Siyaasadda:

**Isla xisaabtan iyo ka mid ahaansho**

Siyaasaddu waxay ku salaysan tahay oo mabda'a ah in isboortigu noqdo mid loo dhan yahay, oo qof walba fursad ugu leeyahay ka qaybgalka, iyada oo aan loo eegayn da'da, jinsiga, awoodda jireed ama maskaxeed, heerka dakhliga, ama deegaanka uu qofku ka soo jeedo. Mabda'ani wuxuu muhiimad gaar ah siinayaa in la yareeyo takoorka koox ama qof, lana dhiirrigeliyo ka qaybgalka qaybaha aan si ku filan uga dhex muuqan isboortiga, si isboortigu u noqdo goob mideyn, leh matalaad, isla markaana bixisa fursadda ka mid ahaanshaha bulshada isboortiga.

**Sinnaan iyo caddaalad**

Horumarinta isboortigu waa in ay ku dhisnaataa helitaanka fursado siman oo la xiriira ka qaybgalka, tababarka, tartamada, iyo helitaanka adeegyada isboortiga. Sidoo kale, khayraadka, kaabayaasha, qalabka, iyo maalgelinta waa in loo maareeyaa loona qaybiyaa si caddaalad ah, si dhammaan bulshada iyo deegaannadu u helaan fursado isu dheelli tiran. Mabda'ani wuxuu muhiim u yahay yareynta sinaan la'aanta iyo xaqiijinta in horumarinta isboortigu gaarto dhammaan qaybaha bulshada.

**Ka qaybqaadashada loo siman yahay**

Siyaasaddu waxay aqoonsan tahay in isboortigu aanu ku koobnayn oo keliya ciyaartooyda heerka sare ama kuwa si rasmi ah ugu lug leh tartamada, balse uu yahay dhaqan bulsho oo ay tahay in dhammaan bulshada laga qaybgaliyo. Sidaas darteed, horumarinta isboortigu waa in ay xoogga saartaa ka qaybgalka ballaaran ee bulshada oo dhan, iyadoo la dhiirrigelinayo dhaqdhaqaaqa jireed iyo ciyaaraha heerarka aasaasiga ah oo kala ah heerka xaafadaha, dugsiyada, iyo goobaha kale ee dadweynaha. Mabda'ani wuxuu saldhig u yahay dhismaha bulsho firfircoon oo caafimaad qabta.

**Aqoonsiga kartida iyo horumarinta hibada**

Horumarinta isboortiga qaranku waxay u baahan tahay hannaan nidaamsan oo lagu aqoonsado, lagu taageero, laguna kobciyo ciyaartooyda da'yarta ah ee leh hibooyinka dabiiciga ah. Sidaas darteed, siyaasaddani waxay mudnaan siinaysaa in la dhiso hannaan cad oo u dhexeeya heerka billowga ah ee bulshada iyo heerka ugu sarreeya ee waxqabadka xirfadeed, si hibada jirta loo

ilaaliyo loona gaarsiiyo heer qaran iyo heer caalami. Mabda'ani wuxuu muhiim u yahay xaqiijinta joogtaynta tayada iyo dhisidda jiilal isboorti oo is daba jooga ama is dhaxla.

### Waxqabad heer sare ah

Siyaasaddu waxay aqoonsan tahay muhiimadda ay leedahay in la taageero ciyaartooyda, kooxaha, iyo xirfadlayaasha leh awoodda ay ku gaari karaan waxqabad heer sare ah, taasoo u baahan tahay maalgelin, tababar, taageero farsamo, iyo kaabayaal u qalma tartamada heer qaran iyo heer caalami. Mabda'ani wuxuu xaqiijinayaa in Soomaaliya aysan ku koobnaan ka qaybgal guud oo keliya, balse ay sidoo kale hiigsanayso heerar sare oo tartan iyo guul isboorti.

### Joogtaynta

Horumarinta isboortigu waa in ay ku dhisnaataa aragti fog iyo qorsheyn muddo dheer ah oo la xiriirta kaabeyaasha, barnaamijyada, maalgelinta, iyo horumarinta hay'adaha. Joogtayntu waxay sidoo kale ka dhigan tahay in isboortiga loo horumariyo si mas'uuliyad leh, iyadoo la tixgalinayo ilaalinta deegaanka, waaritaanka khayraadka, iyo sii noolaynta natiijooyinka la gaaro. Mabda'ani wuxuu muhiim u yahay in horumarinta isboortigu noqoto mid aan ku koobanayn guulo ku meel gaar ah, balse dhalisa nidaam waara oo qaran.

## 11.2. Qiyamka Hagaya Siyaasadda

### Daacadnimo

Dhammaan hawlaha isboortiga waa in ay ku dhisnaadaan daacadnimo, anshax, iyo hufnaan. Qiyamkani wuxuu farayaa in maamulka, tartamada, xulashada, iyo maalgelinta isboortigu ay noqdaan kuwo daahfuran oo lagu kalsoonaan karo. Waxa uu sidoo kale si cad uga soo horjeedaa musuqmaasuqa, eexda, ku takrifalka awoodda, iyo isticmaalka walxaha mamnuuca ah ee kor u qaada waxqabadka isboortiga si sharci darro ah. Daacadnimadu waa saldhigga lagu dhisi karo kalsoonida bahda isboortiga iyo sumcadda qaranka.

### Ixtiraam

Isboortigu waa inuu ku salaysnaadaa ixtiraamka xeerarka iyo nidaamyada ciyaarta, xushmeynta ciyaartooyda, kooxaha kale, garsoorayaasha, masuuliyiinta, tababarayaasha, iyo dhammaan dadka ku lugta leh hawlaha isboortiga. Qiyamkani wuxuu sare u qaadaa dhaqanka wanaagsan, isqaddarinta, iyo ilaalinta ruuxda isboortiga, isaga oo isboortiga ka dhigaya meel lagu barto anshaxa, wada noolaanshaha, iyo ixtiraamka kala duwanaanshaha.

### Ciyaar caddaalad ah

Tartan kasta oo isboorti waa inuu ku dhisnaadaa mabda'a ciyaar caddaalad ah, oo ku salaysan xeerarka ciyaarta, fursad siman, iyo ilaalinta ruuxda tartanka. Qiyamkani wuxuu xaqiijinayaa in dhammaan ka qaybgalayaashu helaan jawi nadiif ah oo caddaalad leh, islamarkaana laga fogaado khiyaano, eex, iyo hab kasta oo dhaawici kara daahfurnaanta tartanka. Ciyaar caddaalad ahi waa tiir muhiim u ah sharafka isboortiga iyo kor u qaadista sumcaddiisa.

Marka la isku geeyo, mabaadii'dan iyo qiyamkan hagaya Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliya waxay saldhig u yihiin qaab dhismeed isboorti heer qaran oo lagu maareeyo si hufan, caddaalad ah, loo dhan yahay, oo himilo fog leh. Waxay hagayaan jihada guud ee siyaasadda, waxayna xoojinayaan in horumarinta isboortigu aysan ku koobnayn oo keliya tartan ama guul ciyaareed, balse ay tahay hannaan qaran oo dhisaya qofka, bulshada, iyo qarankaba. Sidaas darteed, hirgelinta dhammaan qaybaha siyaasaddan waa in lagu saleeyaa mabaadii'dan iyo qiyamkan si loo xaqiijiyo horumar isboorti oo waara, sumcad leh, oo waxtar qaran leh.

## 12. UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliyeed waxay ku hawlgalaysaa ujeeddooyin cadcad oo hagaya jihada guud ee dib u habaynta, horumarinta, iyo casriyeynta isboortiga dalka. Ujeeddooyinkani waxay saldhig u yihiin qorsheynta istiraatiijiga ah, hirgelinta barnaamijyada, iyo abaabulka khayraadka lagama maarmaanka u ah xaqiijinta horumar isboorti waara, loo dhan yahay, isla markaana dhaliya natiijooyin muuqda. Sidaas darteed, si loo xaqiijiyo ujeeddada guud ee siyaasaddan, waxaa la qotominayaa tiirar istiraatiiji ah oo mudnaanta u leh hirgelinta siyaasadda muddada ay jiri doonto.

### 12.1. Ujeeddada Guud ee Siyaasadda

Ujeeddada guud ee siyaasaddan waa in sare loo qaado dadaallada horumarineed ee isboortiga dalka, iyada oo dib u habayn iyo casriyeyn lagu samaynayo hawlaha isboortiga, si loo helo hannaan ku dhisan waxqabad tayo leh iyo ka qaybgal bulsho oo ballaaran oo ay ka dhex muuqdaan guud ahaan bahda isboortiga dalka.

### 12.2. Tiirarka Istiraatiijiga ah ee Hirgelinta Siyaasadda

Si loo xaqiijiyo ujeeddada guud ee siyaasaddan, waxaa mudnaan gaar ah la siinayaa tiirarkan istiraatiijiga ah ee soo socda:

I. Dib u habaynta hannaanka maamulka guud ee hay'adaha iyo xiriirrada isboortiga dalka
II. Horumarinta kaabayaasha isboortiga.
III. Horumarinta aqoonta iyo xirfadda xirfadlayaasha isboortiga.
IV. Barbaarinta aqooneed iyo jireed ee da'yarta iyo aqoonsiga hibada isboortiga.
V. Sare u qaadidda anshaxa isboortiga iyo ilaalinta xirfadlayaasha isboortiga.
VI. Ka qaybqaadashada isboorti loo dhanyahay.
VII. Tartanada, munaasabadaha isboortiga abaalmarinada guulaha.
VIII. Abaabulka khayraadka iyo maalgelinta isboortiga.
IX. Iskaashi, muuq-bilid iyo diblomaasiyadda isboortiga.

#### 12.2.1. Tiirka Koowaad: Dib u Habaynta Hannaanka Maamulka Guud ee Hay'adaha iyo Xiriirrada Isboortiga

Tiirkan waxa diiradda lagu saarayaa xoojinta qaab dhismeedka hay'adeed iyo maamulka guud ee isboortiga dalka, si loo helo hannaan mideysan, casri ah, oo leh sharciyo, xeerar, iyo habraacyo cadcad. Arrimaha mudnaanta u leh tiirkan waxaa ka mid ah:

1. Dhismaha Guddiga Qaranka ee Horumarinta Isboortiga.
2. Casriyeynta dastuurka Guddiga Olombikada Qaranka Soomaaliyeed.
3. Hirgelinta dib u habaynta ballaaran ee dhammaan isboortiga dalka.
4. Dib u eegista xeerarka gaarka ah ee xiriirrada isboortiga dalka.
5. Diyaarinta habraaca casriyeynta iyo diiwaangelinta xiriirrada isboortiga ee heer federaal iyo heer dowlad goboleed.
6. Diyaarinta iyo dhammaystirka sharciga isboortiga dalka.
7. Diyaarinta istiraatiijiyadda horumarinta isboortiga dalka.

### 12.2.2. Tiirka Labaad: Horumarinta Kaabayaasha Isboortiga

Tiirkan waxaa looga golleeyahay in la abuuro, lana xoojiyo kaabayaasha lagama maarmaanka u ah kobcinta isboortiga dalka, si loo helo goobo iyo xarumo u qalma in lagu qabto tababbar, tartan, oo suurtagalinaya horumarinta karaanka iyo hibada. Arrimaha mudnaanta u leh tiirkan waxaa ka mid ah:

1. Hirgelinta habraac ama qaab-dhismeed lagu maalgelinayo dhismaha iyo dayactirka kaabayaasha isboortiga dalka, iyadoo la adeegsanayo iskaashi u dhexeeya dowladda iyo dhammaan daneeyayaasha horumarinta isboortiga.
2. Ololaynta helitaanka taageero dhaqaale oo ka timaadda dowladda iyo saaxiibada la shaqeeya Soomaaliya si loogu horumariyo kaabayaasha isboortiga dalka

### 12.2.3. Tiirka Saddexaad: Horumarinta Aqoonta iyo Xirfadda Xirfadlayaasha Isboortiga

Tiirkan waxaa uu xoogga saarayaa tayeynta aqoonta, xirfadda, iyo awoodda farsamo ee bahda isboortiga si loo helo xirfadlayaal tayo leh oo dabooli kara baahiyaha horumarinta isboortiga dalka. Arrimaha mudnaanta u leh tiirkan waxaa ka mid ah:

1. Hirgelinta xarumo iyo machadyo lagu tababbaro xirfadlayaasha kala duwan ee bahda isboortiga, sida macallimiinta, ciyaartoyda, garsoorayaasha, iyo qaybaha kale ee muhiimka ah.
2. Diyaarinta manhaj qaran ee dhammaan xirfadaha kala duwan ee isboortiga dalka.
3. Hirgelinta habraac ama qaab dhismeed lagu hirgelinayo koorsooyinka la xiriira isboortiga ee jaamacadaha dalka, iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Waxbarashada iyo Hiddaha iyo Tacliinta Sare.
4. Dhiirrigelinta hannaanka shahaada siinta xirfadlayaasha kala duwan ee isboortiga.

### 12.2.4. Tiirka Afraad: Barbaarinta aqooneed & jireed ee da'yarta iyo aqoonsiga hibada isboortiga

Tiirkan waxaa ay muhiimaddiisu tahay in la aqoonsado, la kobciyo, lana jiheeyo hibada isboorti ee da'yarta, si loo dhiso jiilal isboorti oo is daba jooga oo leh xirfad, karti, iyo diyaar garow tartan. Arrimaha mudnaanta leh ee tiirkan waxaa ka mid ah:

1. Dabagalka dhaqangelinta manhajka dalka, gaar ahaan hawlaha barbaarinta-jireed ee day'yarta iyadoo la kaashanayo Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare.
2. Hirgelinta akadeemiyado isboorti oo kala duwan, kuwaas oo soo saara ciyaartoy da'yar oo leh xirfad sare.

3. Hirgelinta habraac ama qaab-dhismeed lagu ogaanayo, lagula soconayo, laguna soo xulayo da'yarta leh hibada isboortiga, si loo dhiso tayada naadiyada, xiriirrada, iyo hay'adaha kala duwan ee isboortiga.
4. Diyaarinta hagaha maamulka goobaha isboortiga dadweynaha ee madaxa bannaan.

### 12.2.5. Tiirka Shanaad: Sare u Qaadidda Anshaxa Isboortiga, Ilaalinta Xirfadlayaasha iyo Isboortiga

Tiirkan waxaa uu ku wajahan yahay xaqiijinta isboorti ku dhisan anshax, badqab, caddaalad, iyo ilaalinta xuquuqda bahda isboortiga. Arrimaha mudnaanta leh ee tiirkan waxaa ka mid ah:

1. Dhismaha hay'adda ka hortagga daroogooyinka ee Soomaaliya (anti-doping)
2. Hirgelinta habraac ama qaab-dhismeed ka hortagaya falalka nacaybka iyo takoorka ee ka dhex dhaca isboortiga.
3. Hirgelinta habraac ama qaab-dhismeed lagu ilaalinayo xuquuqda xirfadlayaasha isboortiga.
4. Hirgelinta habraac ama qaab-dhismeed lagu horumarinayo wacyiga bulshada ee ilaalinta anshaxa isboortiga.

### 12.2.6. Tiirka Lixaad: Ka Qaybqaadashada Isboorti ee Loo dhanyahay

Tiirkan waxaa uu diiradda saaraya ballaarinta ka qaybgalka bulshada ee isboortiga iyo hawlaha jirdhiska, si isboortigu uu u noqdo dhaqan bulsho oo kor u qaada caafimaadka, firfircoonida, iyo isku xirnaanta bulshada. Arrimaha mudnaanta leh ee tiirkan waxaa ka mid ah:

1. Dhiirrigelinta bulshada in ay si xooggan uga qaybqaataan isboortiga iyo hawlaha jirdhiska, kuwaas oo kor u qaadaya caafimaadka jireed iyo maskaxeed ee bulshada.
2. Dhiirrigelinta dadaallada lagu horumarinayo in bulshada ay hesho goobo iyo xarumo isboorti oo badqab leh.
3. Diyaarinta habraacyo iyo hirgelinta barnaamijyo lagu dhiirrigelinayo in qaybaha kala duwan ee bulshada, sida dumarka iyo dadka qaba baahiyaha gaarka ah, ay si xooggan oo firfircoon uga qaybqaataan isboortiga dalka.
4. Hirgalinta habraac iyo barnaamijyo lagu dhiirigalinaayo in qurba-joogta Soomaaliyeed ay si firfircoon uga qayb-qaataan hawlaha isboortiga dalka.

### 12.2.7. Tiirka Toddobaad: Tartanada, Munaasabadaha Isboortiga iyo Abaalmarinada Guulaha

Tiirkan waxaa uu ku wajahan yahay xoojinta nidaamka tartamada iyo munaasabadaha isboortiga, si loo helo hannaan joogto ah oo kor u qaada ka qaybgalka, hibada, iyo tartanka isboortiga dalka. Arrimaha mudnaanta leh ee tiirkan waxaa ka mid ah:

1. Hirgelinta habraac ama qaab dhismeed lagu maareynayo tartamada iyo munaasabadaha heer dowlad goboleed, gobolka Banaadir, iyo heer federaal.
2. Diyaarinta hagaha la xiriira qiimaynta iyo abaalmarinta guulaha heer shaqsi iyo heer koox ku guulaystaan ama dalka u soo hoyaan xirfadlayaasha isboortiga.
3. Qabashada tartamada noocyada kala duwan ee isboortiga iyo munaasabadaha heer dowlad goboleed, gobolka Banaadir, iyo heer federaal, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

i. Tartanada horyaallada dalka ee heer federaal iyo heer dowlad goboleed.
ii. Tartanada haweenka.
iii. Tartanada da'yarta u dhaxaysa 10 ilaa 20 jir.
iv. Tartanada iskuullada.
v. Tartanada gobollada dalka.
vi. Tartanada gobollada dalka.
vii. Tartanada dadka qaba baahiyaha gaarka ah.
viii. Tartanada jaamacadaha.
ix. Tarnada dowlad goboleedyada iyo gobolka Banaadir.

**12.2.8. Tiirka Sideedaad: Abaabulka Khayraadka iyo Maalgelinta Isboortiga**

Tiirkan waxaa uu muhiim u yahay xaqiijinta ilaha dhaqaale iyo dhiirrigelinta maalgashiga joogtada ah, si loo suurtageliyo hirgelinta dhammaan mudnaanta siyaasadda. Arrimaha mudnaanta leh ee tiirkan waxaa ka mid ah:

1. Hirgelinta hannaan olole xooggan oo dhiirrigelinaya sare u qaadidda maalgashiga isboortiga dalka.
2. Diyaarinta habraac ama qaab dhismeed lagu helayo, laguna sugayo dhaqaale iyo miisaaniyadeed joogto ah oo loo qoondeeyo horumarinta isboortiga taasoo ka imanaysa miisaaniyadda dolwadda iyo daneeyayaasha horumarinta isboortiga.
3. Diyaarinta xeerka xadeynta xayaysiimaha tartanada isboortiga loogu sameeyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo sugidda xuquuqda muuqaaleed ee baahinta tartanada nuucyada kala duwan ee isboortiga dalka.
4. Hirgelinta Sanduuqa Horumarinta Isboortiga.

**12.2.9. Tiirka Sagaalaad: Iskaashi, muuq-bilid iyo diblomaasiyada isboortiga**

Tiirkan waxa uu diiradda saarayaa in si wax ku-ool ah oo dhinaca danta guud ah looga faa'iidaysto halyeeyadii hore ee soo maray isboortiga dalka iyo xirfadlayaasha kale ee magaca iyo maamuuska ku leh fagaarayaasha caalamka in ay noqdaan safiirro u qareema, sidoo kalana ka shaqeeya danaha Qaranka iyo Ummadda Soomaaliyeed. Arrimaha mudnaanta leh ee tiirkan waxaa ka mid ah:

1. Diyaarinta hagaha iyo habraaca iskaashiga Dowladda iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay ee kafaa'iidaysiga xayaysiineed ee tartanada isboortiga.
2. Hirgalinta hagaha dhinaca danta guud looga faa'iidaysanayo halyeeyada isboortiga dalka ee magaca iyo maamuuska ku leh caalamka in ay noqdaan safiiro ka shaqeeya sare u qaadista horumarinta isboortiga Soomaaliya, dhaqankeena saliimka ah iyo guud ahaan muuqaalka suubban ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Sare u qaadida dadaallada iyo barnaamijyada dhinaca danta guud looga faa'iidaysanayo safiirrada isboortiga iyo halyeeyada kale ee isboortiga dalka in ay ka qayb-qaataan guud hawlaha horumarinta Qaranka hadba kaalintii kaga habboon ama kaga aaddan.

## 13. XIRIIRKA WARBAHINTA IYO MUUQ-BILIDDA

Isgaarsiinta, xiriirka dadweynaha, iyo muuqbaahintu waa tiirar asaasi u ah horumarinta, maamulka, iyo maaraynta hawlaha isboortiga. Sidaas darteed, Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliyeed waxay dejinaysaa hannaan istiraatiiji ah oo lagu xoojinayo sumcadda, muuqaalka, ka qaybgalka bulshada, iyo kaalinta isboortiga Soomaaliyeed ee heer qaran iyo heer caalami, iyada oo la adeegsanayo habab casri ah oo isgaarsiineed, tiknoolajiyada dijitaalka ah, iyo baraha bulshada.

Siyaasaddu waxay si cad u aqoonsanaysaa in isgaarsiinta isboortigu aysan ku koobnayn gudbinta wararka iyo dhacdooyinka isboorti oo keliya, balse ay tahay hawl rasmi ah oo udub dhexaad u ah dhaqangelinta ujeeddooyinka isboortiga, gaar ahaan kuwa la xiriira xoojinta wadajirka bulshada, kordhinta ka qaybgalka dhalinyarada, dhisidda astaanta qaranka, iyo kor u qaadista matalaadda Soomaaliya ee fagaarayaasha heer gobol iyo heer caalami.

Iyadoo taas laga duulayo, siyaasaddani waxay faraysaa samaynta iyo hirgelinta Istiraatiijiyadda Isgaarsiinta Isboortiga Qaranka, taas oo hagi doonta hannaanka warfaafinta, xiriirka dadweynaha, iyo muuqbaahinta dhammaan bahwadaagta isboortiga qaranka. Istiraatiijiyaddani waxay horseedi doontaa isu duwidda farriimaha, abuuritaanka astaan qaran oo mideysan, iyo xoojinta wada shaqayn wax ku ool ah oo dhexmarta Wasaaradda, xiriirrada isboortiga, hay’adaha kale ee ay khusayso, iyo bahwadaagta kale ee taageera horumarinta isboortiga.

Sidoo kale, istiraatiijiyaddan waxaa lagu hagi doonaa mabaadii’da istiraatiijiga ah ee soo socda:

1. Dhammaan isgaarsiinta la xiriirta isboortiga waa in lagu maareeyaa hannaan qaran oo isku xiran, si loo xaqiijiyo isla jaanqaadka farriimaha, mideynta astaanta qaranka, iyo is lahaanshaha muuqaalka isboortiga Soomaaliyeed gudaha iyo dibaddaba.
2. Isgaarsiintu waa in ay kor u qaaddaa muuqaalka dhammaan noocyada isboortiga, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo dhalinyarada, haweenka, iyo qaybaha kale ee bulshada si loo xaqiijiyo ka qaybgal bulsho oo loo dhan yahay.
3. Macluumaadka laga faafinayo isboortiga waa in uu ahaadaa mid sax ah, lagu kalsoonaan karo, oo waafaqsan mabaadii’da isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta, si loo xoojiyo kalsoonida bulshada iyo sumcadda hay’adaha isboortiga.
4. Hababka isgaarsiinta waa in ay ka faa’iideystaan tiknoolajiyada casriga ah, si loo ballaariyo gaarsiinta farriimaha, kor loogu qaado ka qaybgalka bulshada, loona gaaro dhagaystayaal ballaaran, gaar ahaan dhalinyarada.

Intaas waxaa dheer, siyaasaddani waxay faraysaa in la dhiso hannaan mideysan oo lagu maareeyo isgaarsiinta, astaanta, sumcadda, iyo muuqaalka guud ee isboortiga Soomaaliyeed. Tani waxay ka koobnaan doontaa horumarinta astaanta xulka qaranka, muuqaalka ciyaartooyda, bandhigga tartamada kala duwan ee heer qaran ilaa heer jaamacadeed, iyo baahinta guulaha iyo waxqabadka isboorti ee uu qaranku soo hoyo. Ujeeddadu waa in la dhiso sawir qaran oo mideysan oo ka tarjumaya kartida, hibada, iyo himilada isboortiga Soomaaliya.

Siyaasaddu waxay sidoo kale garwaaqsan tahay in isgaarsiintu tahay aalad muhiim ah oo lagu soo jiidan karo maalgashi, laguna abuuri karo iskaashi istiraatiiji ah. Sidaas darteed, waa in la dhiirrigeliyaa barnaamijyada, ololeyaasha, iyo muuqaallada kor u qaadaya xiisaha isboortiga, si

loo kasbado taageerada ganacsiga gaarka loo leeyahay, warbaahinta, iyo bahwadaagta kale ee danaynaya horumarinta isboortiga dalka.

Ugu dambayn, horumarinta isgaarsiinta iyo astaanta isboortiga qaranku waa in loo arkaa qayb muhiim ah oo ka mid ah hirgelinta Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliyeed. Haddii si xeeladaysan loo maareeyo, isgaarsiintu waxay kaalin weyn ka qaadan kartaa kobcinta wacyiga bulshada, dhiirrigelinta ka qaybgalka, kor u qaadista sumcadda isboortiga qaranka, iyo xoojinta taageerada gudaha iyo dibadda ee loo baahan yahay si loo horumariyo isboortiga dalka.

## 14. ISKU DUBBARIDKA IYO HANNAANKA HIRGELINTA SIYAASADDA

Hirgelinta Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliyeed waxay ku xirnaan doontaa hannaan isku dubbarid qeexan, nidaamsan, oo ku dhisan wada shaqayn, isla xisaabtan, iyo kala caddeyn mas'uuliyadeed. Maaddaama siyaasaddani ay taabanayso dib u habaynta maamulka isboortiga, horumarinta kaabeyaasha, kobcinta aqoonta iyo xirfadaha, xoojinta ka qaybgalka bulshada, abaabulka khayraadka, iyo dhismaha hannaan mideysan oo lagu hago horumarinta isboortiga dalka, waxaa lama huraan ah in hirgelinteeda lagu saleeyo qaab shaqo oo mideysan oo u beddela ujeeddooyinka siyaasadda qorsheyaal, hawlo, iyo natiijooyin la taaban karo.

### 1. Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ahaan doontaa hay'adda leh hoggaanka guud, mas'uuliyadda siyaasadeed, iyo kormeerka hirgelinta siyaasaddan. Mas'uuliyadaha Wasaaradda waxaa ka mid noqon doona:

1. Diyaarinta xeerarka, shuruucda, istiraariyadaha iyo siyaasadaha qaran ee hourmarinta isboortiga dalka.
2. Dhiirigelinta bulshada, gaar ahaan dhalinyarada, in ay ka qayb-qaataan isboortiga iyo hawlaha dhaqdhaqaaqa jirka.
3. Maamulka iyo gacan ku haynta garoomada isboortiga dalka iyo sugidda amniga guud ee garoomada iyadoo la kaashanayo ciidanka amniga.
4. Hubinta, fududeynta iyo oggolaanshiyaha dukumintiyada safarrada ciyaartooyda iyo xirfadlayaasha kale ee isboortiga sida sida baasaboorada iyo fasaxyada (nolo osto).
5. Maalgelinta dayactirka iyo dhismaha kaabayaasha isboortiga.
6. Qoondeynta miisaaniyadda joogtada ah iyo mida horumarineed ee hay'adaha/xiriirrada isboortiga dalka.
7. Gacan-siinta aqooneed iyo mida xirfadeed ee hay'adaha/xiriirada isboortiga dalka.
8. Hirgalinta hab-dhaqan ku salaysan isboorti badqaba iyo anshax suubban.
9. Korjoogtaynta iyo la xisaabtanka hay'adaha/xiriirada isboortiga dalka.
10. Hirgalinta daraasadaha iyo dib u habeynada lagu horurinayo hay'adaha/xiriirada isboortiga dalka.
11. Aqoonsiga iyo diiwaan-gelinta hay'adaha iyo xiriirrada isboortiga dalka.
12. Taageerida hay'adaha/xiriirada isboortiga ee sare u qaadista hawlaha la xiriira horumarinta aqoonsiga hibada iyo guud ahaan horumarinta xirfadlayaasha isboortiga.
13. Hirgalinta habraaca iyo hannaan teknoolajiyadeed ee diiwaan gelinta xarumaha isboortiga gaarka loo leeyahay ee dalka in ay yihiin kuwa bad qaba oo ku habboon isboortiga.
14. Hirgalinta machadyada lagu horumarinayo aqoonta iyo xirfadaha la xiriira isboortiga.
15. La socodka hawlaha diyaarinta iyo fulinta tartanada isboortiga ee heer federaal.
16. Hoggaaminta dhammaan hawlaha la xiriira isboortiga ee lala yeelanayo dalalka shisheeye iyo hay'adaha caalamiga ah.

**3. Wasaaradaha Dhallinyarada & Isboortiga Dowlad Goboleedyada Dalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir**

Dowlad goboleedyada dalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir waxay siyaasadan ku leeyihiin door fulineed oo muhiim ah oo ku saabsan hirgelinta siyaasadda inta ku siman heerkooda. Mas'uuliyadahooda waxaa ka mid noqon doona:

1. Diyaarinta istiraariyadaha iyo siyaasadaha qaran ee hourmarinta isboortiga ee heer Dowlad Goboleed.
2. Dhiirigelinta bulshada, gaar ahaan dhalinyarada, in ay ka qayb-qaataan isboortiga iyo hawlaha dhaqdhaqaaqa jirka ee heer Dowlad Goboleed.
3. Maalgelinta dayactirka iyo dhismaha kaabayaasha isboortiga.
4. Qoondeynta miisaaniyadda joogtada ah iyo mida horumarineed ee isboortiga heer Dowlad Goboleed.
5. Korjoogtaynta iyo la xisaabtanka hay'adaha/xiriirada isboortiga ee heer Dowlad Goboleed.
6. Gacan siinta Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga heer Federaal ee hirgalinta daraasadaha iyo dib u habeynada lagu horurinayo hay'adaha/xiriirada isboortiga dalka.
7. Gacan siinta Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga heer Federaal ee diiwaan gelinta xarumaha isboortiga gaarka loo leeyahay ee heer Dowlad Goboleed.
8. Hirgalinta habraacyada iyo hawlaha lagu aqoonsanayo, laguna horumarinayo hibada isboortiga ee dhallinyarada Soomaaliyeed.
9. La socodka hawlaha diyaarinta iyo fulinta tartanada isboortiga ee heer Dowlad Goboleed.

**4. Guddiga Olombikada Soomaaliyeed (GOS), Xiriirrada iyo Ururrada Isboortiga**

Guddiga Olombikada Qaranka Soomaaliyeed iyo Xiriirrada Isboortiga waxay noqon doonaan hay'adaha farsamo ee laf dhabarta u ah hirgelinta siyaasaddan. Mas'uuliyadahooda waxaa ka mid ah:

1. Abaabulka iyo diyaarinta tartanada isboortiga dalka iyagoo la tashanaya Wasaaradaha Dhallinyarada iyo Isboortiga ee heer federaal iyo heer Dowlad Goboleed.
2. Abaabulka iyo diyaarinta xirfadlayaasha isboortiga ee dalka ku matalaada hawlaha isboortiga iyagoo la tashanaya Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga heer federaal.
3. Ka qayb-qaadashada dadaalada dib u habaynta iyo casriyaynta dalka ee ay hoggaaminayso Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga ee heer federaal.
4. Xaqiijinta daadejinta hawlaha Olambikada iyo Xiriirada Isboortiga ilaa heer degmo iyagoo la tashanaya Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga heer federaal.
5. Hirgalinta hawlaha la xiriira sare u qaadista xirfada iyo aqoonta xirfadlayaasha nuucyada kala duwan ee isboortiga dalka.
6. Hirgalinta hab-dhaqan ku dhisan anshax iyo kaqayb-qaadasho loo dhan ee isboortiga dalka.
7. Hirgalinta habraacyo suuragalinaya in dhammaan hawlaha nuucyada kala duwna ee isboortiga dalka ay waafaqsan yihiin xeerarka iyo mabaadii'da guud caalamiga ah.

**5. Hay'adaha Waxbarashada**

Hay'adaha waxbarashada, gaar ahaan Wasaaradda Waxbarashada, jaamacadaha, machadyada, iyo iskuullada, waxay door muhiim ah ku leeyihiin kobcinta hibada, barbaarinta jiilka ciyaartooyda mustaqbalka, iyo horumarinta aqoonta isboortiga. Mas'uuliyadahooda waxaa ka mid noqon doona:

1. Taageeridda hirgelinta barnaamijyada isboortiga ee iskuullada, machadyada, iyo jaamacadaha.
2. Hirgalinta habraacyada iyo hawlaha lagu aqoonsanayo, laguna horumarinayo hibada isboortiga ee ardayda/da'yarta Soomaaliyeed.
3. Martigelinta ama taageeridda ka qayb-qaadashada diyaarinta tartamada iskuullada iyo jaamacadaha dalka.
4. Sare u qaadista iskaashi la yeelashada Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga si loo hirgeliyo koorsooyin iyo tababarro la xiriira isboortiga.
5. Gacan siinta Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga ee diyaarinta koorsooyinka iyo tababarada la xiriira isboortiga.

### 6. Ganacsiga Gaarka loo Leeyahay iyo Bahwadaagta Caalamiga ah

Ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo bahwadaagta caalamiga ahi waxay door muhiim ah ku leeyihiin dhinaca maalgelinta, taageerada farsamo, iyo xoojinta awoodda hay'adaha isboortiga. Kaalintooda waxaa ka mid noqon doona:

1. Taageeridda maalgelinta dib u dhiska iyo dayactirka kaabeyaasha isboortiga dalka.
2. Ka qayb qaadashada maalgelinta machadyada iyo akadeemiyadaha lagu tayaynayo isboortiga ee laga hirgalinayo dalka.
3. Bixinta taageero farsamo iyo iskaashi istiraatiiji ah oo waafaqsan mudnaanta qaran Taageerida iyo gacan siinta hay'adaha iyo xirfadlayaasha isboortiga dalka si sare loogu qaado isboortiga iyo hannaanka abaalmarinta guud ee xirfadlayaasha leh hibada isboorti.
4. Ka qayb qaadashada hirgelinta iskaashi ku dhisan daahfurnaan, isla xisaabtan, iyo dan guud ee horumarinta isboortiga dalka.
5. Taageeridda maalgelineed ee kobcinta tartanada, munaasabadaha, iyo barnaamijyada isboorti.

## 15. HANNAANKA DABAGALKA IYO QIIMAYNTA SIYAASADDA

Dabagalka iyo qiimeynta Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliyeed waa qayb asaasi ah oo lagama maarmaan u ah xaqiijinta hirgelin wax ku ool ah, isla xisaabtan joogto ah, iyo cabbiridda heerka lagu gaarayo yoolasha iyo mudnaanta siyaasadda. Maaddaama siyaasaddani ay dejinayso aragti qaran, ujeeddooyin istiraatiiji ah, iyo hannaan hirgelin oo baaxad leh, waxaa muhiim ah in la helo nidaam dabagal iyo qiimeyn oo suurtageliya in si joogto ah loo ogaado horumarka la gaaray, caqabadaha jira, iyo meelaha u baahan dib u habayn ama xoojin. Nidaamkan ayaa muhiim u ah in siyaasaddani aysan ku ekaan dukumeenti wax haga oo keliya, balse ay isu beddesho aalad wax ku ool ah oo horseedda natiijooyin la taaban karo.

Ujeeddada guud ee dabagalka iyo qiimeyntu waa in lagu hubiyo in hirgelinta siyaasaddu ay ku socoto jihadii loo dejiyay, lana xaqiijiyo in khayraadka, dadaallada, iyo hawlaha la fulinayo ay si wax ku ool ah ugu biirayaan gaarista natiijooyinka la hiigsanayo. Sidaas darteed, dabagalku wuxuu noqon doonaa hab joogto ah oo lagu ururinayo xogta, lagu cabbirayo waxqabadka, laguna qiimeynayo heerka fulinta ee hawlaha siyaasadda iyo sida ay u kala mudanyihiin, halka qiimeyntuna ay noqon doonto hab waqtiyo cayiman lagu eegayo waxtarka, wax ku oolnimada, ku habboonaanta, iyo waaritaanka hirgelinta siyaasadda.

Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa yeelan doonta mas’uuliyadda guud ee hagidda, isku dubbaridka, iyo kormeerka nidaamka dabagalka iyo qiimeynta siyaasaddan. Wasaaraddu waxay dejin doontaa qaab hawleed iyo habraacyo cad oo lagu hago ururinta xogta, warbixinta, dib u eegista, iyo cabbiridda natiijooyinka. Sidoo kale, Wasaaraddu waxay xaqiijin doontaa in hay’adaha ay khusayso hirgelinta siyaasadda, sida dowlad goboleedyada, gobolka Banaadir, xiriirrada isboortiga, Guddiga Olombikada Soomaaliyeed, iyo daneeyayaasha kale, ay qaataan doorkooda ku aaddan xog ururinta, warbixinta, iyo ka qaybgalka dib u eegista joogtada ah.

Si loo xaqiijiyo dabagal wax ku ool ah, waxaa lagama maarmaan ah in laga soo saaro siyaasaddan qaab cabbir oo leh tilmaamayaal cad oo la fahmi karo isla markaana la cabbiri karo, kuwaas oo ku saleysan ujeeddooyinka iyo mudnaanta istiraatiijiga ah ee siyaasadda. Tilmaamayaashaas waxay ka koobnaan karaan dhinacyo ay ka mid yihiin horumarka dib u habaynta hay’adaha isboortiga, tirada iyo tayada kaabeyaasha dib loo dhisay ama la dayactiray, kororka ka qaybgalka bulshada ee isboortiga, tirada ciyaartooyda iyo xirfadlayaasha la tababaray, tirada tartamada la qabtay, heerka ka qaybgalka haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba, iyo mugga/xaddiga maalgelinta iyo taageerada ku timid hab abaabulan. Tilmaamayaashani waa inay noqdaan kuwo u suurtageliya Wasaaradda iyo daneeyayaasha kale inay si dhab ah u cabbiraan horumar ama dib u dhac kasta oo ka yimaadda hirgelinta siyaasadda.

Nidaamka dabagalku waa inuu ku dhisnaadaa warbixin joogto ah oo ka timaadda dhammaan heerarka fulinta. Hay’adaha iyo daneeyayaasha ku lugta leh hirgelinta siyaasadda waa inay diyaariyaan warbixino xilliyo cayiman lagu soo gudbinayo, kuwaas oo lagu muujinayo hawlaha la qabtay, heerka horumarka, caqabadaha jira, casharrada laga bartay, iyo talooyinka hourmarinta leh. Wasaaradda ayaa ururin doonta, falanqeyn doonta, isla markaana mideyn doonta warbixinnadaas, si ay uga soo saarto sawir guud oo ku saabsan heerka hirgelinta siyaasadda ee dalka. Habkan ayaa awood siinaya in la helo xog sax ah oo waqtigeeda ku timaadda, taas oo saldhig u noqon karta go’aan qaadasho ku dhisan xaqiiqo iyo caddeyn.

Qiimeynta siyaasaddan waa in loo fuliyaa si qorsheysan oo heerar kala duwan leh. Waxaa muhiim ah in la sameeyo qiimeyn dhexe oo lagu eegayo halka ay marayso hirgelintu, loona qiimeeyo waxqabadka, caqabadaha, iyo heerka la jaanqaadidda yoolasha la dejiyay. Sidoo kale, dhammaadka muddada siyaasadda waa in la sameeyo qiimeyn dhameystiran oo lagu go'aaminayo heerka guusha, waxtarka, iyo saameynta guud ee siyaasaddu ku yeelatay horumarinta isboortiga dalka. Qiimeyntaas kama dambaysta ah waa inay sidoo kale horseed u noqotaa talooyin lagu hago dib u eegista siyaasadda ama diyaarinta siyaasadda xigta.

Waxaa kale oo muhiim ah in nidaamka dabagalka iyo qiimeyntu uusan ku koobnaan cabbiridda waxqabadka oo keliya, balse uu noqdo hannaan waxbarasho iyo hagaajin joogto ah. Natiijooyinka ka soo baxa dabagalka iyo qiimeynta waa in si toos ah loogu isticmaalaa hagaajinta qorsheyaasha fulinta, dib u habaynta mudnaanta, xallinta caqabadaha, iyo xoojinta meelaha ay ka muuqato fursad ama guul.

Si loo ilaaliyo daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka, waxaa lagama maarmaan ah in natiijooyinka muhiimka ah ee dabagalka iyo qiimeynta lala wadaago daneeyayaasha ay khusayso, si loo xoojiyo kalsoonida, wada shaqeynta, iyo lahaanshaha guud ee siyaasadda taasoo sare u qaadaysaa fahamka wadajirka ah ee ku saabsan horumarka la gaaray, meelaha daciifka ah, iyo talaabooyinka xiga ee loo baahan yahay.

Ugu dambayn, dabagalka iyo qiimeynta Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliyeed waa inay noqdaan tiir muhiim u ah dhaqangelinta siyaasadda. Marka la helo nidaam dabagal iyo qiimeyn oo shaqeynaya, waxaa suuragal noqon doonta in siyaasaddani si wax ku ool ah u miro dhaliso, isla markaana ay Soomaaliya yeelato hannaan isboorti oo horumar, tayo, iyo waaritaan ku dhisan.

## 16. GUNNAANAD

Gebogebadia, Siyaasadda Qaran ee Horumarinta Isboortiga Soomaaliyeed waxaa ay u tahay buddhig dib u soo noolaynta, dib u habaynta, iyo casriyaynta isboortiga dalka. Waxay si cad u qeexaysaa aragtida qaran, mabaadii'da gahaysa, iyo mudnaanta istiraatiijiga ah ee looga baahan yahay Soomaaliya si ay u yeelato nidaam nidaam isboorti oo tayo leh, loo dhanyahay, hugan oo waara. Siyaasaddani waxay sidoo kale caddaynaysaa in isboortigu aannu ku koobnayn tartan kaliya, balse uu yahay aalad qaran oo wax ku ool u ah horumarinta bulshada, xoojinta midnimada, kobcinta caafimaadka, dhiirrigelnta dhallinyarada, iyo sare u qaadista magaca dalka.

Hirgelinta siyaasaddan waxay u baahan tahay hoggaan adag, hannaan maamul hufan, iskaashi joogto ah, iyo ka go'naan ay wada yeeshaan dhammaan daneeyayaasha ay khusayso. Wasaaraddu waxaa ay leedahay doorka hoggaamineed, balse guusha siyaasaddani waxay ku xirnaan doontaa wada shaqaynta hay'adaha dowladda, xiriirrada isboortiga, dowlad goboleedyada, gobolka Banaadir, hay'adaha waxbarashada, ganacsiga gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka, ciyaartooyda, iyo bahwadaagta caalamiga ah.

Sidoo kale. waxaa lama huraan ah in la helo shuruuc iyo habraacyo dhammaystiran, hay'ado awood leh, maalgelin joogto ah, kaabayaal shaqeynaya, iyo nidaam dabagal iyo qiimayn, si loo hubiyo in yoolasha siyaasadda ay isu bedelaan natiijooyin la taaban karo. Haddaba haddii si buuxda loo dhaqan geliyo, siyaasaddani waxay horseedi kartaa koboc muuqda oo ku yimaada tayada isboortiga dalka iyo in Soomaaliya dib u soo ceshan karto maqaamkeedii isboorti ee heer gobol, heer qaaradeed, iyo mid caalamiba. Sidaasi darteed, siyaasaddani waa in loo qaataa ballan qaran iyo maalgashi istiraariiji ah oo ku wajahan dhallinyarada Soomaaliyeed iyo sumcadda dalka si isboortigu u helo matalaad Sharaf leh gudaha iyo dibaddaba.